# Dirkii Ina Sanweyne iyo Murankii Miisaanka Maansada



C. C. Faarax 'Barwaaqo'

CASHUUROW GARI
ILAAHAY BAY
TAQAAN
EE
SODDOG
IYO SEEDDI
TOONA  MATAQAAN

Ina Sanweyne

# Dirkii Ina Sanweyne iyo Murankii Miisaanka Maansada



Cabdiraxmaan C. Faarax 'Barwaaqo'

2009

HAL-AQOON
WARSIDAHA

# *Waxa diyaariyey iskuna soo dubbaridey*

*Cabdiraxmaan C. Faarax 'Barwaaqo'*

E-mail:

Hal_aqoon@yahoo.com

***Hayb guri:***

*45 Hunterhorn Dr. N.E.*
*Calgary, AB. T2K 6C4*
*C A N A D A*

*Hawshani waxay ka mid tahay adeegga bulshada uu maammulka Hal-aqoon Publishers u hidiyo dadweynaha Soomaaliyeed.*

*Qof kasta oo xiisaynayaana lacag la'aan buu rogan karaa ama ku daabacan kara.*




***Sawirka waxan ka soo dheegtey degelka [www.ramaasnews.com](http://www.ramaasnews.com)***

Labadii aqoonyahan ee ku muransanaa aragtida
Miisaanka Maansada oo uu dhextaagan yahay
guddoomiyihii guddidii sida dhabta ah uga qaybqaatay
soo afjaridda murankan muddada dheer ka dhex aloosnaa.

1. **Borof. Maxmed X. Dhamac 'Gaarriye'**
2. **Borof. Xuseen Xasan**
3. **Borof. Cabdillaahi D. Guuleed 'Carraale'**

**Oslo, Norway**

# Tusmada Buugga

**Mahadnaq**……………..……......…………..….………......9
**Hordhac**………....…..…….……..…...…………...…11

**QAYBTA Iaad**…………………………...…………15

I. Magacyada qaybta hore ee doodda Miisaanka Maansada lagula kulmayo..…………………….……17

II. Sidii ay doodda miisaanku ku bilaabantay… ….........19
A. Gaarriye waa ninkii qoray Miisaanka Afka Soomaaliga, waana Al-Khaliilkii Soomaaliga...….19
B.Why is Gaarriye Silent about the role of Abdullahi Diirye Guled in co-exploring the Somali Prosody? ………...……………..……………………….....24
C. Re: "Why is Gaarriye Silent about the role of Abdullahi Diirye Guled in co-exploring the Somali Prosody?" ……………….……....……..……….... 25
D. Kumaa ah aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?............. …. 28
E. Warcelintii Axmed Keyse……....…....……….… 37
III. Dooddaasi maxaa ka dhashay.?…..…..………….... 40
A.Mahadhada iyo waxqabadka Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' .oo kooban……...……...…40
B. Maxaa Gaarriye loogu hiilin?…….……….….. 43
C. Ina Yuusuf muxuu isku ogyahay ee uu ka sii ooyayaa?…….……………………...……...… 48
D. Falcelintii Waayeel……………….……...……..... 52
E. Rakow Qaaqda jooji…………..……………......53

F. Maxaa Gaarriye Looga Hiilin?………...…..….. 55

**QAYBTA IIaad**………………………………..……..59

1.Warbixin kooban oo ku saabsan ka qayb gala-yaashii labakaclaynta doodda Miisaanka Maansada… …………………………………………………..61
2. Laba kaclayntii doodda Miisaanka Maansada …….. 65

2.1.Wareysi Cabdillaahi Diiriye: Waa Kuma Aabaha M. M. Soomaaliyeed? …………………………….68
2.2.Aragtidayda Muranka Miisaanka Maansada......77
2.3.Aragtidayda Muranka Miisaanka Maansada .... 88
2.4.Muranka Miisaanka Maansada Soomaaliyeed...91
2.5.Soogarbax ama garawso: Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed……..…………..… 99
2.6.Ibraahin Hawd iyo aragtidiisa Miisaanka M... 108
2.7.Wardheernews oo eeddii Barwaaqo iska deeddi-feysey iyo Siciid Suugaan oo qirtay inuu waraysiga ku lug lahaa………...…..……… 120
2.8.Sida loo soo afmeerikaro muranka ka taagan Miisaanka Maansada………………...…...… 121
2.9.Dooddii Miisaanka Maansada…..……..…… 123
2.10.Carraale iyo Gaarriye kumaa hor helay Miisaanka Maansada……………………..…..129
2.11.Dooddii Miisaanka Maansada(Ra'yi)…..….. 134
2.12.Dooddii Miisaanka Maansada: Iyamaanu taageernaa Gaarriye iyo Carraale?…...…....…137
2.13.Maankaaga la kaasho……………….....…..…143
2.14.Dooddii M. M. oo la soof daran habaabiyey. 151
2.15.Falcelinta: dooddii Miisaanka Maansada oo la soofdaran habaabiyey………...…..………… 159
2.16.Marag fur akhriste………..….……………..... 161
2.17.Gaarriye oo si kulul u difaacay…………........ 163
2.18.Murankii ka dhex oognaa Borof. Carraale iyo Abwaan Gaarriye oo soo dhowaaday……… 165
2.19.Muxuu Gaarriye ka yidhi Muranka M.M..… 168
2.20.Waraysi Abwaan Gaarriye: Waa kuma aabbaha Miisaanka Maansada….………...……....…...171
2.21.Waraysi Bare sare Carraale: Waa kuma aabbaha Miisaanka Maansada………….….…...…...180
2.22. M. M. Carraale iyo Gaarriye maxay caddaymo haystaan?……….…………………………...... 189
2.23. M. M. Carraale iyo Gaarriye: dadweynuhu caddayn bay rabaan aan ciiro saarrayn……....192
2.24.M.M. iyo Bare sare C.D.Guuleed 'Carraale'.197
2.25. Garnaqsi: Miisaanka Maansada.……....… 207

2.26.Dood ku saabsan Miisaanka M. oo dhexmartay Garriye iyo Carraale…………...……………. 214
2.27.M. M: Abwaanno Soomaaliyeed oo dood cilmiyeed ku dhexmartay Oslo, Norway……...… 217

2.28.Warsaxaafadeed ka soobaxay guddidii dood cilmiyeedka miisaank m. Soomaalida…….... 219
2.29.Caddayn warsaxaafadeedkii ka soobaxay guddida ………………………..………..…225
2.30.Toosin iyo turxaan bixi…..…………..….… 227
2.31.Warsaxaafadeedkii Oslo iyo …..…….……...234
2.32.Dooddii Miisaanka Maansada: Gardiid waa Alla diid………………………………….…..239
2.33. Muranka Daahfurka Miisaanka Maansada oo soo laba kacleeyey iyo Hadraawi oo ka marag furay………………...…….………………….244
**Gunaanad**……………………..…………………. 251
**Raadraac**………………………..……………..… 254

# Mahadnaq

Mahadi Eebbe ayey u sugantahay. Intii aan hawshan faraha kula jirey dad badan baa talo iyo tusaalooyin aayatiin leh ii soo gudbiyey. Sidaasi awgeed, in kasta oo aanan halkan magacyadooda ku soo wada koobi karin, haddana, inaan wax ka xusaa waa lagama maarmaan.

Ugu horreyn, waxa ammaan iyo mahad badan mudan Borof. Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale' oo markii hore si ragannimo iyo waxgaradnimaba leh u qaatay gartii, hayeeshee waxyar ka dib soo laba kacleeyey isaga oo tibaaxay inaanu marna oggolaan garnaqii loo sameeyey isaga iyo Gaarriye.

Waxa mahad gaara mudan Dr. Martin Orwin oo afafka Soomaaliga iyo Xabashiga ka dhiga Jaamacadda, kolka magaceeda la soo gaabsho loo yaqaan, SOAS oo ah aqoonyahankii Gaarriye ku tilmaamay inuu yahay Abu Khaliilka Soomaalida oo haddii aan midhkiisaasi lagu baraarugin aanay doodduba curateen.

Waxa isna mahad gaar ah iga mudan *Khadar Xasan Cali oo* ka tirsan wargeyska Jamhuuriya oo ah weriyihii ka soo diyaariyey qoraalka kulankii Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" loogu sameeyey magaalada Landhan ee dalka Ingiriiska intii uu halkaasi booqashada ku joogay.

Waxa runtii gallad iyo bogaadinba mudan guddidii reer Oslo, Norway, ee loo xilsaaray kala saaridda labada aqoonyahan, oo innaga mudan inaan ku tilmaanno inay yihiin dirkii Ina Sanweyne.

Dhacdadan oo dhaqanka iyo mahadhada Soomaali-yeed ba ugub ku ahayd ayey si caqiibo leh oo ay ku ladhantahay waayeelnimo, daacadnimo, xilkasnimo, garya-qaannimo, qofjecleysi la'aan, iyo aqoondheeriyi ujeexeen jid la yaqaan oo lagu kala baxo. Guddidaasi oo

sidii war saxaafadeedkii ay soo saareen ku qeexnayd ay magac-yadoodu kala ahaayeen:

1. Borof. Xuseen Xasan Guuleed - guddoomiye
2. Cabdillaahi Saleebaan Bidde
3. Axmed Cawed Ismaaciil
4. Axmed Warsame – Axmed Dheere
5. Cali Cismaan Cige
6. Aadan Looshade
7. Cabdirisaaq Cismaan Fadal
8. Axmed X. Nuur
9. Maxamuud X. Ibraahim.

Waxa kale oo xusid gaar ah iga mudan dadka, reer Norway guud ahaan, gaar ahaan reer Oslo oo ay tahay in lagu ammaano gogosha ay u fidiyeen labada aqoonyahan iyo sida ay iskaga soo xuleen guddidaasi waxgaradka ah ee ku kacay falkaasi ku dayashada leh.

Waxa mahad gaar ah iga mudan degellada kala ah: www.wardheernews.com,www.redsea-online.com, www.farshaxan.com, www.qoraaga.com, www.gur-barwaaqo.blogspot.com, www.ramaasnews.com, www.-haatuf.net, oo qaybta weyn ka qaatay faafinta doodda, la'aantoodna suuragal ma noqoteen in qoraalladu faafaan.

Cabdalla Xaaji oo madax ka ah waaxda kaydka dhaqanka iyo suugaanta TV-ga Jamhuuriyada Jabbuuti oo ka mid ah dadkii igu guubaabiyey in dhacdadan la ururiyo oo la diiwaangeliyo.

Ugu dambayntii, waxa mahad gaara iyo ammaanba iga mudan dadkii doodda uga qayb qaatay si dadban iyo si toosaba oo run ahaantii aanay la'aantood hawshan curinteedu suuragal noqoteen.

Qoraha

# Hordhac

Intaan Yuusuf Garaad BBC-da madax looga dhigin, BBC-du waxay ahayd isha wacaaleed ee ay dadka Soomaaliyeed aad ugu kalsoonaayeen. Wixii ay sheegtana aanu madmadaw ka gelijirin. Tiiyoo ay caynkaasi tahay ayaa in badan la arkay laba qof iyo ka badan oo war ay wada dhegeysteen uu haddana midba si u sheegayo.

Sababta dhabta ah, runtii, lama sheegikaro. Hayeeshee, dhawr siyoodba waa loo malayn karaa. Way dhicikartaa in qofka warka melmelayaa uu si ula kaca u samaynayo. Waxa kale oo dhicikarta inuu si ismoodsiisa warkaasi u beddelmo, taasi oo ay ujeeddadu tahay inuu qofku warka u tebiyo sidii ay ula ekoonaatay.

Arrintani waxay xoojinaysaa ama taageero buuxda u noqonaysaa aragtida sheegta in mahadhada afka laysugu soo tebiyaa ahayn wax lagu kalsoonaan karo kolka ay ammini ka soo wareegto dhacdada laga warramayo. Haddii warkii saacad horteed la wada dhegeystey uu sidaasi isu beddelayo maxaad u malayn dhacdooyinka dhawr qarni ka hor dhacay?

Sidaasi awgeed, waxan istusay in haddii aan la qorin ama la ururin qoraalladii iyo falcelisyadii ka dhashay murankii Miisaanka Maansada, inta raadkoodu qoyan yahay, ay sida warkaasi isbeddelidoonaan oo labaatan ama konton gu' ka dib waxa la sheegayaa noqondoono wax aad uga fog runtii jirtey iyo sidii ay wax u dhaceen.

Waxa kale oo uu qoraalkani ka hortegidoonaa in cid doodda ka qayb qaadatay laga saaro ama qof aan ka qaybgelin lagu daro sidii ku dhacday Deelleydii.

Ujeeddada hawshani maaha in cid guul loogu xambaariyo cidna guuldarro. Haseyeeshee, waa dhaxal loo dhigayo dhacdooyinka la midka ah ee dhicidoona.

Dhacdooyinkaasi oo hadda wixii ka dambeeya aan noqondoonin ugub lagulana xaaliddoono wixii iyo sidii tan laga yeelay. Waxa kale oo uu noqdo kayd la raadraaco oo ciddii danaysa ama jeclaata inay wax ka ogaato sidii ay wax u dhaceen ka helidoonto qoraalladii taariikhdii iyo meelihii ay ku soo baxeen iyada oo aan wax qoraarid ah lagu samayn.

Hadal iyo dhammaantii, doodda muranka waxa bilaabay Keyse Axmed oo qoraalkiisii u horreey (qoraalka ka eeg bogga 24aad) ka soo diray magaalada Landhan ee dalka Boqortooyada Ingiriiska, lana malaynayo in qoraalkii Khadar Xasan Cali uu ka soo diyaariyey (qoraalka ka eeg bogga 19aad) kulankii Gaarriye uu ahaa ka xaradhaamiyey ama raadka ku yeeshay.

Waxa qoraalkii Axmed Keyse ka soo falceliyey Axmed Cigaal oo isna ka soo qoray Magaalada Abu Debey ee dalka Imaaraadka Carabta (qoraalkiisa ka eeg bogga 25aad). Waxa ku saddex noqday Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' oo isna kolkaa deggenaa magaalamadaxda dalka Kanada ee Ottawa (qoraalkiisana ka eeg bogga 28aad). Waxa markale ku soo noqday Axmed Keyse. Qoraalladaasi oo dhammi waxay ku soo wada baxeen degelka sumaddiisu tahay www.redsea-online.com

Waxa qoraalka Cadiraxmaan Barwaaqo ka biyadiiday ninka la yidhaa Siciid Maxamed Hirsi oo ku magac dheer Siciid Suugaan. Siciid[1] diidmadiisa qoraal kuma soo gudbin. Hayeeshe, dad xog ogaal ah ayuu arrinta usheegay. Waxaanu tilmaamay inuu aragtida Barwaaqo ka soo horjeedo oo uu hayo caddaymo uu arrintaasi ku burinayo. Wax uu soo bandhigay iyo meel uu ku soo badhigaytoona lama arag.

---

1. Siciid baa u sheegay qoraha buuggan inaanu wax qorin ee uu qoraallada iyo buugaagta uun uu ururiyo.

Bishii Meey ee 2008dii, ayuu degelka ay sumaddiisu tahay www.wardheernews.com soo saaray waraysi dheer oo uu la yeeshay Borof. Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale'. Wareysigaasi oo bilaabay labakaclayntii murankii la filayey inuu mar hore soo af jarmay. Laba kaclayntii muranku siday ku bilaabantay iyo doodihii lays weydaarsaday ka eeg boggaa 59aad

Guntii iyo gebagebadii, qof kastaa sidii uu ugu jirey, hadday ahayd qof jecleysi ama necbeysi, ayuu maha-dhada ku galay.

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'

## AFEEF

***Qoraallada
maan quraarin.
Waa sidii ay degellada ugu
soo baxeen.Sidaasi awgeed,
waxan ka afeefanayaa inaanan
anigu daanyaqaad u ahayn wixii
gefef higgaadeed  ah ee  ku jira
qoraallada iyada ah. Sidaasina
waxan u yeelay
si loo
ilaaliyo
asalnimada
hawshan iyada ah..***

# QAYBTA I[aad]

## I. Magacyada qaybta hore ee doodda Miisaanka Maansada lagula kulmayo

**Khadar Xasan Cali**: Weriye ka tirsan warsidaha Jamhuuriya. Wuxu ka qaybgalay soo dhoweyntii Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' kolkii uu magaalada Landhan yimid. Waxaanu ka diyaariyey qoraal dheer oo xiiso badan.

**Dr. Martin Orwin:** Aqoonyahan afafka Soomaaliga iyo Xabashiga ka dhiga dugsiga SOAS. Wuxu ka hadlay shirkii lagu soo dhoweynayey Gaarriye waxanu sheegay inuu Gaarriye yahay Abu Khaliilka Soomaalida.

**Yuusuf Garaad**: Madaxa laanta af Soomaaliga ee BBC-da. Shirkaasi ayuu isna goobjoog ka ahaa. Wuxu waraysi ku saabsan Sooyaalka Suugaanta Soomaali-yeed la yeeshay Abwaan Gaarriye.

**Maxamed Baashe X. Xasan**: Waa aqoon yahay, waana qoraa reer Landhan ah. Shirkaa lagu soo dhoweeyey Gaarriye ayuu ka ahaa daaddihiye.

**Axmed Keyse Cali**: Nin reer Landhan ah. Waana ninkii lahaa qoraalka doodduba ka dhalatay.

**Axmed Cigaal**: Reer Abu Dabi. Wuxu ka soo falceliyey qoraalkii Axmed Keyse. Wuxu rumaysan yahay inuu Borof. Carraale yahay nin aan qofna la barber dhigi Karin.

**Cabdiraxmaan Barwaaqo:** Qoraa. Buugaagta uu qoray waxa mid ah:Magac bilaash uma baxo, mahadhada iyo waxqabadka Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' iyo hal-bixinta ereyada kumbuyuutarka.

**A.M.Waayeel**: Waa nin diiddan in Gaarriye loo hiiliyo kana soo horjeeda aragtidiisa ku saabsan in gabayaanimada la barankaro.

**Caddaani Axmed**: Qoraa iyo suugaanyahan Soomaaliyeed. Wuxu ka soo falceliyey qoraalkii A.M.-Waayeel. Wuxu ka soo qoray Hargeysa S/laand.

**Mustafe Guuleed Ismaaciil**: Wuxu ka soo qoray Hargeysa, Somaliland. Qoraalkiisu wuxu liddi ku yahay kii Waayeel.

# II. Sidii ay doodda Miisaanku ku bilaabantay

Gu'gu kolkuu ahaa 2005tii dugsiga barashada aqoonta Afrika iyo Bariga dhexe ayaa martiqaad u fidiyey dhawr abwaan oo ka kale socday dhawr dal oo ay ka mid tahay Soomaalilaand. Martiqaadkaasi oo loogu yeedhay 'Socdaalkii Gabyaaga adduunka' waxa Soomaalilaand ka socday Borof. Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' oo wax ka dhiga labada Jaamacadood ee Hargeysa iyo Cammuud.


Gaarriye oo la sheekaysanaya gabayaagii hal-tebiyey maansadiisa

Booqashadii kadib, ururrada kala ah *Aftahan, Xawaaladda Dahabshil, Oxford House iyo Jaamacadda SOAS* ayaa soo qabanqaabiyey kulan weyn oo lagu soo dhoweynayey Abwaanka. Kulankaasi waxa ka soo qayb galay dadweyne farabadan oo ka mid ah beesha Soomaaliyeed ee deggan magaala madaxda dalka Ingiriiska ee Landhan.

Waxa kulankaa goobjoog ahaa weriye ka tirsan wargeyska Jamhuuriya oo la yidhaa *Khadar Xasan Cali.* Weriyuhu wuxu soo diyaariyey qoraal ladhkiisu ahaa: ***Gaarriye waa ninkii qoray Miisaanka Afka Soomaaliga, waana Al-Khaliilkii Soomaaliga".*** Qoraalkii oo dhammina sidan ayuu u qornaa:

### *A. Gaarriye waa ninkii qoray Miisaanka Afka Soomaaliga, waana Al-Khaliilkii Soomaaliga*

Dec. 20 2005 London - Kulan ballaadhan oo lagu soo bandhigayey suugaanta Abwaanka weyn ee Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye), ayaa lagu qabtay xarunta fanka iyo dhaqanka ee Oxford House ee magaalada London maalintii Axaddii ee taariikhdu ahayd 17kii Dec,

2005ta. Haddaba waxa warbixintan nooga soo diyaariyay Khadar Xasan Cali oo ka tirsan xafiiska Jamhuuriya ee London: Xafladdan oo ahayd mid si aada loo soo agaasimay, ayaa waxa ka soo qayb galay dadweyne badan oo Soomaaliyeed, abwaanno, iyo dadka suugaanta xiiseeya oo ay si aad ah uga dhex muuqdeen haweenku. Waxaana ugu horeyntii ereyo kooban oo soo dhawayn ah ka soo jeediyay Yasiin Sheekh (Suldaan) oo u mahadceliyay dadkii ka soo qayb galay xafladda iyo ururradii iska kaashaday qabanqaabada kulankan (Ururka Aftahan, Shirkadda Xawaaladda Dahabshil, Oxford House iyo Jaamacada SOAS). Intaas ka dib Maxamed Baashe Xaaji Xasan oo hagayey barnaamij-kan, ayaa waxa uu ku soo dhaweeyay Madaxa Laanta Af Soomaaliga ee BBC-da Yuusuf Garaad oo waraysi ku saabsan sooyaalka suugaanta Gaarriye la yeeshay Abwaanka. Abwaan Prof. Gaarriye, ayaa waxa si kooban u dulmaray taariikh nololeedkiisii waxaanu sheegay in uu ku dhashay maaalada Hargeysa sannadkii 1949kii, waxbarashada dugsiga sarena uu ku soo qaatay Sheekh, ka dibna markuu Jaamacadda dhammaystay uu noqday macalin dhinaca Biology-ga ka dhiga Jaamacad-dii Lafoole, isla markaana uu halkaas ka bilaabay cilmi baadhis ku saabsan Miisaanka afka Soomaaliga.

Mar uu Yuusuf Garaad weydiiyay bal in aabbihii Gabyi jiray waxa uu sheegay Gaarriye in aan aabbihii ahayn nin gabyaa ah, hase yeeshee ay reer-koodu ka jaqeen gabayga oo ay jiraan rag badan oo gabayaa waayweyn ah, isla markaana ay eddooyin-kii dhaleen, sida Cali Dhuux iyo Qaasim. Gaarriye sida uu carrabka ku dhuftay waxa uu gabaygiisii u horeeyay tiriyay isagoo 16 jir ah, markaas oo ahayd markii u horeysay ee uu ogaado inuu gabyi karayo. Gaarriye oo ka jawaabaya Deelleyda iyo sidii uu ku bilaabay ayaa waxa uu yidhi “Sannadkii 1979-kii waxa socotay silsilad Miimley ahayd oo Siyaad Barre ummadda iskaga hor keenayay, waxaanu sidoo kale u diyaar garoobay laba kaclayntii. Markaas ayaa aniga iyo Hadraawi aannu isweydiinay sidii looga hortagi lahaa.

Siyaad Barre ayaa isna noo yeedhay oo yidhi waa in qabyaaladda lala dagaalamaa. Horta sidaa ayaanay ku bilaa-bantay, la dagaallankii qabyaaladduna madax-tooyada ayay nala gashay".

Dr. Martin Orwin oo ah khabiir dhinaca af Soomaaliga ku ta-khasusay oo isna ka hadlay Suugaanta Gaarriye ayaa yidhi "Gaarriye waa ruuxii u horreeyay ee hela Miisaanka Af-Soomaaliga waxaanan u hayaa caddaymo iyo qoraalladii uu ka qoray Miisaanka". Martin waxa uu intaa ku daray in qaar ka mid ah Maansooyinka Gaarriye uu u tarjumay afka Ingiriiska sida Fad Galbeed, Madax Goodir iyo Mandela. Intaas ka dib waxa uu Abwaan Gaarriye si cilmiyaysan u sharraxay qaybaha kala duwan ee suugaanta iyo xubnaha afka maldahan. Waxaanu ka waramay xidhiidhka ka dhaxeeya afka iyo caqliga oo uu ku timaamay in afku yahay qalabka ugu sarreeya ee lagu fikiro, qaybta ugu sarraysa ee afkuna ay tahay suugaanta. Waxaanu yidhi isagoo faahfaahin ka bixinaya "Ereyada la isticmaalayo waxaynu u adeegsannaa siyaabo gaara sida, warbaahinta, sharciyada,iwm. Erey kastaana waxa uu leeyahay macne xaddidan oo la yaqaan ama qeexan, haddaba caalamka suugaanta marka laga hadlayo wuu ka duwan yahay oo *ereyadu way* kala jiidmaan (elastic) mana laha macne xaddidan". Waxaanu abwaanku tusaale u soo qaatay tuducyada hoos ku xusan oo mid walba macnayaal kala duwan yeelan karto:

> *Allaa faxane Faraweey haddaan kugu filnaan waayay nin fadeexad neceb baan ahoo waan ku furayaa.*
>
> way ka duwan tahay.
>
> *Al-liwaa, Qarni ifriiqiya iyo Akhbaarsida*
> *Waxaan ahay tii afreyn jirtay oo Aroor walba*
> *tayda waa la arkaa*

(Barkhad Cas).

*Dadkaa lagu habaaraa*
*Ducona waa u dhawdahay*
*Alla Ku Doori waa maxay*

(Cabdi Iidaan)

Gaarriye waxa uu xusay in qolada keliya ee afka in ay ku tasarufto awoodda u lihi ay yihiin hal abuurka. Waxaanu intaas ku daray in mararka qaarkood ashyaada iyo xayawaanka ay la hadlaan gabayaagu sida tixahani muujinayaan.

*Aniga iyo dugaaggaa abtirsiimo noqonoo*
*giddi habar dugaaggaa ii wada adeegoo*
*Markay I agyimaaddaan naxariis ilmeeyee*

(Cabdalla Sagsaag)

*Adduunyada wanaaggii bukee waadhka lagu* tuuray

(Tima Cadde)

*Noolaatay yididdiiladii naxashka saarnayd*

(Qaasim).

Abwaanka oo tafaasiil ka bixinayaana wuxu yidhi “Hal abuurku waxa uu la hadli karaa xayawaanka iyo ashyaadaba, xor ayaanay u yihiin marka suugaanta laga hadlayo”. Sidoo kale Gaarriye waxa uu ku dheeraaday miisaan-ka af Soomaaliga waxaanu si qoto dheer oo aqooni ku dheehan tahay uga war-ramay xubnaha afka maldahan sida shareerada, ekeeyaha, hummaagga, tarminta hummaagga, iyo xuska. Waxaanu abwaanku mid walba tusaale fiican ka bixiyay sida suugaanta loogu adeegsado, taasi oo ay si aada ula dhaceen dhamaanba dadkii ka soo qayb galay xafladdu.

Gabagabadii kulanka ayaa waxa uu Gaarriye ka jawaabay su’aalo laga weydiiyay sugaantiisa waxaanu sheegay in aanu helin fursad uu dalka

kaga soo baxay oo lagu qoro suugaantiisa, inkastoo ay cajalado ku duuban tahay oo aan wali la qorin waxaanu kula kaftamay qoraaga buugga Hal Ka Haleel Maxamed Baashe oo uu ku yidhi "Maxaad iigu hiilin weyday sidaad Hadraawi ugu hiilisay". Yuusuf Garaad ayaa isna ku tilmaamay in aanu Gaarriye ahayn Abwaan oo kaliye ee uu yahay Macalin sida ka muuqata qaabka uu u kala dhigay una macneeyay suugaanta. Waxaanu sheegay in Abwaanka oo dhawaan ka qayb galay bandhig caalami ah oo lagu qabtay dalkan Ingiriiska laga sii daayay idaacada BBC World Service barnaamijkeeda Fanka (Arts) qaybo ka mid ah suugaanta Gaarriye oo la tarjumay. Martin Orwin oo isna ka hadlaya suugaanta Gaarriye ayaa sheegay in buug laga qorayay suugaanta markii la bilaabayay uu soo jeediyay in lagu daro suugaanta Soomaalida. Waxaana sida uu sheegay Martin markiiba maskaxdiisa ku soo dhacay Gaarriye oo sida uu sheegay ah ruuxii u horreeyay ee hela Miisaanka Maansada Soomaaliga. Martin waxa uu yidhi isagoo sharraxaad ka bixinaya arrintaasi " Waxaan PhD ku qaatay Miisaanka, ka dib waxaan baadhitaanno aan ku sameeyay Miisaanka Soomaaliga ku ogaaday in ninkii ugu horeeyay ee Miisaanka Maansada Soomaaliga qora ee si sax ah oo cilmiyaysan uga hadlaa uu ahaa Gaarriye oo maqaallo ku saabsan arrintan ku qoray wargeyskii Xiddigta Oktoober sannadkii 1976.

*Aragtidaa uu Dr. Orwin ka dhawaajiyey dad*
*badan bay baraarujisey, badh kalena*
*waxay ku dhiirrisey iney*
*si kale wax isu tusaan.*
*Tusaale ahaan,*
*qoraalkan hoos ku qorani*
*wuxu ka mid yahay kuwii la soo*
*bandhigay, waxaanu yidhi:*

## B. Why is Gaarriye Silent about the role of Abdullahi Diirye Guled in co-exploring the Somali Prosody?

*Ahmed Keyse Ali, London*
*E-Mail:ahmedkeyse98@hotmail.com*
*www.redsea-online.com*

I like Somaliland websites. So much lively discussion is going on. This column aims digest to what I have read in 'Somali owned websites" and share with you. I read an article in Jamhuriya website on a meeting held in honour of the Somali poet and educationist, Professor Mohamed Hashi Dhamac Gaarriye. Undoubtedly, Gaarriye had a big role in exploring the Somali prosody. Jamhuriya story contains incomplete information about Gaarriye's scholarly achievement, the product of timely collaboration with Professor Cabdulalahi Diiriye Guuled (Carraale). In 1977 I read article Gaarriye co-authored with Diiriye in Xid

digta Oktoobar in which they argued that poets are born but can also be made. The late poet and writer Ibrahim Haji Awad (Kholli) wrote in New Era about Gaarriye and Diiriye's achievements. "Let us see if the first batch of graduates from Gaarriye and Diiriye's school will be able to become poets," he argued. Back in 1988 I listened to a BBC Somali Section interview with Gaarriye. He talked about the influence Arabic poetry has on his poems. I think Gaarriye feels uncomfortable when all credit is given only to him on the basis of collaborative scholarly achievement. The Jamhuriya story does not make mention of Abdullahi Diiriye Guled who has recently published a book on the Somali prosody. In a foreword to the book (Miisaanka Maansada Soomaaliyeed) Cismaan Xuseen Abokor (Cismaan Xamari) writes: " professor Carraale is the first scholar who laid foundations for the Somali prosody." (Page 13). BW Andrejewski, the late SOAS professor and linguist, wrote about the scholarly

collaboration out of which the Somali prosody emerged: No until the 1970s were the principles of the scansion system discovered and worked out in broad outline by two Somali scholars." For the sake of all those who like Somalis and their language and culture, the two scholars – Gaarriye and Carraale--, had better acknowledge each other's role in discovering the Somali prosodic systems." We have so much to gain and learn if our men of letters give each other credit deservingly.

Waxa qoraalkaa ka soo falceliyey nin la yidhaa Axmed Cigaal. Waxaanu soo dawiyey qoraal kan hoos ku qoran ee ku soo dhowaada:

## C. Re: "Why is Gaarriye Silent about the role of Abdullahi Diirye Guled in co-exploring the Somali Prosody?"

***Ahmed Egal***
ahegal@yahoo.com

December 31, 2005, redsea-online.com

I was reading the innovative opinion/article in the web - about the recent article on "Why is Gaarriye Silent about the role of Abdullahi Deririye Gulaid (Carraale) in co-exploring the Somali Prosody?" and I found it worth-while to say my opinion about it.

I believe that professor Abdillahi Deriye Gulaid - Carraale is the first Somali who scholarly laid the

foundations for the Somali prosody **(Miisaanka Maansada Soomaaliyeed).**

I knew Abdillahi Deriye Gulaid – Carraale since 1961 when he was grade four in the Intermediate School. He was born to a family who were poets and highly valued poetry. Carraale was brought up in between very talented poets who used to recite rich poems about the environment and their cultural traditions with beautiful similes, metaphors and images. It was against their practice to earn a living by going around and compose poems before rich or even groups of authority. They were true poets to their oral tradition.

During his intermediate years, young Abdillahi Deriye Gulaid Carraale used to recite, besides others, many of the poems by his immediate family members like **Xirsi Caamir, Weerer, and Huube.** His view to literature was artistic.

Prof. Abdillahi Deriye Gulaid – Carraale simply loved to have poetry happen. And in an attempt to improve the quality and viability of Somali Poetry, Carraale became critical of some poems that led him to develop the scansion system.

This took the form of talking about poems what others don't care for and say what's weak in it. It took him to analyze the rhythm of poems until he was able to distinguish between loud and soft syllables in words before he even begin to talk about lines of a poem. He started to talk about the basic building blocks of lines: individual words. His works ultimately resulted to set, for the first time in the history of Somali poetry, **The Scansion**, which is the analysis of a line of poetry for foot and meter. To "scan" a line of poetry means to analyze it rhythmically. Scansion helps us recover a sense of how poets play with meter and rhythm to create meaning. Prof. Abdillahi Deriye Gulaid – Carraale, is someone who does

not like to showoff himself because of humbleness. He has an attitude of not claiming the works he did painstakingly. It was Carraale who has developed for the first time The Scansion of Somali poem.

I believe that is the reason why he does not bother claiming the noble discovery he made, and sure, if he doesn't anyone else can make a claim.


*I met with Professor Carraale in United Arab Emirates after he graduated from University of UCLA, in October 1982. Since then, about 23 years I haven't seen him. He graduated in Linguistic and Literature. Carraale is a pleasant person to be with.*

Qoraagani, siduu sheegay wuxu rumaysan yahay inuu Borof. Carraale yahay qofkii u horreeyey ee aragtida Miisaanka soo bandhiga. Hayeeshee, wax caddayn ah oo uu aragtidiisa ku taageeray innama soo hordhigin. Waxa keliya ee uu tilmaamay waa inuu Carraale ka soo jeedo qoys aftahannimo ku caan baxay. Hayeeshee, inuu isagu maansoodo iyo in kale muu tibaaxin.

*Kolkay arrini halkaa marayso, ayuu Cabdiraxmaan*
*Barwaaqo dareemay in warla'aan xoog lihi jirto*
*loona baahan*
*yahay in arrinta la demiyo intaanay*
*dad badani ku dhex lumin murankan*
*wax soofdaran habaabinaya.*
*Sidaasi darteed wuxu*
*soo bandhigay*
*qoraalka*
*bogga*
*soo socda ku qoran:*

## D. Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye? *

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'




Beryahan waxa muran weyni ka joogaa sidii loo sugi lahaa ama loo ogaan lahaa ninkii u hor-reeyey ee tibaaxay aragtida loo yaqaan Miisaanka Maansada Soomaaliyeed, loona siin lahaa ladhka lagu loollamayo ee ah: Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed.

Intaanan weydiintaa ka warcelin bal aan marka hore isweydiinnee arrintu ma curad baa mise waa ugub? Midka ay tahay kolkaan kala ogaanno ayaan tilmaan yar ka bixin sidii ay Soomaalidii hore mid kasta u maarayn jirtey. Intaa kadib waxan u xuubsiiban inaan soo bandhigo aragtida aan qabo. Aniga oo iska dhawraya hawraaraha: waa la yidhi, waan aqiin, waan maqlay, waan akhriyey, ama waxa igu maqaala ah, iwm., ayaan dooddayda ku taageeri caddaymo sumad iyo sawrac aan doorsoomin leh. Ugu dambaynta waxaan si aan madmadow lahayn u caddayn una sheegi labadaasi aqoonyahan midka ah aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed.

Dhaqan ahaan, Soomaalidu kolkay arrin tan oo kale ihi la soo deristo, ee ay garteeda galaan, waxay ugu horrayn isweydiin jireen oo ay odhan jireen: arrintu ma curad baa mise waa ugub? Arrinta ugubka ihi waa arrin aan hore loo arag oo ku cusub xeerbeegtida. Xeer hore oo loo dejiyeyna uusan jirin. Ta curaddase ihi waa arrin hore loo arkay ama xeerbeegtida hore u soo martay lana

*Wuxu qoraalku soo baxay Redsea-online.com/e-book I - 2006*

maareeyey. Arrintu haddii ay haddaba, curad noqoto waxa loo maarayn jirey sidii tii hore ama kuwii hore loo maareeyey. Inta badanna dhibaato lagalama kulmijirin. Haddayse arrintu noqoto tu ugub looma kala tegijirin, markaas baana sidii loo maarayn lahaa taladeeda la gelijirey. Waxa haddaba isweydiin leh, arrintan maanta inna hortaal midka ay tahay?

Sida laga wada warqabo, Soomaalidu wax way isku qabsan jirtey, garna waa ka naqsanjirtey. Wax laysku qabsadana waxa u badnaa xoolo. Iney dhacday si la yaab lehna loo maareeyey waxa caddayn innoogu filan sheekan hoos ku qoran ee ku saabsan ninka la odhan jirey **Faarax Maxamed Yuusuf** loona wada yiqiin "**Ina Sanweyne**"*:

> *Beri baa hal geel ah isku qabteen nin baadidoon ah oo reer Dannood ahaa iyo Cashuur oo ahaa Ina Sanweyne soddoggii oo reer Buuhoodle ahaa. Ninka hasha qabsaday oo carro fog ka yimid baa hal geela Cashuur ku jirta sheegtay. Cashuurna garawshiinyo wuu keeni waayey oo hasha anigaa leh buu yidhi. Arrintu si kastaba ha ahaatee beeshii degaan-kaas waxgaradkeedii oo dhammi way goyn kari waayeen gartii ama dhinaca Cashuur bay u badiyeen. Taasaa keentay in ninkii la yidhaahdo waadigan samri waayey ee yay gartaadu kuugu go'daa?*
>
> *Isna wuxuu yidhi ninka Ina Sanweyne la yidhaaho ee beeshaa idin xigta lagu sheegay bay iigu go'daa isaga oo aan ogeyn inuu ninka Cashuur soddog u yahay. Cashuur isagu midh kaa aad buu ugu bogay oo waxay la ahayd in Faarax gar iyo gardarraba ugu hiilinayo illayn inantiisuu qabaaye, markaasuu inta innama diisiina soo kaxaystay soo gole fadhiistay.*
>
> *Faarax baa laysula tegey garna jilibkaa laysu dhigay. Mudduci iyo maddaacale waa laysu*

*dhegeystay, nin kastana wixii uu xusuu -san karayey iyo wuxuu caddayn u hayey goluhuu keenay laakiin taasi mar kasta waxay sii kashifaysey Cashuur oo ay marba marka ka dambaysa soo baxaysey inaanu hasha lahayn. Waxa soo gashay maalintii ugu dambeysey ee garta la goyn lahaa iyo in go'aankii la sheego. Faarax Sanweyne isagoo aad isugu kalsoon oo ilaahay mooyee cid uu ka baqayaana aanay jirin buu ku tiraabay CASHUUROOW GARI ILAAHAY BAY TAQAAN, EE SODDOG IYO SEEDDI TOONA MA TAQAAN, hashana ninkaa reer Dannood baa iska leh.*

Hayeeshee, weli ma maqal goob joogna uma noqon aragti aqooneed oo laysku haysto tan ka hor. Sidaasi darteed, waxan odhankaraa ama dhabtii aan ku tilaami karaa iney tahay arrin, ugub innagu ah, adduunyada kalase curad ka ah. Waxana ila qumman inaan ku maarayno sida ay dadyawga adduunka ee arrimahan oo kale la soo kulmay u maareeyeen.

Inta aan ka warqabo, waxa dadka sidaa aragti isugu qabta lagu kala saaraa oo mudnaanta la siiyaa xilliga iyo meesha uu qofkaasi aragtidiisa ku soobandhigay. Haddii labada qof ee aragtida isku haya midkood ku doodo inuu waxan yiqiin intaan hebel soo saarin, dooddiisu waa barkumataal. Waxana la siiyaa garta qofkii wixiisu qoraal galaan dadkana u soo bandhiga. Aragtidaa innaga oo ka duulleyna, bal aan isla eegno qoraalladii labada aqoonyahan, oon labadoodaba gacanta ku hayo, kuwaasi oon ka helidoonno mid kastaa xilliga uu qoray ee uu dad weynaha u soo bandhigay iyo meesha uu ku soosaaray intaba.

Hadal, haddaba, lama ag joogsadee, sida caddaynta halkan ku lifaaqani tilmaamayso, Maxamed Xaashi Dhamac ‘Gaarriye’ wuxuu qoraalkiisii u horreeyey oo ladhkiisu ahaa: Miisaanka Maansada, soo bandhigay

bishii **Jeen. 17dii, 1976kii**. Qoraalkaas oo ku soobaxay wargeyskii *Xiddigta Oktoobar* ee soobaxay Sabtidii ay bisha Jeenaweri ahayd 17ka ee 1976kii — sannadkii 3aad — Bogga 3aad - L.425aad. Maxamed Xaashi wuxu qoraalkiisaa ku bilaabay:

> *Maqal. Ma jeclaan labayd inaad gabaydo? Mase og tahay inaan abwaannimada loo dhalan uun ee la samayn karo? Waxba ha la yaabin. Ma jiro waxaan qofka aadmiga ihi aanu qaban karin, haddii uu niyad fiican la yimaaddo. Way jirtaa oo waynu aragnaa dad hibo gaar ah u leh gabayaannimada. Hase yeeshee waxa been ah inaan qofkii rabaa aanu noqon karin abwaan. Waxaad iska raariddaa inaad wixii qof samayn karaba aad adiguna sameyn karto.*
>
> *Waa tahay. Aniga ayaa kuugu macallin noqonaya sida loo gabyo ama loo heeso. Hase ahaatee anigu af soomaali ku barimaayo. Waxaan kuu dhigayaa habka loo gabyo iyo shuruudaha la doonayo inaad fuliso.*

Qoraalkaasi wuxu noqday mid dad badan ididdiilo geshey, qaarna baraarujiyey, inkalana uugaan iyo saalaxwareer ku ridey. Dr. B.W. Andrezejwski iyo Muuse X. Ismaaciil Galaal baa hormood u ahaa intii ku ididdiilatay. Hambalyo, taageero iyo gacanqaadna waxay u fidiyeen aqoon yahankii kolkaa da'da yaraa ee arrintan la yaabka leh soo bandhigay.

Inta baraarugatey ee xuub indhahooda ka rogmadey waxa hormood u ahaa Boobe Yuusuf Ducaale oo, kolkii aragtidaa laysku maandhaafay, soo bandhigay qoraal ladhkiisu ahaa: Xidhbesooraha Miisaanka (Xiddigta Oktoobar, Sabti, 22kii Maajo, 1976kii, bogga 3aad – sannadkii 4aad – Lr. 102aad).

Qoraalku wuxu ahaa mid uu Boobe ku taageerayey kuna qeexayey sidii uu u fahmay iyo sida aragtidii dad badani ku mergadey u ahayd tu fudud oo la adeegsan karo. Wuxu weliba isku deyey inuu adeegsado ereyo cusub oon ahayn kuwii uu Gaarriye adeegsaday.

Inta uugaanku ku dhacay ee sidii carsaanyada dhan walba u carartay waa intii u arkaysay inuu Gaarriye jagooyinkoodii halis ku noqday. Intaas oo ah in hoos joogtey Akademiyihii Dhaqanka iyo Hiddaha Soomaaliyeed. Gaarriye looma soo badheedhin. Wax lagu buriyo aragtidiisii la yaabka lahaydna waa la waayey. Hayeeshee, makhaayadaha ayaa laga soo waraabe tuurijirey. Arrinka Gaarriye wuxu kolkaa ku sugnaa: waraabe tuuryana lala gaadhiwaa, af xumana wax lagaga qaadiwaa!

Ibraahin Xaaji Cawad 'Khoolli' oo ahaa aqoon - yahan ka tirsan Akademiyihii Dhaqanka iyo Hiddaha ayaa isaga oon toos u soo abbaarin Gaarriye isku deyey inuu buriyo aragtidan waxaanu sheegay in dad uu ku tilmaamay xer fallaagowdey u arkaan in gefef badani ku jiraan Miisaanka, waxaanu yidhi:

> *Isku soo wada duub, war dhiillo ah ayaan u sidaa Shiikh Gaarriye. Miisaankiisii wuu ku hagaagi-waayey gabayadii caanka ahaa oo ay kala tiriyeen Daraawiishyadii (Sayid Maxamed Cabdulla Xasan iyo Ismaaciil Mire).*
>
> *Gabayga "Gudban" oo ka kooban 150 beyd oo Sayidku tiriyey 1904, kaddib markii Boqor Cismaan ku ballan furay, waxaa ku jira 36 beyd oo ka kooban 22 iyo 23 shaqal, sidaa awgeedna aan ku imanayn Gaarriye miisaankiisa 20 iyo 21 shaqal ku kooban.*
>
> *Eeg gabaygii Ismaaciil Mire tiriyey 1913 isagoo u dabbaaldegaya guushii colkii uu watey ka soo hooyey dagaalkii Dulmadoobe isla markaana ku*

*diganaya dilkii Abbaanduulihii Ciidanka Ingiriis-ka ee Koofil. Gabaygaas (54 beyd) ku magac dheer "Jihaad taladii" 19 beyd oo ka mid ah ayaa 22 iyo 23 shaqal leh oo aan waafaqsanayn Miisaanka Gaarriye (eeg Tusaale 4, beydka hore). Arrintani dhif iyo naadir ma ahee gabayo badan ayey saamaynaysaa. Xertuna Shiikh Gaarriye ayey jawaab ka sugaysaa. (*Xiddigta Oktoobar* Sabti, 3da Maajo1976 - Bogga 3aad - sannadkii 4aad — L.86aad)*

Qoraalka Khoolli waxaad ka dhadhansanaysaa laba arrimood oo kala ah in dadkii arrintan xiiseynayey laba xero kala noqdeen: Xer Gaarriye taageersan, sida uu qudhiisu tilmaamayna uu Boobe kabiir u ahaa iyo xer aragtidaasi ku noqotay dhibaato una badan rag ka tirsanaa Akademiyada. Taasina waa ta keentay in Gaarriye loo dardaarweriyo! Khoolli isaga oon sugin warcelintii Gaarriye, hubsanna waxay arrini ku dambayn doonto ayuu u dardaarweriyey oo uu tilmaamay inaan Gaarriye iyo aragtidiisa meeli uga bannaanayn Akademiyada. Arrintaa isaga oo tilmaamayana wuxu yidhi:

*Akademiyada Dhaqanka iyo Hidduhu maxay Miisaanka Gaarriye ka qabtaa? "Miisaanka maansadu asal-kiisaba", ayey madaxda akademiyadu leedahay, "Waa dhibic ka mid ah badweynta nalaga sugayo inaannu salkeeda soo xaadhno. Sidaas darteedna, dhaqaalaha iyo shaqaala yrida na haysataa midna nooma oggola inaannu miisanka fiiro degdeg ag siinno. Qoraalka farteennu waa 3 jir keliya waxaana jira arrimo naxwuhu ka mid yahay oo nagaga kulul Miisaanka. Hadal iyo murti, arrintu waxay u baahan tahay samir iyo baaris dheer. In Akademiyadu go'aan (oggol iyo diidmo mid kasta ha ahaadee) ceedhiin degdeg uga gaadho Miisaanka Gaarriye ma habboona.*

Waxa haddaba isweydiin leh Khoolli ma af hayeenkii Akademiyaduu ahaa? Ma Gaarriyaa ka codsaday inuu u

galagalaysto? Maxaase ku kellifey Khoolli inuu Gaarriye ka xigsado Akademiyada ee uu u deeddifeynayey?

Qodaxi meesheedee, waxa kale oo iga weydiin ah, intii waxaas oo doodihi dhacayeen Borof.. Cabdillaahi Diiriye Guuleed xagguu isagu joogey? Ma xertii Gaarriyuu ahaa mise tii fallaagowdey ?

Hadal iyo dhammaantii, bal markanna aan qoraalladii ***Borof Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale'*** u galno. Qoraalkii u horreeyey ee uu Borof.isarku qoray wuxu soobandhigay, sida aan caddayntan ku hayo, laba gu' iyo badh (2.5) kadib markii Gaarriye bilaabay qoraalladiisa (eeg sawir-kaan). Qoraalkaas oo ladhkiisu ahaa 'Haw-raarey ninba si kuu qaaday' wuxu soo baxay sabtidii ay bisha Juun ahayd 10ka ee 1978kii ( Xiddigta Oktoobar, bogga 3aad – sannadka 6aad – Lr. 119aad).

Qoraalku wuxu ku saab-sanaa sida laysugu murgiyo ama aan loo kala aqoon labada erey ee maanso iyo suugaan. Dhab ahaan aragti wacan ayuu Borof-ku arrintaa ka bixiyey. Qoraalkiisii labaad ee wargeyskaa ku soo baxay wuxu ahaa qaybtii labaad ee isla ladhkaa aan kor ku soo xusay.



*Buugga Carraale*

Qoraalkiisii saddexaad ayuu Carraale Miisaanka gabayga kaga hadlay. Qoraalkaas oo uu u bixiyey 'Gabaygeenna Miisaan' wuxu soobaxay Axaddii bisha Juun ahayd 18ka ee 1978kii. Kaas kii xigey wuxu ahaa 'Jiiftadana Miisaan' oo isna soobaxay Axaddii bisha Luulyo ahayd 16ka 1978kii. Qoraallada Carraale way badnaayeen. Meel keliya oo ay hawraarta 'Miisaanka Maansada' ku qorantahayna ku arkimeysid (eeg raadraaca). Haddaba inuu Borof. Carraale buuggiisa u bixiyo ladhka ah: Miisaanka Maansada Soomaaliyeed waa gef weyn oo Gaarriye laga galay. Waxa hab-boonayd inuu u bixiyo: Gorfaynta Maansada

Soomaaliyeed oo ah ladh uu isagu iska lahaa oo uu ka qoray arrintan iyada ah.

Runtii aragti ugub ah buu dadku ku kala jabaa, oo lagu murmaa, doodina ka aloosantaa. Hayeeshee, arrin soo jireen ah layskuma luro. Sidaasi awgeed kolkaad labada qoraal isu foodiso waxa kaaga dhuroobaya in qoraallada Gaarriye yihiin kuwa lagu kalajabay ee doodda xoogga ah bulshada ka dhex aloosay. Halka kuwa Carraale aan cidiba ka soo hadal. Haddii aan iska indha tirno taariikhda sugan ee ah inuu Gaarriye bilaabay qoraal-kiisii u horreeyey bishii **Jan. 17dii ee 1976kii** iyo inuu Carraale bilaabay kiisii u horreeyey bishii **Juun 10dii ee 1978kii** waxan ku kala saari karraa labada aqoonyahan sida ay qoraalladoodu dadka xiisaha ugu kala lahaayeen.

Waxaas oo dhan haddii, had-dana, lagu qanciwaayo, waxa xusid mudan inaan tilmaamo aqoon -yahankii saddexaad ee arrinta wax ka qoray oo ah **Dr. John William Johnson** kuna magacdheer '**Heello'**. Dr. Heello wuxu qoraalka la yidhaa 'Somali Prosodic System' oo ku saabsanaa Miisaanka Maansada ku soo saaray wargeyskii la odhanjirey Horn of Africa, Volume 2, No.3 pp. 46-54. Aqoonyahankaasi wuxu tilmaamay in laba aqoonyahan oo Soomaali-yeed ahaayeen kuwa hawshan soo ban-dhigay.



*Dr.John Heello*

Qoraalladii uu raadraacayna waxay ahaayeen kuwoodii Xiddigta Oktoobar ku soobaxay, sannadihii 1976kii iyo 1978kii, sida ku cad sawirkan aan kalkan ku soo dhejiyey oo ah raadraacii Dr. John Heello. Haddii ay jirilahaayeen qoraallo kale oo kuwan ka horreeyey oo Carraale ama Gaarriye leeyahayna wuu raadraaci lahaa. Sidaasi awgeed ayaan muran ugu jirin inuu Maxamed Xaashi Dhamac yahay ninkii u horeeyey ee aragtidan la yaabka leh soobandhiga.

Ugu dambaytii, qoraalkan oon iskudeyey inaan ku soo bandhigo sida ay labada aqoonyahan ee **Gaarriye** iyo **Carraale** u soo kala hor qoreen aragtiyahooda ku saabsan Miisaanka Maansada, aniga oo xiganaya qoraal-ladii dhabta ahaa ee ay soo saareen iyo raad-raacyadii uu sameeyey **Dr. Heello**, ayaan rabaa inaan caddeeyo inuu Gaarriye yahay ninkii u horreeyey ee soo bandhiga aragtidan dhaxal galka ah. Waxaanan leeyahay, waa halkii Ina Sanweynee, GARI ILAAHAY BAY TA-QAANNE, waxa dhab ah hawraartii uu yidhi **Dr. Marin Orwin** ee ahayd in **Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye"** loo aqoonsan yahay inuu yahay: Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed iyo Al-Khaliilkii* Soomaalida! In midhkaa la gala masuugana waxan u arkaa gardarro aan geedna loogu soo gabban.

*Al-Khaliil bin Axmad Al-Farahidi. Aqoonyahankii helay Miisaanka Maansada Carabiga.

**E. Warcelintii Axmed Keyse:**

www.redsea-online.com

Qoraalkaasi wuxu runtii soo af jaray murankii iyo qof wax la doonkii. Arrintaa iyada ah waxa qiray kana soo warceliyey Axmed keyse oo ah ninkii hadalka bilaabay. Waxaanu yidhi:

> *Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' baa degelka redsea-online.com ku daabacay qoraal kooban oo uu ku gunaanaday in Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' yahay "aabbaha Miisaanka Maansada Soomaalida".*
>
> *Cabdiraxmaan Barwaaqo dooddiisu waxay ku salaysan tahay caddaymo qoraal ah muujinayana hawsha Gaarriye ka qabtay Miisaanka Maansada Soomaalida. Haddii aan wax ku gooyo qoraal-lada Gaarriye ee Cabdiraxmaan xiganayo, Gaarriye waa aabbihii Miisaanka Maansada. Sidoo kale, haddii la tixgeliyo sida adag ee Barwaaqo u soo gunaanaday qoraalkiisa isaga oo doonaya inuu "dedefeeyo" waxa uu u arko libin u diidka Gaar-riye, waxaan ku odhan lahaa Cabdiraxmaan Barwaaqo: " Lagaa daba odhan maayo!" Dhawr iyo toban cisho ka hor ayaan degello Soomaaliyeed (**awdalnews.com iyo wardheernews.com**) ku soo qoray maqaal af Ingiriisi ah. Dulucda maqaalkaa: abuurista aqoon isweydaarsi ku saabsan helistii Miisaanka Maansada Soomaalida.*

Qoraalkeygaa (*http://www.awdalnews.com/ wmview. php?ArtID=6671)* way ku caddeyd in aan rumaysnahay in wadashaqeyntii Borof. Carraale iyo Borof. Gaarriye keentay helista Miisaanka Maansada Soomaalida. Waxaan ku taliyey in labada suugaanyahan uu midba midka kale libin siiyo.

Maxaan sidaa ugu taliyey haddii Gaarriye, waa sida uu ku dooday Cabdiraxmaan Barwaaqo e, yahay aabbaha "Miisaanka Maansada Soomaali-da"? Miyaanay labo nin wax wada heli karin, lana odhan karin waa aabbayaashii helay…? Inta aanan ka jawaabin su'aashan bal aan isla eegno Cabdi-raxmaan Barwaaqo badheedhihiisa:

> *"Qodaxi meesheedee, …intii waxaasi oo doodihi dhacayeen Borof. Cabdillaahi Diiriye Guuleed xagguu isagu joogay? Ma xertii Gaarriyuu ahaa mise tii fallaagowday?"*

Doodaha Barwaaqo xusayo waa kuwo ka dhashay jawaabtii gabayaagii Ibraahim Xaaji Cawad "Khoolli" ka bixiyey dadaalka hindise suugaaneed ee Gaarriye. Marka uu Khoolli leeyahay "Xertu Sheekh Gaarriye ayey jawaab ka sugeysaa" way caddahay in Gaarriye hor-muud dariiqada Miisaanka Maansada Soomaali-da yahay.

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' wuu bisleysiiyey aqoon-iswey-daarsigii: soo bandhiggiisa qoraallada Gaarriye iyo Carraale ayaa bilay lafagurka helista Miisaanka Maansada Soomaaliyeed. Su'aasha aan wey-diinayo Cabdiraxmaan Barwaaqo waa: Ma kaa codsan karaa inaad ii sheegto labada qof ee macallin Guush (B.W. Andrzejewski ) ka hadlayo markuu sidan yidhi:

*No until the 1970s were the principles of the scansion system discovered and worked out in broad outline by two Somali scholars…" ('Somalia in word and image', 1986,p.37 ).*

Macallin Guush oo kaliya ma aha baadhayaasha sheegay in helista Miisaanka Maansada Soomaaliyeed tahay hawl iskaashi uu keenay. Baaraha Soomaaliyeed ee la yidhaahdo Axmed Aaden Axmed wuu xusay kaalinta Carraalle markii uu qoray buugga qalin jibinta shahaa-dadda Masterska "Ladhka" buuggiisa qalin jebintu waa: "The Didactic Themes in Somali Poetry", Wisconsin University, sanadkii 1983ka.

Su'aali kama taagna kaalinta Gaarriye ku leeyahay helista Miisaanka Maansada Soomaalida. Cabdiraxmaan Faarax

'Barwaaqo' oo xiganaaya Dr. Martin Orwin wuxuu qoray sidan:

> *Waxaan leeyahay waa halkii Ina Sanweynee, GARI ILAAHAY BAY TAQAANE, [waxaa] dhab ah hawraartii u yidhi Dr. Martin Orwin ee ahayd in Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" loo aqoonsan yahay inuu yahay: Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed iyo Abuu Khaliilkii Soomaalida. In midhkaa lagala masuugana waxan u arkaa gardarro aan geedna loogu soo gabban."*

Ina Sanweyne xog dhinac uun uu ka hayo wax kuma gooyeen. Ma jiri karaan qoraallo si wada jir ah u qoreen Gaarriye iyo Borof. Carraale? Buugga Borof. Carraale sida faahfaahsan ugu kala dhigay noocyada maansada Soomaaliyeed iyo sida loo miisaamo waa "mahadho" Soomaalidu wadaagaan sida ay u wadaagaan dadaalkii barenimo iyo gabaayaanimo ee Gaarriye. In laga dalbado Borof. Carraale inuu "ladhka" buuggiisa (Miisaanka Maansada Soomaaliyeed" beddelo ma bannaana.

Bilowga aqoontu waa run ka sheegista ifafaalayaasha soo ifbaxay. Waxba la iskuma haystee wax baa la kala korodhsanayaa oo la wadaagayaa.

Sida qoraalka ka muuqata Axmed si geesinnimo leh ayuu u qiray in doodda Barwaaqo tahay tu aan lagu mergankarin oo uu wax walba marag ku soo ladhay oo wax lagu hadlo iyo wax laga hadlaa toona jirin. Hayeeshee, hormada dhexe ee qoraalkiisa ayuu wuxu gocday mooyaane ka daba keenay dhawr weydiinood oo uu Barwaaqo[1] u arkay inay ka baxsanyihiin aragtidii ahayd yaa ah aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed?

*1. Weydiintaasi warcelinteeda wuxu Barwaaqo si weyn ugu balballaadhiyey qoraalka ladhkisu yahay: dooddii Miisaanka Maansada oo la soofdaran habaabiyey kana eeg bogga 150aad.*

# III. Dooddaasi maxaa ka dhashay?

Markii dhawrkaa qoraal lays weydaarsaday, ayaan dareemay inay jiraan dad badan oo aan arag aragtida Gaarriye. Si ay dadkaasu u helaan xog mug leh oo ku saabsan aragtida Gaarriye loogana hortago aragtida wax soof daran habaabinaysa ee uu Cismaan Xamari ku qoray goglodhigga buugga Miisaanka Maansada ee Carraale ayaan qoray buugga ay faahfaahintiisu hoos ku qoran tahay:

## A. Mahadhada iyo Waxqabadka Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye'

Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo
October 01, 2007
www.redsea.com & www.wardheernews.com

***Buuggii beryahaaba la bilkeedinayaanu bandhigiisa wadnaaye bi'iwaaye ha seegin!***

***Oo waa buuggee?***




Waa buuggii u horreeyey ee si cilmiyeysan looga qoro mahadhada iyo waxqabadka Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye". Waxa haddaba isweydiin leh: Muxuu buuggani kaga duwan yahay kuwii Abwaannada kale laga qoray? Waydiintaasi aqoonyahanno badan baa durba ka warceliyey. Bal dhawr ka mid ah aan soo qaadanno wixii ay ka yidhaahdeen:

A. "Marka la eego sida ku-hadalka iyo ku-faanka afka Soomaaligu ugu sii yaraanayo Soomaalida qorbajoogga ah, iyo

xataa sida Soomaalida ku nool dalalka Soomaaliga lagaga hadli jirey ay u doorbidayaan in ay afaf kale ku hadlaan ama wax ku qoraan, waxa cad in af Soomaaliga ay ka muuqato astaamihii afafka khatarta ku jira. Haddii aan loo gurmanna, af Soomaaligu waxa uu ku biiri doonaa afafka lumaya. Buuggan la magac baxay Mahadhada iyo Waxqabadka Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' ee uu qoray Cabdiraxmaan Faarax "Barwaaqo" wax weyn ayuu ka tari doonaa sidii loo hakin lahaa khatarta ku soo socota afka Soomaaliga. Markii aan akhriyey Miisaanka suugaanta ee "Gaarriye" iyo gabayadiisa, iyo faahfaahinta qoraha buugga, waxaaba markii ugu horraysay igu soo dhacday in aan baran karo sida loo gabyo oo aan weliba gabayaa noqon karo. Waxa aan filayaa in akhristayaasha buuggani ay iiga markhaatiniqi doonaan dareenkaas. Aad baan ugu mahadinayaa Cabdiraxmaan "Bar-waaqo" qoridda buuggan faa'iidada badan leh."

*Dr. Hussein Ahmed Warsame*
*Accounting Area Chairman*
*Haskayne School of Business*
*University of Calgary, Canada*

**B.** "Buuggani waa mid si yaab leh u waydaaartay hab dhigaalkii iyo sargooyadii looga bartay buugaagtii hore. Wuxuu ka baydhay qaabkii buugga u qoondaynaysey inuu ku habboonaado qaamuus ahaan ama si raadraaceed uun loogu adeegsanlahaa. Waa buug furaya irrid cusub oo fursad kuu siinaya in aad si cilmiyeysan u barankarto maansooyinka Gaarriye iyo kuwa kaleba. Qaabkan lafoguridda maansadu waa arrin hor leh, waana qaab doodeed habaysan. Waannu ku hanbalyeynaynaa Barwaaqo u heellanaanta dayactirka af Soomaaliga iyo qorista buugganba."

*Fu'aad Sh. Abu Bakar*
*Bahda Mareegta Farshaxan*
*Milwaki, USA*

C."Maxammad Xaashi Dhamac (Gaarriye) has the unique distinction in Somali literature of being both a poet and a scholar, which is a blessing for Somali literature. But it poses a challenge for anyone who tries to do justice to Gaarriye's works because that person is required to be able to handle both Gaarriye's poetry and scholarly output. In his insightful and

multilayered book "Mahadhada iyo Waxqabadka Maxamed Xaashi Dhamac" Mr. Barwaaqo has met the challenge. This book is an excellent introduction to Gaarriye's poetics. It is illuminating and a pleasure to read."
*Jamaal Cabdi Gaboobe,*
*Seattle, Washington University, USA*

**Maxay aqoonyahannadu ka yidhaahdeen "Gaarriye" laftiisa?**

**A**."Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" waa aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed, waana Al-Khaliilka Soomaalida."

*Dr. Martin Orwin*
*School of Oriental & African Studies,*
*London, UK.*

**B.** "Gaarriye waa labada gabayaa ee Soomaaliyeed ee ugu waaweyn kuwa hadda nool mid ka mid ah. Waa gabayaa wax weyn ka taray casriyeynta maansada Soomaaliyeed. Waana caalim qoto dheer leh oo ka sal gaadhay habka maansada Soomaaliyeed ay ku dhisan tahay."

*Dr. Georgi Kapchits*
*Moscow University, Moscow*
*Russia*

***Soosaare: Hal-aqoon publishers***
***Daabacaaddii: 1aad***
***Gu'ga uu soobaxay: 2007da.***
***Qiimaha: US$22.71***
***Inta bog ee uu yahay: 284 bog***
***Jimidhka: 6x9 xubnood***
***ISBN: 978-0-9699009-4-***8

Weydiintu waa sidee loo helayaa ama halkee laga helayaa?

Qiimaha iyo sida aad u dalbanaysaba halkan ka eeg:

www.lulu.com/content/1258375

Kolkii intaa Barwaaqo degellada ku soo faafiyey ayuu ninka la yidhaa **A. M. Yuusuf** '**Waayee**l' u qaadan waa ku dhacay. Waxaanu degellada ku soo faafiyey gorfayntan soo socota oo uu ka qoray buugga aan weli ifkaba kolkaa u soo bixin. Waxaanu yidhi:

## B. Maxaa Gaarriye loogu hiilin

A. M. Yusuf | wayeel@operamail.com

www.waayel.blogspot.com

*Adigoon ogeyn baan*
*uurkaaga baadhoo*
*ula jeeddadaadaan*
*ka arkaa dhul dheer*

*Hadraawi: Arag Maqal*

Af Soomaaliguba habeen uu wada maldahnaa ayuu kaftan u dhiibay qoraagii qoray "Hal Ka Haleel". Barfasoor Gaarriye ayaa Maxamed Baashe ku yidhi, "*Maxaad iigu hiilin weyday sidaad Hadraawi ugu hiilisay"* (Degelka Ururka Aftahan)? Ogow kaftanku, xididkiisa hoose, waa dhab!

Cabdirraxmaan Faarax (Barwaaqo), muddo dheerba, waxa uu soo ahaa shamac iskii u shidnaan jiray. Ilays ayuu u soo ahaa dhaqan: -- af hooygii gabay, af uu habeen na u galay. Waa dhaxalreebe aad iigu weyn. Hadda, waxa hawshaas adag ugu soo darsoontay in uu noqdo: "qalin ka afceliyo carrabka aftahankii Soomaa-lida ee intaa, weligeedba, iska soo lulan jiray uun"! Alleylehe, afmaalkii la qabi jiray; qalinmaal ayaa ka dabo yimi. Barwaaqo, isagu na, waa qoraa u hiilliyay Ustaad Gaarriye.

> Beri ayaa rah, meel uun, ka jalaw yidhi. Saa raadi ayaa i gashay. Haddii aan tegey meeshii uu ka qaaq lahaa, waxa aan ogaaday, meesha uu dhex joogayba in ay ahayd: '*Haro wada dhiiqeysan*'. Saa, misana, awowgay ayaan weydiiyay waxa rahu uu intaa u qeylinayo.
>
> Waxa uu yidhi awowgay, "Maanta oo idil, naf iskaga kaa hadlayso; rake ayaan ka arkay: '*Anna way kan! Anna way kan*'!" [ Halkaan ka akhriso ]

Goortii aan su'aashaas weydiiyay awowgey, xagga da'da, toban jir oo kale ayaan ahaa. Yaraanta waxii lagugu ababiyo, weynaanta ayay dib kaaga soo baxaan. Higsashoda dhallaannimo se lama mid aha, midda waayeelnimo. Gocashada carruurnimo waa mid weligeed u curdoonaan sida oogta waaberi. Xusuustaas ilmonimo waa wacdaro si uun ula masoobi karayso caano laga soo maalay geelii Ustraaliye:

"Dhallaanimo qodxihii kugu mudaa kaaga soo dhaco'e!"

Waa dhallaankaas aan soo ahaan jiray waxa kula hadlayaa maanta; marnaba ma aha, odaygan waayeelka ah; haatan se, si aad ah uga feejigan, kabo na ka yeeshay, awgeed aqoonyari carruurnimo, siyaabo daran, qodxohii cagahiisa u soo ragaadin jiray.

Haddaba, gabyaa kasta, waxa uu ahaan karayaa waxii uu soo ahaan jiray yaraannimodii. Sidaas darteed weeye, waxa ay abwaanno badan ay u rumaysan yihiin in "Canuggu noqon aabbehii ninka".

Wiilkaas yar ee awowgii wax weydiin jiray, run ahaan, ayaa aniga na i dhalay uun, mise saa ma aha?

Buug la yidhaado "Mahadhada iyo Waxqabadka Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye'" ayaa goordhow soo baxay. Waxa aan aad ugu hanweyn ahay in aan ka baran

doono: waxyaabo ka duwan, wax Ustaad Gaarriye, isagu ba, aan uu suugaantiisa ka sheegi kari lahayn ama se kaba sheegi aqoon kari lahayn? Iyo Barwaaqo in uu uurka abwaanka isaga ah naga wada ogsoon yahay, iyo in kale? Iyo Barwaaqo, laf ahaantiisu, suugaanta in uu ka badiyo ama uu abwaan Gaarriye suugaantiisa kaga sii war roon yahay? Buugga isaga ah haddii aan saddexdaas waxyaalood ka dhex arki waayo; waxa ay ila tahay, haddee, qoraagu waxa uu afuuf is yidhi waa bigil, kaas oo aan ay dhegtaydu u xiiseyn doonin sida rahii jidhaanta ka dhex ciyi jiray.

Qof haddii uu ilmo gardaadinayo -- kolley anigu dhaqankii laga yiqiin halkii aan ku dhashay -- dabadeed markii uu boggiisa ku xambaarsado, waxa uu ilmohii ku oran jiray:

*"Saan yeelo, yeel!*

*Saantayda raac…"*

Barwaaqo, sida ay ila tahay, waa qoraa isku dayay, rag waabayo tufi jiray in uu xuubkiisii ina horkeeno; balse waa kuma qofka u qaadan, run ahaan, xuubkaa isaga ah in uu u dhigmi karayo isla dubkii, -- maskii Gaarriye ahaa uu ka xuubsiibtay? Hayeeshee, si weyn ayaan u rajeynayaa in Barfasoorkuna yeesho saanqaadka qoraa-gaas oo kale. In uu kaga daydo waxqorista; ka na koro kutirikuteenta. Barfasoorku, qoraayaalka dhiirran ee welibana iskugu kalsoon sida Barwaaqo oo kale, kutebinta qoraalka, waa in uu iyaga ka hiddoraacaa. Waa ku ceeb, isla isagii oo weliba nool, araggiisii in qalin kale uu anqaas ku malmalluugo, lagana yeelo si aan uu isaguba iskugu muujin lahayn amase aan uu dadweyneha ugu muuqan lahaynba. Maanso qalaad ayaa oranayso:

"Awood ayaan rabi lahaa nagu yaboohdo hibada si aan iskugu aragno sida kuwo kale ay inoo arkayaan."[1]

Gaarriye, miyaa tolow la halmaalo Abu Al-Hawl, kii la yidhi: inta kale mooyaane, isagu kama sheekeeyo xogohiisa?

Aniga iyo Barwaaqo na waxa ay inoo taallaa: dabadeed goorta aan buuggaa wada akhriyay, -- misana aan gabyi kari waayo. Taas waa qab la yaab leh ee uu qoraaga ka haysto buruudshiilka Gaarriye. In dadku ba wada gabyi kari lahaa, haddii ay wada baran lahaayeen Miisaanka Abul Khaliil! Hayeeshee, shumacaas hadba gees u babanayo, ololkiisa baxayo na la yidhaahdo Barwaaqo: Barfasoor Gaarriye, isagu na, waa hooskaa ku ag sugan, ku na ag silloon -- hummaag weeye buug dhexdii uga dhex waliileyn geddii halaq laga jaray halkii madax ee looga ba cabsoon jiray.

Haah. Qoraa kasto waa wax looga baahan yahay in jiilalka dambe uu u dhaxalreebo. Illayse, haddii aad ila arkayso ifafaale aan meel fog uga jeedo: Maxuu Barwaaqo usha oday kale u cuskanayaa ama se ba uu u adeegsan qalinka abwaan nool ee weliba isaga ba ka sii codkarsan? Barwaaqo muu qoro buug uu isagu iska leeyahay?

Si weyn miyaan uga qawaday in weliba la yidhaahdo aqoonyahanno ayaa hawshaas ku hambalyeeyay? Haa-yoo taas waa run; maxaa se ku jaban? Aqoonyahan waxa uu doono ha sheego. XIGMADYAHAN se, weli wax uu buuggaas ka yidhi, ma arag anigu! Buuggan, mooyi xuubkiisii; u se maleyn mayo in uu iiga soo baxayo “goodkii oo nool”. Ma qalinka Barwaaqo ayaa micigii Gaarriye ka sumeyn og diktatoorrada, haddaa? Waa aqoonyahan, waa abwaan, waa ustaad, waa xeerbeeg, waa siyaasi, waa reer magaal, waa na wax kasta ee wanaagsan... waa... ba la yidhi... baala...! Barfasoor Gaarriye, laakiin... isagu waxba ma qori yaqaan, sow haddee nuxurkii ma aha?

Haddii ay hiillada Barwaaqo u noqon lahayd gardaadin, magac, haybad, weyneyn, caleemosaar -- ama xusuus hadhowto lagu xusuusto noloshiisii -- ha u qaato aqoonsi loo soo hormariyay kiiyoon dhimanin ee nool. Illayn abwaan nagu wada weyn, Duncarbeed, ayaa horey inoogu soo dhaliilay:

Kol haddaanad geerida horteed geesiga oqoonsan goblan weeye Soomaaliyeey garashadaadiiye!

Agoosto 19, Maxamed Xaashi Dhamac nolol ayaan ku ogaa. Sidee wax u jiraan? Kolley ba, waxa ay aniga ila tahay, buuggan isaga ah, walow loo soo dhoobay, loo na soo ekeeysiiyay qaabkii abwaanka oo kale; waxa keli ah oo aan sii hubo waa: in aan uu ku daabnayn ruuxii canugga! Dareenkii abwaan ayaa si uun meesha ba uga madhnaan. Akhristow, mooyi in aad weligaa soo akhrisatay maanso ku saabsanayd sanamkii burburay ee Ramsiiskii Weynaa, Osimandiyas? [2] Suugaantii Gaaarriye ee qabweynida soo lahaan jirtay; haatan, waxa ay dhex daadsan tahay -- "dirridaa abaarta ah" iyo lamadegaankii Faraaciinta oo kale; ama se, -- buug ay dabaylo ka dhex fooriggaalleynayaan.

Akhristow, horta buugga wanaagsan soo iibso: oo "Kala saar run iyo been, kala garo sir iyo caad." Barwaaqow na, adigu na, kala garo hiil dhab ah iyo hiil dheeg ah. Naftaada u hiilli, maandhow.

**Cagdhigyo**

[1] Waxa aan ka soo amaahday maanso la yidhaahdo "To a Louse," uu qoray na Robert Burns: O wad some Power the giftie gie us To see ourselves as others see us.
[2] Waa maanso la yidhaahdo "Ozymandias," uu qoray Percy Bysshe Shelley, ku na afgoynayo:“And on the pedestal these words appear: *'My name is Ozymandias, King of Kings:Look on my works, ye mighty, and despair*!'Nothing beside remains. Round the decay
Of that colossal wreck, boundless and bare, The lone and level sands stretch far away.”

Waxa qoraalkii Waayeel ka soo falceliyey nin la yidhaa Caddaani Axmed waxaanu soo qoray qoraalkan soo socda.
Waxaanu yidhi:

## C.INA YUUSUF MUXUU ISKU OGYAHAY EE UU KA SII OOYEYAA?

Posted to the Web 08 Oct 07, 09:01,
www.redsea-online.com

W/Q Caddaani Axmed, qoraa iyo hal-abuur Soomaaliyeed

Hargeysa S/Land

Waxay dhammaan bulshada afka Soomaaliga ku hadasha dhawaan wada daalacdeen buug cusub oo la magac baxay *Mahadhada Iyo Waxqabadka Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye"*. Waxaanse ku soo baraarugay maanta oo uu ninka layidhaa *A. M. Yuusuf "Waayeel"* shabakadaha Soomaaliyeed ku faafiyey maqaal aad ka dhadhansanayso cuqdad uu ka qabo ninka wax laga qoray iyo qoraaga qaaliga ah ee Soomaali oo dhammi ku dhaadato in uu isku dhereriyo, taasna waxaa iiga markhaati kacaysa isaga oo aan buuggii akhriyin ayuu yidhi waan gorfaynayaa. Waa markii u horreysey ee aan maqlo ama arko qof gorfayn ka sameeya buug aanu akhriyin. Tolow miyaa loo waxyoodey, mise waaba uur-ku-baallahii la sheegi jire? Alla miyuu sugo inta uu buugga akhriyayo.

"Allahayow aqoon la'aan ha nagu cadaabin eexna ha nagaga tagin", ayaa lagu ducaystaa. Waxan xilli aan fogeyn akhriyey maqaal uu qoray Ina Yuusuf oo la yidhaa: Miisaanka tallaabada Geela. Mar uu ka hadlayey Miisaanka Maansadana wuxu yidhi: Borofessor Gaarriye, hal tusaale ha i siiyo looga gabay fiicnaan karo: Salaan carrabey, Ina Cabdulle Xasan, Qaasin, Qamaan Bulxan,

Faarax Shuuriye, iyo in kale oo badan oo aan wada jecelnahay aniga iyo isaguba? (A.M.Yuusuf)

Waxaa ka muuqata qoraalkiisa inuusan arag akhriyinna aragtidii Miisaanka Maansada. Gaarriye weligii ma odhan waxaan soo saarayaa dad ka gabay fiicnaada nimankaasi uu sheegay. Gaarriye wuxu yidhi:

Maqal! Ma jeclaan labayd inaad gabaydo? Mase og tahay inaan abwaannimada loo dhalan uun ee la samayn karo? Waxba ha la yaabin. Ma jiro waxaan qofka aadmiga ihi aanu qaban karin, haddii uu niyad fiican la yimaaddo. Way jirtaa oo waynu aragnaa dad hibo gaar ah u leh gabayaannimada. Hase yeeshee waxa been ah inaan qofkii rabaa aanu noqon karin abwaan. Waxaad iska raariddaa inaad wixii qof samayn karaba aad adiguna sameyn karto. Waa tahay. Aniga ayaa kuugu macallin noqonaya sida loo gabyo ama loo heeso. Hase ahaatee anigu Af-soomaali ku barimaayo. Waxaan kuu dhigayaa habka loo gabyo iyo shuruudaha la doonayo inaad fuliso. (Gaarriye 1976)

Sidii uu uga hadlay Miisaanka isaga oo aan arag oo aan akhriyin ayuu doorkana uga sii hordhacay buugga uu ka hadlayo isaga oo aan arkin. Haddii ay degdegsiiyo door dhalaan, kaadsiiyana kiish lacagay dhalaan.

Haddana waxa iigu xigtay maqaal kale oo uu leeyahay '*Suugaan la'aani waa Aqoon La'aan'* oo ku qoran ardaaga aftahan http://www.aftahan.org/article.php? artid=53.

Suugaantu waa aqoon la barto ee ma noqon karto aqoon la'aan. Miyaanu ogayn in dayaxa la tagay oo la rabo in lagu dul noolaado. Ma suugaan baa lagu tegey?

Degdegga iyo hubsiimo la'aanta Ina Yuusuf waxa ka mid ah kolkuu lahaa, " Barwaaqo miyuu qoro buug uu isagu leeyahay inta uu Gaarriye ka qoraayo." Taas waxaan u arkaa aqoon la'aan ka haysata kaalinta uu Barwaaqo

bulshada Soomaaliyeed kagaga jiro. Barwaaqo waxa uu qoray buugaag dhawra oo uu ka mid yahay: Abwaan cusub oo af Soomaali iyo Af-ingiriisiya (*A modern Somali-English dictionary*) oo ah kuwa Soomaaliga loogu jecel yahay, yaallana jaamacadaha adduunka si raadraac (reference) loogu sameeyo. Waxa kale oo uu qoray buugga la yidhaa *Abwaanka Cudurrada iyo Duunyada* iyo buugga la yidhaa *Magac Bilaash uma Baxo*, oo ah buuggii uu qoraaga qaaliga ah ee afka Soomaaliga wax ku qora ee *Dr. George Kapchits* ku tilmaamay inuu yahay buuggii uu sugaayay afar iyo labaatanka sanno. Halkan ka akhri qoraalkii uu ka qoray. http:// www. wardheernews. com/ Book% 20Review/ March _ 10_ Magac_Bilaash _Uma_Baxo.html

Si joogta ah waxa uu Barwaaqo soo saare sare uga yahay Joornaalka Hal-aqoon oo saddexdii biloodba mar soo baxa. Halkan ka akhri maqaalkii laga diyaariyey, http://www.qoraaga.com/?p=51.

Shirkii u dambeeyey ee Cilmibaadhista Soomaaliyeed, laguna qabtay magaalada Columbus ee dalka Maray-kanka, wuxu Barwaaqo ku soo bandhigay barnaamij kombuyuutar oo lagu saxayo maansada Soomaaliyeed (Ka dhegeyso waraysigii uu siiyey VOA-da) oo uu waraysanayay Cabdisalaan Hereri.

Waxaa kale oo hadalladii Ina Yuusuf ka mid ahaa: Aniga iyo Barwaaqo na waxa ay inoo taallaa:

*"dabadeed goorta aan buuggaa wada akhriyay.--*
*misana aan gabyi kari waayo."*

Soomaalidu waxay tidhaa, hadal aan fiiro loo odhan iyo caano aan firiqsi loo kabbaniba feedhahay wax yeeleeyaan. Waa ta koowaade qofkasta oo dedaalaa Xaaji Cabbaas waa gaadhikaraa waana dhaafi karaa oo waxay ku xidhan tahay dedaalka qofka in uu wax barto. Haddii uu Ina Yuusuf dedaal la yimaaddo isna jaamacad waa

dhammayn karaa miisaan uu barto daaye. Laakiinse haddii uu damiin noqdo Barwaaqo kama masuul aha ee ninkii seexday ayaa sicii dibi dhalay. Umana malaynayo aqoon yahannada ka faallooday in uu ka aqoon badan yahay Ina Yuusuf. Waxayse u egtahay, sida aad maqaalka ka dhadhansanayso, in uu isku dhererinayo Barwaaqo itaalkiisu meel uu dhigaba.

Haddaba waxaan Ina Yuusuf iyo dadka jecel in ay buugta gorfeeyaan u sheegaya in buug waliba leeyahay qalad iyo saxba, laakiinse labada ay tahay in la sheego marka la akhriyo. Lays kana ilaaliyo caadufadda qabiilka iyo hebel nacaybka se ay tahay in la isa saxo la isna toosiyo, maxaa yeelay taas ayaa horumar lagu gaadhi karaa wax qoridana lagu dhiirri gelin karaa. Waxaanan kagaga baxay in uu maqaalkani Ina Yuusuf u noqon doono caqli celis lagana yaabo in uu ku caqli qaato. Haddii kale waxay noqon doonta in maqaallada danbe ee uu qoro aan la akhriyin ee la yidhaa naga daaya waa ilxin-dhiiqe.

Kolkii uu Caddaani qoraalkaasi u gudbiyey Waayeel, wuu la soo xidhiidhay isaga oo ka cudurdaaranaya gefka uu galay. Waxaanu soo qoray farriintan:

## D. Falcelintii Waayeel:

**> From: wayeel@operamail.com**

> Date: Mon, 8 Oct 2007 00:44:26 +0300
> Subject: Re: UMA MALAYN DOONO IN MAQAALADAADA LA XIISAYN DOONO

> Salaamu Calaykum Walaal Caddaani

> * Horta Ramadaan Kariim *

> Haddii aan si wanaagsan u gartay qoraalkaagan, nin waxtoosinaya ayaad iila muuqataa. Waana aad ku mahadsan tahay niyaddaada wanaagsan.

> Soomaalidu waxay ay tiraahdaa, "laba dhaxal ku dirireysa maxay isu yihiin lama yidhaahdo?" Wax kasta marka la iska illoobo, walaalo ayaynu nahay.

> Si wanaagsan ayaad na u garatay in raggaa iyaga ah aanan ku na caqli, ku na aqoon ahayn. Waad i taqaan.
> Waan kaa qaatay waanadii walaanimo; waa na aan joojin. Waa ballan in aanan dib dambe uga hadli doonin suugaan uu qof Soomaali ah iska leeyahay. Siiba, suugaanta, midkoodii weli NOOL. Wa tahay walaalkayow.

> Mar kale. Iska kay cafi. Mar kale Ramadaan Kariim!

> Yusuf Wayeel

Waxase is weydiin leh, Waayeel ballantii uu qaaday ma fuliyey, mise meel kaluu ka fudkudiyey?

Sidii uu ku ballanqaaday maalintiiba wuu ka saaray qoraalka degelkiisii. Wuxuse gocday mooyaane, laba beri kadib buu qoraalkii ku soo saaray degelkiisii, degello badan oo kalana uu u gudbiyey waana la faafiyey. Waayeel intaa kuma joogin ee wuxu haddana degelkiisa www.wayeel.blgspot.com ku soo saaray qoraal kale oo af lagaaddo ah oo uu u haysto inaan lagu garan. Qoraalkaasi oo uu ubixiyey *Rakaw*[1] *qaaqda jooji*. Qoraalkuna wuxu u qornaa sidan:

**E. Rakow Qaaqda jooji**

"Guud ahaan mas'aladan (naqdiga suugaanta) mushkilado dhawr ah ayaa inaga haysta haddii aynu soomaali nahay. Waa marka koowaade buugga, buugba, wax ku sheeggiisa iyo wax ka sheeggiisu weli dhaqankeenna ma ay degin. Marka labaad waxaynu moodnaa haddii qof halabuurkiisa wax laga sheegayo in ay tahay in la ammaano uun; haddii aan la ammaanayn maxaaba loo soo hadal qaadayaa, ayey inala tahay. Mar kale haddii qof suugaantiisa la dhaliilo ama la ammaano waxaa loo qaadanayaa in shakhsiyaddiisa laga hadlayo, xataa haddii ay tahay hawl heer ummadeed ah" [*Hoos-xarriiqda aniga ayaa u yeelay*].

Labadan arrimood ee dambe, marka la isku kiciyo, waxay salka dhigtaan **qabiil iyo qabyaalad**, sida ay dadnimada soomaalida oo dhami halkaa u sal dhigato. Waa mucjiso haddii la arko qof si xilkasnimo iyo daacad ah wax uga sheegaya qof aan la qabiil ahayn ama la qabiil ah".

( Ibraahin-Hawd, Ibraahin Yuusuf Axmed: Waxaan Akhriyey Hal ka Haleel, 7/2004 )

**F.G.** Qoraalkaan aniga ayaa soo xigtay ee ma aha mid uu ii soo diray Ibraahin-Hawd. Fikraddaas Ibraahin-Hawd ayaa madaxeyga ka dhex guuxeysay goortii aan soo qaadanayay sheekada ku saabsanayd Awowgay iyo Rakeha.

Waxa aan is weydiinaya hataan, imisa rake oo kale ayaa dacda ka soo dhex yeeri doonto? Qof dacdaa lagu diqoonayo dhex jiifa in uu nadiif is moodo, haddana, Soomaalida dhexdeeda, waa faan, ogow, aan ugub ku ahayn.

Iska illow, waxa qof kuu ah ina-adeer uu naftiisa u tari ama u tabci karayo!

Adigu, ANNA-WEY-KANOW, horta kuma ayaad tahay? Maxaad tari kareysaa? Maxaad tacbi kareysaa? Ii sheeg maxaa kaa maqan? Ha ii sheegin cidda aad taqaannid!

Anigu waxba kale ma ahi; cid kale na ma ahi. Aniga uun ayaa is ah. Qabiil kale ma qabo aan ka ahayn: "Wayeel". Isaga ayaa na iigu filan wax kasto. Wayeel ayaa wax i tara, wax na ii tabco!

**Rakow**, seexo hurdadaadii dheerayd ama ba iska dhimo: waayo, goordhow, jidhaantii qabyaaladda waa ay engegi doontaa!

1. Gobollada qaar baa raha looga yaqaan rake.

Ninka la yidhaa Mustafe Guuleed Ismaaciil baa isna ka soo falceliyey qoraalkii waayeel ee ladhkiisu ahaa: *Maxaa Gaarriye loogu hiilin*? Waxaanu soo qoray qoraalkan hoos ku qoran. Waxaanu yidhi:

## F. Maxaa Gaarriye Looga Hiilin?

**Date:** Friday, October 12 @ 07:51:16 CDT, www.redsea-online.com

W/Q Mustafe Guuleed Ismaaciil

Hargeysa, Somaliland

mgismael@yahoo.com

Marka hore aan soo qaddimo CIID MUBAARAK. Marka xiga haddii aan in yar is bidhaamiyo, waxan ahay nin dhallinyaro ah oo deggan magaalada Hargeysa dhawaanna ka qalin jabiyey jaamacadaha dalka. Waxaanan ka mid ahay akhristayaasha ku mamay dheehashada web-saytka *Aftahan.org* iyo kuwa kale ay gacanta ku hayaan muwaadiniinta reer Somaliland ee Illaahay kartida u dhaliyey.

Subax aan dheerrayn ayaan ku qureecday maqaal ku soo baxay Aftahan.org oo uu qoray nin magaciisa ku soo gaabiyey A. M.Yuusuf cinwaankiisuna ahaa "Maxaa Gaarriye Loogu Hiilin? Qacdii u horreysay ee aan isha ku dhuftayba akhris baan la boobay oo waxan u arkay maqaal ka dhan ah macalinkaygii. Haseyeeshee waan ku hungoobay waanay ii suurto-gali wayday in aan ka bogto nuxurkii maqaalkaasi xambarsanaa. Saddex ilaa afar jeer baan dib u akhriyey, waxbase igagama duxin. Xataa waxan fahmi kari waayey ujeedada guud ee maqaalka. Ma anigaa waalan mise cadan baa laga heesayaa?

Qoraaga maqaalku wuxu u eg yahay mid ku wadhwadhay af-Soomaaliga, haddana waxa muuqata in aanu lahayn awoodda uu farriin qoraal ah ku soo gaadhsiin karo qof Soomaaliyeed oo sidayda da' yaraan iyo saboolnimo af isku darsaday. Mise tolow wuxu ugu talo galay akhristeyaal gaar ah oo sheed ka sii fahmi kara waxa uu ka hadlayo? Siday doontaba ha noqotee, caqabadaha iga xanibay fahamka maqaalkan waxa ka mid ahaa:

1. Erayada iyo duur-xulada maqaalka loo isticmaalay oo kakan lagana yaabo in ay yihiin hambo ka hadhay af dabar go'ay

2. Hadalka qoraaga oo aan kala qallayn ceeryaan badanina ku hagoogan tahay ama u eg hannaankii googaa cigale

3. Ujeedada maqaalka oo aan si toos ah iyo si dadban toona u qeexnayn

Marnaba ku-talo-galkaygu maaha in aan banaanka soo dhigo goldaloolooyinka ka muuqda xirfadda qoraaga, balse waa in aan ka hal celiyo dhibaatooyinka dhallinyarada ka qabsada qorayaasha qaarkood gaar ahaan kuwa is-muujintu ku jirto ama aaminsan aragtida odhanaysa *maqaalkagyu si uu miisaan u yeesho waxan isticmaalayaa ereyo iyo weedho culculus, ninkii aan fahmi karrayna isagay u taallaa*.... qorayaashaasi waxay ku sifoobayaan xikmadda odhanaysa "karis-xun iyaduna wax ku la'." Waxa muhiim ah in waxa ugu weyn ee qoraagu ka fikirayaa ay noqoto sidii uu fariintiisa oo aan madmadaw lahayn dadka inta ugu badan u gaadhsiin lahaa. Taas intaas aan kaga gudbo.

Haddii aan u soo noqdo maqaalka A M Yuusuf, waxan u arkaa in ay wax iska caadi ah oo la isla wada yaqaan tahay in buug, qoraa ama mufakar la dhaliilo. Haddii ujeedada qoraagu ahayd dhaliil-toosin iyo naqdi buug waa arrin caafimaad qabta waana mid mudan in la dhiiri

galiyo. Haddiise, sida aan ka dhandhamiyey cinwaanka oo ah qaybta kaliya ee aan is leeyahay waad fahantay, ay ujeedada qoraagu tahay "Maxaa loogu hiilinayaa Gaarriye, ma nin in loo hiiliyo u qalmaa? Waxan kaga jawaabayaa: horta nagu qanci sababta aad u diidan tahay in Gaarriye loo hiiliyo haddii kale waxanu dib kuugu soo celin su'aasha odhanaysa *maxaa looga hiilinayaa Gaarriye? Ma nin in laga hiiliyo gayaa?*

Wa bilaahi tawfiiq..

Mustafe Guuleed Ismaaciil

# QAYBTA II aad

# 1. Warbixin kooban oo ku saabsan ka qayb galayaashii laba-kaclaynta Doodda:

**Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale'**: Aqoonyahan wax ku bartay Soomaaliya iyo Maraykan. Haddana wuxu deggen yahay dalka Denmarka. Waa aqoonyahanka ay Gaarriye isku haysteen daah-furidda Miisaanka Maansada. Wuxu doodda ku leeyahay laba waraysi iyo hal qoraal. Ka kala eeg bogga 68aad, ka 180aad iyo ka 234aad.

**Ibraahin Yuusuf Axmed 'Hawd'.** Qoraa deggan dalka Sweden. Buugga la yidhaa 'Aanadii Negeeye' ayaa ka mid ah buugaagtiisa. Doodda hal qoraal buu ku leeyahay ee ka eeg bogga 77aad.

**Deeq A. Diiriye:** Nin xiiseeya suugaanta oo sida la sheegay deggan dalka Kanada. Hal qoraal buu leeyahay ee ka eeg bogga 88aad.

**Khaalid Jaamac Qodax:** Aqoonyahan da' yar oo deggen Hargeysa, xubin firfircoonna ka ah Ururka Hargeisa Readers Club. Hal qoraal buu doodda ku leeyahay ee ka eeg bogga 91aad.

**Maxamed Xirsi Guuleed:** Qoraa iyo hal-abuur xubin ka ah Ururka Qoraaga S/land. Buugaagta uu qoray waxa ka mid ah: Ragga toodi aragnaye, dumar talo ma laga deyey? Qoraal oo xiisabadan buu leeyahay ee ka eeg bogga 99aad.

**Cabdiraxmaan C. Faarax 'Barwaaqo':** Aqoonyahan deggan dalka Kanada. Saddex qoraal buu doodda ku

leeyahay. Qoraalladiisa ka eeg bogga 28aad, ka 108aad, iyo ka 151aad

**Liibaan Axmed:** Aqoonyahan iyo qoraa degan magaalada Manchester ee dalka Ingiriiska. Hal qoraal baanu doodda ka dhiibtey ee eeg bogga 121aad.

**Cabdulqaaddir Nuur Salaad 'Takar':** Bare sare oo wax ka dhigijirey Jaamacaddii Lafoole, aqoon badanna u leh Abwaan Gaarriye sida uu qoraalkiisa ku xusay. Hadda wuxu deggen yahay dalka Maraykanka. Hal qoraal buuna ku leeyahay doodda ee ka eeg bogga 123aad.

**X. Cabdalla Xaaji Cusmaan:** Madaxa kaydka dhaqanka iyo suugaanta RTD ee Jabbuuti. Doodda wuxu ku leeyahay laba qoraal oo caqiiba leh ee ka eeg bogga 128aad iyo ka 239aad.

**Cawil X. Cali:** Wuxu doodda ku leeyahay hal qoraal. Ka eeg qoraalkiisa bogga 134aad.

**Jaamac Cabdillaahi Suleymaan:** Waxgarad Soomaaliyeed. Hal qoraal buu ku leeyahay doodda, kana eeg bogga 137aad

**Cusmaan Aadem:** Bare la faca, sida qoraalkiisa ka muuqata, Carraale. Doodda hal qoraal buu kaga qayb galay ee ka eeg bogga 143aad.

**Idiris A.:** Waxgarad Soomaaliyeed. Hal qoraal oo fal celisa buu doodda ku leeyahay. Qoraalkana ka eeg bogga 159aad.

**Axmed Y. Ducaale:** Aqoonyahan, siyaasi, wasiirkii hore ee tacliinta ee Somaliland. Wuxu doodda ku leeyahay

hal falcelis oo marag fur ah. ka eeg bogga 161aad.

**Shiine Cilmi Kaahin** (weriye ka socda SWDO): Weriye ka tirsan degelka SWDO. Qoraalkii uu soo diray ka eeg bogga 163aad.

**Cali Jaamac:** Wuxu doodda ku leeyahay hal qoraal oo ku qoran bogga 165aad.

**Mustafe M. Khayre:** Aqoonyahan da'yar, xubin firfircoonna ka ah Ururka Hargeisa Readers Club. Hal qoraal buuna ku leeyahay doodda ee ka eeg bogga 168aad.

**Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye':** Abwaan, waana Borofisar wax ka dhiga saddexda jaamacadood ee Hargeysa, Cammuud iyo Hamar University. Waa aqoonyahakii ay Carraale ku muransanaayeen daah-furidda Miisaanka Maansada Soomaaliyeed. Hal waraysi buu doodda ku leeyahay ee ka eeg bogga 171aad.

**Mustafe Guuleed Ismaaciil**: Waxgarad iyo aqoonyahan Soomaaliyeed. Wuxu doodda ku leeyahay laba qoraal oo xiisabadan kana eeg bogga 54aad iyo ka 188aad.

**Sayid Maxamed Yuusuf 'Dhegey':** Qoraa iyo hal abuur ka tirsan Ururka Qoraaga reer Soomaali-laand. Wuxu deggen yahay dalka Sweden. Hal qoraal buu ku leeyahay doodda. Ka eeg bogga 192 aad.

**Fu'aad Sh. Abu Bakar** (Bahda Farshaxan): Aqoon-yahan deggen dalka Maraykanka. Waana maammulaha degelka www. farshaxan. com. Waraysi uu Carraale la yeeshay iyo hal qoraal buu ku leeyahay doodda ee ka eeg bogga 197aad iyo ka 207aad.

**Siciid Maxamed Xirsi** "Siciid Suugaan": Wuxu deggen yahay dalka Maraykanka. Wuxuna ururiya suugaanta hayeeshee sida  uu sheegay wax ma qoro.

## 2. Labakaclayntii Doodda Miisaanka Maansada Soomaaliyeed

Sidii uu Barwaaqo hore u xusay, dad badan baan ku qancin gartii uu naqay. Badh dadkaas ka mid ihi waxay u arkeen Barwaaqo inuu qof jeclaysi Gaariye ugu hiiliyey oo aanu garta dhexdhexaad ka noqon. Dar baa ayana u haystay inaanu la socon dhacdadaba oo uu arrinkiisu qarda jeex iyo ismiidaamis ahaa. Siday doontaba ha ahaatee, waxa dadkaasi ka mid ah ninka la yidhaa *Siciid Maxamed Xirsi* oo ku magac dheer *Siciid Suugaan* deggenna magaalada Kolombas (Columbus) ee gobolka Ohio ee dalka Maraykanka.

Dhawr maalmood kadib markii la soo saaray qoraalkii ladhkiisu ahaa: *Kumaa ah aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed ma Carraale mise Gaarriye*, ayuu Siciid sameeyey dhaqdhaqaaq uu rabo inuu aragtidaasi ku buriyo. Waxaanu dhawr goobood ka sheegay inuu hayo caddaymo burinaya aragtida Cabdiraxmaan Barwaaqo. Hayeeshee, wax uu soo bandhigay ma jirin. Wuxuse noqday dhuxul dambas huwan oo hoos ka baxaysa, hoos baanu arrinta ka hurinayey.

Bishii Ogost ee 2007dii ayuu Cabdiraxmaan Barwaaqo tegey magaalada Kolombas si uu uga qayb galo shirkii 10aa ee Cilmi-baadhista Soomaaliyeed. Siciid Suugaan wuxu ka mid ahaa qaban-qaabiyayaashii shirka. Wuu ka warqabay inuu imanayo. Warqadda uu shirka geeyey iyo waxa ay ku saabsan tahaybana wuu ka dheregsanaa.

Aroortii shirku sida dhabta ah u furmayey ayey Barwaaqo iyo Siciid kulmeen. Waxa isbaray *Cabdikariim Jirde Goolle* oo hadda af Soomaaliga ka dhiga Jaamacadda *Ohio State University* kana mid ahaa dhallinyaradii Cabdiraxmaan Barwaaqo ku soo dhoweysey magaala-daasi iyada ah. Siciid kolkiiba kaftan buu bilaabay

dhacdadii Miisaanka Maansadana Barwaaqo wuu la soo hadal qaaday.

Hadal wayska badnaayey, wuxu Siciid markii dambe u sheegey inuu hayo caddaymo uu ku burinayo aragtida Barwaaqo. Kolkii Siciid la weydiiyey caddaymaha uu hayaa waxay yihiinna, wuxu ku warceliyey, " Waxan hayaa buug uu Carraale qoray 1976kii." C/Raxmaan Barwaaqo ayaa hadalkii qaatoo ku yidhi, "Anigu kama warqabo buug Carraale iyo cid kalatoona arrinta ka qortay oo ka horreeyey qoraalkaasi uu Gaarriye soo saaray." Wuxu Siciid ku yidhi Barwaaqo, " Haddii buuggaasi lagu soo hordhigo gartaadii ma ka noqonay-saa?" C/Raxmaan Barwaaqo ayaa u warceliyey oo yidhi, "Waxay ku xidhantahay xilliga uu buuggu soo baxay." Siciid baa hadalkii ku celiyey oo yidhi, " Maxaad ujeeddaa?" Barwaaqaa ku yidhi, " Haddii uu buuggu soo baxay wixii ka horreeyey 17kii Jeenaweri ee 1976kii waan qaadanayaa. Haddii uu gelinkii dambe ee 17kii bisha soobaxayse ha ii soodhoweyn."

Inta uu qoslay buu ku yidhi, " Ka warran haddii aan kuu keeno ninkii buugga hayey ee madbacadda ka shaqay-nayey?" C/Raxmaan Barwaaqo intuu yaabay buu ku yidhi, "Adeer, maya ee waxba ha ii keenin." Inta uu Siciid ilka caddeeyey buu ku yidhi, " Midda kale Barwaaqo, miyaanad ogeyn in buug qoristu ka hawl badantahay qoraallo la soo saaro? Dee taana ku xisaabtan." Markii intaasi kala gaadhay Siciid iyo Barwaaqo ayey kala tageen.

Aroortii dambe ayey Siciid iyo Cabdiraxmaan Barwaaqo haddana kulmeen. Bariido kadibna wuxu Siciid u sheegay Barwaaqo inuu doonayey inuu buuggii u keeno hayeeshee uu soo illoobey.

Ugu dambayntii wuxu Barwaaqo gadaal ka ogaaday inaanu Siciid wax buug ah hayn ee uu been ii sheegayey. Buugga uu sheegayey ee uu lahaa waan hayaana ahaa mid

uu hayey nin la yidhaa Deeq A. Diiriye oo markaa Kanada deggenaa.

Horaa loo yidhi: nin meeli u caddahay meeli ka madow. Siciid tiisa ayuun baa u muuqatay. Wuxuuna ku dadaaley inuu meel mariyo. Hadalladii uu Barwaaqo kula dooday oo dhanna waxaad ka dareemaysaa waraysigan soo socda ee ay wardheernews la yeelatay Cabdillaahi Diiriye Guuleed. Sidaasi awgeed Cabdiraxmaan Barwaaqo ayaa qabo inuu Siciid diyaarinta wareysigaasi uu qayb weyn ka qaatay.

## 2.1 Wareysi Cabdillaahi Diiriye: Waa Kuma Aabaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed?

www.wardheernews.com
May 20, 2008



WardheerNews waxa uu suurta gashay in ay wareysi la yeelato Bare Sare Cabdillaahi Diiriye Guuleed, oo ku magac dheer Carraale. Macalin Carraale waa aqoonyahan ku xeel dheer suugaanta Soomaalida oo wax ku bartay Soomaaliya iyo dalka Maraykanka.

Professor Carraale wuxu suugaanta Soomaaliyeed ku soo kordhiyey daahfurida qaacidada maansada Soomaaliyeed ku salaysan tahay. Qaacidadaas oo loo yaqaanno "**Miisaanka Maansada**". Waxa xusid mudan in ay jirto aragti kale oo ah in uu qaacidadaas daahfuray Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye).

Maadaama "Miisaanka maansadu" yahay daahfurkii ugu qiimaha weynaa ee qarnigii tegay ku soo kordhay suugaanta Soomaalida, WardheerNews waxa ay furaysaa dood ku saabsan keebaa hor helay "Miisaanka Maansada labadan aqoonyahan ee Soomaaliyeed? Inta aan ka warqabnno ma jirto weli dood ku saabsan su'aashaas oo la dhex dhigay aqoonyahanadaas ama dadka daneeya suugaanta Soomaalida.

Waxa WardheerNews hadda u suuragashay in ay wareysi ka qaado Professor Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale). Carraale waxa uu ka waramayaa sida uu isagu u yahay aqoonyankii ugu horeeyey ee daahfuray Miisaanka salka u ah tixaha Soomaalida ee loo yaqaan "Miisaanka Maansada".

Bare sare Carraale wuxu magcaabayaa aqoonyahannadii markhaatiga ka ahaa arrintaa ee xilligaa goob joogga ahaa. Wuxu Carraale diyaar u yahay, siduu wareysigan ku tibaaxay, in uu Abwaan Gaarriye soo hor fadhiisto iyagoo arrintaa ka doodaya.

Carraale waxa kale oo aqoonyahannada xiiseeya Miisaanka u sheegayaa in hannaanka Miisaanka maansada ee uu 1976 soo bandhigay iyo habka Abwaan Gaarriye xilligaa u soo bandhigay Miisaanka ay dhuuxaan iyagoo kala hufaya. Dhuuxitaankoodaas ka dib waxa uu Macallin Carraale ku doodayaa in ay arki karaan in dhammaan aqoonyahannada xiiseeya suugaanta Soomaalida, Soomaalida iyo kuwa aan Soomaalida ahayn, ee wax ka qoray miisaanku ay qaateen qaacidada bare sare Carraale soo bandhigay.

**Waa kan Wareysigii WardheerNews ay la yeelatay Professor Cabdilaahi Diiriye Guuleed.**

**WardheerNews**: Mahadsanid Professor Cabdillahi Diiriye Guuleed (Carraale), fadlan marka hore nooga waran taariikh nololeedkaaga?

**Carraale**: Taxanahaygii waxbarasho:

1. Dugsiyada hoose, dhexe waxaan ku qaatay gobolka Togdheer 1958-65.
2. Dugsiga sare NTEC(National Teacher Education Center) 1965-68.

3. a) Ka jaamacadeed Kulliyaddii Macallimiinta (Col-lege of Education) ee Lafoole 1970-74 (BSc).
b) UCLA (University of California at Los Angels) 1980-82 (MA).

**WDN**: Miisaanka maansadu waa qaacida ku cusub suugaanta Soomaaliga. Fadlan noo sharax waxa ay tahay Miisaanka maansadu ama tixlaydu? Yaa markii u horeyey

u adeegsaday erayga "Miisaanka" suugaanta Soomaalida dhexdeeda?

**Carraale**: Ereyga "miisaan" kuma cusba halabuurka hadda jira. Waxa jirey haddii meeris jaban curiye ku dhawaaqo, waxa markiiba maanso-dhaadhigu odhan jirey "laaxin" baa ku jira. Balse halka uu kaga jiro ama meerisku waxa uu la dhutinayo hore hoos looma deyin, haddii loo deyeyna Carraale hortii laguma guuleysan. Waxa aan anigu markii ugu horreysey ku guuleystey in aan soo bandhigo halka ama sida laaxinku ugu jiro. Ka dib markii aan kala hufey kala haadiyey ee aan kala shaandhaynna ku kala shiilay, waxa aan helay in Saddex Xeer saldhig u yihiin meeris kasta, bah kasta oo bahaha maansada ka mid ahba ha noqdo e. Saddexda xeerna waa:

1. Tiro cayiman ama go'an oo meerisyada bah maanso ku dhismaan una gaar ah. Ka soo qaad Jiiftada oo meeriska u salka ahi ka kooban yahay Shan Alan (dhawaaq, cod ama "syllable") oo afar shaqal dheere leeyihiin.

Hooyooy la'aantaa (5,4)

Hooyaba la'aanteed (6,3)

-----------------------

2. In bah maanso oo kasta laga rabo in goobo ama kaalimo cayiman shaqal dheeruhu ka galo ama ka galaan waa haddii ay mid ka badan yihiine. Meerisyada sare ku xusan, alanka badhtanka ku jira mar kasta waa shaqal gaab, waa haddii ay jiifto tahay.

3. In la dhawro, lana ilaaliyo hormaynta bah maanso leedahay, waayo way ku kala duwan yihiin bahuhu xagga hormaynta. Meerisyadan soo socda kolkii aynu hormaynta wax ka beddeley waxa ay isu rogeen bah maanso oo kale.

a. Wardheer dal wanaagsanaydaa (waa meeris heello)
b. Dal wanaagsanaydaa Wardheer, (waa hojis gabay).

Bal hoorisna ku dar ah, waayo maan arage.

c. Cashaduu Ilaahay
d. Cirka taagey udub li'i. Waa laba meeris oo jiifto ah.
e. Ilaahay cashaduu
f. Udub li'i cirka taagey. Waa laba meeris oo geeraar ah.

Ereyga "miisaan" isaga oo af Soomaali ah adeegsigiisu waa badan yahay waana jiraa. Balse ereygu waxa uu aniga igu duxay kolkii aan ka helay hal-xidhaalahan laba gabayaa is weydaarsadeen. Kii hore waxa uu yidhi:

*Minyaradu minweynada waxay, kaga macaanaatey*
*Haddaad gabayga miisaan taqaan, miimka ka higgaadi?*

Kii kalena waxa uu ugu warceliyey:

*Minyaradu minweynada waxay, kaga macaanaatay*
*Waa maadh xidhnaayoon la furin, maanta ka horoowe.*

**WDN**: Professor Cabdillaahi, goormaad bilawday baadhitaanka Miisaanka Maansada? Maxaa kugu dhaliyey raadraaca Miisaanka Maansada?

**Carraale**: Miisaanka waxa igu baraarujiyey barashada "meter"ka Ingiriisida. 1972 kolkii naloo dhigay sida gabayga Ingiriisku u dhisan yahay, ayaan is weydiiyey, keligay, kol haddii gabayga Ingiriisku dhiskan cayiman leeyahay, kii Soomaaligu lahaa mee? Waa sannadkaygii labaad ee kulliyadda ("sophomore year as an English major"). Waxa aan dareemay in Soomaaliguna leeyahay e aan la baadhin. 1974 ka kadib, kolkii aan ka qalin-jebiyey Kulliyadda waxa la ii beddeley dugsiga sare ee Marka. Kolkaas baan u gacanbaxay, baadhista dhabta ahna gudo-galay. Toddobaabkii u horreeyey ee 1976

ayaan qalinka ka qaaday oo dhammeeyey qaybtii ugu horreysey, soona bandhigay. Qoraalkaa oo aan markaa u bixiyey "Gorfaynta Gabayga", waayo gabayga oo aan ku bilaabay helista miisaankiisa ayuu ku koobnaa. Gabaygu waa udub dhexaadka suugaanta oo isaga ayaa fura u ah maansooyinka kale oo dhan. Isla 1976 ayaa Jaamicaddii Umadda Soomaaliyeed (JUS) iga iibsatey buuggaa. Kol haddii aan helay furihii oo ah saddexda xeer ee Miisaanka xakameeya oo gabayga saaran, bahaha maansada ee kale hawl culusba iguma ay qaadan. Waxa keli ah ee aan u baahday waxa ay noqdotay tusaaleyaal badan oo aan bah walba ka helo. Kuwaana badidoodaba hore ayaan u ururin jirey. In aan u kala ab-tiriyo ayuun baa soo baxday. Iyana dhibba ma lahayn, waayo Miisaanka saddexdii xeer uun la beegso ayaa soo baxday. Kolkii aan tafo-tirayna waxa aan ku soo ban-dhigay qoraalkaygii labaad ee ahaa buugii "Miisaanka Maansada Soomaaliyeed" oo isna Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed(US) iga iibsatey 1977. Labada qoraalbana waa la heli karaa iyaga iyo taariikhdoodiiba. Xasan Aw Daahir Qaalib ayaa markaa Xafiiska Manaahinjta joogay oo si buuxda ula socday. Qoraaladii aan Xiddigta Oktoobar ku soo daabacay 1978 waxaan ka soo qaadan jiray buugaa “Miisaanka Maansada Soomaaliyeed”.

Haa, way jireen dad ila socdey xilligii aan qoraalka ku dhex jirey. Balse dadkaasi ma ay hubin in aan ka midho-dhalin karo iyo in kale. Markiise aan ka biyo-gaadhey bay aqoonsadeen, dabadeedna warkii faafiyeen.

**WDN**: Sidaad la socoto Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac Gaarriye waxa dadka qaarkood u tiiriyaan inuu yahay aabbaha Miisaanka Maansada. Abwaan Maxamed Xaashi wuxuu ku bilaabay qoraallo Miisaanka Maansada ah oo taxane ah Xiddigtii Oktoobar bishii Janaweri ee sanadkii 1976. Dad badan ayaa dooddaa Miisaanka ka qeyb galay. Xilligaa uu Gaarriye qorayey taxanahaa xaggee joogtay? Ma ka jawaabtay qoraaladaa?

**Carraale**: Kolkii aan "Gorfaynta Gabayga" dhameeyey, ayaa Faarax Abokor Khayrre (Faarax-askari) oo qoraalkayga la socdey, Markana ka wada shaqayneyney, ayaa Xamar inta uu tegey, hawshayda warkeedii faafiyey. Isaga ayaa markaa u sheegay Gaarirye in aan helista Miisaanka ku guuleystey. Isla toddobaadkaa dhexdiisii, waa 1976, ayaa Gaarriye jariidaddii Xiddigta Oktoobar qoraalkiisa ku bilaabay. Anigu marka qoraal-ladaasi soo baxayaan waxaan joogaa Marka oo Xiddigta Okboobar ma heli jirin.

Ta hore, hawl qoraal dhan oo "buug" ku soo baxday iyo maqaallo(articles) jariidad lagu qoray muddada ay kala qaadan karaan halkaas baad ka garan kartaan. Buug cilmi baadhis ku qotoma hawshiisu muday socotaa halka maqaalada Gaarriye, markuu fikradii ka helay Faarax Askari, aanay muddo ku qaadan karin.

Ta labaad mucda qoraalkayga ku jirta, ama kolkii 1978 anna aan Xiddigta Oktoobar ku soo ban-dhigay iyo kor-ka-xaadiska ta Gaarriye waad is barbar-dhigi kartaan. Kolka Gaarriye ku hambaabirey qoraalkiisa isagu Xamar buu joogey, aniga, Faarax-askari iyo barayaal kalebana dugsiga sare ee Marka ayaanu barayaal ka ahayn. Weyddiinta kale, Gaarriye isaga ayaa isku deyey in uu hawsha aan curiyey ka jawaabo. Bal aqoonyahannow isu eega labadayada qoraal kee cilmi-baadhis ah oo tafo-tir qoto dheer iyo muc nuxur lehba xanbaarsan.

Taas marka laga gudbo, weyddinta mudani waxa weeye: Carraale iyo Gaarriye kuma ayaa hor helay furaha Miisaanka Maansada? Taasna, haddii aad i weydiisaan, warcelintaydu waxa ay tahay waa Carraale. Waxa marag goob-joog ahna ka ahaa:

Faarax Abokor Khayre - bare, Faadumo Axmed Caalin “Cureyja” (agaasimihii qaybta maaliyadda ee Jaamacad-da Ummada Soomaliyeed), Xasan Aw Daahir Qaalib - bare (maamulihii xafiiska manaahijta) Said

Saalax Axmed - bare (maamulihii kooxda Iftin ee Wasaarada Waxbarashada iyo Barbaarinta) Maxamed Ibraahim Warsame 'Hadraawi', Prof. John William Johnson, Dr. Xussin M. Adam, iyo qaar kaloo badan.

**WDN**: Professor Abdullahi habka adigu aad u soo bandhigtay Miisaanka Maansada iyo hannaanka Abwaan Gaarriye ma isku mid baa? Haddii aanay ahayn, maxay ku kala duwan yihiin?

**Carraale**: Habka aan anigu u soo ban-dhigay waa mid kala hufan oo qeexaya xeerarka Miisaanka xakameeya, sida aan kor ku sheegay. Ta Gaarriyese ma shiilla, mana kala qalla sida tayda e waa kor-ka-xaadis. Ka soo qaad saddexda xeer ee aan anigu ku qotomiyey, kuna arooriyey Miisaanka. Midna Gaarriye ma xusin.

**WDN:** Aqoonyahana badan ayaa had iyo jeer la socday talaabada ay qaadayso suugaanta Soomaalidu. Ma jiraan cid aad noo magcaabi karto oo marag ka noqon karta inaad tahay aqoonyahankii u horeeyey ee kashifay Miisaanka Maansada?

**Carraale:** Inta aan qoraalladooda dhawaamahan arkayey, waa Prof. J. Wm. Johnson iyo Maxamed Abdillaahi Riiraash, Gaarriye ka sokow. Labaduba tayda ayay akhriyeen, kana dheegteen. Balse erey-bixin bay ku darsadeen, qoraalladoodana waaba ku aragtaan.

**WDN:** Adiga iyo Abwaan Gaarriye marna ma ka wada hadasheen arrinta Miisaanka Maansada? Xilligaad ardada wada ahaydeen, adiga iyo Gaarriye xagga suugaanta ma ka wada sheekaysan jirteen? Markaad suugaanta falanqayneysaan, Miisaanka maansadu ma soo dhex geli jirey?

**Carraale:** Aniga iyo Gaarriye marnaba kama aanu wada hadal, kamana aanu wada doodin Miisaanka. Gaarriye Biology buu baran jirey anna English. Markaa dood-

wadaag cilmiyeedba nagama dhexayn. Intii dhammaadkii toddobaatameeyadii (70s) dhawr goor baan doonay in dood na loo qabto, mase ay suurtoobin.

**WDN**: Arrinta Miisaanka Maansada waa qaacida suugaaneed la oran karo waa ikhitiraaciddii ugu weyneyd ee suugaanta Soomaalida ee qarniyadan. Abwaan Gaarriye iyo adigu sidee rabtaan in la idiin kala saaro?

**Carraale:** Aniga iyo Gaarriye waa in aqoonyahannadu labadayada qoraal is barbar-dhigaan, ka dhabta ku qotomana qaataan. Weliba haddii ay suurtagasho dood noo qabta, goob-jooggiina waraysta. Arrinta ah yaa ku horreeyeyna, waa marag-maddoon, markhaatiyadeediina waa noolyihiin, horena waan u xusay. Waxa marag kale oo mudan ah: aqoon-is-weydaarsigii ugu horreeyey ee 1979 lagu qabtay Hotel Jubba ninka keli ah ee warqad Miisaanka Maansada ka hadlaysa ka qoray, kana akhriyey waa Abdillahi D. Guled. Raggan iminka wax ka sheeganayaa way wada fadhiyeene maxay tarkooda ula iman waayeen?

Mid qudh ah oo aragtidayda tu ka duwan la yimi ma jirin, mid weyddiin iila soo kacayna ma jirin. Fadlan eega "Somalia and the World", Proceedings of the International Symposium, held in Mogadishu, October 15-21, 1979, compiled and edited by Dr. Hussein M. Adam, Volume 1, page 132.

Wardheer iyo inta waraysigani gaadhaaba waad mahadsan tihiin.

*Xusuus: Bare Sare Cabdilaahi Diiriye Guuleed (Carraale) wuxu dib isugu geeyey hal buug oo keliya labadiisii buug ee "Gorfeynta Gabayga,1976" iyo "Miisaanka Maansada,1977" buug keliya oo cinwaankiisu yahay "Miisaanka Maansada" oo la daabacay 2003.*

Bare sare Cabdillaadi Diiriye Guuleed waxaa lagala xidhiidhi  karta emailkiisa: caraleguled@hotmail.com

Waxa waraysigaa ka soo falceliyey ninka la yidhaa Ibraahin Yuusuf Axmed 'Hawd' oo soo qoray qoraalka hoos ku qoran. Waxaanu ku yidhi:

## 2.2. Aragtidayda Muranka Miisaanka Maansada

Posted @ 09:50:03 CDT by redsea-online.com iyo wardheernews.com May 26, 2008

W/Q Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"

Dhaqan ahaan sheegashada halabuurka iskuma aynu qabsan jirin, maansada oo ahayd waxa ugu badan ee la curiyana weligeed taariikhda soomaalida anigu kuma aan maqal laba qof oo lahaanteeda isku qabsaday. Hal abuurkuna, sidiisaba, qofka uma lahaan jirin waxtar ka badan haybad iyo qurux uu ku xarragoodo, ninka kale ee xarragadaa ku qabsadaana wuxuu noqon lahaa bahal liita oo aan isagu xarrago samaysan karin. Xitaa dhaqanka cusub iyo nolosha magaalada ee ay fanka, suugaanta iyo weliba qoraalku lacagoobeen anigu weli ma maqal laba qof oo xuquuqda curinta ku murmaya. Taa waxaa caawiyey hiddaha oo sidaas ahaa. Waa ta sababtay xilligii dawladnimada in aan laguba baraarugin dejinta xeerar ilaaliya xuquuqda iyo lahaanshaha hal-abuurka.

Dhaqanka sidaas u hufan ee aynu caadaysannay haddii aynu wax burinaya maqallo waxaa inagu dhacaya xanaaq iyo weliba cabsi. Laakiin haddana khasab ma aha isku qabsiga mar walba in ay godobi ku jirto; waxaa jiri kara qalad dhacay iyo ismoodsiis ay labada dhinacba ka eed la yihiin. Sidaas darteed marka dhiillo caynkan ah la maqlo waxaa wacan in dhinaca samaha eegmada lagu horraysiiyo ilaa ay si kale caddaato, taas ayaana habboon in lagula dhaqmo khilaafka Cabdillaahi Diiriye Guuleed "Carraale" iyo Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" ee

ku saabsan kooda daahfuray xeerka Miisaanka Maansada soomaalida. Waa doodad ay mareegta Wardheer-news.com ku dardargelisay waraysiga ay dhowaan la yeelatay Carraale:

http://www.wardheernews.com/Wareysiyo/05_wareysi_Diiriye.html. Malahase waxaa habboon horta in aynu isla eego Miisaankan maansada ee laga hadlayaa waxa uu yahay iyo waxtarka ku jira ogaanshihiisa ama barashadiisa. Macallin Carraale isaga oo soo koobaya waxa uu Miisaankaasi yahay wuxuu ku sheegay:

1. Tiro cayiman oo meerisyada bah maanso ku dhismaan una gaar ah. Ka soo qaad Jiiftada oo meeriska u salka ahi ka kooban yahay shan dhawaaq oo afar shaqal dheere lee yihiin.

2. In bah maanso oo kasta laga rabo in kaalimo cayiman shaqal dheeruhu ka galo ama ka galaan haddii ay mid ka badan yihiin.

3. In la dhawro hormaynta bah maanso lee dahay, waayo way ku kala duwan yihiin bahuhu xagga hormaynta. Meerisyada haddii hormaynta wax laga beddello waxa ay isu rogi karaan bah maanso oo kale.

Weydiintuse waxay tahay, Miisaankaas in la barto waxtarka ku jiraa waa maxay? Haddii aan la baranse, illayn awelba iyada oo aan la aqoon ayaa la maansoon jiraye, maxaa lagu waayayaa? Warcelinta waa lagu kala duwan yahay. Abwaan Gaarriye wuxuu rumaysan yahay waxtarka meesha ku jiraa in uu yahay iyada oo qofkii Miisaankaa bartaaba maansayahan noqon karo! Maqaalkiisii berigaa waa kii ku bilaabay:

*Maqal. Ma jeclaan lahayd inaad gabaydo? Mase og tahay inaan abwaannimada loo dhalan uun ee la samayn karo? […] Aniga ayaa kuugu macallin noqonaya sida loo gabyo ama loo heeso.”*

Laakiin taasi run ma tahay? Aniga jawaabtaydu waa maya. Haa, maanso-curinta waa la baran karaa, waase arrin u baahan isku taxallujin iyo ku tababbarasho dhismaha iyo habdhaca meeriska maansada, ilaa qofka dareenkiisu dhadhansado lana qabsado. Marka ay taasi dareenka qofka la falgasho ayuu u gudbi karaa heer kale oo ah in uu dhab isu cabbiro oo aragtida iyo dareenka si habaysan maanso ugu soo gudbiyo isaga oo aan Miisaanka ku hawshoon. Taasna guusheeda dadku aad ayey ugu kala duwan yihiin iyada oo ku xidhan qof waliba duruufaha afeed, degaan iyo dadeed ee uu ku dhex koray ama ku dhex nool yahay. Taas waxaa ka baxsan hibada dhalanka ah ee ay dad gaar ahi lee yihiin kagana duwan yihiin cid walba oo kale oo iyaga duruufahaas oo dhan la wadaagta. Hibadaas dhalanka ahi waa ta kala duwi karta mataano weligood isku meel ku noolaa maansadana isku si u jeclaa oo haddana midkood noqon karo abwaan ka kalena amuume.

Shaqayn mayso, weligeedna shaqayn mayso, aragtida Abwaan Gaarriye ee odhanaysa Miisaanka aan ku baree maansayahan noqo. 32 sannadood ayaa laga joogaa maalintii xeerka Miisaanka la ogaaday, welina lama hayo qof ay taasi ka caawisay in uu afarrey curiyo. A M Yuusuf Waayeel oo ah nin aqoon wanaagsan oo taas hore uga hadlay ayaa Gaarriye ku careeyey:

> *"Ha ii sheego hal arday oo dusha ka wada qabtay "miisaankiisa" ee tirshay maansooyin hallaasi ah oo ka qurux badan maansooyinkii hore." – Miisaanka Tallaabada Geela, qaran-nimo.org, 2005/06/19.*

Haddii ay sidaas tahay, oo aan barashada Miisaanka qofna maansoyahan ku noqonayn, maxaa laga dheefay daahfurkeeda? Maxaase ka hadalkeeda loogu xabeeb-sanayaa? Jawaabtu waxay tahay, daahfurkan iyo bara-shadiisuba run ahaantii waxtar aan la koobi karin waxay u lee yihiin culuunta afka guud ahaan iyo aqoonta dhismaha

maansada gaar ahaan. Halkaas ayuu khayraad badani ka buuxaa kana buuxi karaa. Waa aqoon loo adeegsan karo baadhitaanka aqoono kale, waana tallaabo bilaw ah oo wax badan lagaga ogaan doono dhismaha afka, maskaxda afkaa dhistay iyo sida ay u dhistay.

Ma ay fogayn goortii aan anigu ogaaday in arrintaa muran weyni ka taagan yahay; waxay ahayd sannadkii 2003. Waa muddo yar ka dib markii iigu horraysay ee aan akhriyey buug uu Cabdillaahi Diiriye Guuleed “Carraale” arrintaas ka qoray. Aniga oo sidaas u haysta ayey markaas in yar ka dib ila kulmeen saddex arrimood oo isu xilli dhowaa kala ahaana: 1) ”Diiwaanka Maansda Deelley” oo ay wada ururiyeen Axmed F. Cali "Idaajaa" iyo marxuum Ibraahin Cawad M. "Khooli" kaas oo aan helay sannadkii kaa xigay ee 2004; 2) Gaarriye qudhiisa oo bishii nofembar ee sannadkii 2005 markii uu Yurub soo gaadhay shakhsi ahaan arrintaa noogu sheegay; 3) iyo maqaal cinwaankiisu ahaa "Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?"– redsea-online.com, jeenawari 2006, kaas oo uu qoray Cabdiraxmaan C. Faarax “Barwaaqo”.

Buugga Carraale iyo saddexdaas arrimood dhexdooda intuba si ayey isu wada diiddanaayeen, waana ta kicisay xiisahayga iyo xiisaha ay dad kale oo badani masaladan u hayaan. Aniguna, in kasta oo aan isdiidmooyinkaas fikrado badan kala baxay, haddana waqtigu iima oggolaan in aan dabagal ku sii sameeyo. Sidaas darteed waxa aan halkan kaga hadli karaa waa aragtiyaha ilaa imika dhacdada laga dhiibtay waxa ay kala yihiin iyo waxa ay kala qabaan iyo guud ahaan cimilada ku gadaaman.

Ugu horrayn Carraale, sida ku cad buuggiisa ”Miisaanka Maansada Soomaaliyeed”, kaas oo ay ka muuqdaan baadhitaan iyo ufiirsasho badani, wuxuu si buuxda u muujinayaa in uu isagu daahfuray Miisaanka Maansada af soomaaliga. Buuggaas ka sokow wuxuu cuskanayaa

marag isugu jira qoraallo, munaasabado iyo dad badan oo shaahid ahaa. Gaarriye isaguna wuxuu sheeganayaa, kuna adkaysanayaa, Miisaankaas in uu isagu daahfuray, maraggiisuna waa maqaalka caanka ah ee lagu daabacay wargeyskii Xiddigta Oktoobar sannadkii 1976. Inta aan og ahayna Gaarriye ma uu keenin caddayn iyo markhaati kale oo u dhigma waxyaalaha badan ee uu Carraale garabkiisa soo tubay. Sidaas darteed run ahaantii doodda Gaarriye looma wadwadi karo sida aadka ah ee ta Carraale loo wadwadi karo.

Aniga oo ka duulaya talada ah in eegmada dhanka wanaagsan lagu horraysiiyo, bilawgii waxaan isgeliyey dareen ah: malaha daahfurka xeerka Miisaanka Maansada ee lagu muransan yahay waa fikrad ay labada nin ka sheekaysteen islana arkeen intii aan la shaacin, dabadeedna maalmo isu dhow si kala gooni ah u soo bandhigeen, iyaga oo weliba, haddii ay doonaan, u tartamaya kooda ku horreeya? Dareenkaa xooggan waxaa ila wadaaga dad aad u badan uu ugu dambeeyey suxufiga Wardheernews.com waraysiga uga qaaday Carraale kaas oo sidan wax u weydiiyey:

> *"Adiga iyo Abwaan Gaarriye marna ma ka wada hadasheen arrinta Miisaanka Maansada? Xilli-gaad ardada wada ahaydeen, adiga iyo Gaarriye xagga suugaanta ma ka wada sheekay-san jirteen? Markaad suugaanta falan-qayney-saan, Miisaanka maansadu ma soo dhex geli jirey?"*

Waxaan malaynayey xilligaas in ay lahaayeen xidhiidh aad u dhow kaas oo ay wax ka beenoobeen markii uu Carraale sheegay in ay laba magaalo ku kala noolaayeen. Taas oo jirta haddana imikadan qudheeda malahaas meesha lagama saari karo, waayo haba kala joogeen Xamar iyo Marka e haddana shaki ma leh in ay lahaan kareen xidhiidh toos ah ama mid ay saaxiibbo u kala gudbiyeen. Waxyaalaha taa xoojinaya waxaa ka mid ah Faarax Abokor Khayrre "Faarax-askari" oo sida uu

Carraale sheegay isla maalmahaas labada magaalo u kala gooshay isaga oo haya xogta dhiraandhirinta Miisaanka Maansada ee dhanka Carraale.

Dhan kale haddii aynu arrinka ka eegno, waxaa jirta xaalad dabiici ah oo labada nin u kala dhowaynaysa u fiirsashada iyo baadhidda abuurta iyo dhismaha maansada. Gaarriye waa maansayahan la mid ah maansayahannada badan ee soomaalida. Haddii uu ka mid yahay inta yar ee waxbaratayna aqoontaasi waa maaddada bayooloji oo aad uga fog afka iyo suugaanta iyo aqoontooda cilmiyeed. Maaddadaas ayuu bartay waxna ku dhigi jiray. Mar hore iyo jeer dambe toonna Gaarriye caado uma yeelan, loogamana baran, baadhi-taan iyo qoraal ku saabsan afka iyo culuuntiisa. Wax kale iska daaye xitaa isaga maansadiisa dhowaan ayey dad kale u qoreen. Haddii ay dhacday in uu sannadkii 1976 arrinka sidan isugu shuqliyey caadi ahaan tallaabadaasi waxay noqon lahayd mid uu hawshan iyo degaankeeda ku sii dhex galo heerar kalena ula gudbo. Sow ma aha? Taasi haddaba sida la og yahay ma ay dhicin, ilaa maantana lama hayo eray qudha oo uu Gaarriye meel ku xarriiqay marka laga reebo maqaalka Xiddigta Oktoobar oo nus qarni kudhowaad laga joogo.

Isaga waxaa ka duwan Carraale oo markaaba ahaa nin aqoonta afka iyo suugaanta cilmi ahaan ugu dhex jiray, markaas iyo ka dibna looga bartay baadhitaanno arrinka ku saabsan. Weydiin aad u habboon oo ay Wardheer-news.com weydiisay jawaabta uu ka bixiyey ayaa wax badan oo taa la xidhiidha ina tusaysa. Jawaabtaasi waxay ahayd sidan:

> *”Miisaanka waxa igu baraarujiyey barashada "meter"-ka Ingiriisida. 1972 kolkii na loo dhigay sida gabayga Ingiriisku u dhisan yahay, ayaan is weyddiiyey, keligay, kol haddii gabayga Ingiriisku dhiskan cayiman leeyahay, kii Soomaaligu lahaa mee? Waa sannadkaygii labaad ee*

> *kulliyadda ("sophomore year as an English major"). Waxa aan dareemay in Soomaaliguna leeyahay e aan la baadhin."*

Haddaba laba qof oo wax isku haya si loo kala saaro waa in la helaa cid ka garnaqda, ciddaasina waa in ay haysaa ama heshaa xog arrinka ku saabsan – sow tii la yidhi "War la helyaaba talo la hel". Tanina waxay u baahan tahay ugu horrayn dad xogogaal ahaa oo si toos ah wax uga yidhaahda. Hadraawi, Idaajaa, Rashiid-Gadhweyne, Siciid Saalax, Boobe, marxuum Khooli intaas iyo in kaleba sida la og yahay waagaas aad ayey isaga wada warhayeen isuguna dhowdhowaayeen, hawl ahaan iyo hiwaayad ahaanba, sidaas darteed wax badan baa laga ogaan karaa. Aniga oo taas u tooghaya ayaan eegay "Diiwaanka Maansada Deelley" kaas oo ay wada ururiyeen Idaajaa iyo marxuum Khooli. Labadaas nin buuggaas arrinka waxay kaga qoreen faallo aad u gaaban oo sidan u dhigan:

> *"Miisaanka maansadu waa tirada iyo xiriirka ka dhexeeya shaqallada; shaqalka gaaban waxaa loo tiriyaa (1) ka dheerna (2). Waxaa wada dejiyey Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" (Xiddigta Oktoobar, Jan-May 1976) iyo Cabdil-laahi Diiriye Guuleed."*

Hadalkaasi in kasta oo uu dhexdhexaad yahay haddana sida muuqata labada nin ee is'haya midkoodna kuma qanacsana. Idaajaa iyo Khooli iyaguna markii ay sidaas qorayeen khasab ma aha in ay ismaandhaafka ka garnaqayeen, waxayse ka ahaan kartaa xogogaalnimo ay sidaas wax ula socdeen. Haddiise ay muranka ogaayeen hadalkaasi wuxuu ahaan karaa eedkacarar iyo mawqif diblomaasi. Dhexdhexaadnimada aadka u digtoon ee labadaas nin waxay inagu baraarujinaysaa aamusnaanta dad kale oo badan oo arrinka ilaa bilawgii la socday. Markaa fikraddaas iyo tu walba oo kaleba si nuxurkeeda loo qiimeeyo horta waa in la ogaadaa murankani goortii

uu soo baxay, iyo haddii uu horreeyey sababta markaaba wax looga odhan waayey.

Cabdiraxmaan C. Faarax "Barwaaqo" isagu kama mid aha dadka arrintan xogteeda martida loogu yahay waayo soobixiddeeda waxba kama uu ogayn. Iyada oo ay sidaas tahay ayuu haddana soo bandhigay qoraal caynkan u dhiirran:

> *"… waxaan si aan madmadow lahayn u caddayn una sheegi labadaasi aqoonyahan mid-ka ah aabbaha Miisaanka Maansada soo-maaliyeed."*

Cabdiraxmaan-Barwaaqo si aan kala reebbanayn oo aad u xamaasad badan ayuu Gaarriye maqaalkaas ugu taageeray, isla markaana wuxuu ku maagay dadka garta dhinaca kale ka taagan. Duniduna waa sheeko iyo shaahide, sidii aynu soo xusnay Cabdiraxmaan kama mid aha shaahidkii dhacdada, xogta uu qoraalkiisa u cuskadayna ma aha ogaansho qof ahaaneed, waase gacan labaad uu saldhig uga dhigay maqaalka Xiddigta Oktoobar ee sannadkii 1976, kaas oo ah isla caddaynta qudh ah ee Gaarriye haysto. Ilo dhawr ah oo uu carrabbaabay kama uu soo saarin caddayn dhab ah oo fikraddiisa taageeraysa. Tusaale ahaan John William Johnson wuxuu ka soo xigtay oo keliya isla qoraalka uu ninkaas qudhiisu ka soo xigtay Xiddigta Oktoobar, taas oo aan daliil u ahayn in aanay isla xilligaas jirin qoraallo kale. Sidaas oo kale Barwaaqo marka uu lee yahay:

> *"Dr. B.W. Anderezejwski iyo Muuse X. Ismaaciil Galaal baa hormood u ahaa intii ku ididdiilatay, hambalyo, taageero iyo gacanqaadna waxay u fidiyeen aqoon yahankii kolkaa da'da yaraa ee arrinkan la yaabka leh soo bandhigay."*

Halkaa kuma uu sheegin labadaas aqoonyahan meesha ay taas ka yidhaahdeen. Isla markaa, haddiiba ay dhacday in ay Anderezejwski iyo Galaal maqaalka Gaarriye ku

bogaadiyeen, iyaduna caddayn uma aha in aanay isla markaaba hawsha Carraale jirin, ama in ay ula jeedeen "Gaarriyow, adiga ayaa Miisaanka daahfuray". Barwaaqo isaga oo ina xusuusinaya qoraal uu marxuum Ibraahin-Khooli fikradda Gaarriye ku burinayey oo isla cishooyin-kaas soo baxay wuxuu yidhi:

> *”Intii waxaas oo doodihi dhacayeen Borof.. Cabdillaahi Diiriye Guuleed xagguu isagu joogey? Ma xertii Gaarriyuu ahaa mise tii fallaagowdey?”*

Jawaab uu Carraale siiyey Wardheernews.com ayaa malaha weydiintaas ku filan, isaga oo sheegay in uu isagu markaa ka shaqayn jiray magaalada Marka oo aan wargeyska Xiddigta Oktoobar ee laga hadlayaa iman jirin. Waxaase iyaduna judhaba meesha imanaysa weydiin kale oo ta Barwaaqo ka horjeedda: Intii uu Carraale buugaagtiisa Jaamacadda Umadda ka iibinayey, iyo intii uu kulanka caalamiga ah ee Hotel Jubba ka dhacay warqadda aqooneed ee daahfurkaas la xidhiidha ku soo bandhigayey, Gaarriye xaggee buu jiray? Muxuu dacwaddiisa u sheegan waayey?

Qoraalkaas uu Barwaaqo arrinka kaga hadlay sida aynu sadar walba ka arkayno, garsoor xaq ah ma aha, wuxuuse uga dan lahaa oo keliya in uu Gaarriye ku gar iyo garab siiyo, gar iyo garabsiintaas oo sababo badan yeelan karta. Kollay waxaa hubaal ah in uu Gaarriye iyo maansadiisa si gaar ah u qaddariyo.

Taageeradaa xagjirnimada ah Cabdiraxmaan wuxuu ku sii xoojiyey fikrado uu ku daray maqaal dambe oo la yidhaahdo ”Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed”, redsea-online.com, meey 2007 iyo buuggiisa cusub ee ”Mahadhada iyo Wax-qabadka M. X. Dhamac ‘Gaarriye’”, Hal-aqoon publishers, 2007. Dabadeed waxaynu xusuusanaynaa meerisyo ku jiray ”Silsiladdii Xaydha” oo ahaa:

*Haddii aan mudducigii gartaa marag u soo joojin*
*Oo aan muddaacaley wallaha lagula soo meerin*
*Waa ila maroor 'Caamiroow moosku kugu ciirye'.*

Haddaba waxa halkan looga baahan yahay waa dadkii arrinka u warhayey oo ka hadla, ugana hadla si xaqsoor - nimo iyo xilsanimo leh. Xaqsoornimada maanta halkan looga baahan yahay caawin mayso oo keliya xallinta mashaqadan, waxayse kale oo dawo, kalsooni iyo hiil u noqonaysaa dhacdooyinka la midka ah ee soo dhex geli kara dhaqanka aqooneed iyo suugaaneed ee soomaalida.

Si walbana ha ahaatee arrintan guud ahaan ilaa imika waxaa ku jira dhalliilo dhawr ah oo ay tahay in laga saaro kuwaas oo kala ah:

1) Labada nin ee ismaandhaafsan oo aan waraysigan uu Carraale siiyey Wardheernews.com ka hor fikraddooda si toos ah oo habaysan oo rasmi ah u soo gudbin si waxa ay kala sheeganayaan loola ogaado. Carraale maanta ka hor meel uu arrinta kaga hadlay ma aan maqal, Gaarriye isaguna erayo duulduul ah ayuu meelahaas ka yidhi.

2) Dadkii xogogaalka ahaa oo aan wax la cuskan karo arrinkana lagu iftiimin karo weli laga hayn marka laga reebo bidhaanta dinniiqa ah ee ay Idaajaa iyo Khooli ina tuseen.

3) Kalsoonidarro xad'dhaaf ah oo ay soomaalidu naf-teeda ku qabto taas oo keentay in wax walba shisheeye loola irkado, eray walba oo ay soomaalida ka yidhaah-daanna la weyneeyo, xitaa afka iyo suugaanta loo dhashay, iyada oo ay meel walba tuban yihiin soomaali uga xogogaalsan ugana aqoon badani.

Gabagabada hadalkayga, aniga waxay iila muuqataa garta meesha taal sida la moodi karo in aanay u adkayn haddii qodobbadan hoose caddayn loo helo:

1) In ay caddaato buugga "Gorfaynta Gabayga" ee uu Carraale ka iibiyey Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed sannadkii 1976 iyo qaybtiisii kale ee isla sannadkaas in uu miisaanku gabaygu ku qorraa.

2) In ay caddaato Faarax Abokor Khayrre ”Faarax-askari” isaga oo daahfurka Carraale ee Marka ka dhacay xogogaal u ahaa isla jeerkaas in uu Xamar tegay.

3) In ay caddaato munaasabadda uu Carraale lee yahay: ”Aqoon-is-weydaarsigii ugu horreeyey ee 1979 lagu qabtay Hotel Jubba ninka keli ah ee warqad Miisaanka Maansada ka hadlaysa ka qoray, kana akhriyey waa Cabdillaahi Diiriye Guuleed (aniga). Raggan iminka wax ka sheeganayaa way wada fadhiyeene maxay tarkooda ula iman waayeen?”

4) In ay caddaato dadka xogogaalka ah ee uu Carraale markhaatiga gashaday in ay isaga u yihiin maragfur togan.

Afartaas qodob mid qudh ah oo ka mid ahi haddii uu dhaboobo xaqiiqo ahaan garta guusheedu Carraale ayey si fudud u raacaysaa. Hadalkaasina ma aha taageero aynu sida Cabdiraxmaan labada dhinac mid siinayno, waase raadinta runta iyo qiimaynteeda.

Ibraahinhawd@hotmail.com

Waxa isna aragtidiisa Miisaanka Maansada ka warramay ninka la yidhaa Deeq A. Diiriye. Waxaanu soo gudbiyey qoraalkan hoos ku xusan . Waxaanu yidhi:

## 2.3. Aragtidayda Muranka Miisaanka Maansada

**W/Q Deeq A. Diiriye, www.wayeel.blogspot.com**

**Talaado, Maajo 27, 2008**

Waan akhriyay wareysigii Carraale ee Wardheernews. Run ahaantiina waxa uu ku salaysan yahay xaqiiqo. Waxaan dib u fiiriyay mahadnaqa buuggii uu Carraale soo bandhigay 1976dii, waxaadna mooddaa in ay aad isaga markhaati kacayaan. In uu odaygu yahay aabbaha lafaguridda Miisaanka Maansada soomaaliyeedna waxa aan 1997dii ku xusay doodihii aynu ku lahayn 1990s in soc.culture.somalia. Ilaa hadda waxa laga heli karaa google/groups; bal xasuusta maqaal ka mid ah oo cinwaankiisu ahaa: Aragtida Habdhiska Maansada Soomaaliyeed.

Gaarriye, oo waxa aan u aqaannaa in uu yahay one of the best poets in this century; saas oo ay tahay, with all due respect, xagga turxaanbixinta iyo sharraxaadda miisaan-ka waa looga horreeyay; isla markaasna waa laga badiyaa ilaa hadda.

Si kastaba ha ahaatee, Carraale waxa uu mahadnaqa buuggiisa ku xusayaa in uu hawsha gorfaynta gabayga bilaabay 1972dii asii uu soo bandhigay 1976dii horraan-teeda. Haddii aad u baahataan arrintaan xaqiiqdeeda dhowrkaas bog inta soo scan-gareeyo ayaan idiin soo lalin karaa.

Tan kale oo xusidda u baahan waxa ay tahay, intii aanan akhrin buugga Carraale, in aan hore isha u soo mariyay maqaallo ku soo bixi jiray Xiddigta Oktoobar oo lagu qaadaa dhigayay Miisaanka Maansada, oo uu horboodayay Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye); qoraalladaas oo aan wax badan ka akhriyay xilligaas, runtii waxba kama fahmin. Ma aniga ayaan xilligaas u bislayn in aan fahmo qormooyinka qorayaashaas, mise iyaga ayaan u shilisnayn in ay u loogtamaan akhristayaashooda, nooc walbaba. Xaasha, oo ma dhaliilayo Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac Gaarriye, oo waxa aan u aqaannaa in uu yahay one of the best poets in this century; saas oo ay tahay, with all due respect, xagga turxaanbixinta iyo sharraxaadda Miisaanka waa looga horreeyay; isla markaasna waa laga badiyaa ilaa hadda. Abwaan Gaarriye, sida facii ka horreeyay, iyo weliba abwaanno kale oo maanta jira, ayaa dhegtiisa iyo dhugtiisu xafidsan yihiin habdhaca maansada Soomaalida; oo lagama yaabo in uu tiriyo, ama ay u dhuumato, tix jaban, let alone deelqaaf; laakiin, haah, oo waa looga horreeyay, waana laga badiyaa in uu sharraxo habdhiska maansada Soomaalida.

Si kastaba ha ahaatee, sidaas Carraale, aniga oo English Major/sophomore ah ayaa 1984tii waxa ii dhaadhacday Miisaanka Maansada caalamka, oo middoodna qualitative tahay sida tan Ingiriiska, middoodna quantitative tahay, sida taayada. Ilaahay amarkiis, aniga oo maaggan in aan ka soo jibo gaaro bal tan Soomaalida meesha ay ku abtirsato, ayaa nin aanan geeridiisa maqal, oo la yiraahdo Xaaji Raabbi, oo ahaa macallinkaygii luuqadda Soomaaliga, waxa uu i siiyay buuggaas Gorfaynta Gabayga ee uu Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale) uu magaalada Marka ku qoray 1976dii. U malayn mahayo in ay noloshayda soo martay qormo iiga qiimo badan xagga Miisaanka Maansada Soomalida. Wixii ka-bogashada qormadaas ka dambeeyay, kow, waxaa ii suuragashay in aan dhiraandhiriyo Miisaanka bad kasta oo maansada Soomaalidu leedahay, aniga oo ku salaynaya saddexda

xeer ee aan ka bartay Carraale; haah, oo waa marka aan xaqiiqsanayo in guurowga iyo gabaygu ay isku mid yihiin xag walbaba, marka laga reebo lahjadda iyo xareedinta (melody). Labo, waa marka aan ogaanayo waxa geeraarka iyo jiiftadu ku kala duwan yihiin in aysan ahayn tirada shaqallada balse habka ay ugu taxmaan meeriska dhexdiisa. Saddex, waa marka aan baranayo in la baran karo in la curiyo maanso, taas oo markii ugu horreeysay ay ii suurto gashay in aan tiriyo maanso aan laaxin lahayn, qotoda murtidu yeelkeede.

Tan labaad, ee xusidda mudan, waa in Johnson, oo uu Carraale la shaqaynayo, soo bandhigay hab ka tafo gaaban kan Carraale; habkaas oo aan ilaa hadda aan shakhsiyan isticmaalo, waxa uu ku salaysan yahay saddexdii xeer ee Carraale. Markaa, haddii Miisaanka Soomaalidu aabbayaal yeelanayo, labadaas nin ayaa u aabbaayaal ah. Haddii sharraxaaddeeda loo baahdana, kama bakhaylayo.

Tan saddexaad, ee xusidda mudan waa in mar walba Gorfaynta Miisaanka Maansada Soomaalida, la sii hormarin karo. Tusaale ahaan, dabayaaqadii sannadkii hore ilaa horraantii sannadkaan ayaa waxa aan dood ka yeelannay Miisaanka Maansada labo nin, oo abwaanno ah, oo la kala yiraahdo Shaafic Xassan Maxamed iyo Maxamed Aadan. Labadaas nin waxa ay ii bikaaciyaan in xitaa la abuuri karo bado maanso oo cusub. Run ahaantiina waaba ay sameeyeen maansooyin haddii habdhacoodu (rhythm-koodu) kuu dhaadhaco aad jeclaanayso.

Isku soo duudduub, waxa aan oran lahaa waa muran maddoonto in Carraale uu bilaabay gorfaynta Miisaanka Maansada, oo yaan lagu habsaamin in laga doodo in looga horreeyay iyo in kale; balse weli howl baa inoo taale, oo Faanoole fari kama qodno'e, yaan la wahsan ee hawsha Miisaanka ha la sii wado.

Waxa qoraalkii Ibraahin Hawd ka soo falceliyey ninka la yidhaa Khaalid Jaamac Qodax oo soo qoray qoraalkan hoos ku xusan. Waxaanu yidhi:

## 2.4. Muranka Miisaanka Maansada Soomaaliyeed

**Posted on Sunday, June 01 @ 16:31:26 CDT**
**by redsea-online.com**

W/Q: Khaalid Jaamac Qodax
Qodax02@gmail.com

Waa dabciga bini'aadamka in xaajo nin la toosani nin la tuur leedahay, waayo, waxa aad arkaysaa in dadku aad ugu kala duwan yahiin aragtiyo badan oo qofba si ugu muuqata, haddii aad is tidhaahdo qofkaas toosina ay kugu adkaato, ama aad kuba guuleysan weydo, inaad ka dhaadhiciso sida ay dhabtu tahay. Qofka aqoonyahanka ahse kugu qaadan mayso wakhti badan marka aad tusto cilmi baadhis aad si hufan ugu kala haadiso waxa ay arrintaasi ka qabto, waayo waxa kali ah ee qofka aqoonyahanka ahi uu kaga duwan yahay qofka kale, waa isaga oo baadhid ku sameeya arrinta inta aannu go'aan rasmi ah ka gaadhin, isaga oo in badan ka taxadiraaya in uu go'aan ku gaadho hubsiimo la'aan ku fadhiya, arrinta haddii si cilmi ah looga qanciyana qaata

Tan iyo wakhti aan dhaweyn waxa muran weyni ka taagnaa cidda ah aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed. Waxa ay arrintani tahay mid ku cusub dhegaha Soomaalida, oo aan hore looga baran in ay isku qabtaan aragti aqooneed, iyada oo waxa ugu badan ee la kala dhici jirey ay ahaayeen dumarka iyo geela, marka aad eegto dhaqankeennii hore ee reer guuraaga ahaa.

Muranka Miisaanka Maansada soomaaliyeed, waxa aan si fiican u fahmay ka dib markii aan aad u dhuuxey qoraallo badan oo ka hadlaaya Miisaanka Maansada oo ay kala qoreen labada abwaan, iyo aqoonyahanno kaleba. Waxase iigu miisaan weynaa qoraalladaasi aan arkay dood aad u xiiso badneyd oo dhex martey aqoonyahanno iyo qorayaal ka doodey aragtida Miisaanka cidda daahfurtey, dooddaasi oo ka dhalatey ka dib markii Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye", uu booqashada ku tagey dalka boqortooyada Ingiriiska. Dooddaas waxa soo afmeeriyey qoraal aad u qiimo badnaa oo uu qorey qoraaga caanka ah ee Cabdiraxmaan C. Faarax "Barwaaqo", oo sida uu dooddaasi u soo xidhay aanan arkin cid kale oo ka hadashay, waxaana xusid mudan in aan arkay raggii doodda bilaabay oo Barwaaqo ku taageerey meelo badan. Si kastaba ha ahaatee, wiiggan horraantiisii ayaan haddana ku arkey degelka redsea-online.com, oo aan aad u booqdo wareysi aad u xiiso badan oo uu ka soo xigtey degelka kale ee wardheernews.com, uu la yeeshey wareysi khaash ah Profosor Cabdillaahi Diiriye Guuleed "Carraale". Wareysigaas oo ahaa mid dib u soo nooleynaya dooddii ahayd "Kumaa ah aabbaha miisaan-ka maansada Soomaaliyeed". Waxa uu Carraale kaga jawaabey su'aalo daran doori ah oo lagu weydiiyey, waxa uu Carraale si hufan oo cilmiyeysan uga doodey in uu isagu yahay qofkii ugu horreeyey ee seeska u dhiga ee balleysinka u ahaa daahfurka Miisaanka Maansada. Aad ayaan u xiiseynaayey qoraalkaasi, waayo arrintaasi oo aan war ka hayey awgeed ayaa waxa aan dhammeeyey qoraalkii wareysiga ahaa ee laga qaadey Carraale.

Intaa ka dib ayaa qoraaga caanka ah ee Ibraahin Yuusuf Axmed 'Hawd", waxa uu ka daba keeney qoraal dheer oo uu si badheedh ah ugu taageerey Carraale wareysigaa uu bixiyey, dooddiisa ah inuu yahay macallinkii daah furey Miisaanka Maansada Soomaaliyeed. Iyo waliba hadallo badan oo uu si duurxul ah ugu daray maqaalkiisa oo Gaarriye meel ka dhac ku ah.

Haddaba sidey wax u jiraan? Siduu ahaa qoraalkii Hawd? Sideen u arkaa garnaqa uu Hawd arrinta ku gaba-gabeeyey? Xaggeen ka eegi qoraalkii Hawd? Iyo su'aalo kale oo badanba waxa aad kaga dhargi qoraalkaygan kooban, oo aan si tafaftiran aan arrintaas ugu qaadaa dhigi.

Ugu horreyn qoraalkii Hawd, markii aan arkay, waxa aan markiiba fahmay in Hawd arrinta aanu dhex dhexaad ka ahayn sababtoo ah, qoraalkiisu waxa uu dhinac u dheelliyey markii uu soo qaatey ugu horreyn saddexdii dhinac ee uu Miisaanka ka eegey Carraale, waxa aan filaayey in uu 3dii xeer ee uu Gaarriye isaguna u soo bandhigey uu iyadana tusaalooyin ka bixiyo oo uu soo qaato, is barbardhigana. Marka uuse intii Carraale dufan inoo mariyey, waxa aad arkaysaa in dooddiisu ay dheelidey. Hawd waxa ay doodisu qurux badnaan lahayd haddii uu si waayeel iyo dhexdhexaad ah arrinta u galo, waxase qalinkiisii warqada ka qooyay markii uu heeryada dhinac u badiyey, weerar iyo aragtiyo is burinaayana uu maqaalkiisa inoogu soo gudbiyey.

Miisaanka maansadu waa masdarad kuu saxaysa, kuna ogaan kartid in baydka maansadu uu jaban yahay iyo in kale, sidaa darteed, waxa ku jirey qoraalkii Gaarriye ee 1976-kii in uu yidhi

*"Maqal. Ma jeclaan labayd inaad gabaydo? Mase og tahay inaan abwaannimada loo dhalan uun ee la samayn karo? Waxba ha la yaabin. Ma jiro waxaan qofka aadmiga ihi aanu qaban karin, haddii uu niyad fiican la yimaaddo. Way jirtaa oo waynu aragnaa dad hibo gaar ah u leh gabayaannimada. Hase yeeshee waxa been ah inaan qofkii rabaa aanu noqon karin abwaan. Waxaad iska raariddaa inaad wixii qof samayn karaba aad adiguna sameyn karto. Waa tahay. Aniga ayaa kuugu macallin noqonaya sida loo gabyo ama loo heeso. Hase ahaatee anigu af soomaali ku barimaayo. Waxaan kuu*

*dhigayaa habka loo gabyo iyo shuruudaha la doonayo inaad fuliso."* redsea-online.com/e-books

Waxa uu Ibraahin ku doodey in arrintaa uu Macalin Gaarriye ka dhawaajiyey aanay shaqeyneynin, waxase aan u sheegayaa in beydka xaggiisa dambe micnaha uu xambaarsan yahay aaanu dhuuxinba. Tusaale ahaan waxa uu Gaarriye inoo sheegey **"in afsoomaaliga aannu ina bareynin"**, markaa dadka ka doonaya in uu baro afsoomaaliga aaney suurtoobeynin in uu maclin ugu noqdo arrintaasi. Gaarriye jawaabtii uu ka bixiyey ayaa inagaga filan arrintaasi ka dib markii uu Ibraahin Khooli weydiiyey isla su'aashaasi uu is weydiiyey ama ina weydiiyey qoraageenu, ka dib markii ugu horreysey ee uu soo bandhigo aragtida Miisaanka Maansada (1976). Waxaannu Gaarriye si fudud ugu jawaabey Khooli, isaga oo arrintaa ka jawaabaayana waxa uu yidhi

*"Waxa jira laba gabyaa, gabyaa Eebbe hibbo u siiyey in uu gabyo, iyo gabyaa naqdiye "Suugaan Dhaadhi", ka dambe ayaa fahmi kara si hawl yarna u baran kara miisaankeyga, haddii uu dadaallana waxa uu noqon karaa kaas hore"*

Maxaa uu inoo sheegayaa hadalkaasi? Bal adba eeg!! Markaa dadka ka sugaaya in ay gabyaan waa in ay shurruudaha uu u jeexay Macallin Gaarriye raacaan. Waxa aan qabaa in ay u fududdahay in ay sameyn karaan maanso shan ama laba baydna ha ahaatee, iyaga oo raacaya Miisaanka macallin Gaarriye. Maxaa dheef ah ee laga dhaxlay aragtidan Miisaanka? Ku darso oo barashada miisaanku, sida uu Gaarriye sheegey, inama baraayo in aynu ku maansoono oo kali ah ee waxa jira faa'iidooyin badan oo uu innoo soo hooyey. Waxa lagu kala ogaan karaa maanso waliba badda ay ka soo jeeddo (Barwaaqo 2007), waana dhaxal laga dheehan karo in laga diyaariyo cilmi baadhisyo badan oo si mug leh looga sii dhex mushaaxi karo suugaanta.

Ibraahin Hawd, waxa uu ku doodayaa in doodda Carraale iyo ta Gaarriye ay isku yihiin laba arrimood oo aan la is bar bar dhigi karin, waxaanu ku doodayaa in ta Carraale ay ka miisaan weyn tahay ta Gaarriye oo aan sidaa loo sii dhaq-dhaqaajin karin. Marka uu hadalkaas leeyahay waxa ay ka dhigan tahay oo kale taageero iyo lib uu la doonaayo Carraale. Wax midhkaa caddaynaya ma muujin ama inama tusin. Waxase run ah Gaarriye iyo Carraale midna qorayaashu lib afkooda ku siin maayaan, ee waxa ay yihiin uun bay yihiin, kaalinta iyo qiimaha ay bulshada ku kala dhex leeyihiinna waa mid iska cad oo aan daah la saari karin

Kuma filna jawaabta uu Carraale ka bixiyey su'aashii uu weydiiyey Cabdiraxmaan Barwaaqo ee ahayd

*"Intii waxaas oo doodihi dhacayeen Borof. Cabdillaahi Diiriye Guuleed xagguu isagu joogey? Ma xertii Gaarriyuu ahaa mise tii fallaagowdey?"* redsea-online.com/e-books

Waayo, jawaabta uu ka bixiyey Carraale ee ah *"Magaalada Marka ma soo gaadho Wargeysku, manaan ogaan"*, maaha jawaab laga dhergi karo, waana jawaab laaxin leh, sababta aan taas u leeyahay waa; maxaa uu Carraale uga hadli waayey haddii uu ku doodayo in uu buug ka qorey arrinta markii uu maqley ka dib? Muxuuse isagaa doodayee, cabanayee, fikraddan hore ugu soo bandhigi waayay dadka? Saaxiibkeyna haddii uu taasi taageerayo sida ku cad qoraalkiisa, yaanu diidin in haantiisu dalooshan tahay. Haddii uu ku qanci waayo caddeymaha uu Cabdiraxmaan Barwaaqo ina soo hor dhigeyna, waxa kale oo aan u sheegayaa in uu dhuuxo micnahoodana fahmo qoraalladii kale ee ay arrintaasi ka qoreen Khooli, iyo Boobe ee ahayd in arrinta Miisaanka Maansada uu daahfurey Gaarriye keentey guul iyo dood dheer. Sababta oo ah Khooli ma jirto mana dafiri karno in cid ka xogogolsaneyd aaney jirin dhanka arrintan Miisaanka iyo suugaanta soomaaliyeedba, maadaama uu

ka shaqeyn jirey Akaademiyaddii Soomaaliya. Sidaad darteed maqaalkii dheeraa ee uu ku burinaayey aragtida Miisaanka Maansada ee Gaarriye, meelna kagama darin qoraalkaasi dheer in uu jiro aqoonyahan kale oo isku dayey arrintan, oo uu ka dhigto raadraac, amaba uu sheego in Gaarriye looga horreeyey. Dhanka kale Boobe waxa uu soo saarey wakhtigaa qoraal dheer oo uu ugu magac darey "Xidhbasooraha Miisaanka Maansada", marka uu Ibraahin Yuusuf arrintaa leeyahay ha la weydiiyo maxay ka tahay? Waayo wakhtigaasi ayay ka hadleen labada aqoonyahanba e, ma waxa uu rabaa in ay si kale uga hadlaan oo Carraale ay dufan inoo mariyaan sidiisa oo kale.

Qoraalka dheer ee Hawd, waxa ku jirey meelo badan oo uu runtii dalbo ka lahaa, sababta oo ah waxa uu si badheedh ah u yidhi Hawd arrimo aannu xog buuran ka haynin. Mar uu ka hadlaayey Gaarriye iyo suugaanta waxa uu yidhi Hawd isagoon burkaba bahal ka deyin

*"Mar hore iyo jeer dambe toonna Gaarriye caado uma yeelan, loogamana baran, baadhitaan iyo qoraal ku saabsan afka iyo culuuntiisa. Wax kale iska daaye xitaa isaga maansadiisa dhowaan ayey dad kale u qoreen."*

Hadalkani waxa uu ku gelinayaa dareen hoose oo aad siyaabo badan u fasili karto. Sida uu doono ha uga jeedee aniga ilama qummana, waxase ay ahayd in uu qoruhu si kale u dhigo, arrin aannu war sugan ka hayna aanu ku degdegin, waayo, waxa ay u egtahay in uu dhex dabbaashay badweyn. Hadalkaasi waxa uu si gaara ii xasuusiyey maansadii caanka ahayd ee Salaan Carrabey ee ay ku jireen tuducyadani:

*"Waxba yaanu xeerkey i marin xoolana i siine,*
*Xaasha'e nin libin kaa xistiyey xumihii waa yaab"*

Sababtoo ah Gaarriye waa macallin afka iyo suugaanta ka dhiga labada Jaamacadood ee Hargeysa iyo Cammuud ee

Soomaaliland. Haddii uu libinta cilmi baadhista uu labadaas jaamacadood ka wadana uu dafiro, waa arrin kale. Maxaa uu ka dhigaa haddaba ayay kula tahay labadaas jaamacadood? Haddii aan si fudud uga jawaabo waxa uu labada jaamacadoodba ka dhigaa cilmi baadhiso badan oo uu ku sameeyey luqadda afsoomaaliga iyo suugaanteedaba, waxaannu ka qorey buugaag badan oo ku diyaarsan gacanta oo aan wali madbacad gelin sida uu afkiisa nooga sheegey. Haddii aad dafirtey in uu diiwaankiisa maansada qoreyna waa arrin kale oo la mid ah in sheekada "Saddex nafood" iyo "Aanadii Negeeye" ay yihiin sida dadka qaarkood ay qabaan, oo aan aniguna ka mid ahay ay ku doodi karaan in ay ku dhawdahay in aad ka soo dheegatey adiguna dhaqan reer galbeed, aniga oo idhaahda oo kale ayay ka dhigan tahay hadalka ah waa loo qorey maansadiisaba. Ogowse in uu diiwaanka isagu qorey ee la tafaftirey uun ( Kama hadlaayo ka laga qorey ee Barwaaqo qorey).

Waxa aan si hufan u akhriyey qoraalka uu Cabdiraxmaan C. Faarax "Barwaaqo", ku taageeraayo in Gaarriye yahay "Aabbaha Miisaanka Maansada Soo-maaliyeed", waxa uu qoruhu hadalkiisa ku bilaabay weedhahan, markii uu kala saaraayey labada nin

*"Intaa kadib waxan u xuubsiiban inaan soo bandhigo aragtida aan qabo. Aniga oo iska dhawraya hawraaraha: waa la yidhi, waan aqiin, waan maqlay, waan akhriyey, ama waxa igu maqaala ah, iwm., ayaan dooddeyda ku taageeri caddeymo, sumad iyo sawrac leh"* "redsea-online.com/e-books"

Adiguse "Hawd" waxa kali ah ee aad na soo hor dhigtey waa in aad la dhacsan tahay qaabka uu Carraale u soo bandhigey hadalkiisa. Kuguma diiddani in aad aragti-daada ku cabbiri karto in aad taageersan tahay aqoonta uu Carraale ku soo kordhiyey suugaanta soomaalida, aniguna waan kula ogahay in Carraale wax badan ku soo kordhiyey suugaanta soomaalida, waxase aan anigu qabaa

in libinta iyo taageerada aad is bar bar waddo, ee qoraalkaaga ka muuqdaa aanay ahay laba arrimood oo is qabta, marka laga eego dhinacyo badan, waxaanan ku hayaa in Carraale yahay aqoonyahan wax weyn ka tarey suugaanta soomaalida sida Gaarriye oo kale. Balse inaad midna xoogeyso dooddiisa midna aad yasto waxa ay ka dhigan tahay arrin hoose oo kale. Guntii iyo gaba-gabadii waxa aan qoraalkeygan ku soo afmeerinayaa in siyaabo badan aragtidan aan loogu deg-degin, dab hurinna aan la sameyn, waayo waxa ay keeni kartaa taasi inay sii huriso ama sii fogeyso aragtiyaha dadweynaha . Waxa kale oo aan labada aqoonyahan u soo jeedin lahaa in ay wax badan iska arkaan. Dadka suugaanta xiiseeyaana ay qiimeeyaan wax wal oo ku soo kordha, qiimaha ay mudan tahayna la siiyo, iyo waliba in la iska ilaaliyo weerarka aan hummaaggeyseneyn ee badheedhka ah.

Ninka la yidhaa Maxamed Xirsi ayaa isna falcelintiisii sidaa si ka duwan u soo bandhigay. Waxaanu soo qoray qoraalkan hoos ku qoran:

## 2.5. Soo garbax ama garawso: Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed

Posted on Thursday, June 05 @ 06:50:34 CDT
by redsea-online.com

W/Q Maxamed Xirsi Guuleed

Yaa loo aqoonsanyahay Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed? Ma Maxamed Xaashi Dhamac (Gaar-riye) mise Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraaale)? Muranka su´aashaas ka taagani waa mid hadda dad badani u dhegataagayaan si ay jawaabta saxan ugu hubsadaan meel adag. Aniga ayaa ka mid ah dadka u hanqal iyo dhegoba taagaya jawaabtaas. Haddaba YAAN JAWAABTAA KA HELI KARAA?

**Maxaa looga bartay Soomaalida, murankan oo kale?**

Waxa aan arkayey laba aqoonyahan oo aniga hortay mawduucan wax ka qoray, una arkayey arrin ugub ah in Soomaalidu halabuurka isku qabsato. Taas waan deeddafaynayaa. Waxan leeyahay Soomaalidu si weyn ayey isugu qabsataa halabuurka. Laakiin halabuurku weli ma hantiyoobin Soomaalida dhexdeeda. Taas ayaa keentay in murankan xoog loo sii danayn waayo. Haddiise darajooyin la isugu toli lahaa ama duunyo laga maali lahaa, waxad maqli lahayd; dagaal ka dhashay gabay ama halabuur la kala dhacay. Haddii aad gabay dhaadhi tahay waxad hubaashii maqashay gabayo fara badan oo dad kala duwan loo tiirinayo, haddiiba aad

gabayadaas u nisbayso cidda aad u taqaanno na, dad kale ayey kariirta kaga dhegaysaa. Bal adigaba aan ku waydiiyee yaad u taqaannaa in ay tiriyeen gabayadan soo soocda:

**Gabay 1aad:** "Qabqab dhaafay bay laba qabiil qaran ku waydaaye"

**Gabay 2aad:** "Muslin aan islaam kugu dhaqayn muuminnimo khaas ah, Gaal maxasta kuu dhawra ood magansataa dhaama"iyo **heestan**: "Soomaaliyeey toosoo, toosoo isku tiirsada eey. Hadba kiina taag daraneey, taageera weligiineey"

Shaki kama jiro in aad qaarkood maqashay muranka ka jira. Ta ugu dambaysa oo ah heesta qaranka ee ay Soomaalidu si qiiro leh ugu bururto marka la qaadayo, waxa lagu kala sheegaa ilaa saddex qof. Waa Yuusuf Xaaji Aadan Qabille, Cali Mire Cawaale iyo Qaasim Hilowle. Ugu yaraan laba ka mid ah saddexdaas abwaan waabay ka hadleen lahaanshahooda halabuurkaas. Qaasim Hilowlena waxa u hadashay gabadhii uu dhalay ee Faadumo Qaasin. Beri dhaweyd xaflad aan ka qayb galay waxa ka hadlayey aqoonyahan uu dhalay Cai Mire Cawaale oo lagu magacaabo Eng Maxamed Cali Mire. Aqoonyahanku wuxu hadalkiisii ku soo daray, codsi ah in aanu la qaadno heestii aabbihii Mire Cawaale sameeyey 50 sano ka hor, waa siduu hadalka u dhigaye. Markaas ayaanu la wada jiibinay; Soomaaliyeeeeey Toosoo, toosoo isku tiirsada eeeeeeeey. Wakhti kaas kasii dambeeyeyna waxan akhriyey buug ay qortay aqoonyahanad uu dhalay Yuusuf Xaaji Aadan oo ay aabbeheed kaga taariikhaynayso. Waa Foosiya Yuusuf Xaaji Aadane, iyaduna sidoo kale ayey u xustay taariikhda xiisaha leh ee aabbeheed ka curiyey heestaas guubaabada ah; *Soomaaliyeey toosoo, toosoo isku tiirsada eeey.*

Murankaasi cidna kama daahna ayaan filayaa. Laakiin ma jirto cid ka gar naqday iyo cid xeerar ka dejisay toona. Waayo? Dee Soomaalida umaba cadda sababta gar iyo hawlo la isu gelinayo, iyada oo ay jiraan xeerar fudud oo qadiim ah oo qof waliba u madax ban-naanyahay turjumiddooda. Xeerarkaasi waxa ay yihiin:

- XEERKA 1AAD WAA: In aad sax u haysato wixii aad hore u maqashay ama u taqaannay. Wax alla wixii aad gadaal ka ogaataa waa bar kuma taal. Ninkii aad ka maqashaa waa: Iska hadloow Ina Igarre. 114ka Quraanka ayaan aqaanna iyo waa haddii aan kaa akhristo oo loogu jawaabaa. [1]
- XEERKA 2AAD WAA: Haddii hal abuur lagu murmo cidda iska leh, waxa aad eegaysaa labada muranku ka dhexeeyo, qofka ku xiga abtirsiin ahaan. Markaa isaga ayaad u aqoonsanaysaa qofka halabuurkan xaqa u leh. Kuwa kale waa dhac doon iyo wax aan la aqbali karin. [2]

Sow sidaasi xal sahlan maaha?. Dabcan way u muuqan kartaa. Laakiin waa dhib weyn oo haysta hal abuurka Soomaaliyeed. Haddii aan wax laga beddelinna jahawareer ku ridi kara dadka caadiga ah. Waxa ay ahayd in la dejiyo xeerar lagu kala saaro hal abuureyaasha, wixii la kala saari kari waayan, loo aqoonsado hanti umadeed oo aan qof gaar ahi lahayn. Haddii ay taasi aanay hore u dhiicin haddaba talada ha lagu darsado. *Qaddiyaddan Miisaanka maansaduna ha noqoto tijaabo*

## Ilaa hadda iyo ogaalkayga murankan Miisaanka Maansada

In ay maansada Soomaaliyeed leedahay miisaan lagu cabbiri karo waa mid aan weligayba dareensanaa laakiin ma ogayn wixii ka horreeyey 2002 wax daraasad ah oo lagu sameeyey daahfurka Miisaankaas. Sanadkii 2004 waxa i soo galay buugga macalin CARRAALE ee wata

1,2 Xeerarkaasi cidda ku dhaqanta iyo xilliga la dejiyey qoraaga qoraalka ha la weydiiyo.

ciwaanka mawduucan ee ah:"Miisaanka Maansada Soomaaliyeed". Si xiiso leh ayaan u akhriyey. Wuxu iila muuqday mid xambaarsan aqoon xeeldheer oo aan la qiyaasi karin. Laakiin akhriska, fahanka iyo dib u xasuusashada nuxurka buuggu waa mid adag oo lagu caajisayo. Waan jeclaan lahaa in aan helo qoraallo u dhigan hab kale oo sahaalo iigu duxi kara. Taas macneheedu ma aha in aanan waxbaba ka faa´iidin buuggan isaga ah. Wax badan ayaan ka faa´iidaystay -Alla i lehe-.

Wakhti dambe oo taariikhdu ahayd 2005 ayaan nasiib u yeeshay in aan la kulmo Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) oo socdaal ku marayey waddamada Yurub qaarkood. Halkaas ayaan ka ogaaday in muran ka taaganyahay qofkii ama ciddii daahfurtay "Miisaanka Maansada Soomaaliyeed". Gaarriye waxa uu ka cabanayey nin Carraale la yidhaahdo oo iska sheegtay; hindise iyo halabuur uu Gaarriye gaar u lahaa. Ninkaas Gaarriye ka cawday ee abwaanka bililiqaystay- waa sidii hadalka Gaarriye laga fahmi karayey eh- waan gartay oo waa ninkii aan dhawaanta akhriyey buuggiisa. Hindisaha la sheegayana gartay oo waa isla kan buuggaasi u qoranyahay.

Waxa kale oo uu Gaarriye xusay maalmaaas laba nin oo markhaatiyo kala duwan arinkaas ka furay. Mid ahaani markhaati beenaale ayuu furay oo waxbuu qarribay markii uu daahfurka Miisaanka Maansada u tiiriyey Carraale iyo Gaarriye si isku mid ah. Ninka kalena wuxu furay markhaati ilaahay oo waxbuu hagaajiyey markii uu daahfurkaasi u keli yeelay Gaarriye. Labadaas nin waxa ay kala yihiin Johnsson Heello iyo Martin Owen. Waa laba nin oo ka dhashay qabaa´isha laandheeraha ah ee cadcad oo weedhooda awrk lagu kacsan karo amaba carqalad lagala kulmi karo, haba ahaadeen af-barad ah aan dhalad ahayne. Inta dambe waa faallo aan loo dhammayne garo.

Waagaas laga soo bilaabo waxa aan si weyn ugu baraarugay muranka ka aloosan qaddiyaddan. Habase ahaatee uma banbixin dabagalkeeda. Waxaabad i mooddaa in aan sugayey cid kale oo jawaabta saxda ah ka soo baaraandegta oo ii soo hadiyadaysa daraasad hufan oo aan hawl iiga baahnayn.

**Mudduci iyo Muddaacale**

Meeshaas ama hadalkaygaas hore waxa ka muuqda qof cid kale wax ka tabanaya oo "mudduci ah" iyo qof wax laga tabanayo oo "muddaacale ah". Mudducigu halkan wuxu noqonayaa Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" muddaacaluhuna waa Cabdillaahi Diiriye Guuleed "Carraale". Waxa la isku haystaa waa; Yaa helay ama daahfuray Miisaanka Maansada Soomaaliyeed?

Si loo kala saaro labadan halabuure ee weliba macali-miinta ah, waxa loo baahanayaa:

- *Xeerbeegti/guurti*
- *Xeer ilaaliyeyaal*
- *Qareenno*
- *Caddaymo*
- *Iyo Markhaati yaal*

**Xeerbeegti:**

Maadaadaama aanay jirin gole xeerbeegti ah oo u xilsaaran xannaanaynta hal abuurka suugaanta iyo afka hooyo, waxa lagama maar maan ah in ay xilkaas dusha u ridtaan dhammaan bahda hal abuurayaasha iyo suugaan-layda Soomaaliyeed ee ay doodani soo gaadho.

**Xeer ilaaliyeeyaal:**

Xeer ilaaliye waa qofka ciddii xeerka jebisa ama lagu eedeeyo in uu xeer jebiyey dacwad ku soo ooga ama

maxkamadda soo taaga si xukun loogu rido ama isu difaaco. Halkan waxa ku habboon, bahda saxaafadda iyo saxafiyiinta Soomaaliyeed oo leh aqoontii ay hal abuureyaasha ku qodqodi lahaayeen iyo awooddii ay ku soo bandhigi lahaayeen waxa la doon doonayo

**Qareenno:**

Doodani kama fursanayno qareenno u hadla labadan hal abuuure ee is haysta. Maxaa yeelay qaddiyaddoodana dhinac walba kama eegi karaan oo tooda ayuun baa u caddaan karta. Marna nimanku waa odayaal waxana laga yaabaa in ay odayaasha ku adkaato adeegsiga qalabka casriga ah ee kombuyuutarka iyo internetka. Markaa qareenno, afhayeenno u noqda labadan hal abuure waa lagama maarmaan. Waxaana ku habboon in ay qareenno inoo metelaan dadka durbaba mawqif cad ka yeeshay mawduucan.

**Caddaymo:**

Labadan hal abuure ee Gaarriye iyo Carraale iyo qareennadoodaba waxa looga baahanyey in ay badka soo dhigaan caddaymo la taaban karo oo raadraac leh. Taasi waxa ay xeerbeegtida u sahli doontaa in ay xukunka saxda ah ridaan.

**Markhaatiyaal:**

Sida caadiga ah markhaatiyadu waxa ay ka mid yihiin waxyaalaha lagu kala saaro muranka. Laakiin mawduuca kani, uma baahno wax markhaati ah oo dheer cadday-maha qoran. Haa, waa loo baahanyey markhaatiga haddii uu soo bandhigayo caddayn la aamini karo. Haddii kale caddaymaha uun baa inagu filan.

**Halkee wax marayaan ilaa hadda?**

Sida aaan soo sheegayba, wuxu soo ifbaxay muranka Miisaanka Maansada Soomaaliyeed wakhti dhaweyd oo ku siman soo bixidda faaftay ee buugga Macalin Carraale 2003. Abwaan Gaarriye ayaa goleyaal badan ka xusay lahaanshihiisa "daahfurka Miisaanka Maansada Soomaali -yeed" iyo in uu halabuurkaas ku qabsaday nin lagu magacaabo Carraale. Inta aan kala socdo is qabsigan waa intaas, wayse dhici kartaa in horeba ay labada abwaan isu maandhaafeen, laakiin ay markan uun shacabka caadiga ahi ogaadeen. Carraale isaga wax juuq ah waa laga waayey.

Muddo yar ka bacdi oo ku siman 2006, waxa soo baxay maqaal ciwaankiisu ahaa "KUMAA AH AABAHA MIISAANKA MAANSADA SOOMAALIYEED: MA CAR-RAALE MISE GAARRIYE? Qoraalkan waxa qoray Cabdiraxmaan Faarax (Barwaaqo). Af Soomaali hufan iyo farshaxannimo heer sare ah iyo weliba cilmi-baadhis caddaymo wadata ayuu ku lafa guray mawduuca murankan. Wuxu soo bandhigay caddaymo ku siman 1976 oo ah markii ugu horraysay ee uu Gaarriye mawdduucan ka hadlo, isaga oo hab maqaallo ah ugu soo bandhigay wargeyskii Xiddgta Oktoobar. Isla wargeyskaa waxa kale oo uu ka soo xigtay markii ugu horraysay ee macalin Carraale isla mawdduucaas ku soo bandhigo Xiddigta Oktoobar oo ahayd 1978. Qoraal dhaxalgal ah ayuu Barwaaqo halkaas ku soo bandhigay. Laakiin marka aad wax yar uun ka gudubto bogga koowaad, waxa kuu caddaanaysa jawaabta uu soo wado qoraagu. Waxa ka muuqata qanacsanaan iyo kalsooni 100% ah in "aabaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed" yahay Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye). Waxa ka muuqata la yaab weyn oo uu u qabo macalin Carraale-han sheeganaya daahfurka Miisaanka Maansada Soomaaliyeed. Xiitaa wuxu qalad u haystaa in uu Carraale buuggiisa u bixiyey magaca uu u bixiyey. Wuxu yidhi Cabdiraxaan Barwaaqo: *"Haddaba inuu Borof. Carraale u bixiyo buuggiisa ladhka ah: Miisaanka Maansada Soomaali-yeed, waa gef weyn oo laga galay Gaarriye"*. Mar kale

wuxu ku nuux-nuuxsanayaa in ay tahay Gardarro aan geedna loogu soo gabban, haddii Gaarriye lagala masuugo ahaanshaha: aabaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed.

Marka aad si weyn u dhuuxdo qoraalka Cabdiraxmaan Barwaaqo, waxa inoo caddaanaya in aynu helnay qareen wax ku ool ah oo labada hal abuure mid ahaan u soo baxay. Taasi waa sidii la rabay –Marraa waaxid. Marka aad ka dheregto tabashadii Gaarriye iyo tafatirka qareen Barwaaqo, waxay indhahaagu eegayaan dhinaca macalin Carraale adiga oo leh: **"AMA SOO GAR BAX AMA GAARRIYE U QIR" .**

Laga bilaabo markaa wuxu Carraale noqday mid laga dhawrayo caddaaladda horteeda si uu isu barraxo. Macalin Carraale juuq iyo jaaqba waa laga waayey. Laga yaabee in uu hoos hoos uga hadlay mawduucan, laakiin war debedda u soo baxay lama arag. Dabadeed xeer ilaaliyaha mawdduucan oo ah saxaafadda ayaa askartiisa u diray baadigoobka macalin Carraale. Waa la soo helay waxaana lala yeeshay waraysigii ugu horreeyey. Bogga internetka ee Wardheernews.com ayaa Carraale la yeeshay waraysi taariikhi ah oo uu Carraale ku difaacay lahaanshihiisa xuquuqda daahfurka Miisaanka maan -sada Soomaaliyeed. Wuxu umadda ku wargeliyey in ka hor intii aanu Gaarriye waxba ku qorin joornaalkii Xiddigta Oktobar 1976, uu isagu mawduucan buug dhan ka soo saaray. Buuggaas waxa iibsatay jaamacaddii umadda ayuu ku warramay Carraale, isaga oo magaca buuggana ku sheegay "GORFAYNTA GABAYGA". Buuggan koowaad wuxu ku koobnaa Miisaanka gabayga iyo xeerar-kiisa laakiin sanadkii 1977 ayuu Carraale soo saaray sida uu waraysiga ku sheegay buugga kale ee "MIISAANKA MAANSADA SOOMAALIYEED" oo isagana ay ka iibsatay jaama-caddii umaddu. Buuggan dambe wuxu daboolayaa dhammaan noocyada maansada Soomaaliyeed iyo

miisaankooda. Qoraallada taxanaha ah ee ku soo baxay Xiddigta Oktoobar 1978 waxa aan ka soo qaadanayey buugga Miisaanka Maansada, ayuu yidhi macalinku.

GABAGABAYN IYO GUNAANAD

Haddii aynu markii hore Gaarriye ku sheegnay mudduciga kiiskan oo muddaacalehuna ahaa Carraale, isdifaaca dambe ee Carraale wuxu noqonayaa mudduci-gawrac. Haddii ay caddaato in macalin Carraale soo saaray buuggiisa "Gorfaynta gabayga" ka hor maqaalkii Gaarriye ee ugu horreeyey 1976, isla markaana uu kaga hadlay Miisaanka gabayga, markaa dacwaddii Gaarriye way jabaysaa. Haddii ay caddaato in Carraale buug dhan soo saaray bilowgii 1976, waxa loo qaadanayaa in uu buuggaasi ka dhashay shaqo wakhti dheer soo socotay, waanu ka qiimo weynaanayaa maqaallo joornaal ku soo baxay. Taasi waxa ay Carraale ka dhigi doontaa; Aabaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed. Laakiin weli kubbaddu waxa ay taallaa dhinaca macalin Carraale. Isaga ayaana laga sugayaa caddaynta. Dhinaca Gaarriye iyo qareenkiisa wax loogu noqdaa ma yaallaan. Haddii Carraale ama ciddii isu xilsaarta qareennimadiisa ay keeni waayaan caddaynta buuggaas la sheegay, waxa taariikhda daahfurka Miisaanka Maansada laga soo bilaabayaa axaddii 17ka jeenawari 1976 oo ku beegan maalintii uu soo baxay maqaalkii ugu horreeyey ee Gaarriye. Isaga ayaana loo aqoonsanayaa; aabaha Miisaanka Maansada

Maxamed Xirsi Guuleed

2008-06-03
abdibashir@hotmail.com

ILAAHOOW AQOON LA´AAN HA NAGU CADAABIN, EEXNA HA NOOGA TEGIN

Cabdiraxmaan Barwaaqo oo daba socda qoraalkii Ibraahin Hawd baa isna qoraalkan hoos ku qoran soo dawiyey. Waxaanu yidhi:

## 2.6. Ibraahin Hawd iyo Aragtidiisa Miisaanka Maansada

Posted on Sunday, June 08 @ 15:40:51 CDT by redsea-online.com & www.wardheernews.com

W/Q Cabdiraxmaan Faarax "Barwaaqo"

*Sidii bahalkii biriijka ka dhacay*
*Baraarugey goor dad soo baxay*
*Ilaahay ballankii barquu kacay**

*Midhihii, Eebbe haw naxariistee, Cabdi malaw*

Intaanan qoraalkayga bilaabin, waxan marka hore si kooban akhristayaasha ula socodsiin waxa laysku hayo iyo waxa aan ka garnaqay waxa ay yihiin. Kadib waxaan si aad ah u muujin sida uu had iyo jeer Ibraahin uga hadlo wax aanu aqoon u lahayn. Si aan tiigaal lahayn waxan isaga balfin xajiinta iyo xasaradaha uu ninkaasi igula soo galgashay. Ugu dambaynta waxan tilmaan kooban ka odhan wacdaraha aan looga baran maam-mulka Wardheernews iyo sida aan marnaba loogu arkikarin inuu maammulkaasi arrinka dhexdhexaad ka yahay.

**Waxa laysku hayo:**

Ugu horrayn arrinta laysku hayaa, akhriste, haddii aanad hore ula socon, maaha maanso la curiyey sida uu

* Tuducu wuxu ahaa: Ilaahay ballankii barqaan kacay.

Ibraahin Hawd sheegay. Mana laysku haysto Carraale wax ma qorin, ama Gaarriye wax ma qorin, mana laysku haysto aragtida Gaarriye ayaa ka wanaagsan ta Carraale ama sida kale. Hayeeshee, waxa laysku hayaa hadda waxa weeye: Kuma, ma Carraale mise Gaarriye, ayaa aragtidiisa Miisaanka Maansada dadweynaha Soomaaliyeed u soo hor bandhigay? Haddii uu soo bandhigayna goorma ayuu dad weynaha u soo bandhigay? Si xun wax usheeg sixiroole ka darane, arrinta aan ka garnaqay waa taasi. Afkaygana lagama maqal aragtida Gaarriye ayaa ta Carraale ka fiican ama ta Carraale ayaa ta Gaarriye ka wanaagsan. Cidna afhayeen uma hayne dood bilaabantay baan ka qayb qaatay, aragtidaydii oo caddayni ku ladhantahayna waan soo bandhay. Wixii laysku hayey haddii aan intaa ku dhaafo, bal markanna aan u diga rogto

**Ibraahin Hawd iyo sida uu uga hadlo waxaanu aqoon:**

Inuu Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd" ka hadlo waxaanu aqoon u lahayni, horta, ceebtii maaha ee waa caadadii. Mana aha markii u horreysey uu arrintan oo kale ku kaco. Si aan loo moodin inaan iska eedeynayo ama iska xagxaganayo qoraagii weynaa saw maaha inaan keeno caddaymo aan midhkaa ku taageerayo? Haddaba meel dheerba kama doonayee bal u fiirsada wuxu hadalkiisa ku bilaabay:

> *Dhaqan ahaan sheegashada halabuurka iskuma aynu qabsan jirin, maansada oo ahayd waxa ugu badan ee la curiyana weligeed taariikhda soomaalida anigu kuma aan maqal laba qof oo lahaanteeda isku qabsaday.*

Magaranayo taariikhda dadkan uu ka hadlayaa cidda ay yihiin. Innagoon mid fogba raadin ayuu raadkeedi sii qoyan yahay tii laysku qabsaday. Miyaan dhawaanahan laysku haysan heestii Soomaaliyey toosa ciddii curisay. Ibraahin malaha BBCdana ma dhegeystee, miyaan Faadumo Qaasin laga warsan oo aanay ku doodahayn

inuu aabbaheed sameeyey. Miyaanu Ibraahin daawan cajaladdii laga duubay daahfurkii buugga la yidhaa mahadhadii Eebbe haw naxariistee Yuusuf

Xaaji Aadan. Xudeydi oo arrintaa ka warramaya ayaa yidhi, "Qaasin hilowle ayaannu weydiinnay oo ku nidhi Qaasinow tuluddu waa maxay?" Markaasuu yidhi buu yidhi, 'Maxaa ka kasaa?"

Markaasaanu ku nidhi buu yidhi, "Oo haddaa maxaad u sheeganaysaa samaynteeda?". Cajaladdaasi ka daawada http://www.yusufhajiadam.com/video.html

Waxa isna qoraalkiisa ku caddeeyey jiritaanka arrintaasi *Maxamed* Xirsi Guuleed (eeg redsea-online.com). Halkaasi waxa innoga dhuroobey inaanu Ibraahin la socon mahadhada dadkan uu ka warramayo. Siday doontaba ha ahaatee, doorkan maanta ah, Ibraahinow, layskuma haysto maanso curinteed. Waxa laysku hayaa waa aragti aqooneed oo Soomaali ugub ku ah ee sidaasi ula soco.

Kadar oo dibi dhal. Isagoo braahin qardajeexii ku jira ayuu ka hadlay Miisaanka Maansada waxaanu yidhi:

> *Weydiintuse waxay tahay Miisaankaasi in la barto waxtarka ku jiraa waa maxay*?

Waan yaabbanee, dad yahaw, idinna ma la yaabbantiin? Haddii aanu Ibraahin garaneyn waxtarka Miisaanka ku jira maxaa xiijiyey ee waxan oo hadala ka keenay? Sheeko beri aan yaraa, oo aan miyi joogay, la iisheegay baan xasuustay waxaanay ahayd:

> Lax baa casar horratay. Wan yar, oo baraar ah, baa laxdii daba cararay. Dad u dhowaa inantii adhiga ay laxdu ka horratay la joogtay baa yidhi, "Garannay oo laxdu ilmaheedii bay u horraney saaye, wanka yar maxaa isna wada?" Inantii baa u warcelisoo tidhi, "Dee salbabaq!" Sidaasi awgeed, kol haddii

> uu Ibraahin qirtay inaanu la socon waxtarka ku jira Miisaanka Maansada, waxa ka hadliyey ee uu Cabdillaahi u daba carayaa waa Salbabaq iyo dood baan ka qayb galay aad tidhaahdid.

Waa yaabka yaabkiiye, aqoondarradaasi wuxu markhaati uga dhigtay oo uu u guuxay aragtida uu Miisaanka Maansada ka qabo ninka la yidhaa A.M.Yuusuf oo ku magac dheer 'Waayeel'.

Sida aan ku xusay buugga la yidhaa '*Magac bilaash uma baxo'*, naanaysaha iyo magacyada Soomaalidu iskama baxaan ee ujeeddooyin dhab ah bay ku baxaan. Hayee-she, waxa jira qaar xifaalo ahaan loo bixiyo. Tusaale ahaan, waxad arkaysaa nin aad u madow oo loo bixiyey 'Nuur', ama mid aad u gaaban oo dherer lagu xifaalay-nayo sida 'Cali-dheere' oo kale. Haddaba kolkii aan akhriyey gorfaynta magaceedu yahay '*Maxaa gaarriye loogu hiilin?' oo* uu Waayeel ka qoray buugga la yidhaa *"Mahadhada iyo waxqabadka Maxamed Xaashi Dhamac*" ayaan dareemay inay naanaystaasi tahay tu xifaale ku baxday oo uu A.M.Yuusuf yahay nin ay waayeelnimo ka dheertahay. Sidaasi waxan ugu maleeyey waa qofkii u horreeyey adduunka ee buug aanu arag oo aanu akhriyin gorfeeya. Hadda marka uu Waayeel gorfaynta buugga ka qoray, buugguba mad-bacaddaba kama soo bixin oo anigii qoray ima soo gaadhin. Dhacdadaasi, waxan, runtii, ku tiriyaa yaabab-kii isoo maray kuwii ugu yaabka weynaa.

Run ahaantii, A.M.Yuusuf kumaan tirin inuu hanfade yahay. Waxan u qaatay inuu buugga riyo ku daalacday. Sidaasi awgeed waxan ku tiriyey 3da uu Nebigeennu (NNKHA) ku tilmaamay inay yihiin Marfuucal Qalam (**مرفوُع القلم**) een dembigaba loo qorin. Waxa kale oo aan kaga gam'ay qoraalkii Caddaani Axmed ee ladhkiisu ahaa http://guri-barwaaqo. blogspot. com/2007/11/ina-yuusuf-muxuu-isku-ogyahay-ee-uu-ka_18.html ee uu ku yidhi,

"Gaarriye iyo Barwaaqo toona daanyaqaad uma noqonayaan dammiinnimadaada."

Ma ihi qofka keliya ee dareemay inuu Ibraahin Hawd ka hadlo waxaanu aqoon. Xasan Xuseen Warfaa ayaa qoraalka ladhkiisu yahay **Sheekh Muxammed Bin Cabdulwahaab: Birmageydo lagu gafey** ku yidhi sidan:

*…. Qoraaladaas waxa kamid ah mid uu lahaa qoraaga caanka ah ee Ibraahin Yuusuf "Hawd" (Aqoonyahanka iyo Afkiisa, redsea-online.com), oo sadarro ka mid ah aad ka dhan-dhansanaysey ereyada uu adeegsaday qoraagu, aqoon darro xooggan oo ka haysa Sheekh Muxammed iyo guud ahaan waxa lagu magacaabay wahaabiyada.*

**Wuxu anigana iga sheegay dhegeysta:**

Aqoondarrada waxa lagu yaqaan inay qofka ku abuurto kalsooni xad dhaafa. Intii uu Ibraahin salbabaqa ku jirayba danbay ahayde, wuxu mawdku ka adeegay kolkuu aniga oo aanu aqoon badan ii lahayn uu yidhi, "*Cabdiraxmaan C. Faarax "Barwaaqo" isagu kama mid aha dadka arrinta xogteeda martida loogu yahay waayo soo bixiddeeda waxba kama uu ogayn*."

Horay Soomaaliyi u tidhi, 'cawlba cawlkiisuu la boo-daa.' Ibraahin sidii jalahii Waayeel ayuu ku riyoo-day, baan u malaynayaa, inuu Barwaaqo ka mid yahay dadkii dhashay 80kii. Bal Ibraahin ha la weydiiyo sida uu ku ogaaday, haddii aanay wixiisu riyo ahayn, halka uu Barwaaqo joogay dhalashadii Miisaanka maan-sada. Haddii aan midhkaana caddeeyo, tolow, Ibraahin ma hadhayaa?

Qoraalkii aan ku garnaqay Ibraahin badh buu soo qaatay badhna wuu ka tegey. Qofkii fiiradheeri Eebbe ku galladay ee akhriyey qoraalkaasi wax badan buu ka dareemi. Waxan filayaa inaanu Ibraahin weligii u garqaadin laba wiil oo ay jalayihiin oo arrin isku qab-

taye, waxan halkan ka sheegayaa inaan garta dhexdhexaadka laga yahay, sida Ibraahin Hawd, loo adeegsan hawraaraha; haddii ay sidaasi dhicilahayd sidaasi ayey noqon lahayd, iwm. Sidaa darteed markii aan qorayey qoraalka ladhkiisu yahay "*kumaa ah aabbaha Miisaanka Maansada, ma Carraale mise Gaarriye?"* waxan idhi:

> " *Aniga oo iska dhawraya hawraaraha: waa la yidhi, waan aqiin, waan maqlay, waan akhriyey, ama waxa igu maqaala ah, iwm.,, ayaan dooddeyda ku taageeri caddeymo, sumad iyo sawrac leh"*

Waxan sidaasi u lahaa waxay ahayd si aan la iigu arkin inaan ahay nin dhinac u janjeedha oo hiil ku jira. Caddaymihii aan soo bandhigayna waxa si wanaagsan oo niyadsimiyi ku jirto ugu qancay Axmed Keyse Cali oo ah ninkii doodda furay. Waa nin muujiyey sumaddii iyo sawricii Soomaali lagu yiqiin, sida Ibraahinna garmaqaate muu noqon. Ilaa iyo haddana wax cadday-mihii aan keenay lagu buriyo lama hayo.

Hadal lama ag joogsadee bal halkii uu Barwaaqo joogay markii qoraalkii u horreeyey ee Miisaanka maansadu ku soobaxay Xiddigta Oktoobar aan sheego. Taariikhda reer galbeedku kolkay ayad 11/01/1976kii ayuu Barwaaqo Muqdisho yimid. Hadda baabuurkii dhiga dheere ma sidin. Hargeysa iyo Burco toona kamuu iman. Hawd iyo Soomaali galbeedna kama soo doolin. War baa kuu dhimane, wuxu Barwaaqo ka soo degey garoonkii dayuuradaha ee Caalamiga ahaa ee Muqdisho. Bal hadda qabsoo Somali airlines lamuu socon. Ibraahinow, wuxu Barwaaqo la socday dayuuraddii la odhan jiray Aeroflot ee uu lahaa dalkii burburay ee Midawgii Soofiyeeti. Muu ahayn Barwaaqo, xilligaasi, inan yar oo sii raacay aabbihii oo wasiir ah, dalxiisna umuu tegin ee wuxu ahaa nin waxbarasho u aaday dalkaasi. Maalintaa aan Xamar imid iyo maalmihii xigey midna ma jirin wax hadalhayna oo ku saabsanaa Gaarriye iyo Carraale toona.

Akhristayaal, idinkaan idin weydiiyee, goorma ayaa qoraalkii u horreeyeyna lagu soo qoray Xiddigtii Oktoobar? Miyaanay ahayn 17kii bishaa uu Barwaaqo dalka ku soo laabtay. Barwaaqo oo Xamar dhex joogana miyaanay aragtida miisaanku soobixin? Ibraahin ha la weydiiyo halka uu isagu joogey xilligaasi malaha mabuu dhallanne.

**Indha la'aanta iyo xagjirnimada Ibraahin:**

Runtii, Ibraahin hadal baa hadhay umuu hadale, anigaa hadhay buu u hadlay. Taasi waa ta keentay inuu sidii qof indhala' dhinacuu doonaba u dhaqaaqo. Ibraahin sidaa uu u yidhi barashada miisaanku maxay soo kordhineysaa baa ka sal ah. Indhala'aantaasi waa ta ka yeedhsiisey:

> *Taageeradaa xagjirnimada ah Cabdiraxmaan wuxuu ku sii xoojiyey fikrado uu ku daray maqaal dambe oo la yidhaahdo "Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed", redsea-online.com, meey 2007. Iyo buuggiisa cusub "Mahadhada iyo Wax-qabadka M. X. Dhamac 'Gaarriye'", Hal-aqoon publishers, 2007.*

Waxa hadalkaas qudhiisa ku cad inaanu Ibraahin kala aqoon cilmibaadhista iyo xagjirnimada. Labadii aragtiyood ee Miisaanka ee Carraale iyo Gaarriye ayaan is barbardhigay tii aan doorbidayna waan qaatay. Carraale iyo Gaarriye maan kala dooranayn. Midhkaana daw baan u leeyahay. Qoraalkaasi uu ku tilmaamay mid xag jir ah waxan ku tilmaamay oo caddeeyey in aragtida Miisaanka Maansada Gaarriye aanay inna barayn sida loo maansoodo oo qudha ee ay innoo hawl yaraynayso kala asooridda badaha maansooyinka oo aad laysugu murgiyo. Hadalkaa intaan idhi uun kama dhaqaaqin ee waxan soo bandhigay caddaymo kuwaas oo ahaa sidan:

> *…. Aan ku bilaabee, intaan dalku burburin, dadka iyo afkuna habaqle noqon, waxan u*

*haystey in la kala yaqaanney badaha maansooyinka Soomaaliyeed oo ay aad u adkayd isku murgintoodu. Waxa kale oo aan filayey in la yaqaan maansakastaa badda ay ku abtirsato. Hase ahaatee, malahaasu wuxu afka u dhacay kolkii aan dhawaan dareemay in dhibaa-tada maanta jirtaa kaba horreysey burburka. Tusaale ahaan, maansada uu tiriyey Xuseen Dhiqle ayaa lagu sheegey iney gabay tahay (Aw Jaamac Cumar Ciise 1999).*

*Intaas oo qudha maaha. Bogga 191aad, ee daabacaaddii 2aad, ee buugga Diiwaanka Gabayadii Sayid Maxamed Cabdalla Xasan, labada maanso ee ku yaal, oo geeraar ah, baa ayana lagu sheegay inay gabay yihiin. Waxa haddaba isweydiin leh, haddii Aw Jaamac Cumar Ciise iyo raggii hawsha la wadey ay maansooyinkaasi gabay ku sheegeen maxaad u malayn qof caadiya oon suugaanba wax ka aqoon?*

*Gefafka jaadkaasi ihi ma yara. Dhawrka tuduc ee hoos ku qoran oo ku jirey heestii Diiriye Baalbaal baa iyana la sheegay inaanay tisqaad noqon (eeg bogga 72aad ee buugga Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale' 2003).*

…………

*Kol mushaax*

*Kol mafsuud*

*Kol mashxarad*

*Sidii maansooyinkii hore haddii aan ku adeegsanno aragtida Gaarriye ee Miisaanka maansada si hawl yar baan u ogaankarraa badda ay tuducyadaasi ka tirsanyihiin. Intaynaan, haddaba, sheegin badda ay ka soo jeedaan bal aan*

*marka hore eegno qaab dhismeedkooda oo u qorno sida hoos ku qeexan:*

*Kol mushaax*

*1 1 2*

*Kol mafsuud*

*1 1 2*

*Kol mashxarad*

*1 1 1 1*

*Kolkii aan sidaa u qorray maxaa inooga dhuroobey? Waxa halkaa innooga soo baxay inuu tuduc kastaa ka koobanyahay afar (4) shaqal. Taasi oo inna xasuusineysa qaab dhismeedkii heesta la qaado kolka hadhuudhka lagu tumayo mooyaha ee la laba tiboodinayo. Heestaasi oo tidhaa:*

Mooyaha

2 1 1

Malab laha

1 1 1 1

Magacii

1 1 2

Mooyaan

*2 2*

> *Hadal gun buu leeyehee, waxa halkaasi innooga caddaatay in aragtida Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' ee Miisaanka Maansadu aanay inna barayn sida loo maan-soodo oo qudha*[2] *ee aan si hawlyar ugu kala ogaan karro jaadadka badaha maan-sooyinka Soomaaliyeed.*

Akhriste, qoraalkaasi ma xag jirbaa, mise aragti cusub oo dhab ah baan tilmaamay? Car Ibraahin ha beeniyo! Aragtidii Carraale wixii ay maarayn weydey tii Gaarriye miyaanan ku maarayn?

Akhriste, halkaasuun kagama hadhin, waxan maareeyey kala garashada heesaha wiglo, hirwo, dhaanto iyo heello oo ay aad u adkayd kala garashadoodu. Intaasuun kuma joogin ee waxan dadkayga ugu bushaaraynayaa inaannu, aniga iyo nin aannu jalanahay, dhowaan idiin soo bandhigi doonno qorme kumbuyuutar oo aannu u bixinay 'laaxinjire' oo lagu sixidoono maansada. Wuxu kuu kala sheegidoona maansada aad curisay badda ay ka soo jeeddoo, halka uu laaxinku kaga jiro, inta tuduc ee ay ka koobantahay iwm. Waar ma hawshaa aan wado ayuu Ibraahin leeyahay waa xagjir?

Baroortu orgiga ka weyn baa la yidhee, ha sheego Ibraahin waxa isaga wada. Waxanan u sheegi, Caddaawe iyo Madoobe miduun baa soo horrayne, in Carraale u baahan yahay aqoon lagu garabgalo oo aragtidiisa lagu kobciyo ee aanu u baahnayn Yaa maalijirayeey. Go'aan qaadashada qofka xagjirnimo ku shaqaynaya ee cudur la duudduuban akhristayaashaan u dhaafay.

**Wardheernes iyo waraysigeedii:**

Runtii waan ku obsaday waraysigaa isaga ah, waayo Cabdillaahi baa wax badan caddeeyey. Caddaymaha Cabdillaahi markalaan u dhigtee, bal aan falaadka cusub ee Wardheernews wax ka binniixiyo. Degelka *wardheer-*

*news.com* loogama baran habka uu waraysigan u soo bandhigay. Waraysiyo dhawr ah oo uu maammulka degelku qaaday sumad iyo baadisooc lagu sugo ayey la haayeen. Tusaale ahaan, waraysigii uu degelku la yee shay *Dr. Georgi Kapchits* waxa ku saxeexan oo cad inuu qaaday *Khaliil C. Xasan*. Bal dad Allaw idinba halkan ka eega waraysigaasi http://www.wardheer news. com/ Wareysiyo/25WareysiKapchits.htm. Miyaanay had-daba wax lala yaabo ahayn waxa uu degelka WDN waraysigii uu la yeeshay Cabdillaahi Diiriye Guuleed "Carraale" uga dhigo mid sumad laawe ah lana qariyo ciddii qaadday, meesha lagu qaaday iyo qaabka loo qaaday intaba. Arrintaasi waxay muujinaysaa in maamul -kii degelka lagu soo biiray oo ay wax iska beddeleen. Waxa kale oo ay aad u xoojineysaa tallankii iga galay hadallada waraysiga ku jira oo ka mid ah kuwii ay igula doodeen qaar ka mid dadka aan isleeyahay maammulka wardheernews ayey ku soo biireen.

Hordhaca waraysiga WDN wuxu u qoran yahay sidan:

*Professor Carraale wuxu suugaanta Soomaaliyeed ku soo kordhiyey daahfurida qaacidada maansada soo-maaliyeed ku salaysan tahay. Qaacidadada, oo loo yaqaan, "**Miisaanka Maansada**", waxa jirta arragti kale oo ah inuu daahfuray Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye).*

Cutubka labaadna wuxu u qoran yahay sidan:

*Maadaama "Miisaanka maansadu" tahay daahfurkii ugu qiima weynaa ee qarnigii tegay ku soo kordhay suugaanta Soomaalida, WardheerNews waxa ay furay-saa dood ku saabsan yaa hor helay "Miisaanka maan-sada. Labaddan aqoonyahan ee Soomaaliyeed iyad oo ay jirto in weli dood ku saabsan yaa hor helay "Miisaanka Maansada" aan loo furin.*

Waxa haddaba isweydiin leh sida uu degelka WDN uu dood dhexdhexaad ah uga samayn karo arrintaasi isaga oo kolkii u horreyseyba dhinac ka soo jeestey?

Haddii, sida maammulka wardheernews ku doodayaa dhabtahay waxay u qori lahaayeen sidan hoos ku qoran:

> *Aragtida Miisaanka Maansada oo ku soo biirtay af Soomaaliga ayaa ilaa hadda muran ka jiraa sidii loo ogaan lahaa ciddii daah furtay. Dad badan baa qaba inuu Cabdillaahi Diirye Guuleed yahay ninkii u horreeyey ee aragtidaa daahfuray. Dad kale oo badan baa ayana qaba inuu Maxamed Xaashi Dhamac yahay ninkii soo horbandhigay. Si arrintaa looga gun gaadho wardheernews waxay ku dadaashay sidii ay laba aqoonyahanba waraysi ula yeelan lahayn. Muddo kadib waxay wardheernews ku guuley-santay inay markii u horraysay waraysi la yeelato Carraale oo jooga meel hebla, waxan soo waraystay hebel hebel oo ka tirsan bahda wardheernews.*

Hadalkaasi ayaa dhexdhexaad ah. Qofna niyadda dadka ma oga waxa ku jira. Falka iyo falaadka qofka ayaa la xukumayaa. Sidaasi awgeed anigu uma arko hordhaca wardheernews inuu yahay dhexdhexaad.

Guntii iyo gunaanadkiina qoraalkan oon badidii ku deeddifaynayey eedihii uu ii soo jeediyey Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd" ayaan haddana idiinku sheegay inaan maanta laysku hayn maanso curinteed ee laysku hayo kuma ayaa aragtidiisa Miisaanka Maansada soo horbandhigay? Kii doonaaba ha daahfuree, kolley mid uun buu noqone, waxa habboon in lagu dadaalo sidii aragtiyahaasi loo baran lahaa loona sii kobcin lahaa si wax looga taransado.

## 2.7. Wardheernews oo eeddii Barwaaqo deeddifeysey, dhabtuse maxay tahay?

Sidaan hore u xusay wuxu Siciid Suugaan ii sheegay inaanu waxba qorin. Mana ogeyn inuu ka tirsan yahay maammulka wardheernews. Sidaasi awgeed markii aan waraysiga ka dhandhansaday hadalladii aanu hore ugu doodnay iyo qarinta aan la sheegin cidda qaadday waraysiga ayaa tallan iga galay siday wax u dhacayaan. Taasi ayaa keentay inaan wardheernews ku eedeeyo arrintaa iyada ah. Hayeeshee, eeddaasi aan u jeediyey ul dheer bay isaga leexisay. Barwaaqana waxa laygu xariiray inuu yahay nin af lagaaddoonaya. Maxaase dhacay?

Waxaan soo ogaaday inuu Siciid xidhiidh dheer la leeyahay maammulka degelka wardheernews oo uu waraysiganna gacanweyn ka geystey. Sidaasi awgeed haddii aan dareemay, muran iyo madmadow toona igaga jirin inuu arrintaa lug ku lahaa, maxaa keenay in laygu tilmaamo nin af lagaaddooday?

Liibaan Axmed baa dareemay inuu muranki sii daba dheeraanayo. Si haddaba arrinta loo maareeyo, wuxu soo jeediyey aragtidan hoos ku qoran .Waxaanu yidhi:

## 2.8. Sida loo soo afmeeri karo muranka ka taagan Miisaanka Maansada

June 08, 2008, www.wardheernews.com

W/Q Liibaan Axmad

Doodda ku saabsan qofka ugu horreeyey ee daah-furay Miisaanka Maansada Soomaalida waxay socotay tan iyo sanadkii 2005ta—waa marka la eego wixii dooddaa laga qoray. Way dhici kartaa in arrintaa laga doodi jiray hase ahaatee aan laga faalloon sida hadda looga faalloodo qoraal ahaan. *Wardheernews* waxa ay ku ammaanan tahay dib u aloosidda doodda kadib wareysigii ay la yeelatay bare sare Cabdulaahi Diiriye Guuleed (Carraale) oo rumeysan in uu isagu hor helay Miisaanka Maansada. Aynu sugno inta wareysi kaa la mid ah lala yeelanayo bare sare Maxamed Xaashi Dhammac (Gaarriye).

Inta ka horreysa waxa aan jeclaan lahaa in aan wax ka iraahdo sida loo afmeeri karo muranka ka taagan hor-helista Miisaanka Maansada. Sida ay ila tahay hor-helistu ma aha halbeeg la adeegsan karo waayo waxa Gaarriye iyo Carraale ay ku doodayaan in mid kastaa uu soo bandhigay Miisaanka Maansada sanadkii 1976kii. Maxaa la samaynayaa haddii la helo caddayn muujinaysa in ay isku mar soo saareen?

Shisheeyaha arrinkan u kuurgalay waxay sheegaan in Gaarriye iyo Carraale uu mid kasta si madax-bannaan u daah-furay Miisaanka Maansada. Waxa kala saarista labada hal-abuur wax ka tari karta u kuurgalista wax soosaarkooda. Ilaa hadda waxa aynu ognahay in

afyahanka Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo uu isu xilsaaray baarista Miisaanka Maansada uu Gaarriye (waxka) daahfuray. Buugga uu Barwaaqo ka qoray Miisaanka Maansada waxa lagu u soo ururiyey qormooyinkii Gaarriye ku soo saaray wargeyskii Xiddigta Oktoobar sanadkii 1976kii iyo qaar ka mid ah maan-sooyinkiisa. Waxa ay fududeynaysaa in si degge-naan leh loo eego kaalinta Gaarriye oo markii hore ahayd mid laga sheekeeyo ama mid ay dadka cilmi-baareyaashu xusaan haddase noqotay mid la baari karo qormooyinka uu Barwaaqo soo ururiyey awgood.

Sanadkii 2003da ayuu Carraale isna soo saaray buuggiisa *Miisaanka Maansada*. Hadda waxa aynu haynaa wax soo saarkii labada hal-abuur. Muxuu hal-abuur kasta (Carraale ama Gaarriye) ku sii kordhiyey ama ka dhimay 'daah-furka Miisaanka Maansada" dhowr iyo soddon sano kadib? Looma kala codaynayo laba xisbi oo mid kasta uu wato bareere aan cilmiyeysnayn. Waxa laga doodayaa waa Miisaanka Maansada Soomaalida oo ku dhisan xog u gaar ah maanso kasta, waxana lagu dhererinayaa xogtaa waxa ay soo kala bandhigeen Gaarriye iyo Carraale.

Liibaan Axmad

libahm@gmail.com

Dooddii waxa si aad ah u xiiseeyey Borof. C/qaaddir Nuur Salaad oo loo yaqaan 'Takar'. Wuxu isna soo qoray qoraalkan isaga oo tilmaamaya wixii uu ka ogaa iyo aqoontii uu u lahaa Gaarriye iyo Carraalaba.

## 2.9. Doodda Miisaanka Maansada

Qore: Bare Sare C/Qaadir Nuur Salaad (Takar)

July 14, 2008, www.wardheernews.com

Aad ayaan ugu faraxsanahay doodda "WardheerNews" furtay oo ku saabsan daah-furka Miisaanka Maansada.

Weli iima suurtoobin in aan helo oo akhriyo doodda socota oo dhan. Ha ahaatee waxaan isku tirinayaa xog-ogaal u dhex noqon kara ragga muranku ka dhexeeyo.

In muranku jiro waxaa iigu horraysey 2007 oo Abwaan Maxamed-Gaarriye Xaashi Dhamac uu noogu yimid magaaladaan Nashville (Tennessee) ee USA . Qof ahaan aqoon fiican uma lahayn walow labadayaduba aan Jaamacaddii Soomaaliya Macallimiin ka wada ahayn.

Habeenkaas ayaan xusuusiyey galab aan isugu nimid maqaayad shaah, anigoo la socdey nin labadayaduba aan niqiin oo la yiraahdo Axmed Cabbaas Axmed. Goobtaas oo uu nooga sheekeeyey in habeen habeennada ka mid ah, irridda qolkii uu Lafoole ka degganaa saq dhexe lagu soo garaacay oo isagoo hurdeysan, guntanna go'ii sariirta uu furay mise waa askar dharcad ah. Waxay weydiiyeen "Gaarriye". Kolkuu yiri waa anigana ay ku yidhaahdeen "Walaalow ha nagu ciyaarine Gaarriye noo soo toosi". Isna ugu afceliyey: "Haddaad nin dheer oo laxaad leh

doonaysaanna ma joogo, haddaad Gaarriye rabtaanna waa aniga".

Markaas ay yiraahdeen: "Madaxtooyada ayaa lagaa rabaaye soo labiso" isna isagooba kolkii hore u qaadtay in ay xirayaan degdeg isugu boobay dharkii soona raacay.

War iyo dhammaanti waxaa la keenay Madaxtooyadii waxaana la saaray diyaarad ah kuwa qummaatiga u kaca. Waxaa lagu soo wareejiyey meelihii la dejiyey dadkii ay saameyn jirtey Abaartii Dabo-dheer, ee la dejin jirey Dujuma, Sablaale iyo Kunturwaarey.

Waqti dheerna waa ka soo wareegey aafooyin badanna waa dheceen sidaas darteed waxaan filayaa in dad badan xuxuustii is dhintay. Marka haddaan taariikho illoobo ha la i cafiyo.

Qiyaasta 1976 ama 1977 ayaan ka akhriyey Wargeyskii "Xiddigta Oktoobar" maqaal uu qoray Abwaan Maxamed-Gaarriye Xaashi Dhamac, oo ka hadlaya Miisaanka Maansada. Haddii anan qaldanayn. Gaarriye wuxuu ka hadlayey oo qur ah inta shaqal tix gabay, geeraar, jiifto iyo masafo ku jiri kara oo wuxuu lahaa waa in tixda gabay ay ku jiraan 20 ama 21 shaqal. 21ku waa markii shaqalka koowaad gaaban yahay kan labaadna dheer yahay.

Markii laga soo qaxay Xamar oo kolkii hore nala keenay Kismaayo, haddana nalooka dabo yimid oo nalaku shubay Dhoobley iyo Xadka aan wadaagno Keenya anna ku warhelnay dad badan oo sokeeye qaaliya in lagu gumaaday Muqdisho, waxay ahayd wax dabiici ah in la soo xusuusto gabayo hore, qofkii wax isku tuhmayeyna uu wax tirsho. Waxay noqotay in aan Dhoobley, dhowr beri ku celcesho tix aanan aqoon cid tirisay oo oranaysey:

"Garkaan xiiray,

Guudkaan tidcaday,

Gabarnimaa ii eg,

Gaashaanka labadiisa garab inaan gubaa bay eg,

Golihii rag joogaba in aan garab maraa bay eg"

Intaas waxaa ii weheliyey dhanka aabbe ahaaneed gurigayga Xamar wuxuu ku yiil Naadigii Saraakiisha (Circolo Ufficiale), qiyaasta 15kii Jenwary (Jennaayo) ayaa xaafadda waxaa ku soo dhacay madaafiic. Saan ilmihii ayaan qolalkii ka saaray intaan baqay hadduu nagu soo dhaco in gurigu ku habsado oo jodariyo waxaan u dhigay geed weyn oo noogu yiil deyrka oo ahaa Mohogani (ama loox Filibbiin) hoostiisa. Waxaa u yaraa wiil shan jir ahaa oo la yiraahdo Sardheeye. Way saseen oo argagaxeen. Saan anigoo Sardheeye sida ayaan is iri "Maaweeli". Waxaa un maskaxdayda ku soo dhacday heestii lixdankii ma aqaan ma waxaa lahaa saaxiibkay Cabdullaahi Qarshe mise Cali Sugulle, heestaas oo oranaysey:

"Soomaaloo wanaagsan, Giddigeed walaala

Warshado u sameeyoo wax walba u dhammeeyo"

Intaas markaan iri ayaa Sardheeye i weydiiyey: "Oo Aabbe hadday walaalo yihiin maxay isu laynayaan?"

Ilmaa iiga timid labo sababood:

1. Anigoo 45 jir ah ahna macallin jaamaceed ayaanan awoodin in aan ka afceliyo weydiin wiilkayga oo 5 jir ahi i warsaday.

2. Siyaasiyiinta, saraakiisha, aqoonyahannada iyo ganacsatada Soomaaliyeed, dadkaan ka dhashay

> oo ku dhaaranayey waxay garan waayeen arrinkaas dhallaanku gartay, waa xil dhallaan gartay.

Su'aashii waxay igu noqotay utun aan u baahnahay mar ay noqotaba in aan ka afceliyo. Saddex sano ka dib, 1993, anigoo jooga Nayroobi waxaa gacanta ii soo galay buug Jaamacaddii qaranku qortay oo macallimiin Talyaani ah iyo Idaajaa ay wada qoreen. Waxaa la oran jirey "Antologia della Cultura Somala". Idaajaa wuxuu ku soo daray gabayo rag badani tirshey iyo darasaddii Gaarriye ee Miisaanka Maansada Soomaaliyeed.

Kolkaan akhriyey ayaan is iri "Mindha adna waa isku dayi kartaa in aad gabaydo".

Waxaan ku bilaabay u afcelintii aan Sardheeye u afcelinayey oo waxaan "Belaayada Maanta Taagan" ama "Bilow War Bilow Biloowa".

Hadda walow anan weli gabyaa isku sheegi karin oo aan iraahdo: "Gabay anoon shib ka ahayn, misna shaacir ku ahayn", anigoo tixda ka soo xaday gabaygii "Isna waa shiddiyo hoog" oo Sayid Maxamed Cabdulle Xassan uu ugu maansoonaya Cali (Dhuux) Aaden ku lahaa:

*"Gabay nimaan shib ka ahayn, misna shaacir ku ahayn*
Oo shooli oo oran shafkaygaa wax jiifaan
*Sheegaye midkaasina isna waa shiddiyo hoog".*

Waxaa in badan laga hadlaa Hoobal iyo tixda gabayada furaha u ah ee "Hoobaalayey, Hoobalayey hooye". Erayadaas ayaa u baahan baaritaan qoto dheer, maxaa yeelay magaalada la yiraahdo Eyl, gobolka Bari, agteeda oo xeebtana u dhow waxaa ku yaal meel la yiraahdo "Xabaalo Hoobal". Sidaan maqlayna Talyaanigii ayaa qoday oo wax ka baxshey. Dad baa waxay aamminsan yihiin in Hoobal boqor ahaa oo weliba uu ahaa boqorkii u horreeyey oo dadweynuhu u heesaan. Waxaana la yiri waxaa diley nin gabadhiisa qabay.

Haddaan dhex gelintaas halkaas uga gudbo, calaa kulli xaal, hadda waxaan daabacayaa siddeetameeye maanso abaalna Eebbe ka sokow waxaan ugu hayaa xaaladda dagaalka sokeeye ee ila soo gudboonaatey iyo Abwaan Maxamed-Gaarriye Xaashi Dhamac oo hadduu doono wax ha ka soo dheegto Cabdullaahi-Carraale Diiriye Guuleed, sida kan dambe lee yahaye halka Carraale ka awoodi waayey in uu dadweynaha soo gaarsiiyo muddo dheer wixii u daahfuray isagu si sahlan ugu soo qoray Wargeyskii maalinlaha ahaa ee ka soo bixi jirey Muqdisha.

Sidaas darted haddii maansooyinkayga cidi wax uun ka faa'ido, Gaarriye wax buu ku lee yahay mahaddaas.

Dhanka kale Carraale waan arki jirey in uu macallin ahaana waa filayey illowse haddeer ayaan qurbaha ku bartay oo ku akhriyey buuggiisa, kolkaan Wardheer-News ku arkay doodda xiisaha leh oo ka socota ka dib.

Waxaan qirayaa intaan ka akhriyey labada nin oo loo garnaqayo.

Waxaan oran lahaa buugga Carraale waa daraasad buuxda oo dhaxal gal ah. Sidii Gaarriye kama hadlayo tirada shaqallada ee daraasaddisa Miisaanka Maansada waxaa saldhig u ah: Shaqal Dheere iyo Alammo.

Wuxuu daahfuray in gabaygu ka kooban yahay "Hojis iyo Hooris". Hojiska salkiisu waa 12 shaqalle. Waana toddoba shanle, taas oo macneheedu yahay in uu ka kooban yahay 7 alan oo leh 5 shaqal dheere (7,5). Iyadu tirada shaqalladu ay weli yihiin 12 Toddoba Shanle waxaa lagu beddeli karaa Sidded Afarre (8,4), ama Sagaal Saddexle (9,3), ama Toban Labaale (10,2), Kowiyotoban Kowle (11,1) iyo ugu dambayn 12 eberre (12,0).

Tan kale Carraale wuxuu muujiyey oo caddeeyey in muhimku uusan ahayn oo qur ah tirada shaqallada,

shaqal-dheerayaasha iyo alammada ee misna loo baahan yahay hormaynta alammada sida:

Meeris heello=8,4=Wardheer dal wanaagsanaydaa

Loo beddeli karo: Hojis gabay=8,4= Dal wanaagsanayda Wardheer, waa horaan tegaye.

Dhanka hoorisyada wuxuu daahfuray in mar walba hooriska gabay ka kooban yahay Lixle labaale (6,2), oo macneheedu yahay lix alan oo labo shaqal dheere ku jiraan, taas oo guud ahaan shaqallada hoorisyada ka dhigaysa siddeed ta tixda gabayna kas dhigaysa 20: Labo iyo toban (hojiska) oo lagu daray siddeed hooriska (12+8).

Waxaa isna wax ka qoray Miisaanka Maansada qoraa Cabdulfataax Cabdullaahi- "Gacmadheere" oo qoray buugga la yiraahdo "Asaaska Suugaanta Soomaaliyeed" (waxaa daabacay SCANSOM PUBLISHERS Box 6118, 17506 Jarfalla Stockholm, Sweden).

Waa wiil uu dhalay macallinkii Dugsigii Gaalkkacyo ee SYL Alif-Ba iigu bilaabay 1953 waloow uu ahaa Reer Galbeed. Isagu arartiisa wuu qirayaa dadkuu wax ka soo qaatay in ay ku jiraan Cabdullaahi-Carraale Diiriye Guuleed iyo Maxamed-Gaarriye Xaashi Dhamac.

Barafasoor C/Qaadir Nuur Salaad 'Takar'

Email: deritakar@yahoo.com

Cabdalla X. Cusmaan baa isaga oo ka yaabban sida uu wargeyskii Xiddigta Oktoobar u gaadhiwaayey Marka baa Jabbuuti ka soo qoray qoraalkan soo socda waxaanu yidhi:

## 2.10. Carraale iyo Gaarriye: Kumaa hor helay Miisaanka Maansada?

Qore Cabdalla X. Cusmaan
July 15, 2008, www.wardheernews.com & www.wedsea-online.com

Kumaa hor helay Miisaanka Maansada Soomaaliyeed?

Waa su'aal weli muran ka taagan yahay tan iyo sannadkii 1976kii. Labada aqoonyahan ee ku muransani waa Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale) iyo Maxa-mad Xaashi Dhamac ( Gaarriye).

Labadan aqoonyahan ee macallimiinta ah shaki kuma jiro inay dadaallo badan u galeen sidii uu mid waliba u heli lahaa Miisaanka Maansada Soomaalida, taas waxa marag u ah buugta ay qoreen iyo muxaadarooyinka ay ku qabteen meelo kala geddisan oo dalka iyo dibaddiisaba ah. Waxa kale oo labada Profasoor cilmi baadhistoodii ay horumar la taaban karo ku soo kordhisay suugaanta iyo guud ahaan af Soomaaliga, taariikhduna way xusi doontaa inay baal dahab ah ku leeyihiin suugaanta Soomaalida. Haddaba intaan u gelin su'aasha inna hor yuururta tan iyo sannadkii 1976kii ee ah kumaa hor helay Miisaanka Maansada Soomaaliyeed? Waxaan is weydiinaynaa, kumaa horta bilaabay baadhis-ta Miisaanka Maansada Soomaalida? Jawaabta waxaan ka raadinaynaa labada macallin mid walba wixii uu afkiisa ka yidhi.

Aan ku horreyo macallin Gaarriye, Bishii Dis. 17keedii 2005tii ayuu Gaarriye bandhig-suugaaneed ku qabtay guriga dhaqanka iyo hiddaha ee (Oxford house) ee magaalada London ee xaruunta Britan, goobtaa anigu goobjoog ma ahayn hasayeeshee waxa laga soo daayey laanta af Soomaaliga ee B.B.C da caajalad aan diyaar-sadayna waan ku duubay oo weli gacantaydaan ku hayaa. Muxaadaradii uu Gaarriye halkaa ka soo jeediyey ayuu ku qaadaa dhigay Miisaanka Maansada iyo guud ahaan badaha ay ka kooban tahay suugaantu. Abwaan Gaarriye intii uu casharkaa bixinayey wuxuu ku soo daray sababtii ku riixday inuu Miisaanka Maansada baadho iyo goortii iyo goobtii ay ahayd, wuxuuna yidhi sidan.

"Anigoo arday ah oo sakenderiga ku jira ayaa macallin la odhan jiray Axmad Sheekh Aadan Allaha u naxariis-tee, ayaa wuxuu noo dhigay Miisaanka afka Carbiga ah, wuxuu nooga sheekeeyey nin la odhan jiray Axmad Al-Faraahidi oo helay gabayga Carabiga dhismihiisa.

Wakhtigaa aan anigu daneeyeyna waxay ahayd anigoo 18jir ah amma 19 jir ah. Kolkaa ayaan is idhi tolow af Soomaaliguna ma leeyahay dhacdoooyin caynkaas ah. Khaladka aan markaa hore sameeyey waxay ahayd, dhawr iyo tobanka god ee Carabiga ah ee la I baray inaan ku eego gabaygii Soomaaliga ahaa, markaasaan mar gabay soo qaataa, mar buraanbur baan soo qaataa, mar saar baan soo qaataa, mar shirrab baan soo qaataa, markaasaan is idhaa ku eeg inay is le'eg yihiin ka Carabiga ah. Shaw dameer baan u tu'inayaa faras kolkaasay baqal iska dhalayaan.

Markii la qoray farta Soomaaliga ee aan qori karay baydka Soomaaliga ah 1972kii, ayaan anigu 1973kii markii u horraysay ogaaday inuu af Soomaaligu leeyahay dhisme isaguna, laakiinse ka duwan kii Carabiga, dhisme muusig leh inuu leeyahay baan ogaaday".

Halkaa waxa innooga soo baxay milaygii uu Gaarriye bilaabay doondoonista Miisaanka Maansada Soomaalida. Gaarriye halkaa ha ii joogo.

20kii bishii May 2008da macallin Carraale waraysi dheer ayuu siiyey degelka Wardheernews. Waraysigaa wuxu Carraale ku faahfaahiyey Miisaanka Maansada Soomaali-yeed iyo baadhistii badnayd ee uu sameeyey iyo xitaa buugtii uu qoray. Su'aalihii la weydiiyey Carraale waxa ka mid ahayd su'aashan soo socota.

Profasoor Cabdillaahi, goormaad bilawday baadhitaanka Miisaanka, maxaase kugu dhaliyey raadraaca Miisaanka Maansada?

Waxa uu ku jawaabay Prof. Cabdillaahi:

"Miisaanka waxa igu baraarujiyey barashada Meterka Ingiriisiga. 1972kii kolkii naloo dhigay sida gabayga Ingiriisku u dhisan yahay, ayaan is weydiiyey keligey, kol hadii gabayga Ingiriisku dhiskan cayiman leeyahay, kii Soomaaligu lahaa mee? "

Waraysigaa Carraale waxa innooga soo mudh yidhi milaygii uu bilaabay amma uu ku baraarugay baadhista Miisaanka Maansada Soomaaliga.

Haddaba markaynnu si cadaalad ah ugu garnaqno ee nin walba wixii uu afkiisa ka yidhi ku xukunno, go'aanku waa macallin Gaarriye ayaa hor bilaabay baadhista Miisaanka Maansada. Taa halkaa aan ku dhaafo oo aan u tallaabo arrinta uu muranku ka taagan yahay ee ah, kumaa hor helay Miisaanka Maansada? Carraale mise Gaarriye?

Sida cadaaladdu inna farayso, haddii laba ruux isku qabtaan lahaanshaha wax muuqda, waa inay caddayn muuqatana keenaan, haddii caddaymo la waayo marag waa in la helaa kala saara. Maraggaasi waa inuu noqdaa mid caddaymo haya amma uu noqdaa mid indhihiisa ku

arkayey amma dhegihiisa wax ku maqlayey. Labadan macallin ee aynnu u garqaadayno, muxuu mid walba caddayn iyo marag hayaa?

Aan ku horreeyo Gaarriye, abwaan Gaarriye caddaynta ugu weyn ee uu hayaa waa qoraalkii ku saabsanaa Miisaanka Maansada ee uu ku soo bandhigay jariidaddii Xiddigta Oktoobar bishii Jeenaweri 17keedii,1976kii. Marag cadna cid baa u furtay oo waa qoraaga la yidhaa Cabdiraxmaan Faarax (Barwaaqo)oo xilligaa goobjoog ahaa sidaa uu qoraalladiisa ku bayaamiyey.

Prof. Carraalena muxuu caddaymo iyo marag hayaa?

Macallin Carraale waraysigii uu siiyey WardheerNews bishii May 20keedii 2008da wuxuu ku sheegay in markii uu dhammeeyey gorfeynta gabayga uu saaxiibkii Faarax Abokor (Faarax Askari) oo qoraalladiisa la socday magaalada Markana ay ka wada shaqaynayeen uu Xamar tegey oo hawshiisa warkeeda uu faafiyey, isaga ayaa markaa Gaarriye u sheegay inaan helista Miisaanka Maansada ku guulaystay. Waxa kale oo uu Pr. Carraale sheegay inay marag goobjoog ah ahaayeen dad badan oo uu qaar magacyadooda xusay. Waxa kale oo uu Carraale waraysigaa ku sheegay in qoraalkii gorfaynta gabayga uu toddobaadkii u horreeyey ee 1976kii uu farta ka qaaday, isla 1976kii ayaa Jaamicaddii ummadu iga iibsatay buu yidhi buuggii gorfaynta gabayga.

Prof. Carraale oo ka jawaabayey su'aal ku saabsanayd 1976kii markii uu abwaan Gaarriye bilaabay inuu ku soo qoro wargeyskii Xiddigta Oktoobar Miisaanka Maansada iyo dooddii arrintaa ku saabsanayd oo dad badani ka qayb qaateen iyo inuu dooddaas ka qayb galay isaga qudhiisu iyo in kale. Waxa uu ku jawaabay, anigu markii qoraalladaasi soo baxayeen waxaan joogay magaalada Marka oo Xiddigta Oktoobar ma heli jirin.

Haddaba waraysigaa uu bixiyey Carraale sheegasho mooye caddayn iyo marag cad midna muu soo bandhigin, waxa gartiisa u buuxin oo qudha isagoo badka soo dhiga caddayn ku saabsan buugga gorfaynta gabayga ee uu sheegay inuu ka iibiyey Jaamicaddii ummadda. Waxa kale oo Pr. Carraale looga baahan yahay inay u marag furaan ragga uu magacyadooda xusay. Midda kale ee uu yidhi magaalada Marka markaan joogay Xiddigta Oktoobar ima soo gaadhi jirin, jawaabtaasu aniga way iga degi weyday , kaba dhig inuu wargeskii Xiddigta Oktoobar aanu magaalada Marka gaadhi jirin. Weydiintuse waxay tahay ragga aad macallin Carraalow aad sheegtay ee saaxiibbadaa ahaa ee kaa war hayey inaad heshay Miisaanka Maansada ee weliba warkaaga Xamar iyo Gaarriye u geeyey, maxay kuula socodsiin waayeen cilmi baadhista iyo doodaha toddobaad walba maalinta sabtida ah ku soo bixi jiray wargeyskii Xiddigta Oktoobar ?

Maahmaah Soomaaliyeed baa tidhaa (Dhagax meel dhaw buu ku dhacaa, dhawaaqna meel dheer). Aniga oo Jabuuti jooga ayaa xilligaa heli jiray wargeyska Xiddigta Oktoobar ee Xamar ka soo baxayey. Tobannaan ka mid ah nuqulladii berigaa gacantayda soo galay weli waan hayaa oo way ii kaydsan yihiin. Laba ka mida ayaa ah kuwii uu Gaarriye 1976kii ku soo bandhigi jiray Miisaanka Maansada, midka hore cinwaankiisu waa (Xiddigta Oktoobar, sabti 27ka Maarso, 1976kii, bogga 3aad, sannadkii 4aad, L. 55aad) Midka labaad cinwaankiisu waa (Xiddigta Oktoobar, sabti 3da Abriil, 1976kii, bogga3aad, L.61aad) Haddaba gari Alley taqaan ee nin ma taqaan waatii la yidhiye innagoo u caddaalad falayna labada macallin runtana ka gabbanayn aan u xaq soorno. Maadaama uu Gaarriye haysto caddayn ah inuu wargeyskii Xiddigta Oktoobar ku soo bandhigay Miisaanka Maansada bishii Jeenaweri 17keedii 1976kii isaga ayaa ah aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed inta la helayo wax cad oo burinaya oo uu la yimaaddo Prof. Cabdillaahi Diiriye.

Wax jira Alla og, Ilaah innaga war roon

Waa nabad
Cabdalla X. Cusmaan
Email:Cabdalla_xaaj@yahoo.fr

Ninka la yidhaa Cawil X. Cali baa isna aragtidiisii sidan u soo dhigay:

## 2.11. Doodda Miisaanka Maansada (Ra'yi)

Posted on Tuesday, July 15 @ 12:21:13 CDT by www.redsea-online.com

W/Q: Cawil X. Cali

Hoodo iyo hibo midna uma lihi suugaanta soomaaliga, tix iyo tiraab mid ay tahayba. Haddana waxaan isku tiriyaa kuwa akhriya si ay wuxuun uga dheefaan.

Waxa beryahan ku soo baxa mareegaha internetka qaar ka mid ah qoraalo loogu garnaqayo dood dhextaal laba nin oo soomaaliyeed oo ku hawlan ama wax ka qoray suugaanta, waa Gaarriye iyo Carraale. Haddaba si ay dooda iyo kuwa kale ee dadweynaha loo soo gudbinayaaba ay nuxur u yeeshaan waxna looga faa'iidaysto. Waa in la ilaaliya dhawr qodob;

Waa ta kowaade waa in aan laga tegin asluubta iyo anshaxa wax loo soo gudbinayo. Tusaale ahaan ceeb ma aha in qofku qof taageero ama la dhaco waxa ay qoreen. laakiin waa gardarro iyo faduul in uu cid kale u diido in ay fikrad ka duwan ama ka soo horjeeda tooda yeeshaan.

Waxa arrintan garab maray dhawr qof waxa ugu daran Qoraaga la yidhaahdo Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' oo arrinkan hore wax uga qoray oon aan filayey in uu dib u taageeri doono fikraddiisii iyo mawqifkiisii hore.

Laakiin markii uu arrinkan wax ka qoray 8dii Juun 2008 redse-online.com, meel kale ayuu ka fad kudiyey. Waxaan xusuustay maahmaah carbeed oo tidhaahda 'jacaylku qofkuu indha tiraa'. Cabdiraxmaan wuxuu doodiisii oo dhan u sed buriyey in uu isagu is muujiyo, ama rag kale eed saaro. Taasoo arigtidayda hoos u dhigtay doodii la soo gudbiyey madashiina u ekaysiisay yaw-yawtan iyo jikaar aan macna badan lahayn. Way kala duwan tahay oo waa laba arin u baahan in aan la isku khaldin, in qof la naqdiyo oo wuxuu qoray la dhaliilo ama hal abuurkiisa wax laga sheego, iyo in qofka laftiisa meel lagaga dhaco oo wax loo dhimo. Waana tan danbe ta dadkeenna lagu ibtileeyey oo qofku isagoo jibbadiisa ku qarinaya intuu gar isa siiyo cid kastoo kalena maagaa.

Ta labaad arinka doodani ka taagantahay siday aniga ila tahay ma aha yaan taageerraa. Waxan filayaa innaga dadweyne ahaan in aaney waxba inoo kordhinayn, ee wixii la qoraaba aan ka faa'iidaysano. Waxaase haboonaan lahayd in labada halabuur Gaarriye iyo Carraale iyo cidii kale ee xog ogaal ahayd ay madal isugu keenaan oo eegaan bal waxan ay daah fureen waxay yihiin.! ma isku midbaa? mise waa kala duwanyihiin? Kee taya roon ? Inkastoo aanan filayn in midkoodna abaalmarin weyn ku helayo.!

Ta kale ee ka muhuumsani waa in aragtida Miisaanka aad loo sharaxaa oo loo shaandheeya, dadkana loo soo dhoweeyaa si nuxurkeeda oo buuxa loo helo, ee aanu arrinku ku koobnaan wakhti badanna lagu lumin; horta yaa hor helay.!

Ugu danbeyntii waxan ku khatimayaa su'aal daw ah oo ay haboon tahay in la waydiiyo labada nin ee arinkani

khuseeyo: waa ta kowaade Bare sare Cabdullaaahi Diirye Guuleed 'Carraale', maxa loo maqli waayey ama uu ummadda ugu soo gudbin waayey aqoontiisan ku saabsan Miisaanka? waayo muddo dheer ayaa u dhaxaysay sanadihii uu qoray buugaagtiisa hore 1976/1978 iyo kan danbe ee soo baxay 2003. waayo waxa jira dad badan oo aan meelahaa ka dhoweyn 1976kii dib danbena aan ifka ugu arag wax uu soo bandhigay Carraale. Halka Gaarriye gole walba kaga luuqeeyo badaha kala duwan ee bah maanso!.

Su'aasha kalena waxay waydiinteedu ku jeeddaa Abwaan -Bare sare Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye'. Haddii aqoontan aad daahfurtay oo aad ahayd ninkii ugu horeeyey ee kala dhanbala, maxaa loo waayey aqoonta miisankaaga oo lagu ururiyey buug ama buugaag. Maxay taraysaa anaa hor hindisay haddii arrinkii sheegasho iyo maqaal dhaafi waayey?

1. Buug (Book): bogag fara badan oo faaqidaad lagu daray.
2. Maqaal (Article) bog keliya ama dhawr bog mar keliya ayuu soo baxa.

Farqi ayaa u dhexeeya waxa buug lagu qoro iyo ta maqaal lagu soo gudbiyo, waxa culus oo dhaxal galna noqda waxa buug lagu qoro.

Anigase aragtidayda; qiima badan ilama laha, in hebel ama ka kale libin la siiyaa, wax badana inoo kordhin mayso. Laakiin way fududahay waana la samayn karaa in labada macalin madal la isugu keeno oo ay soo bandhigaan aragtidooda. Inteena kalena mid kastaa ra'yigiisa xor u ahaado innagoon qadaf iyo aflagaado isu gaysan.

Waxaan filayaa labada aqoonyahanba waa u xog ogaal arinkan oo wax badani kama qarsoona. Markaa iyagaa ku

61haboon in ay u jid bixiyaan arinkan halkii dad kale doonyaqaad iyo difaace ugu noqon lahaayeen.

Jaamac C. Suleymaan oo daba socda qoraalkii Ibraahin Hawd baa isna qoraalkan xiisaha leh soo gudbiyey. Waxaanu yidhi:

## 2.12. Doodda muranka Miisaanka Maansada: Iyamaanu taageernaa Gaarriye iyo Carraale

Qore: Jaamac Cabdillaahi Suleymaan

Email: cigaal215@hotmail.com
July 23, 2008, www.wardheernews.com

Ma ihi Suugaan yahan ku xeel dheer allifida maansada, sidoo kale ma ihi dadka aqoonta dheer u leh Suugaanta ama cilmi baadhista ku sameeya suugaanta. Hase yeeshee waxaa i soo jiidatay dood beryahaasba ka socotay shebekadda wardheerNews iyo shebekado kale, kuna saabsanayd keebaa daah furay Miisaanka Maansada Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale) iyo Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye). Dooddan oo iminka mudo socotay waxay ka bilaabantay waraysi ay shebekadda wardheerNews la yeelatay barre sare Carraale, oo sheegay inuu isagu daah furay Miisaanka Maansada, wuxuuna iclaamiyey inuu hayo caddaymo badan oo taageeraya doodiisa. Si kasta ha ahaatee waraysigaasi wuxuu soo jiitay akhristayaal badan oo dooddan hore ula socday iyo qaar kale oo ku war helay waraysigan, halkaasna waxaa ka dhalatay dood xiiso leh oo dad badan isu keentay.

Waxaana dadka dooddan fikraddooda ka dhiibtay ugu horeeyey qoraaga Ibraahim Hawd oo isagu si ballaadhan oo aad u faahfaahsan uga hadlay Miisaanka Maansada iyo

faa'iidooyinkiisa, isagoo is waydiiyey maxaa ku jaban in la barto Miisaanka Maansada iyo in layska dhaafo? Isaga laftiisa ayaana inooga jawaabay oo yidhi sidan hoos ku qoran:

*"haddii ay sidaas tahay, oo aan barashada Miisaanka qofna maansoyahan ku noqonayn, maxaa laga dheefay daahfurkeeda? maxaase ka hadalkeeda loogu xabeeb sanayaa? jawaabtu waxay tahay, daahfurkan iyo barashadiisuba run ahaantii waxtar aan la koobi karin waxay u lee yihiin culuunta afka guud ahaan iyo aqoonta dhismaha maansada gaar ahaan. halkaas ayuu khayraad badani ka buuxaa kana buuxi karaa. waa aqoon loo adeegsan karo baadhitaanka aqoono kale, waana tallaabo bilaw ah oo wax badan lagaga ogaan doono dhismaha afka, maskaxda afkaa dhistay iyo sida ay u dhistay."*

*qoraalkii Ibraahin Hawd*

Dabadeed wuxuu sii dhex galay muranka labada macallin dhex yaalla iyo cadaymaha mid waliba hayo wuxuuna ku fogaaday caddaymaha macallin Carraale hayo iyo iyana caddaymaha uu hayo macallin Gaarriye, halkaas ayaad moodaa inuu Ibraahin Hawd qoraalkiisa laaxin ka geliyey ka dib markii uu labada aqoonyahan dooddoodii iyo caddaymihii mid waliba hayey, isu soo maanguuriyyey ee is barbar dhigay ayuu sidii ay ula ekoonaatay u dhigay. Waxaana la odhan karaa Ibraahin Hawd aad ayuu ugu degdegay faallada iyo qoraalka dheer ee uu ka diyaariyey aragtida muranka Miisaanka, khaladaadka Ibraahin galay waxaa ka mida isagoo markhaati u soo qaatay buug uu qoray nin ka mida raga dooddu dhex taal, kaasoo ah macallin Carraale. Wuxuuna leeyahay sidan: *"buugga macallin Carraale ee Miisaanka Maansada Soomaaliyeed wuxuu si buuxda u muujinayaa inuu Carraale daah furay Miisaanka Maansada"*. laakiin haddaad maskaxdaada ka la kaashado qofka dhexdhexaadka ah ee ka garnaqaya doodda labadan nin

dhex taal, taas cadayn uma soo qaadan karo. Waayo? buugga qof saddexaad ma qorin ee labadii nin ee is hayey awalba ayaa mid ka midi qoray, wuxuu ku qorayna markhaati looma soo qaadan karo. Mida kale xilliga Carraale qoray buuggan waxay ka danbaysay xilligii Gaarriye ku faafiyey maqaalkiisii daahfurka Miisaanka Maansada wargeyskii xidigta oktoober oo ahayd sanadkii 1976.

Markaas sheekadu waxay u muuqanaysaa war la qabo xiiso ma leh, dhanka kale Ibraahim isagoo ka hadlaya caddaymaha abwaan Gaarriye wuxuu yidhi wuxuu cadayn hayaa maqaalkiisii caanka ahaa ee uu ku qoray wargeyskii xiddigta oktoober sanadkii 1976, intaas Ibraahin Hawd wuxuu ku ladhay "*intaan ka ogahay Gaarriye ma keenin cadayn iyo markhaati kale oo u dhigma waxaa Carraale garabkiisa soo tubay*". Waa yaabe Ibraahin caddaynta uu Gaarriye ka doonayaa waa mid noocee ah, waxa laga hadlayaa kol hadday tahay wax cusub oo la daah furay waxaa loogu magac daraa cidii ugu horreysay ee ku dhawaaqday. Cidii iyadu wax ku kordhinaysa ama hore u sii marinaysana waa u furan tahay, kolkaas labadan aqoon yahan keebaa sidiisaba ku hor dhawaaqay inuu daah furay Miisaanka Maansada?

Haddaynu taas ka jawaabno, muran kuma jiro inuu Gaarriye ku hor dhawaaqay daah furka Miisaanka Maansada, muslinow run sheeg muslinowna uga qaado maqaalladii taxanaha ahaa ee Gaarriye ku soo qori jiray wargeyskii Xidigta Oktoober sanadkii 1976, ayaa ugu horeeyey wax ka hadla Miisaanka Maansada. Mida kale ee caalamkoo dhami isku raacsan yahay waxaa weeye, kol haddii aqoon ama cilmi cusub la daah furo in cidii ugu horreysay ee daahfurtay ama heshay loo aqoonsado. Tusaale cilmiga cufsad jiidadka (gravity) muran kama taagna inuu helay sir Isak Newton, waayo isagaa markii ugu horreysay caalamka u soo gudbiyey. Markaas caddaynta kale ee ibraahim hawd abwaan Gaarriye ka rabo kolay anigu ma fahmin.

Haddaan iyana waxoogaa ka idhaahdo tan ku saabsan inuu jiray nin saddexaad oo u kala dabqaadi jiray xilliyadaas magaalooyinka Muqdisho iyo Marka oo ay labada aqoon yahan ku kala nooleeyeen, isagoo haya xogta dhiraandhirinta Miisaanka Maansada ee dhanka Carraale. Ninkaas oo magaciisa lagu sheegay Faarax Askari oo isna macallin ahaa, lagana yaabo inuu Gaarriye ka helay xog dheeraada inay sidaas ahayd wax cadaynaya ma hayno. Macallin Carraalena inooma sheegin Ibraahin Hawdna inooma sheegin, waxayse labadooduba inoo sheegeen inay kala duwan yihiin sida Gaarriye ugu dhawaaqay daahfurta Miisaanka Maansada iyo sida Carraale ugu dhawaaqay, waxaana la odhan karaa taasi waxay markhaati u tahay in aanay jirin cid saddexaad oo dhexdooda isaga adeegtay waayo hadday jiri lahayd soo gudbintoodu way is waafiqi lahayd.

Tan kale ee iyana wax layska weydiin karaa waxaa weeye sida macallin Carraale uga jawaabay su'aashii WardheerNews weydiisey ee ahayd adigu miyaanad la socon maqaalada Xiddigta Oktoober ku soo bixi jiray ee Gaarriye ka diyaariyey Miisaanka Maansada?

Wuxuu Carraale ku jawaabay xilligaas waxaan joogay magaalada Marka oo aanu soo gaadhi jirin wargeyska Xidigta Oktoober. Jawaabta macallin Carraale maaha mid lagu qanci karo, waayo Marka iyo Muqdisho waxay isu jiraan 100 km. Waxaana u dhaxaysa wado laami ah, waxaana jira ganacsi iyo xidhiidh joogto ah oo u dhaxeeya labada magaalo. Maalin walba intaas oo bus oo caasi ah iyo intaas oo sitay manoogto ah ayaa xilligaas u kala gooshi jiray, labada magaalo wargeyska Xiddigta Oktooberna xilligaas wuxuu soo gaadhi jiray magaalada Hargeysa iska daa Marka oo laydhka Xamar u muuqdee.

Wuxuu kale oo Ibraahim Hawd ku dooday in aan Gaarriye ka sokow hal abuurkiisa aanu samayn wax cilmi baadhis ah oo ku saabsan afka iyo culuuntiisa, wuxuuna hadalkiisa u dhigay sidan hoose

"d*han kale haddii aynu arrinka ka eegno, waxaa jirta xaalad dabiici ah oo labada nin u kala dhowaynaysa u fiirsashada iyo baadhidda abuurta iyo dhismaha maansada. Gaarriye waa maansayahan la mid ah maansayahannada badan ee soomaalida. haddii uu ka mid yahay inta yar ee waxbaratayna aqoontaasi waa maaddada Bayooloji oo aad uga fog afka iyo suugaanta iyo aqoontooda cilmiyeed. maaddadaas ayuu bartay waxna ku dhigi jiray. mar hore iyo jeer dambe toonna Gaarriye caado uma yeelan, loogamana baran, baadhitaan iyo qoraal ku saabsan afka iyo culuuntiisa. wax kale iska daaye xitaa isaga maansadiisa dhowaan ayey dad kale u qoreen. haddii ay dhacday in uu sannadkii 1976 arrinka sidan isugu shuqliyey caadi ahaan tallaabadaasi waxay noqon lahayd mid uu hawshan iyo degaankeeda ku sii dhex galo heerar kalena ula gudbo. sow ma aha? taasi haddaba sida la og yahay ma ay dhicin, ilaa maantana lama hayo eray qudha oo uu gaarriye meel ku xarriiqay marka laga reebo maqaalka xiddigta oktoobar oo nus qarni kudhowaad laga joogo*".

Waxaad moodaa ama aqoonta uu Gaarriye u leeyahay ha koobnaato ama hawba badheedhee in Ibrahim Hawd si cad u dafiray inuu Gaarriye hore iyo danbaysoba ka mid ahaa cilmi baadhayaasha afsoomaaliga, oo weliba ka mid ahaa ragii aasaasay akedemiyadii fanka iyo suugaanta Soomaaliyeed. Halkaas oo ahayd meesha kaliya ee lagu baadho aqoonta cilmiyeed ee Af Soomaaliga. Waxaan xusuustay shir ay qaban qaabisay dawladda Jabuuti oo ka dhacay dalkeeda sanadkii 2003, kaasoo ku saabsanaa cilmi baadhista afka Soomaaliga ayna ku kulmeen rag badan oo aqoon dheer u leh afka Soomaaliga. Waxaana aan ka xusuustaa ragii shirkaas ka qayb galay Hadraawi, Gaarriye, Yamyam allaa haw naxariistee, Idaajaa, Riiraash, qoraaga Nuuradiin Faarax. Tiradoodu aad ayey u badnayd laakiin intaas ayaan ka xusuustaa, waxaan anigu kala socday tvga Jabouti oo dooda si toosa u soo tebin jiray habeen walba. Kulankii ugu horeeyey ee shirka lagu furay ragii ka hadlay waxay dhammaantood u

mahadnaqeen dawlada Jabuuti oo shirkan dhaqan gelisay, isla markaana saamaxday inay meel isugu keento saaxiibo kala baaday oo mudo dheer aan is arag ama aan ku kulmin hawl caynkan oo kale ah. Ujeedada ugu weyn ee shirku wuxuu ahaa sidii loo hir gelin lahaa buug qaamuus af Soomaali ah oo laysku raacsan yahay, Gaarriye iyo Idaajaa labaduba waxay halkaas ka sheegeen inay ka mid ahaayeen gudi hore oo dawladii kacaanka ahayd magcowday sanadkii 1976, hawshooduna ahayd inay soo diyaariyaan buug qaamuus ah oo af Soomaali ah. Waxayna sheegeen in aan lagu guulaysan in buuggaas la qoro, walow ay hawl badan qabteen. Waxaan kale oo ku ogaaday shirkaas ka dhacay waddanka Jabuuti in abwaan Gaarriye kaydiyo maansadiisa iyo xataa ta saaxiibkiis Hadraawi. Intii shirku socday ee laga hadlayey barnaamijka cilmi baadhista mar kasta oo Hadraawi damco inuu tixraaco gabay ka mida gabayadiisa ama goluhu ka codsado inuu tiriyo maanso ka tirsan maansadiisa dhanka Gaarriye ayuu isu dhaafinayey, Gaarriyena korka kama hayn ee diiwaan hor yaalla ayuu ka akhriyey. Kolkaas saw I braahim Hawd ma haysato tixdii salaan Carabey ee ahayd

*Waxba yaanu xeerkay i marin xoolane i siine*
*Xaashee nin libin kaa xistiyey xumihii waayaabe*

Abwaan Gaarriye mar keliya kama dhex bixin baadhista aqoonta af Soomaaliga weliba fagaarayaal badan ayuu ku soo bandhigay cilmi baadhista aqoonta af Soomaaliga. Wuxuu kale oo yahay macalin afka iyo Suugaanka ka dhiga jaamacadaha Hargeysa iyo Camuud.

Gebegebadii aan ku soo khatimo dooda muranka Miisaanka Maansada iyamaynu u aqoonsanaa aabbaha Miisaanka Maansada labada aqoon yahan ee Gaarriye iyo Carraale? Waxaynu u aqoonsaynaa abwaan Garariye, waayo isagaa ahaa ninkii ugu horreysay ee ku dhawaaqay inuu daah furay Miisaanka Maansada.

Cusmaan Aadem oo sida qoraalkiisa ka muuqata ka mid ahaa ardaydii ay aadka isugu dhowaayeen Carraale baa soo dawiyey qoraalkan dheer ee hoos ku qoran. Waxaanu yidhi

## 2.13 **Maankaaga La Kaasho**

Qore: Cusmaan Aadem

**Email:**osmanaadam@yahoo.com

July 24, 2008, **www**.wardheernews.com

Sannadku waa 1973 xilli aan durugsanayn oo bilo laga joogo, ayaa Af Soomaaliga far loo yeelay oo la qoray. Waa waxtarkii ugu qiimaha weynaa ee ilaa hadda loo qabtay horumarinta dhaqanka iyo aqoonta Soomaali-yeed. Waa dhacdada qudh ah ee lagu diirsado ee laga dhaxlay xukunkii askarta. Golayaasha aqoonta, sida machadyada culuunta sare , dugsiyada, macallimiinta iyo aradaydaba, waxa ka muuqda rajo ballaadhan oo la filayo in aqoontu si xad-dhaaf ah ay dadka ugu baahdo, dabadeedna ay si dhakhso ah u keento isbeddel laga gaadho kor u qaadidda garaadka dadka iyo hurumarinta dalka.

Anaga oo ah koox yar oo ka mid ah ardayda Kuliyada Waxbarashada ee Lafoole (Lafoole College of Education), waxa noo sheekaynaya Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale), oo isaguna aradayda ka mid ah .Markasta iyo meel kasta oo uu fursad u helo, Cabdillaahi kama daalo hadal haynta sheekadan oo la moodo in uu ku ibtiloobey. Cabdillahi waxa uu ka hadlayaa cilmibaadhis uu beryahanba gacanta ku hayey oo uu ku baadhayo xeerarka xukuma dhismaha iyo dhaqanka gaybayga Somalida. Mararka qaarkood, su'aalaha uu na weydiiyo waxa ka mid ah, gabaygu waxa uu yahay iyo waxa gabay ka dhiga. Marar kalena waxa uu na tusaa waxa ilaa hadda

uu ka ogaaday dhismaha gabayga.Inkasta oo aanu weli meel fog gaadhin, haddana isaga oo ka duulaya fikradda gundhiga u ah cilmibaadhistiisa (hypothesis), Cabdillaahi waxa uu culays saaraa oo uu ku nuuxnuuxsadaa kaalinta shaqal-ladu ay ku leeyihiin dhismaha gabayga.

Muddo sanado ah ka dib, Cabdillaahi hawshan waxa uu ka soo saaray laba buug oo kala ah Gorfaynta Gabayga iyo Miisaanka Maaansada Somaliyeed. Buugagan waxa uu ku soo bandhigay xeerar dhawr ah oo maansadu ku dhisan tahay. Miisaanka Maansada Somaliyeed waxtar-ka uu Afka iyo Suugaanta u leedahay ka sokow, waa cilmibaadhista qudh ah, ee qof Soomaali ihi, hawl sidan u baaxad weyn oo weliba uu keli ku ahaa uu ka soo hooyey guul aan hore loo arag. Nasiib-darro, halkii laga sii wadi lahaa sidii guushan loogu diirsaday markii 1976kii la daahfuray natiijada cilmibaadhistii Gorfaynta Gabayga, iyo Miisaanka Maansada Somaliyeed 1977, ayaa soddameeye sano ka dib laga furay muran raad-xumo ku yeelan kara cilmibaadhis dambe oo la sameeyo wakhtiyada soo socda. Isaga oo dhacdadan xusuusan, qofkii cilmibaadhis in uu sameeyo ku fekeraa, waxa laga yaabaa in aanu ku dhiiran isaga oo ka cabsi qaba in hadhaw lagaga dabo yimaddo waxa uu qabto.

Tan iyo intii WardheerNews badka soo dhigtay doodan ka taagan qofkii u horreyey daahfurka Miisaanka Maansada, waxa aynu aragnay waraysi Macallin Carraale uu ku caddeeyay halka uu ka taagan yahay xaajadan. Si dhinaca kalena dacwaddiisa loo maqlo, waxa beryahanba si xiiso leh loo sugayey Macallin Maxamed Xaashi Dhamac, Gaarriye oo isaguna badheedhihiisa golaha soo dhex dhiga. Taasi oo la helaa, waxa ay dadka u suurto gelin lahayd in si caqligal ah oo waafi ah labada badheedhe la isugu eego, miisaamo, barbar dhigo dabadeedna si qumman looga faalloodo. Nasiibdarro, ilaa maanta oo laba bilood iyo dhawr dharaarood laga joogo markii doodani bilaabantay, Macallin Gaarriye, inta aan

ogahay lagama hayo wax jawaab ah oo mawdduucan ku saabsan.

**Miisaanka Maansadu waa Maxay?**

Miisaanka Maansadu waa natiijo ka soo baxday cilmibaadhis lagu sameeyey Maansada Somalida . Cilmibaadhistaa waxa lagu ogaaday qaabka Maansada Somalidu u dhisan tahay iyo sida dhismaha noocyada maansadu leedahay u kala duwan yihiin. Si kale haddii aan u dhigo,cilmibaadhistani waxa ay soo ifbixisay in Maansada Somalidu ku fadhido xeerar la'aantood aanay maansadu ahaateen sida ay hadda u taallo. Sidaas waxa tusaale u ah, marka meeris maanso ah la tiriyo (lagu dhawaaqo ama la akhriyo), ayaa dhegeha iyo carrabkuba Somalida ee u bartay, inta ay dhadhamiyaan ay kala gartaan in miirisku uu sax yahay iyo in kale. Taas macnaheedu waxa weeyi, meerisku marka uu miisaaman yahay waa maanso, hadiise aanu miisaaneyna waxa aynu markiiba ogaanaa in uu jaban yahay, kaas oo meeriska u diidaya in uu maanso noqdo.

**Faa’iidooyinka Miisaanka Maansada**

Miisaanka maansadu waa aqoon faaiido aan la qiyaasi Karin u leh barashada Maansada Soomaalidu sida ay udhisan tahay iyo sida ay u dhaqanto. Intaa waxa dheer, ardayda maansada barata, miisaanku waxa uu u fududeeyaa in ay fahmaan dhismo ahaan, qaybaha maansadu sida ay u kala duwan yihiin. Miisaanku waa qiyaasta lagu halbeego, waxa gabayga ka dhiga gabay, geeraarka ka dhiga geeraar iyo sababta laamaha kale ee maansada ka dhiga sida ay yihiin. Sidaa awgeed, Miisaanka Maansada waxa lagu macnayn kara in uu yahay qalab iyo hannaan lagamamaarmaan u ah kala soocidda, kala saaridda iyo kala garashada noocyada maansada.

Miisaanka maansadu suugaan iyo maanso midna ma aha. Waxa kale oo aanu ahayn sheeko ama malaawaal lago cabbiro waayaha aadmiga. Miisaanku waa fikrad cilmi (scientific fact) oo si kasta oo loo tijaabiyo, natiijada ka soo baxdaa ay isku mid tahay. Miisaanka Maansada laguma barto sida loo maansoodo, ee waxa lagu bartaa sida ay maansadu u samaysan tahay iyo sida ay noocyadeedu u kala duwan yihiin.

**Hawsha Cilmibaadhista Maansada Soomaaliyeed**

Cilmibaadhista maansadu sida bilawga qoraalkan aan ku sheegay,horraantii toddobaataneeyadi ayay ka bilaabantay Kulliyadii Waxbarashda Lafoole. Cilmibaadhistani waxa ay ka unkantay jacayl qof u qabo in uu ogaado sirta Maansada Somaliyeed. Waxa ay ayahayd hawl irriduhu u furan yihiin oo qofkii doonaa uu ogaan karayey kolba heerka ay mareysey. Xilligaas, labada macallin ee doodu dhex-taalo iyo anigu Lafoole ayaanu arday ka wada ahayn.Hawsha cilmibaadhistan markii gacanta lagu hayey, aad baan ula socdey oo in badan baan ka ogahay.Sidaas darted, halkan waxa aan ku eegi doona duruufaha ku xeeran muranka ka taagan cidda daahfurtay Miisaanka Maansada Somaliyeed. Sidaas oo kale,waxa jirta koox xilligaa kulliydda ka ahayd arday ama macallimiin iyo aqoon yahano kale intaba, oo midba si wax ha ugu ogaado, ee ka warhayey hawshan, qaarkoodna ay la socdeen ilaa daahfurkeedii.Waxa aan ku kalsoonahay in iyaguna markooda ay arrinkan ka hadli doonaan iyaga oo damiirkooda u adeegaya oo gudanaya waajibka ka saran ilaalinta aqoonta dhaqan ahaan iyo hanti ahaanba, Lafoole waxaan arday ka ahaa 1969-1973. Macallin iyo mamuleba dugsiyada sare ee Xamar waan ka soo ahaa. Sannadihii dambe, kulliyada Lafoole ayaan ka bixin jirey duruus lagu barto noofalka iyo sheekada gaaban oo Af Somali ku bixi jirey. Markii shaqada macallinnimada aan meel kale uga foofay oo ahayd 1978kii, waxa i beddeley oo xilkii Lafoole igala wareegey Cabdillaahi Diiriye Guuleed. Sanadkii 1977kii,

Maxamed Cabdulle Bariir oo isaguna macallin ahaa iyo aniga ayaa si wadajir ah u qornay buug la yidhaa Maansada Soomaalida , Hordac, oo aanu ku eegeyno hadalka maldahani (figurative language) sida uu ku yahay Suugaanta Somalida. Buugaa, markii qoris-tiisu dhamaatay waxa iibsatey Jaamicaddii Ummada Somaliyeed.

Inkasta oo aanaan ahayn saaxiibo aan la kala dhex marin, intii aanu Lafoole ardayda ka wada ahayn iyo dabadeedba, labadan macallin xidhiidh caafimaad qaba ayaa naga dhexeeyey. Maxmed Xaashi Dhamac kulli-yadda waxa uu ka baran jirey Biology, Cabdillaahi Diiriye iyo aniguna Afka iyo Suugaanta Ingiriiska ayaanu baran jirney. Xilligaa, ardayda Lafoole tiro yar oo kooban oo 150 ilaa 200 aan ka badnayn bay ahayd. Sidaa awgeed, ardaygii hawl waxbarashadiisa ka baxsan hayey, ma uu qrsoomi kareyn. Intaa waxa dheer, cilmib adhis madax bannaan, sida tan maanasada oo kale, Lafoole daayoo, dalkaba lagama aqoon. Taasi, qofkii hawshaas oo kale u soo ban baxa , waxa ay ka dhigeysey tuke baal cad (qof caan ah) oo indho gaar ah lagu eego.

Arrimha doodan la xidhiidha ee ay tahay in si culus loo tixgeliyo waxa ka mid ah in la is weydiiyo laba qof oo kala barta laba maaddo oo u kala fog sida Biologyga iyo Afka iyo Suugaanta Ingiriiska, midka ay ku habboon tahay, u dhawdahay, u fududahay ama fursad u haysan kara ama ay caqli-galba ay tahay in uu hawl laxaadkan leh uu u babac dhigo. Sida aanay maan-gal u ahayn in qof isaga oo barshada afka iyo suugaanta ku gudo jiraa uu isla markaa faraha la galo baadhista cell Biology, ayaanay ka Biology baranayana suurtogal ugu ahayn in uu baadho xeerarka Maansada Soomaalida ku qotonto.

Dhinac kale haddi laga eego, isku si loogama gar-naqo hanti maadi ah iyo mid aqooneed oo la isku haysto. Hantida maadiga ah laba qof isku mar ma wada yeelan karaan, waayo in kastaba ha qaadato, ee marka si

caddaalad ah loo baadho, hantiilaha xaqa ah waa la heli karaa. Haseyeesho, ee garsoorka hantida aqoontu, sidaa uma sahlana. Laba qof isku mar cilmibaadhis isku mid ah waa ay wada qaban karaan isku natiijana waa ay gaadhi karaan. Haddi wakhti isku dhaw ay natiijo isku mid ah ku dhawqaaqaan , inay hantidaa aqooneed si wada-jir ah u leeyihiin baa loo aqoonsadaa ka dib marka ay qanciyaan baadhis guddi aqoonyahano ihi ku sameeyaan hawlaha la qabtay.In badan bay dhacdaa in laba aqoon yahan oo cilmibadhis midaba gooni u sameeyey, inta ay isku natiijo soo saareen labadoodaba si is le'eg loogu aqoonsaday in hantida aqoontaa ay wadaagaan.Tusaale waxa u ah kuwo badan oo Nobel Prize ku wadaaga cilmibaadhis ay sameeyeen. Haddise labada natiijo ay ku kala duwanaadaan run sheegida, tayada, asli ahaanta natiijada iyo habka loo raacay iyo wixii la mid ah, waxa hantida yeesha oo loo aqoonsada qofkii buuxiya shuruudaha saldhiga u ah ee loo raaco cilmibaadhista.

Marka hawl cilmibadhistan oo kale ah lagu guuleysto, waxa daba yaal oo badanaaba la helaa magdhaw ama abaal-gud kooban, oo inkasta oo aanu marnaba u dhigmin hawsha la qabtay, haddana u taagan astaan iyo aqoonsi hawlkarnnimo. Kolley aniga wax aan iga degi kareyn xaalka macallin1976kii cilmibaadhis ka gun- gaadhay ee isaga oon waxba ku dheefin inta uu jeebka ku ritey la dhaqaaqay ee hadda uun ku ambabereey magaca meesha ku jira. Sidaas oo kale waxa aynu ognahay in Wasaaradihii Waxbarashada /Tacliinta Sare iyo Jaamicaddii Ummadu ay ahaayeen xarumihii aqoonta ee lagu qiimeyn jirey laguna aqoonsan jirey kolba wixii aqoonta Soomaaliyeed ee ku soo kordha. Hoos waxa ku tilmaaman heyadaha aqoonta ee labada macallin midaba si gooni ah cilmibaadhistiisa ugu soo bandhigay iyo qoraalladooda.

**Macallin Gaarriye**

1976 - Maqaalo ku saabsan Miisaanka Maansada Somaliyeed ayuu ku daabacay Xidigta Oktoobar. Waxa ay ahaayeen maqaalo taxano ah.

**Macallin Carraale**

1976 - Gorfaynta Gabayga oo buuug ah ayuu horgeeyey Jaamicaddii Ummadda Soomaaliyeed. Gorfaynta Gabayga Jaamicadda ayaa iibsatey

1977 - Gorfaynta Gabayga oo lagu daray noocyada kale ee maansada, ayuu u bandhigay Wasaaradii Hiddaha iyo Taclinta sare iyo Jaamicaddii Ummada. Jaamicaddi Umadda ayaa iibsatey

1978 - Miisaanka Maansada oo maqaalo taxan ah ayuu ku qoray Xidigtii Oktoobar.

1979 - Aqoon isweydarsi lagu qabtay Hotel Juba ayuu ka akhriyey warqad ka hadlaysa Miisaanka Maansada Somaliyeed. Eeg, Proceedings of the International Symposium, Mogsdisho, October 15-21, 1979. Com-piled by Dr. Hussein M Adam, volume 1, page 132
2003 - Miisaanka Maansada Somaliyeed ayuu bug ahaan u daabacay.

Faaduma Axmed Caalim (Curayji) oo ahayd Agaasimaha Waaxda Maaliyadda ee Jaamicaddii Ummada ee Carraale ka iibsatey buugaga, ayaa waraysi ay siisay Radio Somali, Denmark, July 11keedii, 2008 ku qirtay in Cabdillaahi Diiriye Guuleed uu yahay aqoonyahankii ugu horeeyey ee daahfuray Miisaanka Maansada Somaliyeed sannadihii 1976 iyo 1977. Waraysigu waxa uu ku saabsanaa buug la yidhaado " Sa Waxay Tiri, and then She Said" oo ay Faadumo ka qortay maansadii iyo waayihii hooyadeed Xaawa Jibril. Ka dhegeyso www.somaliradio.dk ama www.jumbliestheatre.org

Ugu dambayn, haddii qof halabuur lagu bartay oo sidaas ku canbaxay uu sheegto soo saaridda Miisaanka Maansada Soomaaliyeed wax lala yaabo ma aha. Waayo inta maqashaa iyaga oo aan shakiba gelin ayay dareen la'aan duuduub run u qaadnayaanyaan. Marka horaba damaca abuuray in arrintan muran la geliyaa, salka waxa uu ku hayaa oo uu ka soo jeedaa sadbursiga halabuuruhu ku haysto bulshada dhexdeeda. Sadbursigan weliba waxa ka daran oo xoog u sii yeelaya faraqa u dhexeeya maansada iyo Miisaanka Maansada oo sida loo badan yahay aan la kala aqoon. Miisaanka Maansada waxa loo haystaa in uu yahay nooc maansada ka mid ah . Aqoon la'aanta sidaas ah baa sabab u ah in Miisaanka Maansada lala xidhiidhiyo maanso yaqaanka.Dadweynuhu waxay ka baraad la' yihiin in Miisaanka maansadu aanu ahayn gabay, geeraar, hees iyo wixii la hal maala ee smaanso ah.

Haddii murankani demi waayo , ayaan loo abbaarin sidii laba nin oo isku haya hanti maadi ah oo si caadi ah loogu garnaqayo, ee ha lagu furdaamiyo in cilmibaadhisyada nimankani ay qabteen la hordhigo guddi aqoonyahano ah oo waayoaragnnimo u leh sida cilmibaadhista loo sameeyo iyo sida loo qiimeeyo.

Cabdiraxmaan Barwaaqo ayaa dareemay in arrintii laga doodayeyba la wanjalay oo wax aan wixiiba ahayn laga hadlayo. Isaga oo ku dadaalaya in doodda majaraheedii hore lagu soo dabbaalo ayuu yidhi:

## 2.13. Dooddii Miisaanka Maansada oo la soofdaran habaabiyey

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'
hal_aqoon@yahoo.com, www.wardheernews.com & www.redsea-online.com

Dooddii Miisaanka Maansada waa la af duubay. Meel daran baana lala aaday. Dad badan baana ku dhex asqoobay oo, hadda, garan la' waxa lagu murmayaa waxa ay yihiin. Sidaasi awgeed waxan qoraalkan kooban ku tilmaami sida loo majarahabaabiyey dooddii ee looga hadlayo wax aan wixiiba ahayn. Waxanan ku xigsiin sida waraysigii Carraale iyo buuggiisii la soo bandhi-gayba ay u yihiin agab loo adeegsaday soofdaran habaabintaa iyada ah. Ugu dambaynta waxan tilmaami wixii dooddu ahayd iyo sida aanu buugga Carraale u soobixin 1976kii aniga oo idin soo hordhigidoona caddaymo arrintaasi muujinaya.

Sidaan kor ku sheegay dooddii Miisaanka Maansada waa la afduubay. Waxa loo beddelay oo laga dhigay in laysku hayo: Cabdillaahi Diiriye Guuleed "Carraale" buug ma qorin 1976kii iyo wuu qoray. Sidaasi awgeed waraysiga Carraale sida loo qaabeeyey ee wax loo weydiinayey waa sidaasi. Sida uu isagu u warceli-nayaana waa habkaa.

Siday doontaba ha ahaatee, dooddu may ahayn sidaasi. Marna laguma doodin Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale' buug buu qoray 1976kii iyo muu qorin? Manay ahayn kii buug qoray baa loo aqoonsanayaa inuu yahay aabbaha Miisaanka Maansada. Haddaba iyadoon mad-

madaw ku jirin dooddu waxay ahayd*: Carraale iyo Gaarriye kee baa aragtidiisa Miisaanka Maansada soo horsaaray oo lagu tilmaamayaa inuu yahay aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed?*

Qoraalkii ladhkiisu ahaa 'kumaa ah aabbaha Miisaanka Maansada, ma Carraale mise Gaarriye?' (dhaxalreeb 2007) Waxan ku tilmaamay inuu Gaarriye qoraalkiisii u horreeyey uu xiddigtii Oktoobar ku soo qoray taariikhdu kolkay ahayd 17kii Jeenawari 1976kii. Cabdillaahi Diiriyana uu qoraalkiisii u horreeyey ku soo qoray wargeyskaasi markay taariikhda ferenjigu ahayd 10kii Juun 1978kii.

Xirgiga suubbani wuxu inna farayaa in haddii la leeyahay Carraale ayaa ka horreeyey Gaarriyey in la caddeeyo oo la helo qoraal ama buug uu soosaaray Carraale wixii ka horreeyey 17kii jeenaweri 1976kii. Looma baahna buug buu qoray, loomana baahna in la sheego inta shir ee uu ka qayb galay iyo inta Cilmibaadhisood ee uu sameeyey midna. Waxa keliya ee loo baahan yahay waa buug ama qoraal soobaxay xilligaa la sheegay ka hor. {a book or an article published before the mentioned date (i.e. before Jan.17, 1976)}.

Si aan u caddeeyo inaanu buugga Carraale soobixin intii u dhaxaysay 1dii-16kii jeenaweri ee 1976kii bal ila eega waxa waraysigii Carraale innooga binniixay. Aan ku bilaabee, waraysiga uu Cabdillaahi Diiriye "Carraale" bixiyey wuu dheeraa. Sidaasi darteed wuxuun baan ku ekaan inta aan kolba uga danleeyahay. Borofisar Carraale oo ka warcelinaya weydiinta ah:

> (*WDN:) Professor Cabdillaahi, goormaad bilawday baadhitaanka Miisaanka Maansada? Maxaa kugu dhaliyey raadraaca Miisaanka Maansada?*

*Waxa uu yidhi:*

*(Carraale) Miisaanka waxa igu baraarujiyey barashada "meter"ka Ingiriisida. 1972 kolkii naloo dhigay sida gabayga Ingiriisku u dhisan yahay, ayaan is weydiiyey, keligay, kol haddii gabayga Ingiriisku dhiskan cayiman leeyahay, kii Soomaali-gu lahaa mee? Waa sannadkaygii labaad ee kulliyadda ("sophomore yearas an English major"). Waxa aan dareemay in Soomaaliguna leeyahay e aan la baadhin. 1974 ka dib, kolkii aan ka qalin-jebiyey Kulliyadda waxa la ii beddeley dugsiga sare ee Marka. Kolkaas baan u gacan-baxay, baadhista dhabta ahna gudo-galay. Toddobaadkii u horreeyey ee 1976 ayaan qalinka ka qaaday oo dhammeeyey qaybtii ugu horreysey, soona bandhigay. Qoraalkaa oo aan markaa u bixiyey "Gorfaynta Gabayga", waayo gabayga oo aan ku bilaabay helista miisaankiisa ayuu ku koobnaa. Gabaygu waa udub dhexaadka suugaan -ta oo isaga ayaa fura u ah maansooyinka kale oo dhan. Isla 1976 ayaa Jaamicaddii Umadda Soomaaliyeed (JUS) iga iibsatey buuggaa.*

Bal u fiirsada labada weedhood ee aan hoosta ka xarriiqay. Weedha hore wuxu Borofisarku inna yidhi, " *Toddobaabkii u horreeyey ee 1976 ayaan qalinka ka qaaday oo dhammeeyey qaybtii ugu horreysey, soona bandhigay*." Hadalkaa Carraale kuma caddayn waxa uu dhammeeyey ee uu qalinka ka qaaday soona bandhigay waxa ay yihiin. Markaad weedha akhriskeeda dhammaysana waxaad isweydiineysaa waxa uu qalinka ka qaaday Carraale waxa ay yihiin.

Cabdillaahi Diiriye "Carraale" isaga oo hadalkii sii wata wuxu yidhi, "*Qoraalkaa oo aan markaa u bixiyey "Gorfaynta Gabayga", waayo gabayga oo aan ku bilaabay helista miisaankiisa ayuu ku koobnaa."*

Kolkan buu, haddaba, Carraale inoo caddeeyey oo inoo qeexay wixii uu qalinka kolkaa ka qaaday ee uu

dhammeeyey soona bandhigay waxa uu ahaa, kaasi oo ahaa qoraal. Borofisarku innama odhan buuggii oo aan markaa u bixiyey “Gorfaynta Gabayga”.
Qoraal iyo buug waxan u aqaan inay yihiin laba erey oo kala higgaad ah, kala odhaah ah oo weliba kala ujeeddo ah. Sidaasi oo kale bay afka Ingiriiskana u noqonayaan: Qoraal oo ah ‘ an article’ iyo Buug oo ah ‘ a book’. Sida la wada ogyahay Cabdillaahi Diiriye Guuleed “Carraale” waa Bare sare oo weliba afka Ingiriiska heer sare ka gaadhay. Sidaasi aawadeed kuma doodi karo oo innama odhan karo markaan ‘qoraal’ lahaa waxan ujeedey ‘buug’.

Borofisarku wuxu weliba innoo tilmaamay qoraalka uu dhammeeyey jaadka uu ahaa. Muu ahayn qoraalku mid beri hore la qoray. Manuu ahayn mid makiinad lagu qoray ee wuxu ahaa mid qalin lagu qoray oo kolkaasuun uu farta ka qaaday. Waxa haddaba isweydiinle sida uu Borofisar Carraale u soo bandhigay qoraal qalin ku qoran?

Intaa haddii aan kaga gudbo wixii inooga dhuroobay waraysigii Borofisar Cabdillaahi Diiriye Guuleed, bal markanna aan eegno waxa inooga dhuroobay soobandhiggii buugga.

Ugu horrayn, degelka wardheernews baa qoray, kolkii uu qoraalka Carraale soo bandhigayey, hordhacan hoos ku qoran ee odhanaya:

> *Wardheer News waxa akhristayaashi la socday dooddii “Miisaanka Maansada” ay usoo bandhigaysaa buuggii Bare Sare Carraale ee Gorfaynta Gabayga ee uu daabacay horraantii sannadkii 1976. Carraale wuxu xilligaa ku afjaray buugga magaalada Marka.*

Sida aan kor ku xusay Borofisar Cabdillaahi Diiriye Guuleed waraysigiisa kuma *sheegin inuu buug daabacay*

*horraantii sannadkii 1976kii*. Wuxu Borofisarku inoo sheegay inuu *qalinka ka qaaday oo uu dhammeeyey soona bandhigay qoraal*.

Ereyga 'daabacay' waa erey soogeleytiya oo la Soomaaliyeeyey. Wuxuna ka soo jeedaa ereyga af Carabiga ah ee '*Dabaca* = طبع' oo ujeeddadiisu tahay '*uu teeb ku garaacay horraantii 1976kii'*. Horraanta sannad-ku waa afarta bilood ee gu'ga ugu horreeya. Sidaasi darteed, hawraartaasi ma tibaaxayso inuu buugaasi yahay ku la daabacay ama la soosaaray 17kii jeenaweri ka hor.

Laga bilaabo 17kii bishii u horreysey sannadkaasi kor ku xusan ilaa iyo dabayaaqadii bishii afraad, sabti kasta Gaarriyaa soo qorijirey qoraalkiisii taxanaha ahaa. Bishii Meey 3dii ayey falcelintii u horreysey ku soobaxday wargeyskii Xiddigta Oktoobar. Waxa qoraalkaasi soo qoray, Eebbe haw naxariistee, Ibraahim Cawd Khoolli oo ka tirsanaa Akademiyihii Dhaqanka iyo Suugaanta Soomaaliyeed. Qoraalkaasi wuxu Ibraahin ku muujinayey sida aanay aragtida Gaarriye u shaqaynahayn kolkii lagu shirrabay gabayadii Sayid Maxamed Cabdalla Xasan iyo kuwii Ismaaciil Mire. Ugu dambayntiina wuxu tilmaamay sida aanu Akademiyuhu diyaar ugu ahayn in laysku hawlo arrin aan shaqaynayn. Haddii Ibraahin ogaan lahaa aragtida Carraale waxa hubaal ah inuu tilmaami lahaa sida ta Gaarriye looga wanaagsan yahay ee ay Akademiyadu diyaarka ugu tahay hirgelintiisa. Sida halkaa ka cad intii dooddu Xamar ka socotay, buugga Carraale wuxu ahaa buug aan soo dhaafin Cabdillaahi iyo Marka oo makiinad garaacid ku jirey.

Buugga ay wardheernews soobandhigtay kuma qorna hadal sheegaya in la soosaaray (published نشر) horraantii sanadkii 1976kii. Hayeeshee, way ka muuqataa in makiinad lagu garaacay 1976kii.

Mar Carraale la wediiyey: xilligaa uu Gaarriye qorayey taxanahaa xaggeed joogtay? Ma ka jawaabtay? wuxu ku

warceliyey: Anigu markaa qoraaladaasi soo baxayaan waxaan joogaa Marka oo Xiddigta Oktoobar ma helijirin.

Hadalkaa qudhiisu wuxu caddaynayaa in hawsha Carraale ahayd mid aan dadweynaha soo gaadhin. Arrintaa iyada ihina waxay ku caddahay gogoldhigga buugga Carraale ee soobaxay 2003dii. Hadalkaasi oo laga soo xigtay buugga la yidhaa '*Somalia in word and image*' wuxu u qoranyahay sidan hoos ku xusan:

> **"...Not until the 1970s were the principles of the scansion system discovered and worked out in broad outline by two Somali scholars, and detailed research is still in peogress."[11]**
>
> **B.W. Andrejswiski, 'Somalia in word and image',1986, p. 37**
>
> Notes
>
> **11. The results of this discovery were first described in a series of articles in Somali in the national daily Xidigta Oktoobar in 1976-1978, and were made accessible outside Somalia through an article by John William Johnson,**

Carraale, 2003:12

Halkan waxa ku cad oo uu Dr. B.W.Andrezejwski si faahfaahsan innoogu sheegayaa in aragtiyihii ay heleen labada aqoonyahan ee Soomaaliyeed ( waa Carraale iyo Gaarriyee) markii u horreysey lagu soo saaray qoraallo taxane ah oo ku soobixijirey wargeyskii maalinlaha ahaa ee Xiddigtii Oktoobar sannadihii 1976kii-1978kii. Sida aan la wada soconnana Gaarriyaa taxanahiisa ku soo hor qoray Xiddigtii Oktoobar sannadkii 1976kii. Halka uu Carraalana bilaabay inuu qoraalladiisa ku soo saaro sannadkii 1978kii. Midhkaasi haddii aanu dhab ahayn, Carraalana raalli ka ahayn maxaa buuggiisa loogu soo qoray?

Mahadnaqa buugga Miisaanka Maansada Soomaaliyeed (Carraale, 2003:17) waxa ku qoran hadalkan hoos ku

xusan. Waxana hadalkaasi qoray Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale' laftigiisa ee bal ila eega.

> Hawshan iminka soo if-baxday qaybteeda hore, GORFAYNTA GABAYGA, waxa aan tafo-tiray 1976kii, qaybteeda labaadna, MIISAANKA MAANSADA, ku dheririyey badhtamaadkii 1977kii. Tan iyo markii aan qalinka ka qaaday iyo haddadan la joogo may suurtoobin in ay gaadho bulshadeedii iyo intii kale ee u oomanayd, kagana haqab bixi lahayd mugdigii ay kaga jireen (welina kaga jiraan) aqoonsiga iyo barashada maansada lafo-gurkeeda iyo kala qalkeeda dhabta ah ee cid maaraysa hore loo waayey.

Sida hadalkaa ku tilmaaman wuxu Carraale sheegayaa waxa uu dhammeeyey 1976kii oo ah tafatirkii qoraal-kiisa la yidhaa 'Gorfaynta Gabayga'. Taasi oo ay ujeeddadiisu tahay inaanu qoraal soo saarin ee uu tafatiray oo keliya. Waxa kale oo uu yidhi, " <u>Tan iyo</u> markii aan qalinka ka qaaday iyo haddadan la joogo may suurtoobin in ay gaadho bulshadeedii iyo intii kale ee u oommanayd,….'

Cabdillaahi isaga oo sheegaya sababta uu buuggiisu u soo bixiwaayey ayuu isla boggaasi ku yidhi:

> Muddadaa waax-boqoleedka (25 sano) ka badan anfacadii hawshan iyo bulshadeedii u heellanayd waxa kala muquuniyey soo bandhigid ama soo saarid awood lagu taabo loo waayey. Haddaba hawshii intaa qol ku raagga ahayd waxa afsaartii caabbiday ka rogey xildhibeen kolkii ay yiqiinsadeen waxtarka ay bulshada iyo bartaha dhaqankoodaba u leedahay ka dib, dhugasho dheeri awgeed isugu xilsaaray sidii ay u bannaysimi lahaayeen, dabadeedna midhaheeda loogu haqab bixi lahaa. Xildhibeenkaa oo isla kaashaday maan, maskax, muruq iyo maalba in aan culayskooda qaddarin run ah ku qiri waayaa waa meel ka dhac aan ka soo waaqsi lahayn.
> Kala mudnaan aan kala bidayo ma aha e, kala hor marinta magacyadoodu waase sidii qalin ugu dhacay.
>
> 17

Isku soo wada xooriyoo, sidaa uu Borofisar Carraale u sheegay ayuu buuggiisu u ahaa mid aan soobixin.

Doodduna may ahayn Carraale buug muu qorin ee waxay ahayd buuggiisu muu soobixin intii ka horreysey 17kii Jeenaweri, taasina marag kale ma rabto oo Carraale isagaa isku markhati furay.

Ugu dambayntii, qoraalkan kooban oo aan kaga hadlayey sidii loo afduubay dooddii ku saabsanayd Miisaanka Maansada, ayaan caddeeyey sida aanay dooddu u ahayn Carraale buug ma qorin iyo wuu qoray ee ay u tahay Carraale iyo Gaarriye midkee baa aragtidiisa Miisaanka Maansada soo horsaaray oo dadweynaha soo hor gaadhsiiyey. Waxa kaloon soo bandhigay qoraalladii uu Borofisar Andrejewski ku sheegey in aragtiyaha Carraale iyo Gaarriyaba ku soo horbaxeen wargeyskii Xiddigta Oktoobar sannadadii 1976kii-1978kii. Taasi oo caddaynaysa inaanu buugga Carraale soo bixin intii u dhexaysey 1dii – 16kii Jeenaweri ee 1976kii.

Nin layidhaa Idiris A. Ayaa ka soo falceliyey qoraalkii Barwaaqo. Waxaanu yidhi:

## 2.14. Falcelintii Dooddii Miisaanka Maansada oo la soofdaran habaabiyey.

www.qoraaga.com in August 19th, 2008 at 7:54 am

Idiris A.

Marka hore waan ku salaamayaa Barwaaqo; adiga iyo inta faalladaydanu gaadhaba.

Aqoonta Aadanuhu waxay bidhaantaa marka shakiga iyo been-ku-abuuradka laga sifeeyo. [Gasaasad aan sifaysneeni, guriga wada nuurin mayso.] Cidda hawshaa gudan kartana waa ehlu-cilmiga garashadu ku dheer-tahay, waxna baadha, dadkana soo gaadhsiiya.

Ka waran, haddii maanta ehlu-cilmigii sheegato ka dhexbuuxdo — wax ma hagaagayaan bay kula tahay? Waxaan taa uga golleeyahay: Murankan la buun-buuniyey, ee ninkii xogogaal ahaa iyo ninkii xaashiyuhu ama xog-maqalladu hagayeenba wada gorfeenayaan, ee "Miisaanka Maansada," meel soke ayaa wali lays garab yaacayaa, illaa haddana cid wax saxday, inay sii qooshto mooyee, ma garan — waxaan ka ahayn cida daliilaha la timaadda.

Kuwa kalaba dhulka yaan ka qaadine, qoraalkan waxaan u arkaa inuu dawgii ku habboonaa seef-laboodyo fara badan tusay. Lakiin waxaan isweydiiyay: "Qoraalkani wax la "af duubay" ayuu farta ku fiiqay ['…qoraalkan kooban oo aan kaga hadlayey sidii loo marinhabaabiyay dooddii ku saabsanayd Miisaanka Maansada…'], balse

ma soo afjaray murankii?" "Maya," ayey jawaabtu ahaatay. Waayo jihada lawada qaadayo ayaa 180 Digree lid ku ah jihadii roonnayd.* Waxaan kaloon is garad siiyay inuu qoraalku si dadban u taagay derbi ay seef-laboodku kasoo daadan karahayn — oo Prof. Carraale ayuu erayadiisii ku xujeeyay. Taasna su'aalbaa iiga baxdoo, ka waran eraygaagii hadduu adigana ku qabto?

Inkastoon la xalin karin arrin aan gole loo maageerin (kaasoo ay dhici karto in laga kala dareero haddii sidaaba loo dhaqaaqo) oon dadkii is hayey isa soo hor fadhiisan, haddana waxaan taageerayaa in cilmi-baadhista kala furdaamiska labada abwaan ee Aabaha "Miisaanka Maansada" ugu magacaaban lasii wado, lagana daalin — war-bixintii macquul noqotaana meel mari doonto Insha Allah — waayo xaqiiqada iyo runta ayaa wax saxda. Rag baa ku murmay in laysu eego Macalin Gaarriye iyo prof. Carraale ka boodhka ka sii jafay "Miisaanka Maansada" oo isla markaasna ku soo kordhiyey mawduucyo markii hore aan la daahfurin. Waxayna taasi micnaheedu tahay, ciddii aas-aaska "Miisaanka Maansada" lahayd ha layska illoobo! Sida shaki iiga jirana, Macalin Gaarriye iyo Prof. Carraaleba laba fikradood oo meelna iska haysta meelna aan iskaga dhaweyna ayey "Miisaanka Maansada" ku qotomiyeene, halkaa maa loo kuur galo, oo la ogaado in midkood magaca "Miisaanka Maansada" khalad ku yahay.

Aan gunaanadee, bagaad Mr. Faaraxow dib tooshka ugu ifisay meesha arrinku ka aloosamay: "Yaa ah Aabbaha 'Misaanka Maansada'" oo hadhow magaciisu baalka suugaanka Soomaalida galaa?

* Kalmadaa faahfaahinteedu jumlada isla jumlada ay ku jirto xigta ayaa ku bilaabata.

__"Allaa xoog leh diin baa xarbi leh tegid xajkii baa leh."
S.M.C.X.

Axmed Y. Duaale ayaa sheegay inuu ka mid ahaa dadkii akhrisanjirey qoraalladii Miisaanka Maansada ee ku soobixijirey Xiddigtii Oktoobar kolkay taariikhdu ahayd 1976dii. Isaga oo arintaa inoo faahfaahinaya wuxu yidhi:

## 2.16. Marag Fur akhriste

**www.somalilandhorta.com**

Axmed Y. Ducaale oo ka falcelinaya qoraalka ladhkiisu ahaa : *Soo Gar Bax ama Garowso: Aabaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed* ee uu qoray *Maxamed Xirsi Guuleed oo lagu soo qoray degelka la yidhaa www.somalilandhorta.com/literature.htm*

*June 25, 2008*

Marag furkeygu wuxuu ku koobanyahay missaanka maansada. marag fur cilmi baadhe maaha- ee waa marag fur akhriste suugaanta, ama gaar ahaan Gabayga iyo wixii laxidhiida jecel.

Qoraallo taxana ah ayuu Maxamed Xaashi Dhamac 70naadkii, ku baahiyey Xiddigta October; kuwaasoo uu ku soo bandhigey godadka ama badaha maansada ee kala duwan, isaga oo godkastaba tusaalo ka bixinaya. Aad ayaan u qadariyey hawshaa qiimaha leh iniga oo xasuustay Al-Khallil Ibni Axmed Alfarahiidi, caalimkii dajiyey Miisaanka gabayga Carabiga ah. Badhtameeyihii 90gii ayaan Gaarriye hadyad ugu soo diray Kitaab Balaaqadda ka hadlayey oo Carabiya. Bilowgii 2001gii waxaan hadyad usiiyey Kitaab kahalaya Miisaanka Gabayga Carabiga. Isla markaana Cajalado uu ku duubay Abijan oo uu Miisaanka Maansada taa taabanayo, isagoo

gabayadiisa akhriyaya, ayaan iyagana daawaday 90meeyadii. Lamaan kulmin hawl qoraal Miisaanka Maansada ku saabsan oo ka horeyay, qoraaladaa uu bilawgii 70naadkii Gaarriye baahiyey.

Akhriste A. Y. D

Ahmed. Y. Ducaale

Gaarriye oo sidii dooddu u bilaabantay aan wax hadal ah laga maqal ayaa markii u horreysey arrinta ka hadlay waxana laga soo wariyey warkan hoos ku qoran:

## 2.17. Gaarriye oo si kulul u difaacay

Shiine Cilmi Kaahin SDWO News Desk - Hargeysa

sirshiine@yahoo.com

SDWO (Hargeisa 23/08/08) Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac Gaarriye ayaa Shalay si kulul u difaacay lahaanshaha inuu yahay midkii daah furay Miisaanka Maansada Soomaalida. Hadalladaa waxa uu jeediyay mar uu ka hadlayay Bandhig-buugeedka Caalamiga ah ee Hargeysa (Hargeysa International Book Fair) oo shalay lagu soo gababeeyay Magaalada Hargeysa.

Abwaan Gaarriye waxa uu carrabka ku dhuftay in websites badan ay baryahan dambe qoreen warar iyo waraysiyo ay ka qaadeen saaxiibkii C/laahi Diiriye Guuleed oo isaguna dhankiisa ka sheegtay lahaanshaha inuu yahay midka daah furay Miisaanka Maansada Somaliyeed.

Abwaan Gaarriye isagoo arrintaasi ka hadlaya waxa uu yidhi "17 January 1976 ayaan joornaalkii Xiddigta Oktoober ku daabacay maqaalo taxane ah oo aan kaga waramayay Miisaanka Maansada Soomaalida, waxase nasiib darro ah in Saaxiibkay C/laahi Diiriye Guuleed mar uu u waramayay Shabakadda Wardheer uu yidhi, "Waxaan daabacay Bishii January 1976-dii wiigagii u horeeyey taasina waa kutirikuteen iyo Mala-awaal".

Abwaan Gaarriye isagoo hadalkiisa sii wata ayaa waxa uu yidhi, "Waxa kale oo layaab leh in C/laahi Diiriye Guuleed uu daabacay Maansada Miisaankeeda sanadkii

1978-dii , arrintana waa marag madoon oo waxaan hayaa nuqullo ka mid ah Cadadkii maalintaasi waxaanse diidaya in taariikhda la isdaba mariyo".

Mar uu Abwaan Gaarriye ka waramayay khaladaadka ka soo yeedhay C/laahi Diiriye Guuleed ee ku wajahan arrintan ayaa waxa uu yidhi, "C/laahi Waxa uu idhaa Anigaa ugu horeeyey oo markaan qoray ayaa nin la yidhaa Faarax Askari oo aan saaxiibo ahayn oo Xamar tegey uu Gaarriye uga sheekayn jiray."

Waa yaabe haddii aan tiisii helay maxay isku mid u noqon waayeen waxa aan qoray iyo waxuu isagu qoray?"

Waxaa kale oo la waydiiyay C/laahi in aan Aniga iyo Isagu kulannay waxaana uu yidhi, "Maya." Arrintanna wuu ka been sheegay oo waxaan hubaa inuu ka mid ahaa dadkii I dhagaysanayay maalintii aan soo bandhigay Miisaankan aan helay.

Waxaa kale oo jirta C/laahi qormadiisii 1978-dii kuma xusin in nin Gaarriye la yidhaah uu ka xaday waxii uu damacsanaa inuu qoro, buug uu qoray 2006 arrintan kuma xusin, warkuna waxa uu soo baxay Sanadkan dambe.

Si kastaba ha ahaatee Farrin ayaan doonayaa in loo gudbiyo Saaxiibkay C/laahi waxana ay tahay Oktoober horraanteeda, London ayaan joogaa, Adiguna igama dheerid oo Denmark ayaad degan tahay, Aniga ayaa Ticket-ka kuu soo diraya ee iskugu kaaya keen London, cadaymahaagana soo ururso, Web site-yada iyo BBC--dana waxan ka codsanayaa inay maalintaasi Baahiso barnaamijkayaga , C/laahina waxaan ka codsanayaa in uu ka soo jawaabo, hadalkayga oo uu maalintaasi soo xaadiro.

Shiine Cilmi Kaahin SDWO News Desk - Hargeysa

sirshiine@yahoo.com

Cali Jaamac oo ka falcelinaya warka la soo sheegay baa yidhi:

## 2.18 **Murankii Ka dhex oognaa Prof. Cabdillahi Diiriye & Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac oo soo Dhawaadey**

WQ Cali Jaamac

August 28, 2008, www.wardheernews.com

Hadda ayay isu dheellitirantey dooddii ka oogneyd cidda daahfurtay Miisaanka Maansada Soomaalida mar haddii dhinacii maqnaa la heley- waa Abwaan Maxamed Xaashi dhamac (Gaarriye) e. Bishan August markay ahayd 23, ayuu Abwaan Gaarriye qirtey in ay jirto dood ka oogan Daah furka maansada Soomaalida. Taas oo ka dhexeysa isaga iyo Saaxiibkii Professor Abdillahi Diiriye Guuleed (Carraale).

Dooddani, waxay soo shaac baxdey dhammaadkii 2006-kii markii sida la sheegayo Abwaan Gaarriye qabtey kulanno uu kaga hadlay maansada Soomaalida iyo xididdadeeda isla markaana sheegtey in isagu uu yahay qofkii ugu horreeyey ee soo saara Miisaanka Maansada Soomaaliyeed.

Kullanadaas ka dib, arrintani waxay dhalisay muran joogto ah oo ay is waydaarsadaan dadweynaha xiiseeya suugaanta Soomaalida guud ahaan iyo aqoonyahano ku xeel dheer afka Soomaaliga gaar ahaan dhinaca suugaan-ta sida Professor Cisman Aadan (Cisman Xoog), Abdiraxmaan Faarax (Barwaaqo), Ibraahim Yusuf

Ahmed (Hawd), Abwaan Maxamed Xirsi Guuleed iyo rag kale oo badan.

Inkastoo doodayaashu aaney aqoon isku mid ah u laheyn halka sartu ka qudhuntey iyo midhka muranku ka taagan yahay, waxay dooddoodu dhiirrigelisay akhristayaal badan oo aan ku jiro, waxaaney nolol u yeeshey afkii Soomaaliga ee dhintey. Sidaan qabo, waxaa doodayaasha laga korodhsadey aqoon iyo farshaxanimo fara badan oo dhex muquursaneyd mawjadaha afka Soomaliga ee in yari fahamsaneyd. Sidoo kale, waxaa soo baxay shebekado raadiya dooddan iyo ciddii ay khuseysay aqoontana u hiiliya sida WardheerNews. Waxaanan leeyahey wardheerNews, waad ku mahadsan tihiin sida aad isugu dayeysaan kobcinta wacyiga iyo aqoonta dadka af Soomaliga ku hadla.

Sida ku cad, wírarka uu saxaafadda siiyey Maxamed Xaashi Gaarriye (**WardheerNews** & **Lughaya news**), waxaa uu imanayaa London bisha Oktoobar ee foodda inagu soo haysa, waxaanu diyaar u yahey in uu dood cilmiyeed la galo saaxiibkii Cabdillahi Diiriye Guuleed si fool ka fool ah.

Haddaba, maxaa la gudboon dadkii Soomaaliyeed ee dooddan la socdey iyo inta xiiseysa suugaanta Soomaalida? Waxay ila tahey in ay habboon tahey in la fahmo waxa laysku hayo iyo ahmiyadda ay Miisaanka Maansadu u leedahey suugaanta kala geddisan ee Soomaalida. Waayo, miisaanku ma aha gabey, kuna barimaayo sida loo gabyo ee waa mitir lagu cabbiro dir maanso looguna abtiriyo. Arrintan waxaa si dheer uga Hadley Professor **Cisman Aadan**, anna waan ku raacey ka dib markii aan akhiyey buuggii Miisaanka Maansada Soomaalida ee uu qorey Professor Abdillahi Diiriye.

Si kastaba arrintu ha ahaatee, hadda waxaa la soo gaadhey xilligii la soo afjari lahaa dooddan ciddii gartu

siisana si dhab ah loogu aqoonsan lahaa xuquuqda uu mudan yahay iyo magaca ay leedahey hawsha uu qabtey.

Su'aashuse waxay tahey mar haddii aaney Soomaalidu aqoon iyo waayo aragnimo hore u laheyn ka garniqidda arrimaha cilmi-baadhista, sidee si xaq ah loogu garnaqi karaa Carraale iyo Gaarriye? Waxaan filayaa in aaney ka maarmeynin in lala kaashado garyaqaanno aqoon u leh ka garnaqidda hanti maskaxeedka (intellectual property) iyo xuuquuqda la ahaanshaha. (Copy rights).

Ali Jama

E-Mail:**ahmedfayr@hotmail.com**

Mustafe M. Khayre oo goob joog u ahaa markii uu Gaarriye ka hadlayey arrinta Miisaanka Maansada ayaa si kooban oo aanu waxna dhimin waxna ku darin inoo soo gaadhisiiyey. Waxaanu yidhi:

## 2.19. **Muxuu Gaarriye ka yidhi Muranka Miisaanka Maansada?**

W/Q Mustafe M. Khayre

Posted in September 3rd, 2008, www.redsea-online.com

Sida aynu la socono, waxa in dhawayd warbaahinta ku jirtay dood ku saabsan ciddii u horeysay ee daah-furtay Miisaanka Maansada Soomaalida. Dooddaas oo dadkii afkaaraha ka soo dhiibtay ay qaar taageerayeen in Gaarriye yahay aabaha Miisaanka Maansada qaarna Carraale kuwo kalena ay danaynayeen in baadhitaan dheeraad ah lagu sameeyo labada aqoonyahanna madal la isku soo hor fadhiisiyo. Doodda Miisaanku waxay kululaatay amaba si wanaagsan u soo ifbaxday markii uu Carraale siiyey shaba kadda Wardheer waraysi uu ku sheegay in uu isagu yahay ninkii u horreeyey ee helay Miisaanka Maansada.

Haddaba, Gaarriye oo isagu intii dooddaasi Internet-ka ka socotay aan ka qayb qaadan, ayaa markii u horreysay ka hadlay 22kii August 2008 wakhtigaas oo uu khudbad ka jeedinayey Bandhiggii Caalamiga ahaa ee Buugaagta. Waxan ka mid ahaa dadkii dhagaysanayey. Waxanan jeclaystay in aan idinla wadaago qoraal kooban oo aan ka sameeyey hadalkiisii si ciddii dambe ee dooddaas ka qayb qaadanaysaana ay u ogaato waxa uu Gaarriyena qabo.

Gaarriye wuxu hadalkiisii ku bilaabay kelmadahan kaftanka ah. “Intiina isticmaasha internet-ku waxad beryahan akhrisanayseen doodo ka socday website-yada,

taas oo lagaga doodayey aniga iyo Carraale ka hor helay Miisaanka Maansada. Intiina aan "dot com-ka" isticmaalina waan ka tacsiyeynayaa, waayo waxa la isku dubanayaa xiddigaha". Kaftankaas kadib hadalkiisii buu guda galay "Waxan jeclaan lahaa doodahaas intiina ka qayb qaadanaysaa in aydaan kala taageerin laba nin oo midna Gaarriye la yidhaa midna Carraale. Waayo, doodda ayaa idinka xumaanaysa oo shakhsi jeclaysi bay idinla galaysaa. Waxa habboon in aad akhridaan oo ka bogataan waxa aan anigu umadda hor keenay iyo waxa uu Carraale keenay, kadibna aragtidiinu ay halkaas ka duusho. Waxan halkan idiinka caddeynayaa in aan anigu ahay ninkii u horreeyey ee helay Miisaanka Maansada Soomaalida. Markhaatigeedii oo aan muran lahayna waan idiin hayaa oo waxan bishii January ee 1976kii ku daabacay Xiddigtii Oktoobar. Beenaale markhaatigiisa ayuu Bay dhabo geeyaaye, waa kaa Boobe ina hor fadhiya. Isagaa ka marag ah. Isaga ayaana ka mid ah dadkii igu dhiiri galiyey in aan ku soo ban dhigo Xiddigtii Octobar. Taariikhdu waa sidaas mana aha in la is daba mariyo. Dhawr qodob baana muhiim ah in aad ogaataan:

- In aan lagu muransanayn in aan anigu ahay ninkii u horreeyey ee Miisaanka Maansada Soomaalida oo qoraal daabacan ah umadda hor keena
- In aniga iyo Carraale labadayada miisaan ay kala duwan yihiin, idinka ayaanan idiin daynayaa in aad soo saartaan ka asalka ah.

Gaarriye hadalkiisa wuxu ku naqdiyey dooddii Carraale wuxuna yidhi "Carraale wuxu Miisaankiisa ku soo qoray Xiddigtii Oktoobar 1978kii. Waa laba sanno kadib markii aan anigu soo ban dhigay. Qoraalkiisii wakhtigaas kuma uu sheegin in uu yahay ninkii u horreeyey ee helay Miisaanka Maansada, anigana iguma uu soo hadal qaadin. Sannadahan u dambeeyey ayuun baan maqlayaa sheegashadaas. Anigu cimrigayga intiisii u badnayd waxan ku qaatay suugaanta, soddonkii sanno ee u dambeeyey arsaaqad aan iyada ahayn maan cunin.

Carraale intee in leeg buu suugaanta ku dhex jiray. Miisaanka Maansadu ma waxyi ku soo dagay buu ahaa? Ma wax sidii shilka uu ula kulmay buu ahaa?" Gaarriye wuxu tusaale u soo qaatay kooxda kubadda cagta ciyaarta wuxuna yidhi "Miyaad aragteen nin aan weligii kubad laadin oo inta uu garoonkii ugu weynaa soo galay aayar uun goolkii ugu quruxda badnaa dhaliyey? Anigu Miisaankii aan berigaas sameeyey dhaliilo wuu lahaa. Waanan aqoonsanahay. Laakiin tadawur badan baan ku sameeyey oo cilmi-baadhis ku saabsan arrimo waaweyn oo Miisaanka ah iyo daah-fur hor leh ayaan London ku soo ban dhigayaa Oktoobar 2008. Carraale isaguna wuxuu ku kordhiyey wixii uu berigaa qoray ha keeno.

Gaarriye wuxu hadalkiisii ku soo gunaanaday in uu diyaar u yahay aadna u rabo in isaga iyo Carraale madal la isku soo hor fadhiisiyo. "Walaalkay Carraalow waxan ku leeyahay Afrika way kugu fog tahaye London isugu keen keen bisha Oktoobar. Weliba tigidhka aad ku imanaysona aniga ayaa kuu soo diraya. Dhammaan caddeymahaagana soo ururso". Gaarriye wuxu ka codsaday warbaahintii halkaas ku sugnayd in ay hadalkiisa qoraan oo baahiyaan. BBC-da iyo war-baahinta kalena wuxu ka codsaday in marka isaga iyo Carraale la isa soo hor fadhiisiyo ay barnaamijkaas si toos umadda ugu baahiyaan.

Markii uu Gaarriye khudbadda ka baxay waxa mikrifoonkii qabsaday Jaamac Muuse Jaamac. Wuxuna halkaas ka sheegay in uu jeclaan lahaa in uu Carraalena madashan joogi lahaa si uu dooddiisa u dhiibto. Jaamac wuxu sheegay in hadalka Gaarriye uu yahay mid isaga loo tix raacayo balse aan Redsea-online loo nis baynayn.

***Afeef: Hadalkii Gaarriye intan kuma dhamma. Isaga oo dhammeystiran oo maqal iyo muuqaalba ah waxa duubay Redsea-online.com***


**Mustafe Maxamed Khayre**
**khaire1@yahoo.com**

Gaarriye oo ay dadku tebeyeen aragtida uu ka qabo waraysigii ay wardheernews la yeelatay Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale' ayaa ugu dambayntii hadlay. Waraysigaasi oo ay wardheernews la yeelatayna waxa uu u dhacay sidan hoos ku qoran.

## 2.20. Wareysi - Abwaan Gaarriye: Waa kuma Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed?

**September 28, 2008, www.wardheernews.com**

***"Waxaan bulshada u sheegayaa in aan horraanta bisha Oktoobar London imanayo si aan uga qeyb galo tartan Gabayo lagu soo bandhigayo oo caalami ah, anna aan ku jiro. Waxa aan diyaar u ahay in aan wakhtigaas kulanno si aannu uga wada doodno arrintan aniga iyo Prof. Carraale, iyada oo aan weliba jeclaan lahaa in BBC-da toos looga sii daayo dooddaas."*** Abwaan Gaarriye



Tan iyo markii ay Wardheer-News **wareysigii** ay la yeelatay Bare Sare Cabdillaahi Diirye Guuleed (Carraale), uu ku sheegay in uu isagu ahaa aqoonyahankii ugu hor helay qaacidada Miisaanka Maansada Soomaalida, waxa akhristayaal badani sugayeen jawaabta uu arrintaas ka bixin doono Abwaan Maxamed Xaashi dhamac (Gaarriye).

Gaarriye waxa dad badani u aqoonsan yihiin in uu isagu ahaa aqoonyahankii daahfuray Miisaanka Maansada. Haddaba nasiib wanaag waxaa WardheerNews u suurto

gashay in ay wareysi khaas ah oo taabanaya arrintan iyo waxyaabo kaleba ay la yeelato Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye).

Abwaan Gaarriye oo ah aqoonyahan ku caan baxay hal abuurka suugaanta siiba curinta gabayada ayaa sida aan la wada soconno, waxa uu si rasmi ah ugu soo bandhigay qoraallo ku saabsanaa Miisaanka Maansada wargeyskii Xiddigta Oktoobar sannadkii 1976. Qoraalladaasi ayaa waxay ahaayeen sida uu Prof. Gaarriye ku sheegay wareysigiisa natiijadii cilmibaadhis uu ku sameeyay Miisaanka Maansada oo uu si aad ah u sii dhexgalay baadhisteeda sannadkii 1975. Taas oo ay si buuxda ula socdeen sida uu noo sheegay aqoonyahanno ay ka mid ahaayeen marxuum Muuse Galaal, Prof. Andrzjewiski iyo Saalax Jaamac

Prof. Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) waxaa uu carrabka ku adkeeyay in Prof. Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale) oo arrintan ay ku muransan yihiin uu la socday hawshiisa, ayna ka wada sheekeysteen intii ay joogeen kulliyaddii waxbarshada ee Lafoole. Waxaana la yaab leh buu yidhi Gaarriye waxa Carraale uga hadli waayay xilligii aan Cilmibaadistayda ku soo bandhigayay Wargeyskii Xiddigta Oktoobar ee uu maanta uun muranka uga keenay.

Waxaa kaloo uu abwaan Gaarriye xusay in farqi uu u dhexeeyo qaaciidada Miisaanka Maansada ee uu soo bandhigay isagu iyo midka Carraale.

Abwaan Maxamed xaashi Dhamac (Gaarriye) oo aanu wareysigan ka qaadnay isaga oo ku sugan magaalada Hargeysa, una xamaan urursanaya safar uu ku iman doono magaalada London, ayaa waxa uu u soo jeediyay Prof. Cabdilaahi Diiriye Guulleed (Carraale) in ay ku kulmaan London, loona qabto dood si loo ogaado xaqiiqada cidda daahfurtay Miisaanka Maansada Soomaaliyeed.

Prof. C/laahi Diiriye Guuled (Carraale) waxa uu isaga laftiisu **wareysigii** aannu la yeelannay uu ku codsaday in dood loo qabto isaga iyo Gaarriye. Waxa hadda laga dhursugayaa sida uu u fulo codsigaasi ay labada aqoon-yahanba soo jeediyeen.

Haddaba wareysigii oo uu abwaan Gaarriye kaga hadlayo arrimahaas iyo kuwo kale oo badanina waxa uu u dhacay sidan:

**WardheerNews (WDN):** Abwaan, Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) marka hore waxaannu kaaga mahad celineyneynaa fursaddan qaaliga ah ee aad noo siisay inaanu kula yeelanno wareysigan. Waxaannu ku leennahay ku soo dhawow WardheerNews.

**Gaarriye:** Waad mahadsantihiin

**WDN:** Inkastoo aad tahay abwaan dhulalka Soomaalidu degto oo dhan si aad ah looga yaqaan, haddana waxaannu jecelnahay bal marka hore inaad guudmar kooban noogu samaysid taariikh nololeedkaaga, siiba dhinaca waxbarashada iyo cilmi baadhista intii aad ku dhex jirtay?

**Gaarriye:** Waxa aan ku dhashay Hargeysa. Wax-barashadeydii waxa aan ku soo qaatay Sheekh. Markii dambena waxa aan ka baxay jaamacaddii Lafoole aniga oo maadada Bayoolajiga ku takhususay. Waxa aan markii dambe ka tirsanaa Akademiyada Cilmiga iyo Fanka. 1977kii waxa aan Bare dhiga suugaanta Soomaalida (Somali literature) ka noqdey kulliyaddii Lafoole aniga oo madax ka noqday qeybtaas. Waxa aan immika degenahay Hargeysa. Waxa aan ka shaqeeyaa ama wax ka dhigaa jaamacadaha Hargeysa iyo Camuud. Sidoo kale waxa aan iyana wax ka dhigaa jaamacad ku taal Norwey. Waxa kale oo aan iyana immika madax ka ahay Machad lagu derso suugaanta Soomaalida (institute of Somali studies). Kaasi oo dhawaan laga furey Jaamacadda Hargeysa.

**WDN:** intii aad ku dhex jirtay cilmi baadhista afka iyo suugaanta Soomaalida waxyaabaha sida gaarka ah laguugu xasuusto waxaa ka mid ah daahfurka Miisaanka Maansada. Bal haddaba marka hore si kooban noogu sharax waxa ay tahay arrintani?

**Gaarriye:** Waxa ay ka hadleysaa qaabdhismeedka ama Miisaanka ay ku fadhido maansadu, waxana aad ka kaga bogan kartaan qoraalladii taxanaha ahaa ee aan ku soo saari jirey **wargeyskii xidigta oktoobara** 17/01/ 1976 illaa 29/05/1976, kuwaasoo aan nuqul ka mid ahna idiin soo gudbiyey.

**WDN:** Maxaa kugu dhaliyay inaad arrintan baadhitaan ku samayso, goormayse kugu dhalatay?

**Gaarriye:** 1969kii annaga oo markaa ku jirna sannadkii u dambeeyey ee dugsiga sare ayaa Axmed Sh. Aaden, oo ahaa macallin na bari jirey tarjumadda (translation) luqadaha Carabiga iyo Ingiriisiga, uu nooga sheekeeyey Miisaanka (wasniga) Carabiga. Waxa aan anna isku deyey inaan bal gabeyga ku miisaamo Carabiga, wayna isqaadan waayeen. Af-soomaaligu xilligaa muu qornayn anna si aan u qoro maan garaneyn. Markii la qoray Af-soomaaliga ee aan qori karay baydka Soomaaliga ah ayaan ogaaday in maansada Soomaalidu leedahay dhisme u gaar ah oo ka duwan kii Carabiga. Waxa iyana aad iigu sii dhiiri geliyey Alle ha u naxariistee Muuse Galaal iyo Andzejewski 1975. Ka dib markii aan dhameeyey waxa aan ku soo bandhigey wargeyskii Xiddigta Oktoobar 17/01/1976.

**WDN:** Waxaa jirta in **<u>wareysi</u>** aannu dhawaan la yeelannay Prof. Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale) uu noo sheegay inuu isagu yahay qofkii ugu horreeyay ee daahfuray Miisaanka Maansada. Goorma ayey ahayd xilligii kuugu horeysay ee aad maqashay arrinta carraale? Sidee baadse ku ogaatay?

**Gaarriye:** Horta waxa aan muran ka joogin in aan anigu ahay qofkii u horreeyey ee bulshada u soo bandhiga. Xilligii iigu horeysey ee aan maqlo arrinka Carraale waxa ay ahayd 1978kii. Markaas oo uu ku soo qorey wargeyskii Xiddigtii Oktoobar. Waxase isweydiin leh sababta uu Carraale uga hadli waayey arrintan xilligii aan cilmibaadhistayda ku soo bandhigayey wargeyskii Xiddigta. Haddiise ay seegtay markaas, muxuu 1978kii uga hadli waayey, haddii ay weliba 1978 kii seegtayna muxuu 2003dii uga hadli waayey?

**WDN**: Maxaa caddaymo ah ee aad soo bandhigi kartaa inaad adigu tahay aqoonyahankii ugu horreeyay ee helay furaha Miisaanka Maansada. Yaadse nooga magacaabi kartaa dadkii aad xilligaa wada joogteen ee xogogaalka u ahaa cilmi baadhistaada?

**Gaarriye:** Waxa xaqiiqo ah in marka qof wax soo saaro ee uu bulshadana u soo bandhigo in haddii cid burineysaa waxa uu soo saaray ay jirto, waa iney keenaan cadeymo. Markaa waxa aan leeyahay maadaa-ma aan ahay qofkii u horreeyey ee bulshada u soo bandhigay Miisaanka Maansada, in cidda burrineysa qoraaladeydii aan ku soo daabici jirey wargeyskii Xiddigta 17/01/76 ilaa 29 /05/76 ay cadeymo keenaan, bal idinkuna wareysta dadkii xilligaa wax ka ogaa rarintan. Dadkii sida weyn iigu dhiirigeliyey in aan wargeyska ku daabacana waxa ka mid ahaa Muuse Galaal, Andrzjewski iyo Saalax Jaamac

**WDN:** Labadan aqoonyahan ee hore (Muuse Galaal iyo Andrzjewski) ee aad magacawday midkoodna hadda ma noola. Markaa miyaanay jirin cid kale oo hawshaada ka war haysay dadkii badnaa ee Lafoole ama Akadee-miyadda aad wada joogteen?

**Gaarriye:** Waa runtaa oo midkoodna ma noola, laakiin waxa nool wixii ay ka tageen.

**WDN:** Prof. Carraale arrintan hore marna ma uga wada hadasheen?

**Gaarriye:** Waxa aanu ahayn isku guri, waxana uu ka mid ahaa qolyihii aan 1972-73 u sharrixi jirey. Maal-mahaas ayaa uu Saalax Jaamac igula teliyey inaan qoraal ka sameeyo oo aan bulshada u soo bandhigo

**WDN:** Ma dhici kartaa in labadiina oo aan is ogeyn uu mid kastaa gaarkiisa adiga iyo Carraaale u helay Miisaanka Maansada Soomaalida?

**Gaarriye:** Maya, waayo waxa uu goobjoog ka ahaa marar badan anniga oo Lafoole arrintaas kaga hadlaya. Waxa kale oo uu naqdin lahaa qoraaladii aan Xiddigta ku soo daabici jiray bilihii Jenaweri ilaa May 1976 kii, sida ay qolooyin kaleba dooddooda wargeyska ugu soo bandhigeen. Kuwaasi oo aan aniguna isla wargeyskaas ugu jawaab celiyey.

**WDN:** Oo waxaad leedahay xilligaa Prof. Carraale wax cilmi baadhis ah oo arrintan ku saabsan muu wadin?

**Gaarriye:** Haa, waayo waan ka maqli lahaa haddii uu wadey.

**WDN:** Ma jiraa **farqi** u dhexeeya qaabka uu Carraale u soo bandhigay Miisaanka Maansada iyo midka aad adigu heshay?

**Gaarriye:** Haa farqi baa u dhexeeya, oo si kala duwan ayaanu uga hadalnay ama u soo bandhignay. Waxa aad si fiican u arki kartaa farqigaas marka aad akhrisato labadii qoraal ee aanu ku soo kala saarnay wargeyskii Xiddigta.

**WDN:** Mar haddii labadiina uu midba dhankiisa kaga adkeysanyo in uu isagu helay qaaciidada Miisaanka

Soomaalida, sidee bay kula tahay in la idinku kala saari karo?

**Gaarriye:** Waxa aan diyaar u ahay in dood naloo qabto, aniga oo weliba jeclaan lahaa in doodaas naloo qabto horraanta bisha oktoobar, idaacahadahana toos looga sii daayo sida BBCda. Xilligaas oo aan anigu ku suganahay London oo aan kaga qeybgelayo tartan gabayada ah oo caalami ah, mar haddii ay isaga Afriki ku fog tahay.

**WDN:** Maxay tahay Faa'iidada ay qaacidada Miisaanka maansadu ku soo kordhisay barashada suugaanta Soomaalida?

**Gaarriye:** Waxa ay kuu sahlaysaa in aad fahamtid qaabka ay maansada Soomaalidu u dhisantahay, iyo sababta ay dhegtaadu u diido markay maqasho beyd jaban. Iyada oo faahfaahsanna waxa aad kaga bogan kartaan qoraalada aan idiin soo gudbiyey (**Miisaanka Jiiftada; Miisaanka Maansada**).

**WDN:** Dad badan markay akhriyaan qoraalkii aad arrintan kaga hadlaysay ee aad Xiddigta Oktoobar ku soo qortay sannadkii 1976, waxay u qaateen in laga baran karo sida loo gabyo, qofkii qaacidaada bartaana uu gabyaa noqon karo. Ma sidaas baa Abwaan Gaarriye?

**Gaarriye:** Maya, shardi ma aha in laga baran karo. Berrigaase waxaan qabay in gabyaa la noqon karo marka la barto.

**WDN:** Xilligii aad arrintan soo bandhigtay ka dib ma jireen baadhitaano kale oo ku taxaluqa Miisaanka Maansada oo aad samaysay mise intaasayba ku dhammayd oo wax ka dhimanba ma jirin?

**Gaarriye:** Haa, way jiraan. Waxa aan bulshada u hayaa waxyaabo badan oo cusub oo layaab leh (surprises). Kuwaas oo aan ku soo bandhigi doono doodaas

(kulankaas), mana doonayo inaan kasii hordhaco oo si kale looga faa'iideysto

**WDN:** Waxaad tahay Abwaan si aad ah ugu caan baxay curinta maansada siiba gabayada. Miisaanka Maansada ka sakow ma jiraan qoraallo iyo cilmi baadhis kale oo aad ku samaysay Afka iyo Suugaanta Soomaalida?

**Gaarriye:** Haa, suugaanta ayaan ku sameeyey oo waa tan aan imikaba jaamacadaha ka dhigo.

**WDN:** Dad badan marka ay maqlaan Gaarriye waa macallin dhiga Bayoolajiga aad bay ula yaabaan, maadaama aad tahay suugaanyahan. Maxaad cilmiga Bayoolajiga ku dooratay waa laba maaddo oo aad u kala foge?

**Gaarriye:** Bayoolajigu waa maaddo aan xiiseeyo, suugaantuna waa qayb noloshayda ka mid ah. Waxa aan isleeyahay qaacidooyinka suugaanta ee aan helay sayniskaaba iga caawiyey. Qaanuun diidayaa ma jiro in qofku isaga oo gabyaa ah uu haddana Sayniska barto.

**WDN:** Waxaa jira hal abuurayaal Soomaaliyeed oo da' yar oo hadda dardartoda qaba. Maxaad kula talin lahayd abwaanda da'da yar ee xilligan?

**Gaarriye:** Horta suugaanta cidi gaar uma laha oo waa wax Soomaali oo dhan dhex u ah. Waxa habboon in dhallinyarada cusub aad loogu dhiiri geliyo lagana ilaaliyo qabyaaladda. Anigu shakhsi ahaan aad ayaan u jecelahay in aan wixii aqoonteyda ah aan ugu kordhiyo, waayo waa iyaga kuwa mustaqbalka nagala wareegi doonaa.

**WDN**: Ugu dambeystii maxay tahay farriinta aad gaadhsiinayso dadka Soomaaliyeed ee Suugaanta xiiiseeya?

**Gaarriye:** Waxa aan leeyahay Soomaalida oo dhan, arrinta hadda soo baxday ee muranka misaanka, waxa habboon in aan arrinka la qabyaaladeyn ee la isbarbardhigo uun qoraaladeydii iyo kuwa carraale. Waxa wareysigiisii ka muuqdey in uu lahaa Gaarriye qoraaladii uu 76kii soo bandhigey waxay ahaayeen sir uu aniga iga xaday, oo aan fikradana ka maqlay Faarax Askari oo ay Marka wada joogeen. Laakiin waxa isweydiin leh qoraaladii aan anigu ku soo bandhigi jirey Xiddigta Oktoobar iyo kuwiisu ma isku midbaa? Qofna cilmibaadhis aanu ku hawshoon inta uu maqlo uun sida waxyiga uguma soo degto oo khabiir iskama noqdo. Tusaale ahaan Gaarriye oo aan weligii garoon is dhex taagin haddii la yidhaa Goolkii adduunka ugu quruxda badnaa ayuu dhaliyay, waxaa la isweydiinayaa xagguu kubadda ku bartay, goormuuse ciyaari jiray? Waa wax aan caqligal ahayn.

Bulshada waxa aan u sheegayaa in horraanta bisha Oktoobar aan London imanayo si aan uga qeybgalo tartan gabayo lagu soo bandhigayo oo caalami ah, anna aan ku jiro. Waxa aan diyaar u ahay in aan wakhtigaas kulanno si aanu uga wada doodno arrintan aniga iyo Prof. Carraale, iyada oo aan weliba jeclaan lahaa in BBC-da toos looga sii daayo dooddaas.

**WDN:** Aad baad u mahadsan tahay Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye)

**Gaarriye:** Idinkaa mudan

Carraale oo ka falcelinaya waraysigii Gaarriye ayaa waraysigan soo socda siiyey wardheernews

## 2.21. Wareysi Bare Sare Carraale: Waa kuma Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed?

Oct 25, 2008, www.wardheernews.com



*"Gaarriye isaga uun baa meelahaa ka yidhaahda, qaar baa waxaygii igu haysta. Maansada iyo miisaankeeda-ba in uu isagu leeyahay ha caddaysto. Sida dukaama-daa is xiga, midba wax gooni ah u iibiyo ayaa Miisaankana qofba dhinac ka geli karaa. Yaa ugu horreeyey ee Miisaanka daah-furay marka ay noqotana waa hubaal in uu Carraale yahay, maragna weliba aan soo tubi karo. Intoodaba anaa u horseed ah. Haddii uu wax cajaa'ib ah"surprise" hayana, waxa aan hayaa mucjiso "miracle."*

Bare Sare Carraale

Ka dib markii ay dhawaan WardheerNews soo daabacday wareysi khaas ah oo ay la yeelatay Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac(Gaarriye), uuna ku soo bandhigay aragtidiisa arrinta muranka daahfuridda Miisaanka Maansada Soomaaliyeed ee isaga iyo Bare Sare Cabdilaahi Diiriye Guuleed(Carraale) ka dhex aloosan, ayuu Prof. Carraale la soo xidhiidhay WardheerNews si uu wax uga yidhaahdo arrimihii uu Abwaan Gaarriye ku sheegay Wareysigiisa.

Haddaba WardheerNews iyadoo ka faa'idaysanaysa fursaddaas qaaliga ah ayaa waxaa u suurto gashay in ay mar labaad aqoonyahanka ka wareysato arrinta muranka cidda daahfurtay Miisaanka Maansada Soomaaliyeed iyo fikirkiisa ku aaddan waxyaabihii uu Abwaan Gaarriye kaga hadlay wareysigiisa.

Bare Sare Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale) waxa uu wareysigan si aad ah ugu faahfaahiyay waxyaabaha caddaynaya in uu isagu yahay aqoonyahankii ugu horeeyay ee daahfuray Missaanka Maansada Soomaaliyeed.

Prof. Carraale ayaa arrintan inta badan u cuskanaya buugggiisa Gorfaynta gabayga oo uu sheegay in uu dhammaystiray sannadkii 1975kii.

"Kolkii aan Miisaanka gabayga helay, Bare Cumar X. Aadan Cilmi tixda boogaadinta ah (forward) ee ku taariikhaysan 1975kii ayuu ii tiriyey, ka dib markii aan dhammeeyey "Gorfaynta Gabayga." Isaga oo igu tilmaamaya in sida naakhuuduhu doonta u hoggaamiyo anna aan maansada u hago. Illayn beenaale markhaati-giisuu fogeeyaa bay Soomaalidu ku maahmaahdaaye, eega bogga 47 ee "Gorfaynta Gabayga": ayuu yidhi Bare Sare Carraale.

Waxaa kaloo uu wareysigan ku xusay aqoonyahanku in qoraalada ay ka tageen Prof. Andrejewiski iyo Alle naxariistiisa janno ha siiyee Muuse Galaal aanay si gaar ah ugu magacaabin Abwaan Gaarriye, hase yeeshee ay meelo badan ku xuseen kaalintiisa Carraale ahaan.

Prof. Carraale waxaa kaloo uu wareysigan kaga hadlay doodda abwaan Gaarriye ee ah waxa uu Carraale jawaab uga bixn waayay amaba uga hadli waayay xilligii uu qoraaladiisa ku soo bandhigayay wargeyskii Xiddigta. Prof. Carraale waxa uu isna ku doodday in hawshiisii

Gorfaynta gabaygu ay horeysay ee muxuu Abwaan Gaarriye uga hadli waayay.

Haddaba Bare Sare Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale) oo arrimahaas iyo kuwo kale oo badan kaga hadlaya wareysigan ayaa waxa uu u dhacay sidan:

**WardheerNews**: Bare Sare Carraale waad ku mahad-santahay fursadda aad WardheerNews mar labaad u siisay in ay wareysi kula yeelato. Wareysigan waxaan ku salayn doonaa weydiimo raadraacaya wareysigii Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye ) aanu dhawaan la yeelanay.

**Carraale**: Idinkaa mudan

**WDN**: Bare Sare Carraale, Miisaanka Maansada Soomaaliyeed qofkii hor helay sugitaankeedu dood dheer ayuu dhaliyey. Maxaad ku qancin kartaa qofka, isagu u janjeera xagga abwaan Gaarriye, doodna ka keena inaad adigu tahay aqoonyahankii ugu horreeyay ee daahfuray, soona bandhigay Miisanka Maansada?

**Carraale**: Waxa aan ku qancinayaa: Kow, in ay qoraaladayada dhugtaan, una fiirsadaan mucda ay kala xanbaarsan yihiin labada hawlood. Laba, in ay u dhabbo-galaan amminta hawlahan. Saddex, in kolkii aan Miisaanka gabayga helay, Bare Cumar X. Aadan Cilmi tixda boogaadinta ah(forward) ee ku taariikhaysan 1975kii ii tiriyey, ka dib markii aan dhammeeyey "Gorfaynta Gabayga." Isaga oo igu tilmaamaya in sida naakhuuduhu doonta u hoggaamiyo anna aan maansada u hago. Illayn beenaale markhaatigiisuu fogeeyaa bay

Naakhuude doonidu nin raga, way u nugusheeye
……………………………, ………………….
Sc Maansaduna yay noqon mid aan, cidi naruuranin. e

Marka 1975

"Gorfaynta Gabayga":

Taariikhdaa ah "Marka 1975" ee bogga 47 ee gabayga Bare Cumar ayaa marag fureysa in hawsha buuggani ka horreysay xilliga Gaarriye ku dhegan yahay ee ah "January 17, 1976" ee uu maqaalada Xiddigta Oktoobar ku bilaabay. Gaarriye kii u dambeeyey maqaaladaa wuxuu qoray "29/05/1976", anniga kuwaygu shan bilood ma socon ee hal mar ayaa lagu wada daabacay buuggii "Gorfaynta Gabayga". Gaarriye qoraaladiisa Xiddigta, isagoo aan meel ku hubsan oon gebagebeyn ayuu hal mar joojiyey, anniga waxaan ku gebagebeeyey xilligaa:

"FIIRO GAAR AHAANEED"

Heerkii saddexaad (Hormaynta Alammada) waxa uu ku jiraa qaybta labaad ee hawshan(Miisaanka Maansada)." Arrag bogga 51 ee "Gorfaynta Gabayga". Labada qoraal ee buuggayga "Gofaynta Gabayga" iyo maqaalada Xiddigta Oktoobar ee Gaarriye waa la kala garan karaa siday u kala nidaamsan yihiin oo u soo kala hor mareen.

**WDN**: Abwaan Gaarriye wareysigii aan la yeelanay wuxuu isbarbardhigay qoraalkiisa Janaweri 1976 iyo kaagii 1978 ee Xiddiga Oktoobar ku soo wada baxay. Maadaama uu isagu Xiddigta Oktoobar ku soo hor daabacay wuxu taa caddayn iyo marag uga dhigtay inuu yahay ruuxii u horeeyey oo qoraal ku soo bandhiga Miisaanka Maansada. Waxaa jirtay in aad dhawaan WardheerNews u soo gudbisay buuggaagii "Gorfaynta Gabayga" ee la daabacay 1976. Ma jiraan wax muujinaya taariikhda buugga iyo hawshiisu iney ka horeysay 1976? Faahfaahin dheeraada ma ka bixi kirtaa hannaanka buugga lagu daabacay iyo hawshii gashay?

**Carraale**: Haa, way jiraan wax caddaynaya in qoraal-kaygu horreeyey. Kow, waa tixda aan kor ku xusay ee Bare Cumar ugu deeqay "Gorfaynta Gabayga" ee taariikhda "Marka 1975" sugaysa. Laba, inta buug dhan

oo dhadhan iyo dhumuc kala qeexan leh lagu qori karo iyo inta maqaalo shan bilood socday jariidad lagu qoray waa marag. Saddex, hannaanka lagu daabacay dhib badan buu lahaa, waayo xilligaa sida loo helo "type-writer" ama qof kaa taageeri kara hawl badan iyo muddo isla baadi-doon bay qaadan jirtey, mana fududayn si laysula helaa. Afar, hawshii gashay "Gorfaynta Gabayga" maskax, maal, muruq iyo muddo ay qaadatayba way isugu jirtey.

**WDN**: Waxaa jirtay in aad dhowr qof oo aad ku tilmaantay in ay hawshaada ka war hayeen aad wareysigii hore ku magcawday. Ma jiraan ilaa iyo hadda dadkaa la socday hawshaada wax ka faallooday Miisaanka Maansada oo kuu marag furay? Mar-khaatiyada abwaan Gaarriye magcaabay, Andrzejewski, Muuse Galaal iyo Saalax Jaamac maxaad ka odhanaysaa?

**Carraale**: Haa, maragga aan cuskaday qaar ka mid ihi way qireen in aan anigu ugu horreeyey qof hela sirta maansadu ku salaysan tahay. Waxay qirayaan oo kale in aan ahay qofkii u horreeyey oo qoraal buug dhamaystiran ka kooban ku soo bandhiga Miisaanka Maansada. Waxa ugu horreysa <u>Fadumo Axmed Caalim</u> (Fadumo-ureji), oo xilligaa ahayd guddoomiye-ku-xigeenka qaybta dhaqaalaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (JUS). Fadumo-ureji ayaa u xil-saarrayd guddi u xulka iyo qiimaynta qoraalada/buuggaagta JUS iibsaneyso. Maraggii ay ii furtay oo codkeedii ah waxaa laga maqli karaa mareegaha/ websites-ka Soomaaliyeed badankooda. Waa madax meel ka sarraysa oo la taabtaa ma jirto. Waxa weheliya kuwo kale oo waraysigii hore aanan maga-caabin, illayn hadalka waan gaabinayaye. Iyana inta ay soo mudh-baxeen ayay ii marag-fureen. Qoraaladoodii mareegaha iyana way ku jiraan iyo qaar kaloo badan oo jidka ku soo jira.

Ta kale, Dr. Goosh iyo M. X. I. Galaal (Alle ha u naxariistee) dhiirri-gelintoodu marag ma noqon kartaa?

Qoraallada ay ka tageense wax isaga gaar ahaan hawsha ugu magacaabani ma ku jiraan? Waxa cad in Dr. Goosh hadduu Gaarriye la ogaa inuu yahay qofka Miisaanka helay uu ku tilmaami lahaa qoraaladiisa. Dr. B. W. Andrzejewski(Goosh) qoraalkiisii "INFILLS: NOUNS AND VERBS WITHOUT LEXICAL MEANINGS IN SOMALI ORAL POETRY" ee ku soo baxay African Languages and Cultures, Vol. 1, No1. (1988), pp.1-14 wuxuu si cad u qorayaa:

*"The demanding rules of alliteration are combined with those of quantitative scansion, which has a variety of metres allocated to each poetic genre (11). In each metre there is a fixed number of morae, i.e. time units of syllabic length, with a short syllable counting as one mora and a long one as two".*

Dr. Andrzejewksi wuxu akhristaha u tilmaamayaa qoraalkaygii 1980[(11)-Detailed accounts of the Somali system of scansion can be found in Abdillahi Deria Guled (1980) ].

Magcaabid la'aantaasi waa marag in Gaarriye sheegashadiisa ah Andrzejewksi ayaa i ogaa meesha ka ka baxayso. Andrzejewksi aniguu ii marag furayaa oo qoraaladayda xusayaa. Dr Andrzejewski meel uu Gaarriye keli ugu magacabay ma la hayaa? "In other words, Dr Goosh attributed the prevailing work to Guled and attenuated or rather discarded Gaarriye's present claims."

Fadlan akhriya "SOMALIA IN WORD AND IMAGE" oo Carraale keli ah loogu qiray hawshan. Waxa kale oo aad akhridaan: African Languages´and Cultures 10, 1 (1997): 83-100 AN APPROACH TO RELATIONSHIPS BETWEEN SOMALI METRE TYPES, by Martin Orwin and Maxamed Abdullaahi Riiraash oo leh: "The study of Somali metrics was revolutionized in the md-1970s with the publication, in the Somali national newspaper Xiddigta Oktoobar,

October Star, of a number of seminal articles by the two Somali scholars and poets Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' (referred to in this article as Gaarriye, except for bibliographical reference) and Cabdillaahi Diiriye Guuleed , who made the long-awaited breakthrough in Somali metrical studies, apparently independently."

Dadkii uu lahaa anaa u sharrixi jirey, miyay wada god-galeen? Saddexdii "lot" ama class ee Lafole xilligaa ku wada jirey, anigu qaar magacaabaye, muxuu isna qaar u sheegan la'yahay?

**WDN**: Barre Sare Carraale, maadaama kani yahay wareysigii labaad ee arrinta la xidhiidhay oo Gaarriye isna mid bixiyey. Hannaan iyo hab noocee ah ayaad rabtaa in adiga iyo Abwaan Gaarriye arrintiina lagu kala saaro? Sida Gaarriye sheegay ma kula tahay in warbaahinta arrintan oo kale door uga bannaan yahay?

**Carraale**: Ugu horrayn, waa in la is weyddiiyaa: b. yaa is haya? t. maxaa la isku hayaa? j. yaa arrinka la isku hayo ka garsoori kara?

Waxa uu afkiisa ka qiray in labadayada hawlood kala duwan yihiin. Haddaba aniga marnaba la igama maqal in aan Riiraash, Johnson iyo isaga midnaba haysto e, ha sheego waxa uu igu haysto. Intayaduba Miisaankaan wax ka qornay. Isaga uun baa meelahaa ka yidhaahda, qaar baa waxaygii igu haysta. Maansada iyo miisaankeedaba in uu isagu leeyahay ha caddaysto. Sida dukaamadaa is xiga, midba wax gooni ah u iibiyo ayaa Miisaankana qofba dhinac ka geli karaa. Yaa ugu horreeyey ee Miisaanka daah-furay marka ay noqotana waa hubaal in uu Carraale yahay, maragna weliba aan soo tubi karo. Intoodaba anaa u horseed ah. Haddii uu wax cajaa'ib ah"surprise" hayana, waxa aan hayaa mucjiso "miracle."

Qof waliba waxa uu bulshada ku soo kordhiyey ha u soo ban-dhigo, dadka ayaa kala doorashada lehe, yaan dadka

maskaxda laga caayin(insulting intelligence) oo qofna ku naaloonin in ummad la wada khiyaamayn karo.

Haddii aan u imaaddo, weyddiinta ah yaa ka gar-niqi kara, sida aan qodobada, b, t, iyo j ku xusay kol haddii arrinku shaad iyo koodh kala yihiin, illayn waa laba feedho-gale maxaa muranba keenay? Haddii laga tagi waayana, ma jaamacadda ayaa shahaadadda aqoonsi bixisa mise jariidad? Aniga oo aan weriyeyaasha iyo mareegahatoona wax u dhimayn, waxa aan qabaa hawshan in ay iska leeyihiin jaamacadaha qaybta suugaantu. Waa dadka ku foogan ("literature and literary ciritiques"). Afkeena waa maanso-dhaadhi. Waxa meesha yaalla, haddiiba la isku haysto ma aha gabay, gabayaa ama maanso ee waa gabayaanimo("i.e not a poem, poet or poetry per se, but it's rather a matter of poetics.") Haddaba gabayaanimadu waa hab-dhismeedka bahaha maansada oo dhan e, yaa hawshaa barasho gaar ahaaneed u leh?

**WDN**: Maxaad ka odhanaysaa dooda Abwaan Gaarriye oo ah inaadan wax jawaab ah ka bixin qoraaladiisii Xiddigta Oktoobar ee 1976. Ma jiraan meel aad ku soo bandhigtay Miisaanka Maansada xilliyadaa oo aan ahayn Xiddigta Oktoobar? Gaarriye sidee arrimahaa u arkayey xilligaa?

**Carraale**: Waxa aan doodaa ka leeyahay, hawshaydaa horreysaye(Gorfaynta Gabayga), muxuu isagu wax uga odhan waayey? Markii aan 1978 Xiddígta Oktoobar Khamiis walba maqaallada aad aragteen ku soo qori jirey, isna maqaallo aan Miisaankaba la xidhiidhin buu marmar isla maalintaa ku qori jiray. Annigu, sidaan hore u sheegay, xilligaa uu Xiddigta wax ku soo qori jirey magaalada Marka ayaan joogey, macallinna ka ahaa. Kolka isagu xilliga aan anigu wax ku soo qorayey isla Xiddigta waxa aanu wada joogney Xamar. Doodda uu ammintan soo aloogayo, maxaa berigaa ka hor-joogey?

Ta labaad, kolkii ay gole-ka-fuulka ahayd ee 1979 & 1980 qofkii cilmi-baadhis sameeyey ku soo ban-dhigay Hotel Jubba & Curuuba wuu fadhiyey, dhegeyste ayuuna ahaaye, muxuu wax ula soo bixi waayey ama Carraale oo labada shirba waraaqo ka akhriyey wax uga odhan waayey? Fadlan eega: "SOMALIA and the WORLD: Proceedings of the International Symposium, held in Mogadishu, October 15-21, 1979 Compiled and Edited by Dr. Hussein M. Adam," p. 132 "The Scansion of Somali Poetry, by: A. D. Guled of the Somali National University. Also cite those who said, "Their papers are not yet complete," which was a lame excuse and lack of authentic credentials.

**WDN**: Bare Sare Carraale, nooga waran sida uu u badbaaday buuga "Gorfeynta Gabayga" maadaama hal nuskhad oo keliyii jirtay oo aan la badin? Ma jiraan cid aad halkan uga è□□□d celinayso oo dhawray buugaa?

**Carraale**: "Gorfaynta Gabayga" oo xabbad qudh ihi ifkaba u soo baxday, waxa ay gacantayda ka baxday kolkii Jaamacadda Ummada Soomaaliyeed iga iibsatey. "Gorfaynta Gabayga" oo xabbad qudh ihi, waxase ay mar labaad igu soo noqotay 10.10.08 oo Deeq Diiriye, oo aan mahad aan la koobin karo u celinayo, dib iigu soo diray. Waxa arrinkaa sabab u noqday Siciid M. M. Shire oo isaga oo muddo la socdey, ogaana in midhkii kelida ahaa ee adduunka jirey uu hayo Deeq Diiriye. Deeq Diiriye oo muddo dheer xannaaneeyey iyo Siciid oo isna raacdo iyo xidhiidh dheer ka dib ii soo sheegay halka uu ku sugan yahay qoraalkii xilliga 32 sannadood ku siman iga maqnaa abaalkooda maba gudi karo. Mahad-naq af laga sheego arrinku waa ka badan yahay, waayo waax iga maqnayd bay ii kaabeen. Labaduba xil-gudashada aqoon daryeel ay mudan yihiin, anna mahad ballaadhan oo xusuus reebto ah bay iga kasbadeen. Mid walba waxa aan ku odhanayaa: "Igu lihid."

**WDN**: Aad baad u mahadsantahay Bare Sare Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale)

**Carraale**: Idinkaa mudan

Waxa waraysigaa ka soo falceliyey Mustafe Guuleed Ismaaciil oo doodda la socday. Waxaanu yidhi:

## 2.21. Miisaanka Maansada: "Carraale iyo Gaarriye maxay caddaymo haystaan?

Posted in October 30th, 2008
by www.qoraaga.com
Mustafe Guuleed Ismaaciil
Hargeysa

In qodob kasta oo madmadaw soo galo la lafo-guro oo guntiisa loo daadagaa waxay muujinaysaa ilbaxnimo iyo bisayl aqooneed. Laakiin lafo-gurku wuxu qiime yeelan karaa oo kaliya haddii aynu ka tanaasulo arrimo badan oo Soomaalida dhiiggooda raacay sida caadifad, qof-jeclaysi iyo hubsiimo-la'aan. In kastoo ay innagu adag tahay, bal aynu intii karaankeenna ah isku dayno in aynu degganaansho iyo caqli miisaaman ugu fiirsano hadba wixii dood horteena la keeno.

Doodda Miisaanka Maansada silsilladda qormooyin-keeda inta badan waan akhriyey. Waraysi labaad oo ay Carraale ka qaadday Wardheernews iyo doodda Gaarriye halka ay ku arooraysona waan akhriyey. Waxay u muuqataa labada ninba in ay qirayaan in wax-soo-

saarkoodu kala duwan yahay. Taasi waxay ka dhigan tahay labada nin Miisaanka iskuma haystaan ee waxay isku hayaan anigaa horreeyey iyo ANIGA. Marka laga hadlayo hanti maskaxeed “intellectual property” waa qodob muhiim ah doodda ku saabsan “yaa horreeyey”, laakiin buunbuunin iyo ka badbadin uma qalanto. Waa aragtidayda.

**Maxaa caddeymo ina hor yaal?**

Carraale wuxu caddeyn u haystaa buug aan madbacad ka soo bixin oo uu isagu teeb ku garaacay laguna magacaabo “Gorfaynta Gabayga”, wuxuna markhaati u haystaa gabadh Jaamacaddii Ummadda Soomaaliyeed u shaqayn jirtay iyo niman kale oo akhyaar ah. Gaarriye-na wuxu caddeyn u haystaa maqaalladii uu ku daabacay Xiddigtii October 1976kii. Wuxu intaa inoo raaciyey in aan la soo heli karin cid kale oo hortii Miisaanka Maansada ku daabacday meel la isla yaqaan .

Haddaba, aniga shakhsiyan caddeynta Gaarriye ayaa ila macquulsan. Waayo Xiddigtii October inuu Gaarriye ku daabacay wakhtigaas iyo in kale si fudud baa loo xaqiijin karaa. Laakiin Carraale weli kama hayno caddeyn niyadda inoo qaboojisa. Buug aan madbacad ka soo bixin, gari Alley taqaanaaye, wakhtigii la daabacay xaqiijintiisu way adkaanaysaa. Shakhsiyaadka kale ee Carraale xusayna (kuwaas oo aan iyaga weli wax sanqadh ah laga maqal) maadaama mujtamac badan oo Soomaaliyeed aanay aqoon u lahayn sida ay looga-qaateen u yihiin, way adkaanaysaa in la rumeysto. Malaha waxa lagu rumaysan karaa uun iyadoo meel fagaare ah lagu dhaariyo.

**Dr. Martin Orwin iyo Boobe maxay ka yidhaahdeen murankan?**

Waxan goob-joog u ahaa su'aalo meel fagaare ah oo Hargeysa ah labadan nin lagu waydiiyey. Dr. Martin Orwin (waa nin Ingiriis ah oo takhasus ku sameeyey suugaanta Soomaalida isla markaana af-Soomaaliga Jaamacadda SOAS ka dhiga) oo ka hadlayey munaasibad isaga iyo Abwaan Axmed Aw Geedi Hargeysa loogu qabtay January 2008 wuxu yidhi:

> *"Miisaanka Maansada waxan u arkaa in aanay cid gaar ahi lahayn ee uu yahay hanti ummadda af-Soomaaliga ku hadashaa iska leedahay. Rag badan baa wax ka qoray oo ka qayb-qaatay daah-furkiisa. Haddii su'aashu tahay yaa u horreeyey, anigu markaan wixii laga qoray oo dhan dib u eegay, intaan arkay qoraalkii u horreeyey ee Miisaanka ku saabsan ee madbacad ka soo baxaa wuxu ahaa kii Gaarriye".*

Boobe Yuusuf Ducaale oo lagu tiriyo dadka ugu xogogaalsan ayaa isaguna 19kii Ramadaan munaasibad ay koox dhallinyaro ah oo lagu magacaabo Hargeysa Readers Club qabteen lagu waydiiyey isla su'aashan wuxuna yidhi:

> *"Anigu miisaankii ugu horreeyey ee la daabaco ee aan arkay wuxu ahaa kii Gaarriye ku daabacay xiddigta October. Taasi waa wixii daabacan. Laakiin sida ay u kala hor heleen, dee taa Illaahay uun baa garan kara. Innagu wixii bani'aadamka quluubtooda ku jira kama warrano, waxaynu ka warranaa uun wixii ay innala wadaagaan".*

Nuxurka hadalka labadan aqoonyahan wuxu xoojinayaa doodda Gaarriye.

Gunaanadkii, doodda miisaanku maaha wax la isku luro mar haddii waxa la isku haystaaba aanay Miisaanka ahayn ee ay tahay ANIGA…!
Wa billaahi tawfiiq,

Waxa isna qoraal soo daruuray waraysigaana ka soo falceliyey Sayid Maxamed Yuusuf 'Dhegey' oo doodda la socday. Waxaanu yidhi:

## 2.23. Miisaanka Maansada: Carraale iyo Gaarriye " Dadweynuhu caddayn bay rabaan aan ciiro saarnayn"

Allow eex ma tiraabine aqoon haygu cadaabin.

Sayid Maxamed Yuusuf (Dhegey), Sweden,
www.qoraaga.com & www.redsea-online.com

Muddo haatan laga joogo dhawr sannadood ayuu soo shaacbaxday muranka ku saabsan Miisaanka Maansada Soomaaliyeed. Muranka waxa soo if-saaray, markii uu Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) booqashada ku yimi dalka Ingiriiska 2005-tii. Beryahaas ayaa dad badani indhaha ku dhifteen, qoraallo cinwaankoodu ahaa "Gaarriye waa Khaliilkii Soomaalida" oo lagu sii ladhay in uu Gaarriye yahay Aabaha "Miisaanka Maansada Soomaaliyeed". Qoraaladaa waxa ka dhashay qoraalo la odhan karo waxa ay ku baraarugeen muranka ka dhexjira labadaa macallin ee Carraale iyo Gaarriye. Waayo waxa jira buug uu qoray Carraale oo si faahfaahsan u tilmaamaya in uu isagu yahay ninka helay Miisaanka Maansada. Inkastoo aan aad ula socday qoraaladaas, balse ma doonayo in aan dib ugu noqdo aragtiyihii kala geddisnaa. Waxa aanse waxyar ka soo qaadan doonaa labo ka mid ah qoraaladaas oo aan u arko in ay muhiim

ahaayeen. Inta aanaan gelin qoraalka mucdiisa, waxa aan dul-kaxaadsan doonaa qoraaladaa hore wixii innooga bidhaamay.

Dadku inay kala aragti duwanaadaan, maaha wax lala yaabo. Sidaa awgeed qoraaladaa hore isku dhan wax kama ay arkayn, ee way ku kala tagganaayeen. Waxaase loo kala qaybin karaa. 1) Qayb xogogaal ahayd, aanse badnayn. 2) Qayb u egayd keeb-la yuurur difaac galay oo dhinac garabka saaray. 4) Qayb ay ka muuqatay in ay jecelyihiin in muranka la soo afjaro oo la is horkeeno labada macallin. Intaa dabadeed, waxa ay soomaalidu tidhaahdaa "Anigaa hadhay looma hadlo, ee wixii dhiman baa laga hadlaa" Waxa aan uga jeedaa, intii horeba kamaan qayb gelin qoraaladaa hore. Dhawr sababood awgood. Waa ta koobaade, xogogaal uma aan ahayn mawduuca lagu muransanyahay. Waa ta labaade, waxa aan u arkayey aragtidayda oo aan soo bandhigaa oo aan weliba garab taageeraa in aanay macno badan samaynayn, ee ay u ekaanaysay in aan dhaqankeennii fiicnaa ee geel-qaadnimada ku salaysnaa uun daba joogo. Taasoo, haddii aan aragatidayda sheego, kollayba lagu gufayn lahaa meel la yaqaan oo aan laga anbanayn, fikraddaydu ha saxsanaato ama ha khladanaato'e.

Intaasi, afeef, araar iyo hordhac ha iga ahaato. Waxa aan tusaale u soo qaadandoonaa weedho ka mid ahaa qoraalkii Abwaanka da'da yar ee Maxamed Xirsi Guuleed. Waxa uu Maxamed cinwaan uga dhigay qoraalkiisa "Soo garbax ama garawso" oo uu uga jeeday ama uu ku sii macneeyey in xeerka soomaaligu inna farayo in garta laba loo kala qaado oo kala ah " Mudduci iyo Muddaacale". Waxa uu Maxamed yidhi: "Muddicigu waxa uu noqonayaa Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye), Muddaacaluhuna waxa uu noqonayaa Cabdilaahi Diiriye Guuleed (Carraale). Waxa aan qodobkaa u soo qaatay, soo afjaridda murankani halka uu ka dhow yahay ayaa halkaas ah. Nasiib wanaag Mudducigiina wuu joogaa Muddaacalihiina wuu joogaa.

Sidaa awgeed waa ay fududahay, haddii aan wax kale ku hoos jirin. Anigoo ku soo noqon doona sida ugu fudud ee loo soo afjari karo Muranka Miisaanka aan inyar ka idhaahdo qoraalkii qoraaga caanka ah Cabdiraxmaan Cabdilaahi "Guribarwaaqo" oo runtii soo bandhigay qoraal indho badan soo jiitey.

Qoraalka aan jecelahay in aan waxyar ka idhaahdo waxa weeye kii ugu horreeyey ee uu Cabdiraxmaan soo gudbiyey. Qoraalkaas waxa ku jiray dheegag aan tuugna xadi karin. Waxa uu qoraagu horteenna soo dhigay "Xiddigtii Oktoober" 1976kii. Maadaama wax kastaaba burbureen in qoraalkan oo kale la helaa 100% ma aan filayn. Waxa taa ka sii daran sida aanay dadkeenu ugu baraarugsanayn qiimaha qoraalka, ha ahaado wargeys ama buug'e. Waxa indhuhu i soo baxeen, markaan arkay maqaalkii ugu horreeyey ee uu Gaarriye (Isaga laftigiisu) uu hadlayo oo uu inoo sheegayo mucjiso uu helay. Waxa taa sii raacsan dheegag kale oo loogu jawaabay, cidda u jawaabaysaa waa mas'uuliyiintii hawshaas diiwaangelin lahayd, balse markaa u arkayey in aanay mudnayn in la diiwaangeliyo oo la isku hawloba. Halkaa waxa innooga muuqata in aanay jirin wax ka horreeyey qoraalkaas. Waa sida caqligu inna siinayo. Waa sababta innagu hoggaaminaysa in aynu ogaanno wixii ka horreeyey. Waa ta aynu u sii xiisaynay mawduucan. Halkaa Cabdiraxmaan kagama hadhin ee waxa uu horteenna soo dhigay isla Wargeyskii oo 1978kii waa laba sannadood ka dib'e uu Macallin Carraalena ku soo bandhigay Aragtidiisa Miisaanka Maansada. Xiddigta Oktoobar kuma aynu arag muran ku saabsan Miisaanka Maansada ee waxa aynu ilaa hadda aragnaa labada macallinba in ay ku soo qoreen Wargeyskaas, oo aan muran lahayn.

Maxaa haddaba muranka keenay? Waxa aan odhan karaa, waxa aan jirin hay'adihii lagu kala baxayey. Adduunka waa ay ka dhacdaa in fikrado la isku qabsado ama lahaansho kale la isku qabsado. Waxaase jira hay'ado u xilsaaran. Hay'adahaasi ma eegaan qofkii hor helay

fikirkaas ama laahaanshihiisa uu leeyahay waxaas uu rabo in loo diiwaangeliyo, waxa la eegaa qofka soo hor-diiwaangeliyey. Maanta innagu halka aynu diiradda saaraynaa waa Kuma ayaa soo hordhigay dadka? Marka aynu leenahay Xiddigta Oktoobar ayaa lagu soo qoray, waxa aynu u jeednaa waa si caam ah ayaa qoraalkaasi u gaadhay dadka. Halkaa marka aan marayo, waxa aan tusaale u soo qaadan karaa, in ay jiri karaan dad kale oo mar hore helay Miisaanka Maansada. Balse waxa aynaan isugu hawlayn, mar haddii aanay dadka soo gaadhsiinin waxa ay ka dhignaanaysaa in aanay diiwaangelin. Sidaa awgeed baynu diiradda u saaraynaa labadan macallin ee ku muransan Miisaanka Maansada. Sidii aan markii horeba ka afeeftay ma doonayo in aan qoraaladii laga qoray mawduucan ku noqdo, waayo inbadani waxa qoraaladoodu ay ahaayeen aniga aragtidayda, qaar aan waxba ku soo kordhin murankii jiray, ee si qalqallooc badan ugu dhexdhacay murankii jirey.

Si qalqalloocaasi aanuu u sii badan, oo aan sidii geela loo kala dhicijiray aan loo kala qaybsamin waa in "Gari ilaahay bay taqaannaaye" Halkeeda la abbaaraa. Maanta labada aqoonyahan ee muranku ka dhexeeyo "Ogaalkay" way nool yihiin. Waxa taa sii raacda in uu Gaarriye ka caddeeyey madal loo wada dhanyahay oo dad badani dhegeysanayeen, in uu iman doono London bisha Oktobar/2008 oo uu rabo in la kala saaro isaga iyo walaalkii. Haddii aanuu noqon, waxa aan ogaa in Gaarriye uu ku suganyahay London. Haddii aanuu ka tegin waxa igu maqaalo ah in uu Carraalena joogo Dhanmark. Waxa aan odhan lahaa "Afjooga looma adeego" labadiina ayaa la idiinka fadhiyaa sidii aydin isu soo hor-fadhiisan lahaydeen. Waxa aan rajaynayaa in aan war idinku seeganayn sida muranku uga dhexaloosmay dad badan oo suugaanta jecel. Warqaddan furani labadiinaba way gaadhi doontaa si ay ku gaadho ba. Haddii aanaydin diyaar u ahayn, dadka u sheega. Inkastoo hadalkii Gaarriye uu ahaa ama macnihiisu ahaa "Anigu diyaar baan ahay ee soo diyaar garaw" Haddana bal

qoraalkani ha ahaado mid soo dedejiya kulanka labada macallin.

Qoraalkan ma rabo in uu dheerado oo aan dhexgalo waxyaabo farabadan oo iiga muuqday qoraaladii faraha badnaa ee lagaga hadlay muranka Miisaanka. Laakiin waxa aan ku talin lahaa in aan qoraalkeenu noqon mid sii kala kaxeeya labada aqoonyahan ee walaalaha ah. Sidaan hore u tibaaxayna "Anigaa hadhay looma hadlo" Arrinku waxa uu maanta joogaa, in la helo guurtidii gartaas geli lahayd.

Wa billaahi tawfiiq

**Allow eex ma tiraabine aqoon haygu cadaabin.**

Degelka farshaxan.com baa isna waraysi dheer oo dhincyo badan taabanaya la yeeshey Carraale. Waxaanu ku bilaabay:

## 2.24. Miisaanka Maansada iyo Bare Sare Cabdilaahi Diiriye Guuleed "Carraale"

Qalinkii iyo Tifatirkii: Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan
www.farshaxan.com

Muddo badan ayaa waxaa qoraalo badan laga qoray Miisaanka Maansada iyo daahfurkeedii,.Arintan waxaa loo tiriyaa inay daahfur ku sameeyeyeen Labada aqoonyahan ee Cabdilaahi Diiriye Guuleed "Carraale" iyo Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye". Labadan aqoonyahan runtii ummada ku hadasha afka Soomaali-yeed waxay u soo bandhigeen hab fudud oo bulshada ku hageysa inay ilaashadaan habdhaca iyo hab socodka maansada ay ummadaha aduunka kaga suntan yihiin kolkii lagu magacaabey "bulshadii Gabayga". Bahda mareegta farshaxan oo had iyo jeer ku dadaasha inay ilaalinayso una hawl gasho kobcinta iyo dayactirka afkan hodanka ah ayey u suurtogashey inay wareysi dhinacyo badan taabtay la yeelato Cabdilaahi Diiriye Guuleed "Carraale" , waxaanay uga mahadcelinyaan sidii qiimaha iyo sharafta laheyd ee uu ugu hurey waqtigiisii qaaliga ahaa ee suurogaliyey wareysigani.

**Hordhac:**

Gu'ayaalku kala mudanee 1945kii waxaa aduunka ka soo gabagaboobay dagaalkii labad ee aduunka , waxaa si ayaandaro ah naftiisii iyo tii afadiisaba galabsadey Adolf Hitler ,waxaa aduunku isla af gartey in la sameysto

xarunta qaramada midoobay,waxaa gabay aad u caan ah oo hirgalay taariikh badanina ku dheehan tahay tiriyey abwaan Maxamed Cabdi xaashi (IHUN) si xeeldheer ahna uga waramey qadiyadii gumaysigii ingiriiska,waxaa ka mid ahaa maansadaa:

*Qunsulkaa la dhigay ceelka Herer qiil kalaa xigiye*

*Waxba yaanu ii kala qarradhin qoolashaan dego,e*

*Markuu geed qalloocsamaba waan sii qandhanayaaye*

*Qayrkay hadday toban yihiin qodob ma riixeene*

*Qanjo uma lahaadeen halkane qaar ayaa wada,e*

*Qoqobaha dhexdiinaba marbaysugu qudh beeshaane*

*Qoonsada halkaa waxa ku jira qabar laxaad weyne*

Xiligan waxaa dhashay Mujaahid Col. Siciid Cabdilaahi Cigaal (IHUN) oo dhawaan- 23 Bisha February 2008- ku geeriyooday magaalada Vaxjo ee dalka Sweden

Waxay sidoo kale dhalashadiisu ku beegnayd Bare sare Cabdilaahi Diiriye Guuleed –Carraale oo ku dhashay Gaashaamo ee dalka Somaliland,waxaanu ku barbaarey kuna hanoqaadey **Burco.**

Bare sare Cabdilaahi wuxuu dugsigii dhexe iyo hoose ku qaatey magaalada …… xiliyadii 1958kii ilaa 1965kii,halkuu waxabarashadii dugsiga sare ku qaaatey halka iminka loo yaqaan lafoole oo berigaa la odhan jiray NTEC-National Teachers’Education Center- 1965 ilaa 1968kii.

Intaa markay isaga iyo buug kala gaadheen ayuu ku shaqo tagey inuu noqdo bare-macalin- dugsiga sare ee Village arab girsl’s school, hase yeeshee gu’gii 1970[kii] ayuu dib ugu laabtey NTEC oo noqotey markii ugu horeysay

Jaamicadii lafoole, Waxaa ardeydii ay xiligaa wada galeen ka mid ahaa :
-Faarax Abokor kheyre (Faarax Askari)
-Cismaan Aadan Iimaan
-Maxamed Xaashi dhamac (Gaarriye)
-Cabdi Axmed Xuseen (Ina aw hawd)
-Axmed Aadan Axmed

Wareysigiina sidan ayuu u dhacey:

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Cabdilaahi mar-ka hore ku soo dhawoow mareegta farshaxan aadna waanu kuugu mahadnaqaynaa sida aad waqtigaaga qaaliga ah noola wadaagtay?

**Cabdilaahi Diiriye**: Waad mahadsan tahay Fu'aad

**Cabdilaahi Diiriye**: Weydiinta ugu horraysa waraysigan waxa aan kaga warcelinayaa: Waad mahadsan tahay Fu'aad.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Inta aynaan u guda galin nuxurka wareysiga bal taariikh nololeed-kaaga wax nooga taabo?

**Cabdilaahi Diiriye**: Waxa aan 1945 ku dhashay Gaashaamo oo aan isku da' nahay, waa xilligii la degaye.
Dugsiga hoose-dhexe waxa aan ku qaatay Gobolka Togdheer.
Dugsiga sare " " " " National Teacher's Education Center (NTEC)
Jaamacadda kowaad " " " " Colleg of Education-Lafole (BSc)
" labaad " " " " University of California at Los Angels-UCLA(M.A)

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Miisaanka maan-sadu siday kuugu dhalatay inaad wax ka qorto?

**Cabdilaahi Diiriye** :1972 kolkii "The metre of English poetry" na loo dhigayey ayay igu dhalatay in gabayga ama maansada Soomaaliyeedna yeelan karto wax miisaama hab-dhismeedkeeda. Sidaas baan ku bilaabay, kagana jibo keenay.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Arintan markaad wadey cidna ma la wadagtay amase ma u sheegtay inaad wado cilmi baadhistan?

**Cabdilaahi Diiriye** :Maya e hawshan cidna lama wadaagin. Balse barayaashii aanu dugsiga sare ee Marka ka wada dhigeyney waan u sheegay markii aan ku guuleystey helista Miisaanka gabayga ee aan dhammeeyey "Gorfaynta Gabayga." Waana 1975.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): markaad dhameysay yaad u gudbisay?

**Cabdilaahi Diiriye** :Waxaan u gudbiyey Jaamicada Ummada oo iga iibsatey.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Jaamicada umma –da yaa kaa gudoomay buugaagtan Gorfaynta Gabayga iyo Miisaanka Maansada ?

**Cabdilaahi Diiriye**: Faduma Ahmed Alim (Faduma-ureji) oo ahayd guddoomiye-ku-xigeenka qaybta dhaqaalaha ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (JUS) ayaa uga guddoontey. Iyada ayaa loo geyn jirey buug kasta oo jaamacaddu iibsaneyso, una xuli jirtey guddd qiimaysa. Labadayda qoraal iyo qaar kale oo yar baa gaadhey qiimaha ugu sarreeyey oo markaas ahaa 10,000 So. Sh.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Waxaa kaloo arintan wax ka qoray Maxamed Xaashi “Gaarriye” , ma is ogaydeen? Adiguse tiisa ma ogayd? Mase maqashay inuu isagu taada ogaa?

**Cabdilaahi Diiriye**: Markii aan "Gorfeynta Gabay-ga" dhammeeyey ayaa Faarax Abokor Khayre (Faarax-askari) oo intuu Marka nagaga tegey Xamar gaadhey ayaa Gaarriye u sheegay in Carraale buug Miisaanka gabayga ah dhammeeyey. Kolkaas ayuu Gaarriye bilaabay in uu maqaallo ku soo qoro Xiddigta Oktoobar.

**Bahda MareegtaFarshaxan**(BMF): Xidigta Oktoober ayuu Gaarriye ku qoray cilmi baadhistiisa ,meel kastana Xidigtu way gaadhi jirtay, ma heshay taxanaha qoraalkiisu ku soo baxey oo mudo socday (17/01/ 1976 illaa 29/05/1976)?

**Cabdilaahi Diiriye**: Maya. Xilligaas xafiis dawladeed ma hubo e, suuqa Marka Xiddigta Oktoobar ma oollin, lagamana heli jirin. Maalin danbe oo aan Xamar imidse waan arkay midh, danna kama gelin waayo qof walba seyladdu waa u furan tahay.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF) : Goormaa kuugu horaysay eed maqashay inuu arintan Gaarriyena wax ka qoray,isagu taada wuu maqlay isla 1978 [kii] markay wargeyska xidigta Oktoobar ku soo baxdayee?

**Cabdilaahi Diiriye** :Weydiinta hore iyo warcelinteeda ayaan qaybta hore ku sheegay. Qaybteeda labaad, kolkii aan 1978 Xiddigta Okoobar ku qori jirey maqaalladayda Xamar baanu wada joogney, haw-shanna marnaba kama aanu wada hadal.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Dadkii aad lafoole ku wada jirteen ma jiraan dad idinla ogaa arinta si gaar iyo si guudba?

**Cabdilaahi Diiriye**: Lafoole cilmi-baadhisi kama dhicin, waayo arday walba hawl ku filan baa hor taalley oo ahayd in uu waxbarashadiisa ka adkaado. Weyddiinta aan oogey dad ogaana way jireen.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Marna ma kuu suurtogashay inaad ka qaybgasho gole uu Gaarriye ku falanqaynayey arintan markaad ku sugnaydeen labadiinuba kuliyada Lafoole?

**Cabdillaahi Diiriye** :Annaga oo Lafoole ku wada jirna, ma ay dhicin gole uu Gaarriye wax ku soo ban-dhigay. Bal goorta ay ahayd, goobta ay ahayd, waxa uu hayey iyo dadka uu wax la falanqaynayey ha sheego. Saddexdii lot ama class ee xilligaa Lafoole ku jirey badi waa nool yihiine qaar ha magacaabo, ha una markhaati fureen. Kolkii aanu labadayaduba Lafoole ka baxnay 1974 ayaan anigu baadhistayda guda-galay fursadna u helay u gondodeggeeda.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Dadka marag ka furi kara arintan eed tilmaami kartaa waa kuwama ,kuwa uu Gaarriyese tilmaamay ma ka war qabaan cilmi baadhistaada ogaakaa?

**Cabdilaahi Diiriye** :Dadka maragga ii furi kara waxa ka mid ah:

b. bare iyo maamule Faduma Ahmed Alim(Faduma-ureji) oo maraggii ii furtay. Ka dhegeysta www.somaliradio.dk

t. bare Faarax Abokor Khayrre(faarax-askari)

j. bare iyo maamule Hassan aw Daahir Qaalib

x. aqoonyahan Rashiid Sh. Abdillahi(Rashiid-gadh-weyne) iyo qaar kaloo badan. Kuwa isagu til-maamayana in ay dooc iyo dareen ka hayaan anigu ma qabo.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Arintan gole loo dhan yahay marna ma ku soo bandhigay?

**Cabdilaahi Diiriye**: Baadhistayda waxa aan ku soo bandhigay laba gole oo qof kasta oo wax is taawiyey cilmi-baadhisna ka sameeyey qayb kasta oo bulshada Soomaalida la xidhiidha lagu soo bandhigay. Waana labadii aqoon-is-weydaarsi ee lagu kala qabtay HoteL Jubba 1979 iyo Hotel Uruba 1980. Waa kolkay gole-ka-fuulka ahayde. Waraaqahaygii inta la qaybiyey ayaan anna labadaba ka akhriyayey. Gaarriye ka mid buu ahaa dhegeystayaasha labada shirba. Haddii uu wax la gole imanayo, yaa ka hor taagnaa? Fadlan eega, "Somalia and the World, compiled and edited by Dr. Hussein M. Adam."

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Aqoonta aad Gaarriye isku leedihiin way dheer tahay ,waxaad ku kulanteen kuliyadii Lafoole,qol wadaag noqo-teen , markaa miyeydaan marna arintan iska waraysan?

**Cabdilaahi Diiriye**: Markii aanu qolka wada degganeyn "freshman" baanu ahayn, hawshanina nagumaba jirin. Sannadkii labaadna(sophomor year) laba takhasus oo kala ah "English major" iyo "biology major" baanu u kala leexanay. Waanad garan kartaan laba arday oo aan isku maadad ahayni waxa ay wadaagi karaan. Waan sheegay in sannadkii labaad ee Lafoole(1972) wayddinta miisaanku igu dhalatay, kolkaasna isku qolba maanu degganayn.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Xiliyadaa aad qortay buugaagta iyo qoraalada ku saabsan Miisaanka marna ma ka hadashay in Gaarriyena arinta ku sameeyey cilmi baadhis ka duwan taada ?

**Cabdilaahi Diiriye:** Warcelintaydu: Waa maya. Xamar intii aanu wada joogney ka hor iyo ka dibtoona marnaba arrin Miisaanka ku saabsan islama aanu soo qaadin labadaydu gaar ahaan iyo gole ahaantoona**.**

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Qoraalo iyo buugaag ma ka qortay Miisaanka Maansada?
**Cabdilaahi Diiriye** : Haa. Qoraalladayda miisaanku waa:
1."Gorfaynta Gabayga" (1976)
2."Miisaanka Maansada Soomaaliyeed" (1977)
3.Maqaallo-seminal articles in Xiddigta Oktoobar(1978)
4. iyo laba warqadood- papers- aan ka qaybiyey, kana akhriyey labadii aqoon-is-weydaarsi ee aa warcelintayda 11 ku sheegay. Fadlan eeg "Somalia & the World" edited and compiled by Dr. Hussein M. Adam.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Imisaa la daabacay buugaagta?Qoraaladase?

**Cabdilaahi Diiriye** : "Gorfaynta Gabayga" mooyiye saddexda qoraal ee kalaba waa la daabacay, waana la hayaa.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Sida aad labadiinuba qirteen labada cilmi baadhis ee salka ku haya Miisaanka maansadu way kala duwan yihiin , ma isku wadaan inaad arrin meel isla dhigtaan.kol haddaanay jirin bulsho aqoonteeda leh oo isku imanaysa arrintana isla eegaya islana gorfaynaya?

**Cabdilaahi Diiriye**: Horta labadayada hawlood kol hadday kala duwan yihiin maxaa meel la isla dhigaa? Ta kale ee soo hadhay waa yaa ku horreeyey daah-furka miisanka maansada e ha la eego qoraalladayada iyo maraggoodaba.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Cilmi baadhista Gaarriye ma akhriday ? Maxeyse cilmi baadhista aad sameysay kaga duwan tahay?
**Cabdilaahi Diiriye:** Waxa ay labadayada qoraal ku kala duwan yihiin, aqoonyahannada Miisaanka/qaab-dhismeedka maansada axadha-waa maanso dhaadhiga e-ayaan u deynayaa.

Bahda Mareegta Farshaxan (BMF): Haddii cidiba is tidhaa ka garnaqa arintan talo ahaan maxaad soo jeedin lahayd ,maxaadse shuruudo uga dhigi laheyd aqoon-yahanadaa isxilqaadaya?

**Cabdilaahi Diiriye:** Horta waxa meesha yaallaa ma aha maanso, ama maansayahan ee waa maansayahannimo (poetics). Aqoonyahanka arrintan geli karaa waa in uu noqdo maanso-dhaadhi leh (literay and poetic critiques).

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Kala duwa-naanshaha labada cilmi baadhiseed isku qirteen, Siday kuula eekaan laheyd haddii aad labadiinuba midba cilmi baadhista ka kale eego waxna isla meeldhigtaan ? Tani miyaanay aqoonta waxtar u noqoteen?

**Cabdilaahi Diiriye:** Arrintani aqoonyahan hawlahan ku xeeldheer bay u taalle, annaga farahayga kuma jirto. Balse, midkaayaba in uu tarkiis bulshada u soo bandhigo ayaa nala gudboon. Go'aankana bulshada iyo aqoonyahankeeda ayaa ka dhabta ah ee u cuntama in ay qaadato iska leh.

**Bahda Mareegta Farshaxan** (BMF): Guntii iyo Gabagabadii maaha markii ugu horaysay ee aqoon ay laba qof si kala duwan u soo saaraan ku kulmaan fagaaraha aqoonta sida aqoonta Kalkulaska(Calculus) , sideed u aragtaa in arintan lagu xalin karo.

**Cabdilaahi Diiriye:** Tani waa isla warcelimihii hore uun. Balse haddii aan mar labaadna baaciyo waa sidan:Gabagebadii, bulshada Soomaaliyeed iyo aqoon-yahankooduba ha eegeen, hana ka bogteen waxa qoraalladayadu kala xanbarsan yihiin, kuna kala duwan yihiin. Waa ka muc iyo cilmi-baadhis dhab ah xanbaarsan in ay doortaan. Anigu buug Gaarriye qorayba ma arage, kolka uu u soo ban-dhigo bulshadu ha kala xulato. Haddii ay doortaan maqaallo 1976 la qoray iyo laba buug oo midna seyladda maanta yaallo, midna aan mareegaha


(websites) sudhay, uguna deeqay in ay ka faa'iideystaan waa dookh bulsho.

Waanad mahadsan tahay Fu'aad-

THE END

*Waraysigaa*
*kadib ayuu maammulka*
*degelka Farshaxan sameeyey*
*baadhis dheeraad ah. Tifaftiraha*
*degelka ayaana soo*
*diyaariyey*
*qoraalka*
*soo socda*
*ee uu*
*ugu*
*yeedhay*
*garnaqsi*

# 2.25. Garnaqsi: Miisaanka Maansada



Qalinkii iyo Tifatirkii: Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan
www.farshaxan.com

Gar waliba gundhig leh ,sidoo kale arrin kastaana god ay ku biyo shubato ooy ku huleelato ayey leedahay .Waxaa mudooyinkan danbe soo noqnoqonaysay arrin ku saab-san Miisaanka Maansada. Arrintani waa arrin inagu ugub ah oo la daahfuray waxtar weyna u leh afkeenna hodanka ah .Waxaanay u tirinayaan dhinacyada wax ka qoray aqoonyahanada Cabdilaahi Diiriye Guuleed "Carraale" iyo Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye". Miisaanka Maansada oon in badan la isku dayin in horta la fahmo ama ay in koobani aqoonteeda dhugatey ayaa hadana abuurtay in dood afjarkeedu god mulac galay lagu falanqeeyo.

In aqoon la isku qabto oo la is waydiiyo yaa hor daahfuray kuma ugub aha bahweynta aqoonta jirta ee la adeegsado, waxaa qarnigii 17aad daayaaqadiisii socday muran muddo dheer qaatey oo la isku qabtay ahaan ayaa ooda ka rogay aqoonta Calculus[1] ,ka dib markii loo kala

1 The Calculus Wars: Newton, Leibniz, and the Greatest Mathematical Clash of All Time

tiriyey aqoonyahada Isaac Newton (1642–1727) iyo Gottfried Wilhelm Leibniz (1646–1716).Sida taariikhdu sugtay in horaantii 1665 [kii] Isaac Newton si madax-banaan u qoray hab farshaxaneed ku salaysan aqoontan fadeexad dhinaca qoraalka ka qabsatey awgeed ayaanse u suurtogalin inuu qoro,hase yeeshee intii u dhaxaysay 1672 [kii] iyo 1676 [kii] ,ayuu aqoonyahanka Gottfried Leibniz si madaxbanaan u qoray qoraalo ku saabsan daahfurka cilmiga Calculus-ka isagoo waliba adeeg-sanaya sumadaha sargooyada u ah ee ilaa iminka la isticmaalo. Isla markii uu Leibniz daabacay qoraaladiisii, ayaa taageerayaashii Newton seefta galka ka siibeen bilaabeena dagaal hor leh oo suurtogaliyey in taageera-yaashi Leibniz-na u xadhko xidhaan uu gargaaridiisa .

Markaa waxaa guusha loo xagliyey dhinaca Leibniz ilaa maantana la isticmaalo eray bixintiisii hor daabacii uu soo hor daabacay awgeed, inkastoo maanta si lamaane ah guusha loo siiyo labadoodaba, lana dayac-tiray aqoontii, tanina ay guul weyn u soo hoysay aqoontaa oo iminka dhinacyo badan oo nolosha loo isticmaalo .

Hadaba bahda mareegta farshaxan waxaa u suurtogashay inay si baaxad leh degdegna ka reeban yahay u dhex dabaashaan mugweynta aqoontan la daah furay ee Miisaanka Maansada, iyagoo si xeeldheer u eegay labada cilmi baadhisba kuna bilkaynay maansooyin badan. Waxaanay bahda mareegta farshaxan si aan gabasho laheyn u qiraysaa in labadan daahfur ee ku saabsan Miisaanka Maansadu yihiin guul u soo hoyatay dhamaan ummada danaysa afka hodanka ee bul-showeynta Soomaaliyeed .

Aqoontan iyada ah oo in badan qoraalo dhawr ah laga qoray ayaa kalifaysa in aan korna indhaha laga qabsan karin in la is waydiiyo yaa daah furay ,iyadoo aqoonyahano dhawr ahi ku talinayaan rayigooduna yahay inaan waqti badan la siin yaa daah furay ee sidii aqoontan loo baran lahaa loogana faa'iidaysan lahaa

walibana loo hormarin lahaa loogu dadaalo tamar badana halkaa lagu lumiyo.

Xiliga lagu tirinayo aqoontan in la daahfuray waxaa maanta nool dad badan oo wax ka odhan kara aqoon dheerina ka dhaxeysay labada aqoonyahan ee laysku hayo kii qalinka ku hor duugay.Sidaa darted waxay bahda mareegta farshaxan go,aansatey inay ummada u soo bandhigto waxay arintan ka ogyihiin iyo siday u arkaan.

Bahda mareegta farshaxan intii dadaalkeeda ah waxaa u suurtogashey inay xidhiidh telefoon la sameyso inta lays odhan karo arrintan iyo labada aqoonyahanba way u dhuun daloolaan. Mar uu ka warameyey mudane Maxamed Cilmi Bulaale[2] ogaalkiis wuxuu tilmaamey in uu maqlay markii qoraalada Gaarriye ku soo bixi jireen wargeyskii Xidigta Oktoobar in kuliyadii lafoole hadal-haynta gudida qiimayneed ee loo saaray buugii Gorfeynta Gabaygu dhagaha dadka soo gaadheysay. Isagoo ka waramaya sababta kuliyadu aaney ugu suurtogalin inay daabacdo buuggaana wuxuu tilmaan maangal ah ka bixiyey in buuggaagta kuliyadu hayso inta loo isticmaali karo manhajkii dugsiyadaya wasaarada waxbarashadu daabici jirtay, inta manhajkaa ka baxsana loo daabici jiray sida suuqgayntu saama-xayso halka qaarkooda ku suntaysan aqoon guud loo dhigan jiray uun raadraac. Waxaa kaloo sugtay Khadiija Maxammuud in buugaagta madbacada qaranku daabacdo ay oggolaan-shaha rasmiga ah ka heli jireen wasaarada hidaha iyo tacliinta sare

Haddaan fursad siino labada aqoonyahan inay inoo sheegaan siday iyaga la tahay ayuu Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" yidhi[3] isagoo ka hadlaya madashii bandhiga buugaagta ee Hargeysa "Waxan halkan idiinka caddeynayaa in aan anigu ahay ninkii u horreeyey ee

---

[2] Xidhiidh telefoon --bahda mareegta farshaxan
[3] Muxuu Gaarriye Ka Yidhi Muranka Miisaanka Maansada-Mustafe Kheyre

helay Miisaanka Maansada Soomaalida. Markhaatigeedii oo aan muran lahayna waan idiin hayaa oo waxan bishii January ee 1976 [kii] ku daabacay Xiddigtii Oktoobar. Beenaale markhaatigiisa ayuu Baydhabo geeyaaye, waa kaa Boobe inna hor fadhiya. Isagaa ka marag ah. Isaga ayaana ka mid ah dadkii igu dhiiri geliyey in aan ku soo bandhigo Xiddigtii Octobar. Taariikhdu waa sidaas mana aha in la is daba mariyo. Dhawr qodob baana muhiim ah in aad ogaataan". Waxaa ay u suurtogashay inuu ka qayb galo madashaa buugaagta lagu soo bandhigayey qoraaga xeeshadheer ee Boobe Yuusuf Ducaale, isagoo arrintan Miisaanka Maansada ka Had-leyna wuxuu sheegay in uu Gaarriye ku soo hor daabacey wargeyska xidigta Oktoober, hase yeeshee marka laga hadlayo yaa soo hor saarey intay baadhista wadeen siday u wadeen Ilaahay baa og.

Sidoo kale aqoonyahanka kale ee Cabdilaahi Diiriye Guuleed "Carraale" ayaa isagoo ka waramaya daah furka Miisaanka Maansada yidhi:[4] "Sida dukaamadaa is xiga, midba wax gooni ah u iibiyo ayaa Miisaankana qofba dhinac ka geli karaa. Yaa ugu horreeyey ee Miisaanka daahfuray marka ay noqotana waa hubaal in uu Carraale yahay, maragna weliba aan soo tubi karo. Intoodaba anaa u horseed ah. Haddii uu wax cajaa'ib ah "surprise" hayana, waxa aan hayaa mucjiso "miracle" ". Isagoo Carraale ka waramaya dadka ogaa wuxuu magacaabay inay arrintan marag goobjoogna uu ka ahaa Faarax Abokor Khayre-Faarax Askari. Sidoo kale Faarax Askari oo u waramayey Bahda Mareegta Farshaxan xubin ka mid ahna wuxuu sheegay in Masraxu Dalaam-Gole ay ardeydu isku waydaarsato afkaartooda – marar uu Carraale arrintaa Miisaanka Maansada kaga warramyey uu Gaarriyena u soo qabqabanayey, hase yeeshee aanay isaga-Faarax iyo Gaarriye ooy isku mijilis ahaayeen marna ka wada hadal arrintaa .

[4] Wareysi Bare Sare Carraale: Waa kuma Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed? Oct 25, 2008.

Hase yeeshee sida had iyo jeer dhacda ayaa Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd" ku tagey inuu akhris badan ka dib guusha siiyey Carraale waxaanu yidhi[5]:

> *"Ugu horrayn Carraale, sida ku cad buuggiisa "Miisaanka Maansada Soomaaliyeed", kaas oo ay ka muuqdaan baadhitaan iyo ufiirsasho badani, wuxuu si buuxda u muujinayaa in uu isagu daahfuray Miisaanka Maansada af soomaaliga. Buuggaas ka sokow wuxuu cuskanayaa marag isugu jira qoraallo, munaasabado iyo dad badan oo shaahid ahaa. Gaarriye isaguna wuxuu sheeganayaa, kuna adkay-sanayaa, Miisaankaas in uu isagu daahfuray, marag-giisuna waa maqaalka caanka ah ee lagu daabacay wargeyskii Xiddigta Oktoobar sannadkii 1976 [kii]. Inta aan og ahayna Gaarriye ma uu keenin caddayn iyo markhaati kale oo u dhigma waxyaalaha badan ee uu Carraale garabkiisa soo tubay. Sidaas darteed run ahaantii doodda Gaarriye looma wadwadi karo sida aadka ah ee ta Carraale loo wadwadi karo." Mar kale Ibraahin oo xoojinaya fikra-diisani rabana inuu inoo sheego siday suurtogal ku noqon karto inuu Gaarriye ogaado arrinkani wuxuu yidhi: "Waxyaalaha taa xoojinaya waxaa ka mid ah Faarax Abokor Khayrre "Faarax-askari" oo sida uu Carraale sheegay isla maalmahaas labada magaalo u kala gooshay isaga oo haya xogta dhiraandhirinta Miisaanka Maansada ee dhanka Carraale".*

Waxaa sidoo kale qoraal arrintaa ka qoray Xaaji Cabdale Xaaji oo isna arrintaa kaga duwan Ibraahin qirayana

[5] Aragtidayda Muranka Miisaanka Maansada - Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"

inuu Gaarriye caddeymo badan darteed yeelan karo guusha waxaanu yidhi[6]:

> *"Waraysiga Carraale waxa innooga soo mudh yidhi milaygii uu bilaabay amma uu ku baraarugay baadhista Miisaanka Maansada Soomaa-liga. Haddaba markaynu si cadaalad ah ugu garnaqno ee nin walba wixii uu afkiisa ka yidhi ku xukunno, go'aanku waa macallin Gaarriye ayaa hor bilaabay baadhista Miisaanka Maansada"* .

Si kastaba arrintu ha noqotee markaad si xeeldheer u eegto labada cilmi baadhis ee labada aqoonyahan inoo daahfarureen waxaa si hubaal ah u soo baxeyso inay kala duwan yihiin, taasoo muujin karta inay labaduba si madax bannaan arrintan u gudagaleen una soo bandhigeen, waxaana lama ilaawaan ah in labada aqoonyahanba ay qireen inay labadooda cilmi baadhis kala duwan yihiin , waxaa sidaasoo kale ku tagey Cilmi baadhaha ruug cadaaga ah ee Rashiid Sh.Cabdilaahi oo xubin ka mid ah bahda mareegta farshaxan uga waramayey in labaduba iskood arintan ugu hawlgaleen sida ku cad natiijada cilmi baadhistooda ,waxaanu intaa ku darey in arintan uu Gaarriye qoraalkaa xidigta Oktoobar mooyee aanu wax kale oo uu soo bandhigay arkin , inkastoo markii 1979 [kii] uu Carraale qoraalkiisa ku saabsan arintan ku soo bandhigay aqoon iswaydaarsigii lagu qabtay Hudheelka Jubba, uu isla xiligaa Gaarriyena kala Hadley inuu isna fursadan ka faa'iideeyo oo uu qoraalkiisa ku saabsan Miisaanka Maansada ku soo bandhogo cilmi baadhistaa

Guntii iyo gabagabdii waxaa mudan in aad loo barto cilmi baadhistan ay labada aqoonyahan inala wadaageen,

6 Carraale iyo Gaarriye: Kumaa hor helay Miisaanka Maansada? Qore Cabdalla X. Cusmaan July 15, 2008


iyadoo sidoo kale ay qoraallo ku saabsan Miisaanka Maansada qoreen Cilmi baadhe Maxamed Cabdilaahi Riiraash iyo Prof. John William Johnson oo muujinayso in aqoontan horumarkeedu u furan yahay qof kastoo danaynaya rabana inuu kobciyo barashada xeeshadheer ee ku ladhan maansooyinka afkeena ku sargo'an. Waxaa aragtidan nala qaba oo kale mudane Rashiid Sh. Cabdilaahi oo ku soo koobay fikradiisa erayadan lagu xardhan karo dhagax si loo ilaaliyo ma guuraanimada weedha waxaanu yidhi: " Aragtidaydu waa aqoontu cid waliba way u furan tahay, nin walibana intiisa (his/her contributions) ayey ku leedahay ee aqoonta ha laga faa'iidaysto oo ha la baylah tiro, qof walbana si gaar ah intiisa ha lagu qiimeeyo".

**Ilaahoow, aqoondarrana ha nagu cadaabin, eexana ha nooga tegin!**

*Halkaa kolka uu arrinku marayo ayuu Gaarriye socdaal ku tegey dalka Norway. Bulshada reer Oslo oo la socday muranka ka dhex aloosan Gaarriye iyo Carraale ayaa isxilqaantay oo doontay inay labada aqoon yahan dhexdhexaadiso. Guddi ayaana arrinta loo xilsaaray.Intaan wax go'aan ah laga maqal guddidii dhexdhexaadinta ayey Gaarriye iyo Carraalaba aragtiyahooda u soo bandhigeen dad weynaha reer Oslo. Qoraalladii laga soo diyaariyeyna waxa ka mid kuwan soo socda:*

## 2.26. Dood ku Saabsan Miisaanka Maansada oo Dhexmartay Gaarriye iyo Carraale.

SDWO (Norway 02/12/08)



***Gaarriye oo qeexaya aragtidiisii***

Waxa maanta ku qabsoomey magalaada Oslo ee wadanka Norway tartankii maansada oo dhex marayay Abwaan maxamed xaashi dhamac (Gaarriye) iyo abwaan Cabdillaahi Diiriye Aw Guuleed (Carraale). Tar-tankaasi oo lagu qabtey

Jaamacada Oslo ee Norway waxaa gorsoorayaal ka ahaa aqoon yahan soomaliyeed iyo abwaano. Tartan kaasi oo maanta aad looga soo qaybgalay kuna bilaamay jawi heer sare ah.

Ayaa waxaa dooda ku horreeyay Prof. Gaarriye oo sheegay in maansada sharaxaadeeda iyo cilmiyaynteeda uu isagu iqtiraaxay ama uu abuuray taasi oo uu ku daabacay wargeyskii Xiddigta Oktoober ee jamhuuri-yaddii Soomaaliya. Bishii Maaris 1976kii. Halkaasi oo uu ku soo bandhigay nuqullo ka mida daabacaddii wergaysku daabacay ee Xidigta Oktoober. Waxa kale oo uu abwaan Gaarriye sharaxaad dheer ka bixiyay qaabka uu u hindisay ee maansada uu ugu saleeyay luqad ahaan sida ay u fadhido. Halkaasi oo kasoo qayb galayaashi aad ugu riyaaqeen.Waxa kale oo uu abwaan Gaarriye sharaxaad dheer ka bixiyay qiimaha Miisaanka afka Soomaligu ku leeyahay Maansada. Waxa tusaalooyinkii Gaarriye ka mid ahaa oo uu soo qaatey Maqaleey warlaay oo ku salaysan qaab xisaabeed sida luqada afsoomaligu udhacayo ama u shanqadhayo. Sharaxaddii dheerayd ee Prof: Gaarriye waxa ka mid ahaa muhiimadda ay u leeyihiin shaqalada iyo shiibana-yaashu maansada marka laga hadlayo.

Waxa uu Prof: Gaarriye sheegay in dib u sax uu ku sameeyay wax yaabihii luqad ahaan ka qaldanaa barigii uu daabacay maansada isaga oo sheegay in uu ogaadey in xarfo u dhaqma sida xarfaha labanlaabma oo culays ku keeni kara meesha ay ka galaan maasada. Xarfahaasina waxa uu ku sheegay inay yihiin S-SH-K-T-J-F.

Prof. Carraale ayaa isna qaatey hadalkii oo la wareegay hadalka iyo sharaxaad ka bixinta maansada waxa uu isaga laftiisu sheegay in uu maansada daabacay 1977kii oo nuqul aanan laga haynin lakiin imika looga soo diray dalka maraykanka jaamacad iibsatey barigaasi nuqulka maansada Carraale. Abwaan Carraale waxa uu ku dheeraday in uu hayo maansooyin dhaxal gala oo ku ururiyay buug uu ku soo bandhigay goobta.

Waxa madasha mar labaad ku soo noqdey Prof: Gaarriye ood moodo inuu faras sange ah saaran yahay qaabka uu u kala dhigayo maansada iyo wax-yaabo cusub oo uu ku soo daray doodiisii hore



***Carraale oo qeexaya aragtidiisii***

halkaasi oo dadku sacab iyo qosol mar kaliya isku dareen. Sikastaba ha u dhacdee bandhigaasi labada mutacalin kasoo jeediyeen maansada Soomaliyeed oo aad loogu riyaaqey ayaa dadka badankiisu aad ugu mahad naqayeen Abwaanka weyn ee Maxamed Xaashi markii uu soo bandhigay waxyaabo aan hore loo maqal oo diiwaanka taariikhda u gashay abwaanka kana hor cadeeyay habkuu u helay aqoontan cusub. Iyadoo ilaa berritoole laga war sugayo inay warbixin soo saaran guddiga qiimaynta maansada oo goobtaasi fadhiyay. Warkan oo faahfaahsan oo codkii ah ayaan idiin soo wadnaa dhawaan. Waxaan odhan karnaa waa madal taariikhi ah.

Waxaa kaloo goobta wacdaro ka dhigtay inan Noorwegian ah oo goobta ka heestay hees Somali ah lana soo bandhigay album cusub oo aay soo saartay oo suuqa soo gali doona dhawaan,waxaa kaloo ka heesay goobta Himilo oo soo wada album cusub sanadka cusub. **SDWO -**

**Norway - Oslo**

Xigasho: Mareegta SDWO

## 2.27. Miisaanka Maansada: Abwaanno Soomaaliyeed oo dood cilmiyeed ku dhexmartay Oslo, Norway

**Oslo, Norway (Calanka.com) 03-Desember-08**

*Dood cilmiyeeddii la ma gac-baxday (Miisaanka Maansada) oo dhexmartay abwaano Soo-maliyeed oo caan ah ayaa xalay lagu soo gabagabeeyay magaaaladda Oslo ee caasi-mada dalka Norwey.*




***Prof. Gaarriye iyo Prof. Carraale***

Doodan ayaa lagu qabtay hoolka shirarka ee Jaamacadda Blindern-University (Oslo), waxeyna dood-cilmiyeedani dhex-maray abwaanada kala ah Prof. Maxamed Xaashi Dhamac (Abwaan-Gaarriye) iyo Prof. C/laahi Diiriye (Abwaan-Carraale) oo mid walba ku doodayey inuu yahay kii ku-horeeyay daah-furka (Miisaanka-maan-sadda). Marti-sharafta lagu casumay inay goob-joog-ahaadaan doodan kulul iyo guddi loo xilsaaray dood-cilmiyeedkan,ayaa si-weyn oola dhacay,casharadii uu halkaas ka soo jeediyay Abwaan Gaariyye,oo soo jiitay dareenka dhageystayaasha dooddan.

Waxaana la arkayey dadweynaha oo qosol iyo dhoolacadeyn isku-dareyay kolka uu maykarafoonka qabsaddo, taasoo daliil u ah in dood-cilmiyeedkan ay guusha ku raacday Abwaanka,inkastoo guddiga loo xil-saaray inay labadan Professor kala saareen,aysan wax go'aan ah ka soo saarin,shaqsigii ay raacday guusha.

Geba-gabadii kulanka ayaa halkaas amaan looga soo wada-jeediyay labadan aqoon-yahan,waxaana lagu

booriyay inuu nin walba dhankiisa kawado, dadaalka uu oogu jiro Miisaanka maansadda Af-Soomaaliga.

Dood-cilmiyeedkan ayaa waxaa soo qaban-qaabiyay Gudoomiyaha Ururka (Noshaac)C/risaaq Cismaan Fadal oo kaashanaya Ramaas Media iyo Raad-Tv.

Qoraa ka tirsan Shabakada Calanka.Com oo lagu casumay inuu goobjoog ahaado, dooddan kulul ee dhex-martay Abwaanadan, ayaa xusay hadii cod loo qaadi lahaa aqoonyahanadan inay guusha raaci laheyd Abwaan Gaarriye oo isagu la yimid daliilo cadeynaya inuu yahay Abwaankii oogu horeeyay ee Soomaaliyeed ee daah-furay Miisaanka Maansadda.

Waxayna dadweynaha si wanaagsan oola dhaceen, kolkii uu soo bandhigay maqaallo uu ku qoray **Joornaalkii Xidigta-Oktoobar ee Somaliya sanadkii 1976**, oo muujinaya inuu yahay ninkii ugu horeeyay ee bilaabay Miisaanka Maansada iyo gorfeynta gabayga.

**Xuseen Yaasiin Godo-Godo**

TiiboTalyaani@live.com (Political-Editor)
Calanka.Com

***Wax la dhursugo oo dadka dhegtu taagnaataba, bishii Disambar 5dii. 2008dii ayey guddidi soo saartay war murtiyeed ay labada aqoonyahanba raalli ka ahaayeen saxaafadda xorteedana ay ku saxeexeen. Waxaanui u qornaa sidan soo socota:***

## 2.28. Warsaxaafadeed Ka Soo Baxay Guddidii Dood-cilmiyeedka Miisaanka Maansada Soomaalida

**Oslo** (Ramaas) Dec.05, 2008 - Waxa shalay (04.12.2008) lagu saxeexay war-saxaafadeed ka soo baxay dood-cilmiyeedkii Miisaanka Maansada ee ku



qabsoontay jaamacadda Oslo, iyo kulan turxaan bixin ah oo loo qabtay labada aqoonyahan Prof. Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" iyo Prof. Cabdillaahi Diiriye Guu-leed "Car-raale" 29.11.2008 kuna qab-soomay guri ku yaal magaalada Oslo.
Saxeexa war-saxaafadeedkan oo ay qalinka ku duugeen labada aqoonyahan, isla markaana ay si buuxda isugu raaceen waxa uu xambaarsan yahay, waxa lagu saxeexay garoonka diyaaraduhu ka haadaan ee magaalada Oslo (Gardermoen).

Waxaana labada aqoonyahan ka saxeexay qoraalka guddoomiyihii guddida hawshan waddey Prof. Xusseen Xasan Guuleed. Xafladdii saxeexa war-saxaafadeedka ka dib waxay ramaasnews waydiisay su´aalo kooban labada aqoonyahan iyo Guddoomiyaha guddiga Prof. Xusseen Xasan waxaanay u dhaceen sidan:

**Waxaan ku bilaabay Prof. Carraale:**



**S/**: Prof. Cabdillaahi Diiriye Guuleed hawshii aad halkan u timi ee ahayd Miisaanka Maansada ee guddida ballaa -dhani ka qeyb qaadatay ee labada weji lahayd, jaama-cadda oslo-na aad doodda ku qabatay sidan heshiisku u dhacay raali baad ka tahay saw maaha?

**J/**: Raali baan ku ahay sheekadaana dhamaan baa loogu heshiiyey.

**Prof. Gaarriye:**

**S/**: Prof. Maxamed Xaashi arrintii ku saabsanayd Miisaanka Maansada adiga iyo Carraale bartanaa wada taagan tihiin, hawshii guddi reer Oslo ah ayaa qayb weyn ka qaatay oo Xuseen Xasan madax u yahay, maxaad ka leedahay heshiiska?

**J/**: Heshiiskaa waan ku qanacsannahay, Ilaahay guddida heshiiskaa soo saartayna ha ka abaal mariyo, raggii qabanqaabiyey Ilaahay ha ka abaal mariyo. Hawluhuna waxay ku wanaagsan yihiin marka la isla buuxiyey ku wanaagsan yihiin, marka la is barbaryaaco kuma wanaagsana. Maanta waxa noo bilaabmay aniga iyo Cabdillaahi inan is buuxinno, annagoo heshiiskaa ka duulayna iyo taladaa aad noo soo jeediseen.

**Prof. Xuseen Xasan Guddoomiyaha Guddida:**




**S/**: Prof. Xusseen Xasan adiga oo labada aqoonyahan heshiiskooda arkaya ma-xaad ummadda u jeedinay-saa?

**J/**: Waxan odhan lahaa horta waa mahadsan yihiin hawshan maanta inaga dhacday ee labada professor u taallay ee ay maanta Oslo ku soo af jareen, mana hagaagteen oo guddidu waxay qaban lahayd ma jireen, haddii aanay labada professor raalli ka noqon oo aanay xaggeeda wanaagsan ka eegin. Waxaanu ummadda soomaaliyeed ka codsanaynaa wax allaale iyo wixii muran ee noocaas ah ee ama siyaasi ama ijtimaaci ah, wax aan wadahadal lagu daweyni ma daweysmaan ee wadahadal iyo isu tanaasul ha lagu dhameeyo khilaafyada.

Halkan hoose ka akhriso war-saxaafadeedkii oo dhameystiran:




Borof. Carraale iyo Borof. Gaarriye oo heshiiskii saxeexaya



W a r   s a x a a f a d e e d

Aaraar

Guddida war saxaafadeedkan soo saartay waxay ka kooban tahay sagaal xubnood oo kala ah:

1. Professor Hussain Hassan Gulaid (Guddoomiye)
2. Abdillaahi Saleeban Bidde
3. Ahmed Awad Ismail
4. Ahmed Warsame – Ahmed Dheere
5. Ali Osman Egeh
6. Adan Looshade
7. Abdirisak Osman Fadal
8. Ahmed H Nur
9. Mohamoud Xaaji Ibrahim

Guddidan waxa laga magacaabay wax garadka iyo odayaasha jaaliyadaha Somaliyeed ee ku nool Oslo, waxaana loo xilsaaray in ay soo darsaan dood iyo andacooyin in muddo ahba dhextiilay laba aqoonyahan, oo mid waliba geestiisa aqoon miisaan leh u leeyahay suugaanta Somaliyeed: Waa Prof. **Cabdilaahi Diiriye Guuleed(Carraale) iyo** Prof. **Maxmed Xaashi Dhamac (Gaariye).**

Muranka ka dhex aloosnaa labadan aqoonyahan ayaa ku salaysnaa kooda daahfuray (discovered) miisaanka maansada Somaaliyed. Miisanka Maansadu waa qaaciidada ama qaab dhismeedka ay ku salaysan tahay maansada Somaliyeed, noocay doonto ha ahaatee. Waxa guddidani ogaatay in murankani muddo dheer jiray, hase yeeshe dar-dar qaatay ka dib waraysiyo la isku waydaarsaday **WardheerNews.com**. Waraysiyadaa ayaa kii ugu horeeyey ku soo baxay WardheerNews.com bishii May, 20-dii ee sannadkan 2008, halkaas oo Prof Carraale ku sheegay, isagoo cuskanaaya buug uu qoray oo la yidhaa "Gorfaynta Gabayga, in uu isagu yahay daahfuray miisanka maansada iyo xeerarka ay ku fadhido.

Bishii September, 28-keedii ee sannadkan 2008, ayaa Prof. Gaariyana siiyey waraysi WardheerNews.com, halkaas oo uu ku caddeeyey in isagu yahay qofkii ugu horeeyey ee Miisaanka Maansada u soo bandhiga dadweynaha Somaaliyeed. Waxaa uu Gaariye taa daliil uga dhigay qoraaladiisii ku soo bixi jiray Xiddigta Oktober, ee uu ugu horeeyey qoraalkii ku soo baxay cadaadkii wargeyska ee 17-kii Janauray, 1976.

Waraysi kale oo isna ku soo baxay WardheerNews.com 25-kii october, 2008, ayaa Prof caraale mar kale ku dadafeeyey andacooyinka Gaariye, waxaanu sheegay in uu isagu leeyahay daahfurka Miisaanka Maansada, isagoo inta badan daliil uga dhigaaya buugga "Gorfaynta Gabayga" ee uu yidhi wuxuu dhamaaday 1976.

Prof. Maxamed Xaashi Dhamac wuxuu hadda joogaa Norway, isaga oo macalin (visiting professor) ka ah Machad sare oo ku yaal Lillehammer. Professor Caraalena wuxuu degan yahay magaalada Helsingör, Denmark oo aan sidaa uga fogayn Oslo.

Iyadoo fursaddaa laga faa'iidaysanayo, ayaa odayaasha iyo wax garad reer Oslo ahi garteen in labadaa aqoonyahan la isu keeno, oo loo fidiyo gogol iyo gole ay ku doodaan.

Gogoldhig hor dhac ah:
Markii labada aqoonyahan mid walba geestiisa loo waraystay, ee la waydiiyay waxa muranka u dhexeeyaa ku qotomo, ayay soo baxday in muranku salka ku hayo laba arrimood: Waa mid eh, waa kuma daahfuraha miisaanka maansada; waa ta kale eh, labadooda daraasadood, ama cilmi-baadhiseed (research) iyamaa shilis, ama muc badan.

Guddidu waxay isku raacday in gole saaxiibtinimo oo hor dhac ah loo sameeyo labada aqoonyahan. Sababta sidan loo yeelay waxay daaran tahay, in guddidu, inta aan goleweyne la tegin, isu dhagaysato labada aqoonyahan, oo aan hadda ka hor is hor fadhiisan.

29-kii november (sabti) ayaa labada aqoonyahan iyo guddidi isugu timi guri ka yaal Oslo. Guddidu waxay dhagaysatay dood dhex martay labada aqoonyahan, waxayna aragtay qoraalo loo soo bandhigay markhaati ahaan (documention). Qoraalada Guddidu arragtay waxaa ugu muhiimsanaa kuwan:

1. Maqaal ka hadlaya miisaanka maansada Somaliyeed oo ku soo baxay wargeyskii la odhan jiray **Xiddigta Oktoober**, cadadkii 17-kii January, 1976. Maqaalkaa waxa leh Gaariye
2. Buug aan la daabicin (Type written Manuscript) oo la yidhaa "Gorfaynta Gabayga". Buuggaa waxa qoray Prof. Cabdillahi Diiriye Guuleed (Carraale), waxaanu sheegay Prof Carraale in buuggaasi dhamaaday 1975, lamase type-garayn, la'aanta makiinadda type-ka awgeed. 1976-kii ayaa type-garayntiisa dhammaatay, ka dibna Jaamacdii Somalia ayaan ka iibiyey, ayuu yidhi Prof. Carraale.
3. Buug kale oo uu qoray Prof Carraale, oo isna aan la daabicin (type written manuscript), kuna saabsan miisanka maansada, taariikhdiisuna tahay 1977.
4. Buug daabacan (Miisaanka Maansada Soomaaliyeed) oo uu yidhi Prof Carraale waxaan isugu geeyey labada buug ee kor xusan. Buuggaasi waxa la daabacay 2003.

Qeexid:
Markii doodda labada aqoonyahan dhamaysteen, ayaa guddidu u soo jeedisay in arrinta loo abaaro sidii oodo dhacameed loo kala guri jiray. Arrinta ku saabsan tayada iyo mucda gorfaynta labada aqoonyahan

sameeyeen, waxay u baahan tahay in dad yaqaanna suugaanta ka garnaqaan. Waxa kale oo Guddidu soo jeedisay in la sameeyo dood dhex marta labadooda oo dadweynaha loo bandhigo, oo la isu dhagaysto, wanaaga iyo sida ay u kala tayo roon yihiin. Waxaana kala saari kara labadooda dadweynaha Somaaliyeed iyo aqoonyahanno si gaar ah u dhuuxa barashada suugaanta. Sidaa awgeed, waxay Guddidu ku talisay in arrinta dhex taal labada aqoonyahan loo qaybiyo laba qaybood:

1. Ta ku saabsan yaa hor daahfuray miisaanka maansada, way ka garniqi kartaa Guddidani, iyada oo markhaati looga raadinaayo qoraaladii la soo bandhigay iyo dooddii labada aqoonyahan.
2. Arrinta ku aaddan tayada iyo sida ay u kala waafisan yihiin, ha loo daayo dadweyne isu dhagaysta, waana sida caalamkaba caadiga ah. Laba ama ka badan oo wax isku mid ah wada qoraba , akhristayaashaa kala saraa.

Markii qeexiddaa lagu heshiiyey, ayaa Guddidu gooni u baxday si ay go'aan uga soo gaadho labada aqoonyahan kooda loo aqoonsado daahfurka Miisaanka Maansada. Guddidu waxa ay ka doodday qoraaladii la hor keenay, ee kala ahaa maqaal lagu daabacay Xiddigta Oktoobar, iyo buuggaag aan la daabicin, keebaa loo aqoonsan karaa oo qoraal ahaan ka markhaati kici kara kala horraynta daahfurka miisanka maansada. Dood dheer ka dib, waxay Guddidu isku raacday in qoraalada aan la daabicin, loo aqoonsan karin markhaati. Qoraalkii ku soo baxay Xiddigta Oktoobar, 17-kii January 1976, ee uu lahaa Prof. Gaariye, ayaa markaa Guddidu u aqoonsatay in uu yahay markhaatiga qiraya cidda hor daafurtay miisaanka maansada. Iyada oo isu dhan, ayaa Guddidu go'aankaa maqashiisay labada aqoonyahan, waanay aqbaleen.

<u>Dood cilmiyeed:</u>

Golahaa koobnaa ee Guddidu isugu keentay Carraale iyo Gaariye, wuxuu meesha ka saaray qodobkii ugu xasaasisanaa ee ahaa yaa hor daahfuray miisanka maansada. Wuxuu noqday gole lagu guulaystay oo aad isugu soo dhaweeyey lababdii aqoonyahan ee muranku dhexyiil. Waxa marka loo gudbay lugtii labaad arrinta.

Salaasadii bishan diisambar 2-da ahayd ayaa Jaamacadda Oslo laga diyaariyey dood balaadhan oo dhex martay Prof Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale) iyo Prof. Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye). Waxay ahayd dood cilmiyeed aad iyo aad u qiimo badan, oo labada aqoonyahanba, si heer sare ah u soo bandhigeen aqoontooda iyo daraasadda ay ku sameeyeen miisaanka maansada Soomaaliyeed.

<u>Abbaaro kala duwan (two different approaches)</u>

Sida ay u kala abbaareen gorfaynta miisaanka maansada ayaa kala duwan, hase yeeshe labaduba waxay soo bandhigeen gorfayn xisaab (maths) ku taagan, oo nuxurkeeda isku dhaw yahay. Labada aqoonyahanba way sii guda galeen gorfaynta miisaanka maansada,

waxaanay soo bandhigeen daraasado cusub oo aan hore loo maqal. Waxay muujiyeen in ay yihiin aqoonyahano isu haya ixtram iyo is qadarin, oo isu qiraya midba waxa uu ku soo kordhiyey cilmigan ku cusub suugaanta Soomaaliyeed.

Dooddani waxay indhofur u noqotay dadweynaha fursadda u helay in ay dhagaystaan labada aqoonyahan.

Prof Carraale wuu daabacay(published) cilmi-baadhistiisa, waxaanu ku soo ururiyey buugga la yidhaa Miisaanka Maansada ee uu Sweden ku daabacay 2003. Markaa waxaa xus gaar ah mudan in buugga Prof Carraale yahay qoraalkii ama buuggii ugu horeeyey ee lagu daabacay (published) Miisanka Maansada.

Prof Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye) wax badan ayuu ku kordhiyey daraasadiisii 1976 oo soo bandhigay, welise kumuu soo saarin buug daabacan, waase uu ku tala jiraa sida uu ka sheegay kulankii dood cilmiyeedka.

Gebgebo:

Guddidu waxay talo ugu soo jeedinayaan labada aqoonyahan in ay iska kaashadaan hawsha baaxada leh ee ay qabteen iyo sii wadida dhameystirkeeda.

Guddidu waxay ugu baaqaysaa dhamaan bahweynta Af Soomaaliga ku hadasha in ka dhawraan labada aqoonyahan dhexdooda wixii turxaan ama wiiqaya ka wada shaqeynta hawshan baaxada wayn, isla markaana waxaan ka codsanaynaa cid kasta oo kari kartaa inay ku gar-gaarto hiil iyo hooba.

Allaa Mahad Leh

Guddoomiyaha Guddida
Prof. Hussein Hassan Gulaid

Oslo, 04.12.2008

Dhawr maalmood kadib markii warsaxaafadeedkaasi la soo saaray, ayuu soobaxay war tibaaxaya in xubno ka tirsan guddidii dhexdhexaadineysey labada aqoonyahan ay gudbiyeen warsaxaafadeed ka geddisan kii ay guddidu ku heshiisey. Sidaasi awgeed ayey mar kale ramaasnews.com u faafisay qoraalkale oo uu soo qoray guddoomiyihii guddidu. Hordhacii iyo qoraalkiiba waa kuwan hoos ku qoran:

## 2.29. **Caddeyn War-Saxaafadeedkii Ka Soo Baxay Guddidii Dood-Cilmiyeedka Miisaanka Maansada Soomaalida Oslo Norway**.

Date: Fri, 19 Dec 2008 02:43:49 +0100

"Waxan si qadarin leh idinka codsanayaa in aad soo gelisaan shabakadihiina ogeysiiskan caddeynta ah ee ka soo baxay guddoomiyihii guddidii ku dhex-dhexaadisay Oslo labada Professor ee Gaarriye iyo Carraal. Dhex-dhexaadintaas oo ku dhamaatay guul, isla markaana ay labada aqoonyahan soo saareen war-saxaafadeed ay ku wada saxeexan yihiin oo soo gabagabeysey khilaafkii u dhaxeeyey. Waxaana qoraal-kan caddeynta ah ee dambe kalifay ka dib markii shabakadaha wararka ay ka dhinac geliyeen dad aan xilkas ahayni qoraalo lagu tilmaamayo heshiiskii ay gaadheen labadaa odey, qoraalkaas oo shaki iyo mad-madow ka dhex abuuray intii hawshan isu xilqaantay iyo intii hore ugu xidhiidhsaneyd arinta labada oday."

Waad Mahadsan Tihiin

**Ogeysiis:** Caddeyn War-Saxaafadeedkii Ka Soo Baxay Guddidii Dood-Cilmiyeedka Miisaanka Maansada Soomaalida Oslo Norway.

**Ku**: <u>Bahweynta Ku hadasha Afka Soomaaliga.</u>

Waxa aan halkan ummadda af soomaaliga ku hadasha ugu caddeynayaa, aniga oo ah Prof. Xusseen Xassan Guuleed ahaana Guddoomiyihii Gudidda War-Saxaafadeedka rasmiga ah ka soo saartay "Dood-Cilmiyeedkii Miisaanka Maansada Soomaa-lida Oslo" ee dhex martay Prof. Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale) iyo Prof. Maxamed Xaashi Dhamac(Gaarriye) in go'aankii guddidu qortay ee labada Professor iyo guddoomiyaha guddidu ay saxeexeen uu yahay ka RASMIGA AH.. Wixii kale ee laga qoray se ay yihiin wax aanay guddidu shaqo ku lahayn.

Allaa Mahad Leh

Prof. Hussain Hassan Gulaid
Oslo, Norway.

**Fiiro gaara:**

*Dad baan garan waxa lagu eedaynayo degellada iyo waxa ay ku kala geddisanyihiin warsaxaafadeedkii ku qornaa ramaasnews.com iyo kuwii ay soo qoreen degellada kale sida jamhuuriya.info; Somaliland.org, iwm. Siday doontaba ha ahaatee, isla toddobaadkaasi ayuu Axmed Xaaji Nuur oo ka tirsanaa guddidu si faahfaahsan u soo qoray qoraalkan hoos ku qoran kaasi oo uu si cad ugu qeexayo halka is maandhaafku ka jiro.*

## 2.30. **Toosin iyo turxaan bixin**

Ahmed H Nur, Oslo, 18 dec 2008

Jamhuuriya Online

Qoraalkan gaaban waxaan ku iftiiminayaa waxa u dhexeeya warsaxaafadeed ku soo baxay Ramaas-news.com bishan 5-teedii (http://www.ramaasnews.com/news.php? readmore=447) iyo qoraallo ku soo baxay website-yo kala duwan. Waa qoraallo ku saabsan Abwaan Gaarriye iyo Professor Cabdillaahi Diiriye Carraale iyo su'aasha ah yaa hor daahfuray Miisaanka Maansada Soomaaliyeed. Kan ugu denbeeyey qoraalada noocan ahi, waa ka ku soo baxay Somaliland.org, 18-kii bishan. Maqaalka Somaliland.org waxa laga soo xigtay Haatuf News. Ma hubo ilaha Haatuf News iyo website-yado ka heleen warkan. Si kastaba ha ahaatee, dhawr qodob ayaa u baahan toosin ama dheelitir. Arrintan waxaan u ahay xogogaal. Waxaan ka mid ahaa guddida qoraaladan ku xusan, anigaana unkiyey (write-up of the draft) warsaxaafadeedka guddida.

Qoraaladan ku soo baxay website-yada kale wax badan kama duwana ka guddida gudoomiyeheedii iyo labada aqoonyahanba saxeexeen.

Warsaxaafadeedka guddidu soo saartay wuxuu leeyahay hordhac tusmaynaaya xaajada guddidu isu xilsaartay iyo qaabka ay u abbaartay. Waxa uu qeexayaa sida loo kala hor mariyey laba qodob oo muranka labada aqoonyahan ku salaysnaa, oo kala ahaa:

1. yaa hor daahfuray Miisaanka Maansada iyo

2. cilmibaadhista labada aqoonyahan keeba (teeba) tayo roon (muc badan. Warsaxaafadeedku wuxuu dhigayaa go'aanka guddidu gaadhay iyo majaraha ay u maartay

go'aankaas. Warsaxaafadeedku wuxuu ku gunaanad mayaa dood cilmiyeed lagu qabtay Jaamacadda Oslo (Universitetet i Oslo) iyo sida ay u dhacday. Intaa waxa raaca waano iyo talo bixin guddidu u jeedisay labada aqoonyahan iyo dadweynaha Somaliyeed, meel ay joogaanba.

Nuxurka warsaxaafadeedkii ku soo baxay www.ramaas-news.com waa paragraph-kan, waxaana ku cad go'aankii guddida. Akhri warsaxaafadeedka ku yaal www. ramaasnew.com, si aad u garato halka uu ku yaal paragraph-kani)

*"Markii qeexiddaa lagu heshiiyey, ayaa Guddidu gooni u baxday si ay go'aan uga soo gaadho labada aqoonyahan kooda loo aqoonsado curiyaha Miisaanka Maansada. Guddidu waxay ka doodday qoraaladii la hor keenay, ee kala ahaa maqaal lagu daabacay Xiddigta Oktoobar, iyo boogaagta aan la daabicin, keeba loo aqoonsan karaa qoraal ka markhaati kici kara kala horraynta soo saarka miisanka maansada. Dood dheer ka dib, waxay Guddidu isku raacday in aan qoraalada aan la daabicin, loo aqoonsan karin markhaati. Qoraalkii ku soo baxay Xiddigta Oktoobar, 17-kii January 1976, ee uu lahaa Abwaan Gaarriye, ayaa markaa Guddidu u aqoonsatay in uu yahay markhaatiga qiraya cidda soo hor saartay miisanka maansada. Iyadoo isu dhan, ayaa Guddidu go'aankaa maqashiisay labada aqoonyahan, waanay aqbaleen."*

**Toosintaydu waxay tooganayaa laba arrimood:**

Mid weeyaane, warmurtiyeedka qoraalada ku soo baxay website-yada kale iyo ka Ramaasnews.com waa isku mid. Waxase kala duwan adeegsiga weedhaha "curiye" iyo "daahfure". Warsaxaafadeedka ku soo baxay Ramaasnews waxa ku taal "daahfure", halka kuwa website-yada kale badankooda ay taal curiye ama soo saare. Sababta keentay waa sidan:

Galabnimadii khamiista, ee bishu 4-ta ahayd ayaa aniga iyo Hussain Hassan Gulaid la noo xilsaaray in aannu soo qoro "draft-ka" warsaxaafadeed ka hadlaaya go'aankii guddidu ka gaadhay qarnaqii labada aqoonyahan. Ku talo galku wuxuu ahaa in labada aqoonyahan laga saxeexo go'aanka guddida maalinta jimcaha, bisha 5-teedii, maalintaas oo Gaarriye dhoofaayey.

Isla habeenkaaba waxaanu u dirnay draft-kii guddida qaarkood iyo Abwaan Gaarriye. Ma hubo in Prof Carraale habeenkaa arkay draft-kii ugu horreeyey, waanse filayaa. Waxa la nagu soo celiyey meelo iyo weedho la tilmaamay in wax laga beddelo. Isla habeenkaaba Abwaan Gaarriye wuu ogolaaday sidii draft-ku u dhignaa, waxase raagtay oo aan ka seexday jawaab laga sugaayey Abdirazaq Osman Fadal oo aan filaayo in uu Prof Carraale la socodsiiyey qoraalkii draft-ka ahaa.

Jawaabtii Fadal waxaan helay subaxnimadii, waxaanu soo diray xalay, ka dib markaan seexday. Subaxnimadii jimcaha, bisha 5-teedii ayaan u qaatay qoraalkii shaqada, si aan halkaa ugu dhamaystiro. Waxaan ku daray/ beddelay weedhihii Fadal soo jeediyey, habkii uu ku soo taliyeyna waan u qoray.

Final draft

Ilaa hadda (ca 09:30 subaxnimadii jimcaha) waxa ku taal qoraalka "curiye", meelaha qaarkoodna "soo saare". Kelmadda "daahfure" weli kuma jirto qoraalka. Sida ayuu ahaa qoraalku kama denbayntii, ka dib markii ilaa xalay la isku celceliyey ee la hufay. Goor abbaaro tobankii subaxnimo ah, ayaan draft-kii kama denbaynta ahaa (sidaan u arkaayey) u diray Guddida intii an hayey e-mail address-kooda. Waxa ka mid ahaa: Hussain Hassan Gulaid, A O Fadal, Ahmed Awad, Ahmed Dheere iyo Abdillahi Saleebaan Bidde.

Isla waqtiyadaa waxaanu telefoonka dhawr jeer ku wada hadalnay Abdillahi Saleeban Bidde oo isu xilsaaray in uu iga qaado qoraalka kama denbaynta ah, si uu uga soo saxeexo Guddoomiyaha Guddida, Prof Hussain Hassan Gulaid, iyo labada aqoonyahan. Ka dib anoo diray qoraalkii kama denbaynta ahaa, ayaa Abdillahi Saleebaan telefon iigu sheegay, in aan "curiye" ku beddelo "daahfure", sababtuna waa sida hoos ku qeexan, waanan la qaatay. Wax yar ka dibna waxa ilaa soo hadlay Gaarriye, oo isna yidhi labadaa kelmedood isku beddel. In Gaarriye iyo Abdillahi wada hadleen ma hubo, waxayse u ekeed waxay ku soo heshiiyeen. Sidaas ayaan, meel kasta oo "curiye" ku jiray, ugu beddelay "daahfure". Laakiin guddida inteeda kale nalamay ogayn beddelkaa.

Ahmed Awad Ismail wuxuu ii soo diray telefoon, waxaanu i weydiiyey in qoraalka aan u soo diray yahay kii final-ka ahaa, waxaanan u sheegay in uu yahay "final", waayo markaa maan filayn in beddel denbe yimaado. Qoraalka Ahmed Awad wax iga weydiinayaa waa kii abbaaro tobankii aan u diray ee ugu sheegay "final draft", ila soco oo waa ka hor intii aan "curiye" laga saarin qoraalka.

Ahmed Awad, oo sidaan ugu sheegay, u fahamsan in qoraalku yahay kii kama denbaynta ahaa ayaa ku qoray Jamhuuriya.info.

Hadaba waxa u dhexeeya qoraalada website-yada kale baahiyeen iyo Ramaasnews sidan ayuu ku abuurmay. Qoraalka Jamhuuriya ayaa ugu horreeyey saxaafadda internet-ka, website-yada kalena Jamhuuriya ayey ka qaateen, sidaan filaayo, denbise kuma laha Ahmed Awad Ismail waayo:

1.Guddidu kumay heshiin in qoraalka saxeexan oo kale ah la baahiyo.

2.Qoraalka saxeexani waa rasmi, taas oo macnaheedo yahay waa ka sida heshiiskii labada aqoonyahan – Signed Agreement, not Press release

3.Warsaxaafadeedku waa warqad furan (not signed)oo lagu baahiyo saxaafadda

4.Qoraalka Ahmed daabacay waxa loogu sheegay in uu yahay kii ugu denbeeyey ee siday go'aanki gudidda, markaa kuma qaldana baahintiisa

5.Kelmadaha "curiye" iyo "daahfure" in la isku beddelo Abdillahi iyo Gaarriye ayaa keenay, guddida inteeda kale ma ogayn. Waa laga yaabaa in Fadal wax ka ogaa, waayo way wada socdeen isaga iyo Abdillahii markii qoraalka la iga qaaday.

**Maxaa kala duwan, maxaa isku mid ah:**

Hadal gunbuu leeyahaye, waxa kala duwan adeegsiga weedhaha "curiye" iyo "daahfure". Haddii aad ku beddesho "daahfuraha" meelkasta oo ay ku jirto "curiyaha", way isu tagayaan, macne ahaan, maqaalada website-yada kale ku soo baxay iyo ka ku soo baxay Ramaasnews.com. Wax kale oo la taaban karo, oo ay ku kala duwanyihiin ma jiro. Warmutiyeedka ku wajahan go'aanka guddida ee labada aqoonyahan saxeexeen waa isku mid, sidaan ku bilaabay faalladan. Qoraalada ku soo baxay website-yad kale iyo Ramaasnews, intuba waxay sameeyeen hordhacyo kala duwan laakin faarriinto waa isku mid.

Kala doorashada labadan weedhood "curiye" iyo "daahfure" waxay ku fadhidaa turjumaddan:

Daahfur waxa lagu macneeyey ogaanshaha wax hore u jiray, waxaanay u dhigantaa " Discover" oo ah kelmad ingiriisi ah. Markaa sababta loo doortay daahfur waxa garab u ah doodda odhanaysa Miisaanka maansadu

waligiiba wuu jiray, oo way raacijireen abwaanada Somaliyeed intii af Somali iyo maansadiisu jirtayba, markaa ma aha wax ay curiyeen labadan aqoonyahan. Curiye waxuu u dhigmaa, sida Abdillahi iyo Gaarriye u turjumeen, "inventor", oo ah soo saare wax aan hore u jirin. Miisaanka maansado ma aha wax cidi hadda curisay – not patenable invention. Labadan aqoonyahan, ha kala horeeyaani, waxay daboolka ka qaadeen ama daahfureen qaaciido (formula) maansada Somaaliyeed leedahay oo weligeedba jirtay.

Waxaa kala oo iyana qeexid mudan, in aan guddidu wada joogin goobtii go'aankan lagu gaadhay: Goobtaa waxa joogay oo go'aankan wada qaatay:

1. Hussain Hassan Gualid

2. Abdillahi Saleebaan Bidde

3. Abdirsaq Osman Fadal

4. Ahmed Warsame – Ahmed Dheere

5. Ahmed H Nur.

6. Ahmed Awad Ismail

Soo ururin

1. Go'aankii Guddidu waa sida ku cad faqradda go'aanka Guddida oo u dhigan sidan:

*Qoraalkii ku soo baxay Xiddigta Oktoobar, 17-kii January 1976, ee uu lahaa Abwaan Gaarriye, ayaa markaa Guddidu u aqoonsatay in uu yahay markhaatiga qiraya cidda soo hor saartay miisanka maansada*

2. Daahfure ayaa lagu beddelay curiye, sababta kor ku qeexan awgeed.

3. Guddidan lixda ah ayaa joogtay goobta go'aanka, waanay isku wada raacday go'aanka, iyadoon cod la qaadin.

4. Soo saare iyo daahfure waa isku macne halkan (in this context)

5. Labada aqoonyahan way aqbaleen go'aanka guddida waanay saxeexeen.

Gunaanad

Go'aankii guddida ee labada aqoonyahan ogolaadeen waa seddexdan sadar ee kor ku xardhan.

Qoraalka warsaxaafadeedka intiisa kale waa hadal waayeel iyo hawraarsan lagu gelbinaayo go'aankii guddida iyo garwaaqsigii labada aqoonyahan.

27 beri kadib ayuu Carraale, isagoo ku tumanaya xeerarkii garta u yiil oo dhan, qoraal horle u diray degelka wardheernews.com, kaasi oo uu ku sheegay inaanu oggolayn go’aankii guddida. Maammulka degelka baa ayaga qudhoodu yaabay. Sidaasi awgeed bay hordhac kooban ugu sameeyeen qoraalkii Carraale ayaga oo ka afeef dhiganaya. Waxaanay ku bilaabeen odhaahda tifatiraha ee ku soo dhowaada:

## 2.31. War Saxaafadeedkii Oslo & Taariikhayntii Miisaanka Maansada

W/Q Bare sare Abdillahi Deria Guled (Carraale)

Jan 02, 2009, www.wardheernews.com

**Odhaahda Tifaftirka**: *Inkasoo la filayay in magaalada Oslo lagu soo afjaray dooddii cidda daahfurtay Miisaanka Maansada Soomaaliyeed ee u dhexeeyay labada aqoonyahan ee Prof. Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraale) iyo Prof. Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye), ka dib markii ay dhexdhexaadiyeen guddi ka koobnayd Jaaliyadda Soomaaliyeed ee magaalada Oslo ee xarunta Norwey, haddana waxaa muuqata in Prof.Carraale aanu ku qanacsanayn sida ay wax u dhaceen iyo warsaxaafadeedkii ay guddidaasi soo saareen intaba.*

*Qoraal uu saxaafadda ugu talo galay Prof. Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraaale) oo uu kaga hadlayo tabashadiisa ku aaddan go'aanadii guddida iyo warsaxaafadeedkii ay guddida Oslo soo saareen oo uu soo gaadhsiiyay Shabakadda WardheerNews, ayaa waxa uu u dhignaa sidan*:-

---

Anigoo ah Cabdullaahi Diiriye Guuleed (Carraale), daahfuraha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed, waxaan qoraalkan ku soo bandhigayaa arrigtidayda ku aadan War Saxaafadeedkii Oslo ee Miisaanka Maansada. Hore uma

ogaalan, hadda ma ogoli, oo ma ogolaan doono in Gaarriye yahay daahfuraha Miisaanka Maansada. Sidaan hore u sheegay waxaan ahay daahfurihii Miisaanka Maansada waxaana taa ii qiri kara, qaarkoodna hore u qireen, ruugcaddaayada suugaanta iyo goobjoogayaashii xilligaa oo ay ka mid yihiin: Murwo Faaduma Axmed Caalin, Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame Hadraawi, Axmed Faarax Cali (Idaajaa), Abwaan Saciid Saalah Axmed, Faarax Abokor Khayre (Faarax- Askari), Maxamed Cabdullaahi Riiraash, iyo suugaanyahano badan oo xilligaa arrintan la socday. Markhaatiyadaa tooda ayey tahay in la qaato marka ay timaado yaa daahfuray Miisaanka Maansada.

**Gudida Oslo xaalkiisu sidan ayuu u dhacay:**

1. Guddidu waxa ay gole ka sheegtay in qoraalka baahinta ku hor faafay Xiddigta Oktoobar ("published") leeyahay Gaarriye.

2. Waxa kale oo ay guddidu qirtay in Carraale buug dhan ku hor faafiyey ("published") qoraalkiisa.

3. Guddidu waxa ay is ka indhatirtay/dhaaftay ("printed script") oo 1975 qalinka laga qaaday, ay kuna eg tahay uun qoraalladii dad weynaha ku hor baahay ama loo soo hor bandhigay. Buug jaamacadi qiimaysay oo iibsatey iyo maqaallo jariidad lagu qoray in dad weynuhu kala saaraan iyaga ayey u taallaa, aqoon yahanna waaba kaalinta uu leeyahay.

4. Waxa ay guddidu aragtay in labadayadu (Carraale & Gaarriye) laba waddo u kala marnay (two different approaches) hab cilmiyeedka baadhista Miisaanka Maansada.

5. Guddidu waxa ay garawsatay in labada hawlood ee aanu dadka Soomaaliyeed u soo kala ban-

dhignay nuxurka, mucada ama macda iyo qoto-dheerida ay kala xanbaarsan yihiin loo daayo aqoon yahanka hawshaa takhasuska gaarka u leh iyo dad damaceeda leh. Waa Soomaalida aayatiinka ka rabta barashada maansadooda iyo intii danaynaysaba.

Intaasi waa go'aankii golaha laga sheegay, lana guddoonsadey. Dabaddedd laba go'aan oo is barbar socda ayaa laba nin oo guddida ku wada jirey soo kala saareen. Labadii war ee ay kala baahiyeen waxa guddoomiyihii ka soo daba qoray in nuskhaddii (draft) kii la qaybiyey si loo ahkristo qaar/nuskhado kale ka daba yimaaddeen.

Waxa nuskhaddii la saxeexay ku qoran ereyo kale oo kuwii hore ka duwan. Halkii go'aanku ka ahaa: "Yaa hor faafiyey ama ku hor maray u soo bandhigidda ("published") dad weynaha waa u ligan. Waana jariidad iyo jaamacad kala xulashadood (mass media & intellectual forum). Daahfur ("discovery") goluhuba ma soo hadal qaadin. Haddaba aniga oo ah Cabdillaahi Diiriye Guuleed sida ay qoraallada, waraysiyada iyo goob-joogayaashii xilligaa joogeyba ka marag furayaan marnaba ma aan oggolaan, ma yeelin, ma yeelayona saddexda qoraal ee Oslo laga faafiyey.

**Gari Allay taqaan**

1. Kol haddii guddidii dhawr go'aan isla barbar yaacday,
2. Kol haddii is qabqabsigii guddida iyo go'aankay kala hororsatay iyagii loogu gar-naqay,
3. kol haddii qoraalkii la is ku ogaa ("oringinal text") kuwo kale oo aan u dhigmin lagu doorshey, arrinkiina ay maroorsadeen,

4. Kol haddii guddidu hawshii ay kala qaartay haddana isku qob-toshay,

5. Kol haddii labadii hawlood ee la kala asteeyey aqoon yahanka intii loo daayeyna loo gacan dhaafay/faro-xumayn loo geystey,

Waxa soo baxay in hawshiiba marin habawday, kol haddii arrinkii la is ku ogaa la kala maroorsanayo. Anigu gabagebadii waxa aan ku gunaanadayaa:

Arrintan aqoon raadiska ah daah-furkeeda ("discovery, not invention") waxa ka gar-niqi kara ama garteedaba geli kara xeer-beegti ku xeel dheer suugaanta ("literature"), gaar ahaan maansada ("poetry & poetics") iyo kala shaandhayntooda. Hadda ma aha waan gabyaaye waa maanso dhaadhi. Xeer-beegtidaa xulka ahi waa inay waraysataa dhiggooda ama dhegeystaan goob-joogayaashii xilligaa, caddaymaha iyo qoraallada jira sida Marwo Faduma Ahmed Alin(Faduma-ureji) iyo in badan oo weli noolba. Kuwo kale oo noolina waa badan yihiin. Haddaba, kol haddii intaa midna aanay samayn guddida Oslo go'aankeeda ah in Gaarriye yahay daah-furaha Miisaanka Maansada wax dhacay, dhici kara ama suurtoobaya ma aha.

Daah-furuhu waa Carraale, waana la isu nool yahay labada ta rumowda. Guddida Oslo afar mooyaane intooda kale ehelba uma aha waxa hawshani daaran tahy. Qof kasta waxa aan ku leeyahay una sheegayaa in hawsha daah-furka Miisaanka Maansada Soomaaliyeed ee ku saabsan Carraale iyo Gaarriye ku kala gartaan sumaddooda iyo astaamaha ay kala sitaan. Naga daba kaalaya oo wax cusub ku soo kordhiya Soomaalida, ha kuna habsaaminaya taayada e mid qaata midna beenia, illayn mid kaleba waa keeni kartaane.

Waa gallad Eebbe,

Bare sare Abdillahi Deria Guled (Carraale).

email: caraleguled@hotmail.com

Qoraalkaa
Carraale waxa ka soo
falceliyey Cabdalla Xaaji Cismaan
oo ka yaabay waxa Carraale ladhka ku soo kiciyey.
Waxaanu soo qoray qoraalkan
soo socda ee magaciisu yahay
*Dooddii Miisaanka*
*Maansada:*
*Gardiid waa*
*Alla diid*, kaasi
oo uu kaga hadlayo sida
ay guddidii Oslo u qaadday
gartu inuu
yahay
hab
eex ka
fog, iyo sida
aanu Carraale geed
kale u codsankarin; go'aankii
guddidii Oslana u yahay
go'aan kama dambayn ah.
Waxba yaanan hadalka ku tumanne
wuxu ku bilaabay:

## 2.32. Doodda Miisaanka Maansada: Gardiid waa Alla Diid

Waxa qoray: Cabdalla Xaaji Cismaan
[Cabdalla_xaaj@yahoo.fr
www.guri-barwaaqo.blogspot.com

Sida ay dad badani la socdaan waayadan danbe waxa socotay dooddii ahayd kumaa daah furay Miisaanka Maansada Somaaliyeed? Ma Abwaan Gaarriye mise waa Macallin Carraale? Dooddaas oo ay ka qayb qaateen dad badan oo Somali ah oo dunida daafaheeda kala jooga. Waxay dooddaasi hadba heer soo martaba dabayaaqadii bishii November 2008-dii ayaa guddi is xilqaantay oo ka kooban aqoonyahanno soomaaliyeed oo deggan magaalada Oslo ee Xarunta dalka Norwey marti qaad u fidisay labada macallin ee Gaarriye iyo Carraale, si ay ugu garnaqaan. Garnaqaas oo labadooduba oggolaadeen, guddidaas markii ay horyimaaddeen labada aqoon-yahaan, sidii uu xeerku ahaa ayay guddiddu garnaqa u bilowday oo waxay labada Profesoor mid walba gaar u waydiisay su'aashan. Guddidan oo walaalahaa ah kuuna eexan, kaana eexan wixii ay kuu goyso ma ogoshahay? Haa waan oggolahay ayuu mid walba kaga jawaabay. Wixii intaa ka danbeeyay guddidu waxay bilowday garnaqii.

Guddidu waxay dhego-furnaan ku dhegaysteen hadal-ladii labada macallin afkooda ka soo baxayay, waxa kale oo ay guddidu caafimaad qab ku eegtay qoraalladii labada dhinaca soo gudbiyeen. Guddidu wixii waydiimo ah ee ay uga baahnaayeena way ka dhamay-satay labadoodaba. Dabadeed guddidii ayaa gooni u baxday oo gartii dhan walba ka eegtay oo u rog-rogtay si xigmad iyo xilkasnimo leh.

Bishii December 5-teedi 2008 ayay guddidii is xilqaantay soo saartay go'aankeedi soona hor dhigtay labada profosor ee Carraale iyo Gaarriye iyo dad-waynihii kale

ee arrintaa la socday intaba. Go'aankaas oo ahaa Pro: Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) ayaa ah Daah-furaha Miisaanka Maansada Somaliyeed, guddidu waxay go'aankaa u cuskatay caddayn uu Mr. Gaarriye keenay oo ah qoraalkii u horreeyay ee uu Mr. Gaarriye ku soo saaray Wargayskii Xiddigtii Oktobar lagu magacaabi jiray sannadkii 1976-kii bishii Janaury 17-keedi.

Somalidu waxay tidhaahdaa gartu nin way u go'daa ninna way ku go'daa, Gartii ku saabsanayd Miisaanka Maansada halkaas ayay ku go'day oo Mr. Gaarriye ayay u go'day. Dabadeed si cad oo aan madmadow ku jirin ayay labadooduba u oggolaadeen go'aankaa ay guddidu soo saartay, ayna isku gacan qaadeen.

Intaa dabadeed Pro: Carraale ayaa soo gocday oo qoraal uu ku diiddan yahay go'aankii ay guddidu gaadhay soo saaray, bishan January 2-deedi 2009-ka, qoraalkaa oo Pro. Carraale ku sheeganayo inuu isagu wali yahay daah-furaha Miisaanka Maansada Somaliyeed. Waxaa taa ii qiraya ayuu yidhi rag aqoonyahanno ah oo uu magac-yadooda xusay, waxa kale oo uu macallin Carraale sheegay inaanu aqbali doonin mar hore iyo mar danbaba inuu Gaarriye yahay daah-furaha Miisaanka Maansada sidii ay go'aamisay guddidii Oslo.

Waxa kale oo uu Pro. Carraale qoraalkiisa ku sheegay in rag ka mid ah guddidii Oslo aanay ehelba u ahayn waxa ay hawshani daarran tahay, waxa kale oo uu Mr. Carraale sheegay in arrintan ka gar naqeeda ay gali karaan uun xeer beegti ku xeel dheer cilmiga sugaanta.

Intaa aan kaga hadho go'aankii guddida iyo oggol-diidkii Pro: Carraale. Somalidu waxay ku maahmaada "Gari laba nin kama wada qosliso" haddaba Pro: Carraale xaq buu u leeyahay inuu yidhaahdo geed kale ayaan ka leeyahay sida uu qof walba oo laga gar helaaba u dalban karo geed kale, waase goor xeedho iyo fandhaal kala dhaceen xilliga uu diidmada ka keenay go'aankii guddida. Waxa jira xeer

Somaliga qodobbo iyo dhegalay ku saabsan garqaadka kuwaas oo Pro: Carraale si cad uga hor yimid.

Waa marka horee haddii guddi loo saaro laba dhinac amma laba ruux oo wax isku haya, waa in labada ruux amma labada dhinac oggol guddidu ka qaado ama la waydiiyo inay oggol ku yihiin guddida. Haddii ay raali ku noqdaan mar danbe laga yeeli maayo inay guddida wax xumaan ah ka sheegtaan. Haddaba guddidii uu Pro. Carraale hore u oggolaaday inay u gar-qaado imika laga yeeli maayo inuu yidhaahdo qaarkood ehelba uma aha inay gartan oo kale ka garnaqaan.

Waa marka labaade haddii laba qof loo gar-qaado oo guddi loo saaro, waa inay la yimaaddaan labada qof caddaymo iyo maragyo u buuxiya gartooda. Hadduu mid codsado inta garqaadku socdo oo uu yidhaahdo maragga dadkii ii furi lahaa baa iga maqane tolkayow dib ha la iigu dhigo, waad heshaabaa la yidhaahdaa oo guddidu dib ayay u rixdaa fadhigaa bal danbana way u muddayn. Waa xeer iyo xaq qof kastaaba leeyahay, haddii aad aamusto oo aad codsan waydo kolka gartu go'do aad tidhaahdo marag baa ii dhiman xeer kuu oggolaanayaa ma jiro. Sidaa daraaddeed Pro: Carraale inuu bil ka dib yidhaahdo marag baa ii maqan ee hala ii waydiiyo xeer u ogolaanayaa ma jiro.

Ta saddexaad marka ay guddi gar-qaaddo ee ay go'aan soo saarto, qofkii ay gartu ku go'day hadday u cuntami waydo farta ayuu taaga, markaas ayay guddidu tidhaahdaa maxaad farta la taagtay? Markaasu qofku yidhaahdaa Tolkayow gartu iima buuxdee geed kale hala ii geeyo, waad heshaa ayay guddidu tidhaahdaa, markaasaa guddi kale iyo geed kale la geeyaa, taasina waa xeer iyo xaq qof kastaba leeyahay. Haddaad sidaa odhan waydo gartii igu go'day waan qaatay ayay ka dhigan tahay, waana inaad sideeda u fulisaa.

Haddaba guddida Oslo markay go'aanka soo saartay Pro: Carraale muu odhan gartu iima buuxdo iyo geed kale ii geeya midna, ku darsoo waliba waan oggolaaday baa afkiisa laga hayaa. Dhinaca kale haddii aan ka soo gudubno xeerka Somaliga oo aan eegno Maxkamadaha xiligan Dawladnimada, Hadii Maxkamadi go'aan kugu riddo xaq baad u leedahay inaad laba toddobaad gudahood aad rafcaan ku qaadato, sidaa haddaad yeeli waydo xukunkii ayaa sidiisi laguugu fulinayaa, Pro. Carraale taana muu yeelin oo 27-maalmood ka dib markii guddidu go'aanka soo saartay ayuu qoraal uu ku diiddan yahay guddida iyo qoraalkeediba soo saaray, taana sidaabuu xeerku qoraalkiisa xaaran uga dhigayaa.

Waa marka afraade guddi kasta oo dad u gar-naqaysaa inta aanay go'aanka soo saarin way shaandhaysaa, way falanqaysaa oo dhan walba iska taagtaa, ruux kasta oo guddida ka tirsanina ra'yigiisa sida ay la tahay iyo wixii uu qoddobbo cuskanayo ayuu xaq u leeyahay oo uu sheegaa soona bandhigaa.

Go'aanka kama danbaysta ahiina waa guddidu halka ay u badato. Haddaba guddida Oslo go'aankeedii ku taariikhaysnaa 05-december 2008-dii wixii ka danbeeyay haddii rag ka mid ah guddidii Oslo soo saaraan qoraal kale wax ka soo qaad ma leh, ragga sidaa ku kacana waxaa loo yaqaan "Doc-faruur" guddi danbe oo gar-qaadaysana laguma daro oo waa laga dabbaala. Wax walba waxa ka asal ah go'aankii koowaad ee guddidu u dhamayd, waa sida xeer Somaligu yahay ee aan odoyo ka soo gaadhnay.

Guntii iyo gabagabadii markaan eegno intaas oo qoddobbo ah ee aan soo sheegay go'aankii guddida Oslo ee uu Madaxa ka ahaa Pro: Xuseen Xasan Guuleed soona baxay 5-tii bishii December 2008-dii sidiisi ayuu meel mar u yahay oo Pro: Gaarriye ayaa ah daah-furaha Miisaanka Maansada Somaliyeed, Guddi danbe oo

arrintaa u fadhisataana waa gef iyo gardarro, go'aanka ay soo saartaana waa xaqdarro.

Wax jira Alla og
Ilaah innaga war roon

**¨**
**V**
***Bishii***
***Juulaay ee aynu soo***
***dhaafnay ayuu Cabdillaahi Diiriye Guuleed ' Carraale' ka gaadhay magaalada Hargeysa halkaasi oo lagu qabanayey bandhig dhaqameed loogu magac daray Maxmed Mooge Liibaan.***
***Waxa la soo sheegay***
***in Carraale oon***
***ka hadhin***
***sheegashadii uu sheeganayey***
***inuu isagu yahay ninkii u horreeyey ee daahfura aragtida Miisaanka Maansada uuwarbaahinta iyo isgaasiintaba u sheegay midhkaasi. Shir ay si dadban uga soo qayb galeen Gaarriye iyo Carraale isna ka hadlay Hadraawi oo ay hore labadooduba markhaati u qabsadeen.***
***Waxana shirkaasi***
***ka soo baxay***
***qoraalkan***
***hoos ku qoran***
***oolagu daabacay***
***wargeyska Haatuf.***

## 2.33. Muranka Daahfurka Miisaanka Maansada Oo Soo Laba Kacleeyey Iyo Hadraawi Oo Ka Marag-Furay




Hargeysa July 28, 2009 9 (Haatuf)-

Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) ayaa shalay madal ku soo bandhigay inuu isagu helay oo dejiyey isla markaana qoray miisaanka maansada Soomaaliyeed.

Abwaan Gaarriye waxaa uu faahfaahin ka bixiyay inaanu ahayn qofka ugu aqoonta badan marka laga hadlayo dejinta miisaanka maansada Soomaaliyeed, balse isagu cilmibaadhis uu sameeyay uu ku helay miisaanka maansada Suugaagta kuna qoray wargeyskii Xiddigta Oktoobar taariikhdu markay ahayd 1976-kii, taas oo uu shalay ku soo bandhigay daliilo cad-cad iyo marag muujinaya.

Abwaan Gaarriye, wuxuu arrintaasi ku soo bandhigay hadal dheer oo uu ka jeediyay madal dhaqameedka loogu magac daray Maxamed Mooge iyo Carwada caalamiga ah ee Hargeysa, oo xalay lagu soo gabogabeeyay Ambassador Hotel.

Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac, wuxuu u mahad celiyay qaban qaabiyeyaasha kulankan ee maanta(shalay) ajandaha ku soo daray in laga hadlo miisaanka maansada, waxaanu tilmaamay in maansada Soomaalidu ay tahay mid ka dhaxaysa oo ay wada jir u leeyihiin qoomiyadaha Soomaalidu.

Ugu horayn waxa hadalkii furay isla markaana

daadihinayey barnaamijka doodan ku saabsan: yaa ugu horeeyay ee helay ama cilmi baadhistii ugu horaysay ku sameeyay Miisaanka Maansada Suugaanta Soomaaliyeed oo soo baxda soona gaadha bulshada. Hadaba Xuseen Xasan Guuleed oo ka mid ahaa ama gudoomiye u ahaa guddi ka garnaqday muranka u dhexeeya labada Professor ee Maxamed Xaashi Dhamac Gaarriye iyo Cabdillaahi Diiriye Guuleed Carraale oo midba ku doodayo in uu isagu ahaa ninka helay Miisaanka Maansada Suugaanta Soomaaliyeed, isaga oo arrintaa ka hadlaya Xuseen Xasan waxa uu yidhi "waa ii sharaf inaan galabta daadihiyo doodan halkan ka dhacaysa, dood ama dood cilmiyeed waxa inoo akhriyi doona ama cilmi baadhis uu sameeyay wax inooga shaacin doona Professor Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye), Gaariye waa nin aanu mar arday wada ahayn, mar shaqaale wada noqonay, mar saaxiib aanu nahay.

Waxa kale oo taa dheer oo dhawr jeer aanu ku kulanay Jaamacad Norway ku taala oo Lila-hammer la yidhaahdo ayuu Professor ka yahay sanadkiiba laba jeer ayuu noo yimaadaa oo muddo nala joogaa hadaan taa inyar dhaafo oo aan ka waramo cilmi baadhista laga yaabo imika inuu wax inooga ifiyo kal hore bishii December ayaa guddi aan ka mid ahay ama aan gudoomiye u ahaa ayaa dood ka dhaxaysay ama arrin ka dhaxaysay Professor C/llaahi Diiriye Guuleed Carraale iyo Professor Maxamed Xaahi Dhamac (Gaarriye) ayaan ka qayb galay, doodaas ama murankaas oo ahaa laba qaybood oo kala ahaa:

Ta ugu horaysa oo ahayd:Yaa ugu horeeyay oo daahfuray Miisaanka Maansada Suugaanta Soomaaliyeed.Ta labaadna waxay ahayd, markaan leeyahay yaa ugu horeeyay waxa weeye Carraale iyo Gaarriye. Arrinta labaad ee meesha timidna waxay ahayd labadooda qoraal ama labadooda cilmi baadhiseed ee ay sameeyeen keebaa mug leh, keebaa culus, keebaa waxtar badan, anagu madasha markaanu joognay ee Norway joognay ee aan guddidaa ka madax ahaa waxa ay noqotay inaanu ka gar

niqi karo mid, taas oo ah yaa u horeeyey oo daah-furay Miisaanka Maansada Soomaaliyeed anagoo saldhig uga dhigayna wixii qoraal ahaa ee jiray taariikh ahaan ka soo horeeyay ee u soo baxay bulshada, wixii cilmi baadhis la sameeyay keebaase loo soo hor saaray ee lagu soo saaray qoraal soo gaadha dadka taa waanu ka garnaqnay waxanu ku baysgaraynay oo ugu horeeyay wixii lana soo hordhigay ee qoraal ahaa article ku yiilay Xiddiga October 17kii January 1976-kii. Arrinta kale ee ah labada cilmi baadhiseed buuggaagta ay qoreen kee mug weyn, kee mac, kee shillis waxanu nidhi wax aanu anagu guddi ahaan maalintaa iyo halkaa aanu ka gar niqi karayno maaha waxna ka sheegi karayno sababtoo ah intayadi meesha joogtay ehel umaanaan ahayn Suugaanta Soomaaliyeed, markeeda iyo wakhtigeeda iyo meesheeda ayay taasina noqon doontaa haddii ay cidi taa doonayso.

Waa nasiib wanaag maanta ama galabta inuu Gaarriye inala joogo C/llaahina waa fadhiyaa baan filayaa laakiin wax leh Microfan-ka imika aan ku soo dhoweynayaa Gaarriye" ayuu yidhi Xuseen Xasan Guuleed

Intaa ka dib waxa hadalka doodda ku saabsan yaa helay ama cilmibaadhsitii ugu horaysay ku sameeyay Miisaanka Maansada Suugaanta Soomaaliyeed, Maxamed Xaashi Dhamac Gaarriye in uu ahaa ninkii helay isla markaana qoraal lagu soo daabacay Ex. Xiddigtii Oktoobar ee ummada soo gaadha taariikhdu markay ahayd 17 January 1976-kii, taas oo uu isaguna dhiniciisa u sheeganayo Professor C/llaahi Diiriye Guuleed Caraale, waxana uu Gaarriye doodiisa ka waramay arrintaa waxa ka mid ahaa oo uu yidhi "arrinkan aynu ka wada hadalaynaa waa arrin cilmi ah oo ku saabsan maansada Soomaaliyeed oo inaga inteena halkan joogta oo kaliya aynaan lahayn, waxaynu ka hadlaynaa markaynu ka hadlayn Miisaanka maansada Soomaaliyeed, waxaynu ka hadlaynaa waxa wada leh wax allaale wixii af Soomaliga ku hadla oo dhan ayaa wada leh Jabuuti baa inala leh, Itoobiya ayaa inala leh, kiiniya ayaa inala leh, horta

qodobkaasi inuu cadaadaa baan jecelahay oo wax xaafad yari wadato maahee waa wax ummad leedahay baynu ka wada hadlaynaa oo cilmi ah oo afkeeda ku jira, af walibana waxa uu leeyahay Miisaan buu leeyahay tixdiisu qawaaniin ay raacdo oo xukunta ayaa af waliba leeyahay" ayuu yidhi Gaarriye, waxanu isaga oo ka hadlaya dooda muranka u dhexeeya isaga iyo Carraale ka hor helay ama cilmi baadhis ku sameeyay soo baxada Miisaanka maansad Soomaliyeed uu yidhi " sidaa uu sheegay Xuseen wixii qornaa ee ugu horeeyay ee la daabacay waxay ahayd aniga ayaa waxaan ku qoray Xiddigta Oktoobar 1976-kii halkan waxaa jooga raggii markaa joogay, Muuse Cabdi Cilmi, Rashiid Sh Cabdillaahi, Siciid Jaamac beenaale markhaatigiisuu Baydhabo geeyaa. Waxa kale oo aan doonayaa waxaan bilaabay, anigu intii aan afsoomaaliga la qorin ka hor baan bilaabay macalin Sacandery- ga anigoo ku jira Carabidana waan ku wanaagsanaa ragii ila fasalka ahaa baa garanaya, macalinkii Carabida noo dhigayey oo Axmed Sh Aadan la odhan jiray oo reer sheikh ahaa oo dhintay ayaa wuxuu nooga sheekeeyay Al-Khaliil binu Axmed Al-Faraahidi oo ah ninkii helay qawaaniinta xukunta maansada afka Carabiga ah ayuu nooga sheekeeyay caruur baan ahaa markaa awood gabyaana waan leeyahay laakiin cilmi uma lihi cilmi afeed ma aqaan, markaasuu wuxuu tusaalooyin naga siiyey sida ay u shaqayso faacilaadu…..godadkii gabayga af carabiga xukumayay buu na siiyey.

Aniga waxa markiiba igu soo dhacday tolow af soomaaligiinu ma leeyahay baa markaa igu soo dhacaday, gabayaana waan ahay oo waxaan leeyahay markaa bal hada isku qiyaas, markaasaan waxaan isku qiyaasay godadkii uu na siiyey ee af carabiga ahaa ayaan is idhi maansadii soomaalida geli gabaygii soomaaliyeed bal inu galayo, gabaygiina anigaaba awood u leh inaan sameeyo. Show waxaan isla doonanayaa laba af oo aan shaqo isku lahayn inay qawaaniini xukuntana waan arkayaa, markaa afka Soomaalidu ma qorayn oo eeg gabay markaad qorto ee aad is hor dhigto ee baydkaa qorto ee baydkaa qorto

ayaad arkaysaa oo aad garan kartaa waxa ka dhexeeya beydadkaa muu qorayn afku dhib ayay igu noqotay anigoo la daalaa dhacaya ayaa 1972 kii lagu dhawaaqay afka soomaaliga, markaasaa markii ugu haraysay baan qori karay gabayga Soomaalida, markaasaan markaa 20 bayj qoray sidaa isu daba qoray ayaa waxaan is weydiiyey maxaa ka dhexeeya? Ragaan markaa kala sheekaysan jiray halkanay fadhiyaan. Ka dib waxa isoo baxday markii farta la qoray bay ii fududaatay, waxa ii soo baxday beydadkii gabayga ahaa uun baan shaqalo u wada bedelay waxaan arkay markaan labaatan beyd sidaa u eegay wax ka dhexeeya ayaa igu soo baxay, waxa ugu dhowaa cid aan ku cararo, waxaan doonayaa taarkhiida aan ka hadlayo idinkaa leh inta la wada nool yahayna inaad taariikhda heshaan weeye.

Waxa aan ku cararay markaan eegay ee wax shaqaynayana ay soo baxaday ayaa waxaan ku cararay saxiibkay Hadraawi oo maanta nool, waxaan la tagey guri uu lahaa nin Axmed Cabdi Dacar la yidhaahdo oo macalin ahaa, Hadraawi waxa la xidhay oo xamar afweyne ku xidhay 1973-kii, intaan Hadraawi la xidhin baan ka hadlayaa oo ah horaantii 73-kii ayaan u yeedhay Hadrawi oo guriga Axmed Cabdi Dacar baan geeyay oo muddadaasi waxay ka horaysaa markii aan Xiddigta Oktoobar ku qoray saddex sanadood markaa aan hadraawi u soo bandhigay waanu nool yahay. Haddii hadal laga tegi waayo adiga oo inan yar oo ciyaal ah oo isla booday ah oo wax baan helay oo qof wal oo iga hor yimaadaba wax baan helay miisaankan eeg bal siday u shaqaynayso eeg meel walba aniga oo la maraya ayaa waxa helay nin Saalax Jaamac, Siciid Jaamac nin ay walaalo yihiin oo ka yaraa baa i helay oo igu yidhi waar waxan aad ku hadlaysaa waa wax qiimo leh Ilahay ha ka raali noqdo inanka markaa umaan jeedin waxaa, libtana waa la wada sheegtaa oo Aabayaal badan bay leedahay, waar orodoo meel ku qor buu igu yidhi, oo Xiddiga Oktoobar ku qor buu igu yidhi, kamabaan fikirin-ba igumaba soo dhacdeen hadaan inankaasi igu baraarujin

dabadeed waxaan ku qoray xiddigta Oktoobar saddex sanno ka dib Hadraawi markaan u sheegay, raggii aan wakhtigaa intaa u sheegayna waxa ka mid ah Muuse Cabdi Cilmi oo halkan fadhiya. Intaasi waa sheekada hordhaceedii iyo taariikhdeedii, waxan aan ka hadlayo ayaan hadaba ka hadlayaa waa kan qolada guddiga go'aanka sida ay go'aamiyeen, cilmiguna waxa uu ku wanaagsan yahay qof waliba inuu doorkiisa soo bandhigo oo wax walba waa laga fa'iidaysanayaa. Hadaan anigu ahay leeyahay qofkii ugu horeeyay ee laga maqlaan ahay, haddii aan idhi waxaan ahay qofkii ugu horreeyay ee qoray miisaanka maansada, macnaheedu ma aha inaan ahay ka ugu aqoonta badan, oo waxa dhici karta in dad idinka (Ka qeyb gelayaashii) aad noqon kartaan qaar nooga aqoon badan, laakiinse mid uun ha iga dafirani inaan qoray anigu. Wax alaale waxa kale oo dhami waa sax waayo rag baa soo baxaya iga aqoon badan ayaan ogahay inay soo baxayaan oo rag baa su'aalaha markay qaar I weydiiyaan candhuufta liqaa, markaasaan idhaa ragii ku bedelayay waa kuwaas wuxuna sibay u bilaabantaa oo maalinba nin baa wax ku dara, oo nin walba intuu ku daray uun baa la sheegaa" ayuu yidhi Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye} intaa ka dib Kabiirka gabayaagaa soomaaliyeed ee qarnigii 20-aad iyo ka 21-aadba Maxamed Ibraahim Warsame Hadraawi ayaa markaa ka dib ka soo kacay halkiisii isaga oo salaamaya C/laahi Cukuse oo su'aasha lahaa iyo Abwaan Gaarriye oo sii baxayay markaana la taagnaa, waxaanu isaga oo Cukuse la hadlaya yidhi "Adeer horta aan kuu sheegee sidaa uu Gaarriye sheegay waa runtii oo aniga Xilligaa ayuu iigu sheegay arrintan, markaa uu ii sheegayayna ma ogi inay mid kale oo isla noocan ahi jirtay iyo in kale"

jawaabta uu Abwaan Hadraawi siinayo C/laahi Cukuse ayaa daba socotay su'aashii uu madasha kala kacay iyo mid aan taa ka fogayn oo la xidhiidha isla arrintan oo uu habeenimadii ka horaysay Abwaanka waydiiyay.

Madasha ayaa waxa ka soo qayb galay gudoomiye ku

xigeenka 1aad ee xisbiga KULMIYE Muuse Biixi Cabdi, Abwaan Maxamed Ibraahin Warsame Hadraawi, Abwaan Cali Xasan Aadan 'Banfas', Abwaan Kayd, hal-buurro, qorayaal iyo dadweyne fara badan.

Dhinaca kale Professor Cabdilaahi Diiriye Guulleed, oo xiligan ku sugan Hargeysa ayaa buug uu ka qoray miisaanka maansada ku soo bandhigay carwada madal dhaqameedkan maalmihii la soo dhaafay, waxaanu mar uu saxaafada la hadlayay uu isna dhinaciisa sheegtay inuu ahaa ninkii ugu horreeyay ee dhigay miisaanka maansada.

# Gunaanad

Dooddan oo ka dhalatay sidii loo ogaan lahaa qofkii u horreeyey ee soo bandhiga aragtida Miisaanka Maansadu, waxay bilaabantay gu' gu kolkuu ahaa 2005tii. Waa afar gu' ku dhowaad ka hor xilliga qoraalkan laysku soo dubbaridey. Waxaanay ku dhammatay halkii ay ka bilaabantay.

Markii labadii qoraal ee u horreyey lays dhaafsaday ayuu isku dubbaridaha qoraalkani soo qoray qoraal garnaqa. Ujeeddada uu ka lahaa baa ahayd in muranka la soo gabagabeeyo laguna xiiqin arrin xogteeda la hayo. Bilowgiibana wuxu arrinta uga garnaqay si aan eex iyo uurxuma toona lahayn. Wuxu ku saleeyey gartii uu qaaday qoraalladii dhabta ahaa ee ay labada aqoonyahan soo saareen. Wuxu akhristayaasha soo hordhigay raadraacyadii laga sameeyey.

Wuxu qoruhu si aanu madmadaw lahayn u caddeeyey inuu Gaarriye ahaa qofkii u horreeyey ee aragtidaasi dad weynaha u soo bandhiga. Cabdillaahi Diiriye Guuleedna ahaa soo bandhigihii labaad.

Waa guushii u horreysey ee uu Gaarriye la carraabo. Hayeeshee, lagagma hadhin. Cabdillaahi Diiriye Guuleed guluf xoog leh buu heenseeyey si uu guushaasi ula soo noqdo oo aanu Gaarriye ula guryo hoyan. Waxaanu waraysi dheer siiyey degelka wardheernews isaga oo gartaasi deddifeynaya iskuna tilmaamaya inuu isagu ahaa ninkii u horreeyey ee soo daahfura aragtidaasi kor ku xusan. Halkaana waxa ka dhashay muran iyo dood aad u xiiso badan oo lagu kala jabay.

Wuxu muranku oognaado oo ninba meel ku dhuftaba, bishii Diisambar ee 2008da horraanteedii baa guddi dhexdhexaad ihi arrinkii ka garnaqday. Guddidu waxay ahayd mid Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale' iyo

Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' ka haysata kalsooni buuxda.

Guddidu waxay dhegeysatay dacwaddii labada aqoonyahan waxaanay aragtay caddaymihii uu nin waliba ku taageerayey dacwaddiisa. Guddidu kolkii ay dhegeysatay dacwadihii, aragtayna caddaymihii labada dhinac waxay soo saartay go'aan kama dambaysa. Go'aankaasi oo nuxurkiisu ahaa inuu Gaarriye yahay ninkii u horreeyey ee dadweynaha u soo bandhiga aragtida Miisaanka Maansada Soomaaliyeed.

Go,aankaasu wuxu noqday mid ay labadii aqoonyahan ee muranku ka dhexeeyey oggolaadaan oo laysku gacan qaaday. Taasi oo noqotay guushii labaad ee u soo hoyata Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye'.

Dhawr toddobaad ka dib baa lagu war helay waraysi horle oo uu Cabdillaahi Diiriye Guuleed ku sheegayo inaanu raalli ka ahayn go'aankii ay guddidii reer Oslo soo saartay. Waxaanu ku caddeeyey waraysiga inuu isagu weli yahay daahfurihii u horreeyey ee aragtida Miisaanka Maansada.

Wax la yaabbanaadaba, Cabdillaahi wuxu arrintii la tegey Hargeysa isaga oo ka qayb gelay bandhig dhaqameed loogu magac daray Maxamed Mooge Liibaan oo socoday 22-27kii Juulaay 2009ka. Waxaanu halkaa ka cusbooneysiiyey murankii ahaa inuu isagu yahay qofkii u horreeyey ee daahfura aragtida Miisaanka Maansada.

Arrintaasi oo ahayd arrin aad loo xiiseynayey baa markale la qiray inuu Gaarriye yahay aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed. Sidaasina waxay dhacday kolkii uu Abwaanka weyn ee Maxamed Ibraahin Warsame 'Hadraawi' oo dadweynaha Soomaaliyeed dhammaantood rumaysnaayeen inaanu jirin cid isaga uga xogogaalsani uu ku dhawaaqay inuu markii u horreysey

aragtida Miisaanka Maansada ka maqlay Gaarriye gu'gu kolkuu ahaa 1973kii.

Haatan iyo gabagabadii, waa markii saddexaad ee Gaarriye loo qiro inuu isagu yahay qofkii u horreeyey ee aragtidaasi soo bandhiga. Madmadawgii ku jirey inuu Gaarriye yahay Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed ama Abu Khaliilka af Soomaaliguna halkaasi ayuu ku dhammaaday.

Hadalkaasu kama dhigna, siduu isba sheegay, inuu dadka oo dhan kawada maskax weyn yahay. Aragtiduna waa bilow. Wax badan baana u dhiman sidii looga niib gaadhilahaa. Sidaasi awgeed waxan ku talin in labada aragtiyoodba la barto oo lagu dadaalo in halkaa ay labada aqoonyahan gaadhsiiyeen hore looga sii mariyo. Qof kasta oo wax soo biiriiyaana ammaanteeda ayuu yeelan.

# Raadraac

Armstrong, Lilias E. 'The Phonetic Structure of Somali. Mitteilungen des Seminars fur Orientalische Sprachen zu Berlin 37.3:116-161. (Reprinted in 1964 by Gregg Press, East Ridgewood, New Jersey).

Aw Jaamac Cumar Ciise, Diiwaanka Gabayadii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, daabacaadda 2aad, 1999, Neyroobi

Axmed Faarax Cali "Idaajaa" iyo Ibraahim Cawad "Khooli", "Diiwaanka maansadii Deelley (1979-1980), 2001, L'Harmattan Italia.

B. W. Andarawiski and I. M. Lewis, Somali poetry: an introduction, 1964.

Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale', Miisaanka Maansada Soomaaliyeed, 2004, Sweden

**—,** "Hawraarey Ninba Si Kuu Qaaday," *Xiddigta Oktoobar* 6:119 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 10 June, 1978): 3.

---, "Hawraarey Ninba Si Kuu Qaaday: Qabta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6: 120 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 11 June, 1978): 3.

---, "Gabaygeenna Miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6)26 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information national Guidance, 18 June, 1978): 3.

---, "Gabaygeenna Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:134 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 28 June, 1978): 3.

---, "Jiiftadana Miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6:149 (Mogadishu,' Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 16 July, 1978): 3.

---, "Jiiftadana Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:150 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 17 July, 1978): 3.
---, "Dhaantadana Miisaan,"*Xiddigta Oktoobar* 6:164 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information national Guidance, 2 August, 1978): 3. [For the second half of this article, see under "Suugaanta Soomaaliyeed.

---, "Suugaanta Soomaaliyeed: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:165 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 3 August, 1978): 3. [For the first half of this article, see under' 'Dhaantadana Miisaan. "

---, "HeeIladana miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6:172 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 12 August, 1978): 3.

---, "Heelladana Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:173 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 13 August, 1978): 3.

---, "Geeraarka iyo Miisaankiisa," *Xiddigta Oktoobar* 6: 190 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National.Guidance, 2 September, 1978): 3.
---, "Geeraarka iyo Miisaankiisa: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6: 191 Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 3 September, 1978): 3.

---, "Buraanburka iyo Miisaanki.isa,"*Xiddigta Oktoobar* 6:247 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 8 November, 1978): 3. [For the second half of this article, see under "Hojis iyo Hooris Buraanbur.

---, "Hojis iyo Hooris Buraanbur," *Xiddigta Oktoobar* 6:248 (Mogadishu, Somalia: Ministry ofInformation and National Guidance, 9 November, 1978): 3. [For the first half of this article, seeunder "Buraanbur iyo Miisaankiisa."

---, *Gorfaynta Maansada [Analysis of Poetry]* (Mogadishu, Somalia: Academy of Culture, Ministry of Higher Education and Culture). [forthcoming]

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Kumaa ah aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed? Ma Carraale

mise Gaarriye? 2006, Dhaxalreeb 3 www.redsea-online.com

———,Abwaan cusub oo af Soomaali iyo af Ingiriisiya/ a modern Somali-English dictionary. Printed by Ottawa Roman Catholic Separate School Board, 1995, Ottawa.

———,Abwaanka cudurrada dadka iyo duunyada, By the Author in 2001, Ottawa.

———,Magac bilaash uma baxo: ujeeddooyinka magacyada iyo naanaysaha Soomaaliyeed, by the Author in 1998, Ottawa.

———,Xasillooniddarrada af Soomaaliga, Xidhmada IIaad, tirsiga 1aad, iyo 2aad, 2002/ Vol.II, No.1,&2, 2002.

———,Gorfaynta qaamuuska cusub ee af Soomaaliga, Hal-aqoon, Xidhmada IVaad & Vaad, tirsiga 1aad,2aad,3aad 2004-2005/ Vol.IV&V, No.1,2,&3 2004-2005.

———,Hal-bixinta ereyada kumbuyuutarka, Hal-aqoon publishers, Calgary, 2007

*John W. Johnson 'Heello', Heellooy Heellallooy,* 1974,
————, 'Somali Prosodic System' Horn of Africa Volume 2, No.3 pp. 46-54.

Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi), Hal-karaan, Den Norske Somaliakomiteen, 1993, Norway.

**Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye),** Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 17 January, 1976): 3.
---"Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maan-sada," *Xiddigta Oktoobar* 4:2 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 24 January, 1976): 3.

---, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maan-sada," *Xiddigta Oktoobar* 4:8 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 31 January, 1976): 3.

---, "Toddobadkan iyo Suugaanta: Miisanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:14 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 7 February, 1976): 3.

---, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maan-sada," *Xiddigta Oktoobar* 4:20 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 14 February, 1976): 3.

---, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maan-sada," *Xiddigta Oktoobar* 4:55 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 27 March, 1976): 3.

---, "Toodobadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maan-sada," *Xiddigta Oktoobar* 4:73 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 17 April, 1976): 3.

---, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maan-sada," *Xiddigta Oktoobar* 4:86 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 3 May, 1976): 3.

---, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maan-sada," *Xiddigta Oktoobar* 4:90 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 8 May, 1976): 3.

--- ,"Toodbaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maan-sada," *Xiddigta Oktoobar* 4: 108 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and N~,inn~1 Guidance. 29 Mav. 1976): 3.

http://www/aftahan.com

http://www.farshaxan.com/

http://www.qoraaga.com

http://www.redsea-online.com

http://www.ramaasnews.com

http://www.wardheernews.com

http://www.jamhuuriya.info

http://www.calanka.com

http://www.sdwo.com

Cajalad maqal iyo muuqaal ah oo Gaarriye lagaga duubay magaalada Abidjaan ee dalka Ivory Coast,

Cajalado maqal ah oo uu Gaarriye duubay.

Cajaladihii sirta ereyga ee lagu duubay Jabbuuti.

Cajalado muuqaal ah uu ku duubay dalalka Maraykanka iyo Noorwey.

http://www.haatuf.net